o

Nofeembar 4, 2025 Doorashada Guud iyo Gaarka

Degmada King

# Buug-yaraha Rasmiga ah ee Codbixiyeyaasha Deegaanka

codeyn!

Warqaddaada codbixinta waxay imaan doontaa ugu dambeyn Oktoobar 20

206-296-VOTE (8683) | kingcounty.gov/elections

King County Elections

codeyn!

# *Warqad ka socota*
# Agaasimaha



Codbixiyeyaasha iyo Codbixiyeyaasha Mustaqbalka ee Qaaliga ah,

Wax kasta oo ay yihiin aad danayneyso, doorashadaan Nofeembar waxay saameyn ku yeelan doontaa sannado badan oo soo socda. Waxaad u codeynaysaa wakiilladaada laga soo bilaabo Senatarka Gobolka ilaa iyo Guddoomiyaha Degmada Biyaha. Waxaa sidoo kale jira dhowr cabbir sharci oo ku jira warqadda codbixinta, halkaas oo aad fursad u leedahay inaad si toos ah u go'aamiso sharciga.

Arrin kasta ama aragti kasta oo kugu dhiirigelisa inaad dhaqaaqdo – tag oo codee.

Ka fiiri warqaddaada codbixinta boostada ka dibna buuxi goobaabinyaashaada, saxiix, oo isla markiiba soo celi. Ku rid sanduuqa lagu rido ee deegaankaaga (waxaa ka jira 85 gudaha Degmada King). Maalinta Doorashada waa Nofeembar 4 laakiin uma baahnid inaad sugto. Tag oo codee sida ugu dhaqsaha badan ee aad awooddid.

**Isku qor si aad u hesho ogeysiisyada warqadda codbixinta si aad u hesho ogeysiis qoraal ama iimeel ah marka warqadda codbixintaada dib loogu soo celiyo Xarunta Doorashada, iyo marka ay diyaar u tahay in la tiriyo.**

Markaad u diyaar garoowdo inaad codeyso, qaado dhowr daqiiqo si aad u buuxiso qorshaha codeynta ee bogga 8-aad, ka dibna ka caawi saaxiibbadaada iyo qoyskaaga inay sameystaan qorshahooda codeynta si codkooda loo maqlo.

Naga soo wac 206-296-VOTE (8683) haddii aad u baahan tahay caawinnaad si aad isku diiwaan geliso, helitaanka warqaddaada codbixinta, ama fursado kale oo codbixin la heli karo. Sida caadiga ah, waxaan halkan u joognaa inaan ku caawinno.

Codeyn wacan,

Julie Wise

**Isku qor si aad u hesho ogeysiisyada warqadda codbixinta!**



**Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawinno!**




206-296-VOTE (8683)
1-800-325-6165
TTY Relay: 711

elections@kingcounty.gov

kingcounty.gov/elections



**Uma codeyn doontid wax walba oo ku jira buug-yarahaan codbixiyeyaasha.**

Ka eeg warqaddaada codbixinta tartannada iyo cabbirrada sharciga.


**Macluumaadka Guud**
Is diiwaan geli si aad u codeyso ........ 4
Xarumaha codbixinta ........ 5
Sida loo codeeyo ........ 6
Raad-raac warqaddaada codbixinta ........ 7
Qorshe codeyn samayso ........ 8
Waajibaadyada xafiisyada ee doorashadan ........ 9
Goobaha sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ........ 12
Qof Walba Codkiisa Waa Muhiim ........ 14
Khariiradda Degmooyinka Sharci Dejinta ee 2024 ........ 15
Khariiradda Degmooyinka Golaha Degmada King ee 2022 ........ 20

**Gobolka**
Degmada Sharci Dejinta Lr. 5 ........ 16
Degmada Sharci Dejinta Lr. 41 ........ 17
Degmada Sharci Dejinta Lr. 48 ........ 18

**Degmada**
Degmada King ........ 21
Golaha Degmada Lr. 1 ........ 22
Golaha Degmada Lr. 3 ........ 23
Golaha Degmada Lr. 5 ........ 24
Golaha Degmada Lr. 9 ........ 25
Dekedda Seattle ........ 26

**Magaalooyinka**
Magaalada Bellevue ........ 28
Magaalada Bothell ........ 33
Magaalada Clyde Hill ........ 35
Magaalada Issaquah ........ 37
Magaalada Kenmore ........ 40
Magaalada Kirkland ........ 42
Magaalada Medina ........ 45
Magaalada Mercer Island ........ 47
Magaalada Newcastle ........ 49
Magaalada Redmond ........ 51
Magaalada Renton ........ 53
Magaalada Sammamish ........ 56
Magaalada Woodinville ........ 58
Tuulada Beaux Arts Village ........ 60
Tuulada Hunts Point ........ 62
Tuulada Yarrow Point ........ 64

**Degmooyinka Dugsiga**
Degmada Dugsiga Bellevue Lr. 405 ........ 66
Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411 ........ 68
Degmada Dugsiga Lake Washington Lr. 414 ........ 70
Degmada Dugsiga Mercer Island Lr. 400 ........ 72
Degmada Dugsiga Northshore Lr. 417 ........ 73
Degmada Dugsiga Renton Lr. 403 ........ 76
Degmada Dugsiga Riverview Lr. 407 ........ 78
Degmada Dugsiga Snoqualmie Valley Lr. 410 ........ 79
Degmada Dugsiga Tahoma Lr. 409 ........ 80

**Degmooyinka Ujeeddada Gaarka**
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 10 ........ 83
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 16 ........ 85
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 25 ........ 86
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 27 ........ 86
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 34 ........ 87
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 43 ........ 87
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 45 ........ 89
Dab-damiska & Badbaadinta ee Woodinville ........ 90
Degmada Adeegyada Tamarta ee Coal Creek ........ 91
Degmada Biyaha ee Degmada King Lr. 90 ........ 93
Degmada Biyaha ee Degmada King Lr. 117 ........ 93
Degmada Biyaha ee Degmada King Lr. 123 ........ 94
Degmada Biyaha ee Woodinville ........ 94
Degmada Biyaha iyo Bullaacadda ee Sammamish Plateau ........ 95
Degmada Biyaha iyo Bullaacadda ee Northeast Sammamish ........ 95
Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore ........ 96
Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 1 ........ 97
Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 2 ........ 99
Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 4 ........ 101
Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Fall City ........ 102

**Cabbirrada Sharciga**
Qaraarka Wadajirka ah ee Senatka 8201 ........ 103
Degmada King ........ 106
Magaalada Bothell ........ 108
Magaalada Mercer Island ........ 110
Degmada Dugsiga Renton Lr. 403 ........ 112
Degmada Isbitaalka Dadweynaha ee Degmada King Lr. 1 ........ 116
Jardiinka iyo Aagga Adeegga Madadaalada ee Northshore ........ 118

**Tusmada Musharaxa**
Tusmada Musharaxa ........ 123


## Waxaad heli doontaa **Laba** Buug-yaraha Codbixiyeyaasha

Marka lagu daro buug-yarahaan codbixiyeyaasha, waxaad heli doontaa mid ku qoran Af-Ingiriis oo ka socda Xoghayaha Gobolka. Haddii aadan helin buug-yaraha Gobolka, wac 1-800-448-4881.



## 1

# Yaa is diiwaan gelin kara?

**Si aad isku diiwaan geliso oo aad uga codeyso Washington, waa inaad tahay:**

- Muwaadin Mareykan ah,
- Degane sharci ahaan ku nool gobolka Washington,
- Ugu yaraan 18 sanno jir ah maalinta doorashada,*
- Aan laga mamnuucin codeynta amar maxkamad awgeed,
- Qof aan lagu haynin xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington xukun dambi-weyn oo ka dhacay Washington awgeed iyo,
- Aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federaal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa.

*Haddii aad tahay 16 ama 17 jir, waxaad isku diiwaan gelin kartaa kan **Codbixiyaha Mustaqbalka** ahaan oo si toos ah ayaa laguu diiwaan gelinayaa oo aad u helaysaa warqad codbixin marka aad u qalanto.

## 2

# Sidee baan isku diiwaan geliyaa?

### Oonleenka

Booqo **VoteWA.gov** si aad oonleenka isaga diiwaan geliso. Is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashadaan Guud ayaa la heli karaa ilaa iyo **Oktoobar 27**.

### Boostada

Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta **kce.wiki/VoterReg**. Boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Doorashooyinka Degmada King waa inay foomka **helaan** ugu dambeyn **Oktoobar 27**.

### Shakhsi ahaan

Iska diiwaan geli Xarunta Codbixinta ilaa iyo 8 p.m. Maalinta Doorashada, Nofeembar 4. Ka hel saacadaha iyo goobaha Xarunta Codbixinta Bogga 5-aad, iyo barta **kingcounty.gov/elections**

## Booqo Xarunta Codbixinta

**Codbixiyeyaasha u baahan caawinaadda waxay isticmaali karaan cutubka codeynta ee la heli karo si ay uga caawiyaan inay ku codeeyaan si qarsoodi ah oo sugan. Shaqaalaha Xarunta Codbixinta ayaa diyaar ah inay:**

- diiwaan geliyaan codbixiyeyaasha cusub,
- cusboonaysiiyaan macluumaadka codbixiyeyaasha hore u jira,
- daabacaan warqad codbixin beddelaad ah iyo bakhshadda soo celinta,
- ka jawaabaan su'aalo.

## Booqo Xarun Codbixin si aad u hesho caawinaad shakhsi ahaan ah

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa diyaar u ah inay kaa caawiyaan is diiwaan gelinta si aad u codeeyso oo aad u hesho warqad codbixin ilaa iyo Maalinta Doorashada. Shaqaalo tababaran iyo qalab gaar ah ayaa diyaar u ah si loo caawiyo codbixiyeyaasha naafada ah in ay dhiibtaan warqad codbixin qarsoon, oo madax banaan.

| Goobaha | | Saacadaha Shaqada |
|---|---|---|
| **Renton** | **Doorashooyinka Degmada King**<br>919 SW Grady Way, 98057 | Maalmaha shaqada, Oktoobar 15 – 24,<br>8:30 a.m. – 4:30 p.m.<br>Maalmaha shaqada, Oktoobar 27– 31,<br>8:30 a.m. – 6:00 p.m.<br>Sabti, Nofeembar 1,<br>10:00 a.m. – 4:00 p.m.<br>Isniin, Nofeembar 3,<br>8:30 a.m. – 6:00 p.m.<br>Maalinta Doorashada, Nofeembar 4,<br>8:30 a.m. – 8:00 p.m. |
| **Bellevue** | **Xarunta Bulshada ee Crossroads**<br>16000 NE 10th St, 98008 | Sabti, Nofeembar 1,<br>10:00 a.m. – 4:00 p.m.<br>Isniin, Nofeembar 3,<br>8:30 a.m. – 6:00 p.m.<br>Maalinta Doorashada, Nofeembar 4,<br>8:30 a.m. – 8:00 p.m. |
| **Federal Way** | **Federal Way City Hall (Aqalka Magaalada)**<br>33325 8th Ave S, 98003 | |
| **Kenmore** | **Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada)**<br>18120 68th Ave NE, 98028 | |
| **Kent** | **Kambaska Green River College ee Kent**<br>417 Ramsay Way Ste 112, 98032 | |
| **Seattle** | **Xarunta Dhacdada ee Lumen Field / Tiyaatarka WAMU**<br>800 Occidental Ave S, 98134<br>Ku taal Xarunta Dhacdada ee Lumen Field ee uuna gelitaankeedu yahay<br>Occidental Ave S iyo S Royal Brougham Way. | |

**Baarkinka waa bilaash Xarumaha Codbixinta.**

Baarkin lacag ah ayaa laga heli karaa Goobaha Ka-Qaybgalka Ardayga.

## Goobaha Ka-Qaybgalka Ardayga

### Kambaska University of Washington ee Seattle

Waxay ku yaallaan qolka 145 ee Husky Union Building (HUB), goobaha ka-qaybgalka ardayga ee UW Seattle waxay ardayda siisaa fursad ay isku diiwaan geliyaan si ay u codeeyaan markii ugu horreysay, cusbooneysiiyaan diiwaan gelintooda, helaan warqadda codbixinta beddelka ah, ama ay u isticmaalaan qalabka caawinnaadda. Shaqaalaha doorashooyinka ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha oo ay bixiyaan caawinnaad.

### Kambaska University of Washington ee Bothell

Ardayda u diiwaan gashan inay codeeyaan waxay isticmaali karaan goobta la siiyay si ay u daabacaan warqaddooda codbixinta.

Wax dheeraad ah ka ogow saacadaha shaqada iyo adeegyada.

# Sida loo codeeyo!

1. Akhri buug-yarahaaga codbixiyeyaasha si aad u barrato waxa ku qoran warqaddaada codbixinta.
2. Warqaddaada codbixinta, buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhyadaada.
3. Saxiix xagga dambe ee bakhshadda soo celinta ee warqaddaada codbixinta.
4. Soo celi warqaddaada codbixinta. Haddii ay tahay sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti horre codeey!
5. Raad-raac warqaddaada codbixinta. Booqo kce.wiki/TrackMyBallot ama isku qor helitaanka digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/BallotAlert. Kuwani waa hababka ugu wanaagsan ee lagu ogaado in warqaddaada codbixinta la tiriyay oo codkaaga la maqlay.



## Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (OBMP) waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan. Waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, gaar ahaan kuwa indhooleyaasha ah ama uu araggoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadaystaan.



### Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag halka **kingcounty.gov/elections/obmp.**
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Oonleenka ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay,

  AMA
- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah loo calaamadeeyay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, halka sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada.

  Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacayso warqaddaada codbixinta.




**Haddii aad u baahan tahay caawinaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan la xiriir xafiiskeena halka 206-296-VOTE (8683).**

# Isku Qor Inaad Hesho Digniimaha Warqadda Codbixinta!

Waxaad heli kartaa digniimo qoraal taleefan ama iimeel oo toos ah marka warqaddaada codbixinta ay marayso qayb kasta oo ka mid ah nidaamka, laga bilaabo marka laguugu soo diro boostada ilaa iyo laga tiriyo. Digniimaha warqadda codbixinta sidoo kale waa habka ugu dhaqsaha badan ee lagu ogaan karo haddii ay jirto arrin ku saabsan saxiixaaga.

Markaad doorato, waxaad heli doontaa ogeysiisyada doorashadaan iyo doorashooyinka mustaqbalka. Waad iska bixin kartaa wakhti kasta.

**Raad-raac warqaddaada codbixinta oo isku qor si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/TrackMyBallot**







## Aaway warqaddayda codbixinta?

Booqo **kce.wiki/TrackMyBallot** si aad oonleenka uga raad-raacdo ama aad isugu qorto inaad hesho digniimaha warqadda codbixinta oo aad ku heli doonto iimeel ahaan ama/iyo fariin qoraal taleefan.




## Agabyada lagu heli karo 7 luqadood!

Waxaad heli kartaa warqadaha codbixinta, agabka codeynta, iyo isgaarsiinta oo ah afka Ingiriiska, Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, iyo Fiyatnamiiska.

Ka buuxi foomka codsiga oonleenka barta **kce.wiki/languages** oo waxaad xafiiskeena ka heli doontaa dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqaddii dookhaaga ah.

# Qorshe codeyn! Samayso.

**Bisha(Billaha):** Oktoobar iyo Nofeembar

**Hadafka(Hadafyada):** Codeeyo oo aan codkayga ka dhigo in la maqlo!

**Xasuusin:** Maalinta Doorashada waa Nofeembar 4, 2025

Codbixiyeyaasha Degmada King ayaa si toos ah boostada ugu hela warqadahooda codbixinta ku dhawwaad laba asbuuc ka hor Maalinta Doorashada! Waxaan kugula talinaynaa inaad wakhtigaas u isticmaasho inaad baaritaan ugu samayso musharaxiinta iyo arrimaha, oo aad u samaysato Qorshe Codeyn.

## Qorshahayga Codeynta Doorashada Guud ee Nofeembar!

*Goorma ayaad calaamadayn doonta warqaddaada codbixinta? Dooro taariikh!*

*Dadka qaarkood waxay ka codeeyaan miiska jikada, qaar kalena kafateeriyaha xaafadda. Halkee ayaad ka codeyn doontaa?*

Halkan ku sawir

Halkan ku qor

*Halkee ayaad ka heli doontaa macluumaadka kaa caawin doona inaad samayso doorashadaada? Tusaalooyinka waxaa ka mid ah wararka deegaankaaga, xisbiyada siyaasadeed ee deegaankaaga, iyo Ururka Codbixiyeyaasha ee Haweenka.*

*Warqaddaada codbixinta ma ku soo celin doontaa boostada, mise waxaad isticmaali doontaa sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta?*

Goobaabi Mid




* Haddii aad qorshaynayso inaad isticmaasho boostada, waxaan si heer sare kugula talineynaa inaad warqaddaada codbixinta boostada ku soo dirto ugu dambeyn Jimcaha ka horreeya Maalinta Doorashada.




*Haddii aad isticmaalayso sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta, sanduuqa lagu rido midkee ayaad isticmaali doontaa?*

Booqo **kce.wiki/Sanduuqyada** si aad u aragto khariiradda dhammaan goobaha oo dhan.




*Waxaad codeyn kartaa adigoo isticmaalaya qalin qori, qalin, ama qalinka kalarka! Ma leedahay qalin aad ugu jeceshahay oo aad ku codeyn doonto?*

**Ma fikiraysaa in Qorshahaaga Codeynta uu si gaar ah u wanaagsan yahay? Nagu taag-garee qoraalladaada baraha bulshada @kcelections**

## GOBOLKA




Mushahar (2025):
**$61,997**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Senatarka Gobolka

Senatka Gobolka iyo Golaha Wakiillada ee Gobolka ayaa waxay isku noqdaan laanta sharci dejinta ee dowladda Gobolka. Waxay leeyihiin mas'uuliyad siman oo ah dejinta sharciyada, canshuur ku soo rogidda iyo ururinta canshuuraha, iyo ka gorgortanka mudnaanta miisaaniyadda Gobolka.

Waxaa jira 49 Senatarro Goboleed iyagoo sidoo kale mas'uul ka ah ansixinta magacaabisyada uu sameeyo guddoomiyaha.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Sharci Dejinta*




Mushahar (2025):
**$61,997**

Adeeg ah muddo-xilleed 1-sanno wakhtigeedu weli dhammaanin

### Wakiilka Gobolka

Senatka Gobolka iyo Golaha Wakiillada ee Gobolka ayaa waxay isku noqdaan laanta sharci dejinta ee dowladda Gobolka. Waxay leeyihiin mas'uuliyad siman oo ah dejinta sharciyada, canshuur ku soo rogidda iyo ururinta canshuuraha, iyo ka gorgortanka mudnaanta miisaaniyadda Gobolka.

Waxaa jira 98 Wakiillo Goboleed. Laba xubnood ayaa laga soo doortaa mid kasta oo ka mid ah 49-ka Degmooyinka Sharci Dejinta ee Gobolka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Sharci Dejinta*

## DEGMADA




Mushahar (2025):
**$296,028**

Adeeg ah muddo-xilleed gaaban iyo mid buuxda 3-sanno

### Madaxa Fulinta

La shaqeeya Golaha Degmada ee ku aaddan hirgelinta sharciga. Wada hawl-maalmeedka dowladda hoose ee degmada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada King*[1]




Mushahar (2025):
**$183,312**

Adeeg ah 3 sanno

### Xubinta Golaha Degmada

Dejiya siyaasado oo hirgeliya sharciyo, horumariya oo ansixiya miisaaniyadda degmada, iyo kormeera adeegyada degmada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada golaha ee Degmada King*[1]

## DEKEDDA



Mushahar (2025):
**$61,997**

Adeeg ah 4 sanno

### Guddoomiyaha Dekedda Seattle

Adeeg ku aaddan hawlgelinta, maamulidda, qalabaynta, iyo joogteynta dekedda, iyo dejinta siyaasadda dekedda.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada King*

## MAGAALADA



Mushahar (2025):
**Kala duwan magaalo ahaan**

Adeeg ah 4 sanno

### Duqa Magaalada

La shaqeeya golaha magaalada ee ku aaddan hirgelinta sharciga. Wada hawl-maalmeedka dowladda hoose ee magaalada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*

**Liiska waajibaadyada xafiisyada ee doorashadan ayaa sii socda** ➔



Mushahar (2025): Kala duwan magaalo ahaan

Adeeg ah 4 sanno

### Xubinta Golaha Magaalada

Ansixiya miisaaniyadda magaalada, horumariya sharciyada iyo siyaasadaha, iyo kormeera adeegyada dadweynaha.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*



Mushahar (2025): **$224,492**

Adeeg ah 4 sanno

### Qareenka Magaalada Seattle

U shaqeeya sida qareenka magaalada wuxuuna dacweeyaa dambiyada heerka magaalada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*



Mushahar (2025): **$217,337**

Adeeg ah 4 sanno

### Garsoore Maxkamadda Dowladda Hoose

Dhegaysta oo go'aamiya kiisaska dambiyada yaryar.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*

## DEGMADA DUGSIGA



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Agaasimaha Degmada Dugsiga

Dejiya siyaasadaha dugsiyada, bixiya kormeerka hawlgallada nidaamka dugsiga, oo wakiilna ka ah danaha bulshada ee ku aaddan arrimaha waxbarashada dadweynaha.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada dugsiga*[2]

## DEGMADA UJEEDDADA GAARKA AH



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Degmada Dab-damiska

Adeeg ku aaddan sameynta miisaaniyadda degmada dab-damiska iyo siyaasadaha iyo bixinta oggolaanshaha dab-damiska.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Degmada Biyaha

Adeeg ku aaddan sameynta miisaaniyadda iyo siyaasadaha degmada biyaha ee deegaanka iyo dejinta heerarka biilka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Degmada Bullaacadda/Biyaha Wasakhda

Kormeera degmada bullaacadda si uu u joogteeyo xarumaha, loo daboolo baahiyaha biyaha, loona buuxiyo shuruudaha deegaanka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Isbitaalka Dadweynaha

Kormeera hawlaha isbitaalka bixiyana adeegyo lagu horumarinayo caafimaadka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Garoonka Diyaaradda

Adeeg ku aaddan sameynta miisaaniyadda iyo siyaasadaha degmada garoonka diyaaradaha ee deegaanka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Degmada Jardiinka

Adeeg ku aaddan horumarinta yoolalka, dejinta siyaasado, kormeeridda nidaaminta jardiinooyinka degmada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*

*[1]Sannadkii 2022, codbixiyeyaasha ayaa ansixiyay Wax-Ka-Beddelka Lr. 1 ee Sharciga Degmada King, taasoo u guurisay tartankan sannadaha dhabanka ah. Doorashadaan ka dib, tartankan waxaa lagu go'aamin doonaa sannadaha dhabanka ah oo aan lagu go'aamin doonin sannadaha kisiga ah. Sidaa darteed, qofka la doorto sannadka 2025 ayaa xilka hayn doono 3 sanno.*

*[2]Marka ay dhacayso Doorashada Hordhaca, tartannada Degmada Dugsiga Seattle ayaa waxaa ka codeeya codbixiyeyaasha ku nool gudaha degmada agaasimaha. Marka ay dhacayso Doorashada Guud, dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan ee Seattle ayaa ka codeyn kara dhammaan tartannada Degmada Dugsiga Seattle.*

### Ku Saabsan Doorashada Guud ee Nofeembar ee Washington

Haddii doorasho hordhac loo qabto jago xafiis oo bannaan, labada musharax ee hela codadka ugu badan ee Doorashada Hordhaca ayaa u gudbi doona Doorashada Guud.

Musharax kasta oo u tartamaaya xafiis xisbinimo loo doorto ayaa laga yaabaa inuu sheegto xisbi siyaasadeed oo uu musharaxu doorbido. Doorbididda musharaxa micnaheedu ma aha in musharaxaas uu xisbiga soo magacaabay ama uu xisbiga taageero ka haysto, ama uu xisbigu ansixiyay ama musharaxaas xiriir la leeyahay.

Booqo **kce.wiki/sanduuqyada** si aad u hesho liiska dhammaan sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta ee la heli karo doorashadan. Dhammaan sanduuqyada lagu rido waxay xirmaan markay tahay 8 p.m. oo gaw ah Maalinta Doorashada.

### Auburn

Maktabadda Auburn, 1102 Auburn Way S, 98002

Auburn Park & Ride, 101 15th St NE, 98001

* Xarunta Bulshada Muckleshoot, 17432 SE 392nd St, 98092

### Bellevue

Maktabadda Bellevue, 1111 110th Ave NE, 98004

Xarunta Ganacsiga ee Crossroads (albaabka koonfurta), 15600 NE 8th St, 98008

Maktabadda Newport Way, 14250 SE Newport Way, 98006

CUSUB * North Bellevue Community Center (Xarunta Bulshada ee Waqooyiga Bellevue), 4063 148th Ave NE, 98007

### Black Diamond

Maktabadda Black Diamond, 24707 Roberts Dr, 98010

### Bothell

Maktabadda Bothell, 18215 98th Ave NE, 98011

University of Washington - Kambaska Bothell (u dhaw Xarunta Hawlaha & Madadaalada), 18220 Campus Way NE, 98011

### Burien

Maktabadda Boulevard Park, 12015 Roseberg Ave S, 98168

Fagaaraha Magaalada Burien (geeska 5th Ave SW iyo SW 152nd St), 480 SW 152nd St, 98166

### Carnation

Maktabadda Carnation, 4804 Tolt Ave, 98014

### Covington

Maktabadda Covington, 27100 164th Ave SE, 98042

### Des Moines

* Highline College (albaabka laga soo galo ee ka soo horjeeda 27th Ave), 2400 S 240th St, 98198

### Duvall

* Duvall Police Department (Waaxda Booliiska Magaalada Duvall) - Jardiinka Depot, 26225 NE Burhen Way, 98019

### Enumclaw

Maktabadda Enumclaw, 1700 1st St, 98022

### Fall City

Maktabadda Fall City, 33415 SE 42nd Pl, 98024

### Federal Way

Maktabadda Federal Way 320th, 848 S 320th St, 98003

Federal Way City Hall (Aqalka Magaalada Federal Way), 33325 8th Ave S, 98003

* Safeway – Star Lake, 28810 Military Rd S, 98003

### Issaquah

Issaquah City Hall (Aqalka Magaalada Issaquah), 130 E Sunset Way, 98027

### Kenmore

Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada Kenmore), 18120 68th Ave NE, 98028

### Kent

Maktabadda Kent Panther Lake, 20500 108th Ave SE, 98031

Kent YMCA, 10828 SE 248th St, 98030

Regional Justice Center (Xarunta Caddaalad Goboleedka) u dhaw albaabka laga galo baarkinka, 401 4th Ave N, 98032

### Kirkland

Maktabadda Kingsgate, 12315 NE 143rd St, 98034

Kirkland City Hall (Aqalka Magaalada Kirkland), 123 5th Ave, 98033

*Sanduuqaan waxaa loo guuriyay Goobta Baarkinka ee Kirkland Wester, oo koonfur ka xigta Dhismaha Aqalka Magaalada ee ku yaal 3rd Avenue.*

### Lake Forest Park

Lake Forest Park City Hall (Aqalka Magaalada Lake Forest Park), 17425 Ballinger Way NE, 98155

### Maple Valley

Suuqa Cuntada Hobart, 20250 276th Ave SE, 98038

* Dhismaha Degmada Dugsiga Tahoma, 25720 Maple Valley-Black Diamond Rd SE, 98038

### Mercer Island

Mercer Island Community & Event Center (Xarunta Bulshada & Dhacdada Mercer Island), 8236 SE 24th St, 98040

### Newcastle

Newcastle City Hall (Aqalka Magaalada Newcastle), 12835 Newcastle Way, 98056

### Normandy Park

Normandy Park Towne Center (Fagaaraha Magaalada Normandy Park), 19901 1st Ave S, 98148

### North Bend

Maktabadda North Bend, 115 E 4th St, 98045

### Pacific

Maktabadda Algona-Pacific, 255 Ellingson Rd, 98047

### Redmond

* Redmond City Hall (Aqalka Magaalada Redmond), 15670 NE 85th St, 98052
* Redmond Community Center at Marymoor Village (Xarunta Bulshada ee Redmond ee Xaafadda Marymoor), 6505 176th Ave NE, 98052

CUSUB * Redmond Ridge Park & Ride (Corner of NE Cedar Park Cres and Redmond Ridge Drive NE), 98053

### Renton

Maktabadda Fairwood, 17009 140th Ave SE, 98058

* Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, 98057
* Powell Avenue, 725 Powell Ave SW, 98057
  *Sanduuqa warqadda codbixinta wuxuu yaalaa goob laba baloog u jirta Doorashooyinka Degmada King si fudud ayaana lagu tagi karaa wakhtiyada uu taraafik jaamka jiro.*
  * Xarunta Caafimaadka Dadweynaha Renton, 3201 NE 7th St, 98056

### Sammamish

Sammamish City Hall (Aqalka Magaalada Sammamish), 801 228th Ave SE, 98075

CUSUB South Sammamish Park & Ride, 3015 228th Ave SE, 98075

### SeaTac

Angle Lake Transit Station (Saldhiga Gaadiidka ee Angle Lake), 19955 28th Ave S, 98188

Maktabadda Valley View, 17850 Military Rd S, 98188

### Shoreline

Maktabadda Shoreline, 345 NE 175th St, 98155

Shoreline Park & Ride, 18821 Aurora Ave N, 98133

### Snoqualmie

Maktabadda Snoqualmie, 7824 Center Blvd SE, 98065

### Tukwila

* Tukwila Community Center (Xarunta Bulshada Tukwila), 12424 42nd Ave S, 98168

CUSUB Tukwila Justice Center, 15005 Tukwila International Blvd, 98188

### Vashon

Maktabadda Vashon, 17210 Vashon Hwy SW, 98070

### Woodinville

Woodinville City Hall (Aqalka Magaalada Woodinville), 17301 133rd Ave NE, 98072

Maktabadda Woodinville, 17105 Avondale Rd NE, 98072

## Sanduuqyada Seattle

### Ballard

Ballard Branch Library, Geeska NW 57th St and
22nd Ave NW, 98107

### Beacon Hill

Maktabadda Beacon Hill, 2821 Beacon Ave S, 98144

Kambaska Xaafadda NewHolly, 7054 32nd Ave S, 98118

### Broadview/Greenwood

Maktabadda Broadview, 12755 Greenwood Ave N, 98133

### Bryn Mawr-Skyway

Maktabadda Skyway, 12601 76th Ave S, 98178

### Capitol Hill

Seattle Central College (geeska waqooyi bari ee Broadway-Edison Building), 1701 Broadway, 98122

### Central District

Garfield Community Center (Xarunta Bulshada Garfield), 2323 E Cherry St, 98122

CUSUB 12th & Cherry, 1223 E Cherry St, 98122

### Chinatown/International District

Uwajimaya, 713 6th Ave S, 98104

### Columbia City

Rainier Community Center (Xarunta Bulshada Rainier), 4600 38th Ave S, 98118

### Crown Hill

Safeway – Crown Hill (geeska NW 83rd St iyo Mary Ave NW), 8340 15th Ave NW, 98117

### Downtown

Sanduuqa King Street (Kingdome Deli horteeda), Geeska 2nd Ave S iyo S King St, 98104

### Fremont/Wallingford

Waterway 19 Park (ku dhegan Jardiinka Gas Works), 2119 N Northlake Way, 98103

### Green Lake/Phinney

Green Lake Community Center (Xarunta Bulshada Green Lake), 7201 E Green Lake Dr N, 98115

### Lake City

Maktabadda Lake City, 12501 28th Ave NE, 98125

### Magnolia

* Jardiinka Magnolia, 1461 Magnolia Blvd W, 98199

### Northgate

North Seattle College (u dhow geeska waqooyi bari ee N 95th iyo College Way N), 9600 College Way N, 98103

### Queen Anne

* Maktabadda Seattle Pacific University, 310 W Bertona St, 98119

### Rainier Valley

Rainier Beach Community Center (Xarunta Bulshada Rainier Beach), 8825 Rainier Ave S, 98118

### Sand Point/Laurelhurst

* Jardiinka Magnuson – Dhismaha 406, 6344 NE 74th St, 98115

### South Lake Union

South Lake Union, 310 Terry Ave N, 98109

### South Park

Maktabadda South Park, 8604 8th Ave S, 98108

### University District

Kambaska University of Washington, Hoolka Schmitz (albaabka dhanka Waqooyi NE 41st St), 1410 NE Campus Pkwy, 98195

### Uptown

Suuqa Magaalo Weynta ee Queen Anne, Geeska 1st Ave N iyo Mercer St, 98109

### West Seattle/Delridge

Isgoyska Alaska, Geeska SW Alaska St iyo 44th Ave SW, 98116

Maktabadda High Point, 3411 SW Raymond St, 98126

CUSUB Isgoyska Jardiinka Morgan, 6401 California Ave SW, 98136

South Seattle College (halka laga galo ee dhismaha Robert Smith), 6000 16th Ave SW, 98106

### White Center

CUSUB Jardiinka Steve Cox Memorial, 1321 SW 102nd St, 98146
*Sanduuqa horrey u yaallay Maktabadda White Center ayaa loo wareejiyay Jardiinka Steve Cox Memorial.*

* *Sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta adigoo gaariga saaran*

# Qof Walba Codkiisa Waa Muhiim



## Haddii aad maxkamad u sugayso si laguu xukumo, xabsi ugu jirto xukun dambi-yar awgeed, ama aadan hadda xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn awgeed, **waad codeyn kartaa**.



### 1. Is diiwaan geli.

Iska diiwaan geli oonleenka halka **VoteWA.gov** si aad u codeyso ama ka wac Doorashooyinka Degmada King taleefanka **206-296-VOTE (8683)** si aad u codsato foomka diiwaan gelinta codbixiyaha. Buuxi foomka oo boostada ugu dir **King County Elections, 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057.**

**!** Xuquuqdaada codeynta ayaa si toos ah laguugu soo celinayaa markii aad dhammaysato xukunkaaga xabsiga, **laakiin waa inaad is diiwaan gelisaa!**



### 2. Hel warqaddaada codbixinta.

Waxaad ciwaanka xarunta xabsiga u qoran kartaa sida ciwaankaaga boostada ahaan, ama qof aad jeceshahay ayaa sidoo kale kuu soo gudbin kara warqaddaada codbixinta.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka warqaddaada codbixinta, naga soo wac taleefanka **206-296-VOTE (8683)**. Waxaan la shaqeyn doonaa adiga iyo xarunta xabsiga si aan warqaddaada codbixinta kuu siino.




### 3. Soo celi warqaddaada codbixinta.

Uma baahnid istaambo si aad warqaddaada codbixinta u soo celiso. Waxaa loo baahan yahay inay lahaato shaabadda boostada oo ah Maalinta Doorashada ama ka hor, sidaa darteed waxaan kugula talinaynaa inaad u codeyso sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah si aad u xaqiijiso inay gaarto boostada wakhtigii loogu talagalay oo loogu dhufto shaabadda boostada.

**Doorashooyinka Degmada King waxay aqbashaa wicitaannada ka yimaada xarumaha xabsiga. Naga soo wac taleefanka 206-296-VOTE (8683) oo shaqaale tababaran ayaa ku caawin doonna. Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno!**

# Degmooyinka Sharci Dejinta



# Senatarka Gobolka

## Victoria Hunt

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)



(425) 331-9814
victoria@victoriahunt.com
victoriahunt.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Senatarka Gobolka; Wakiilkii hore ee Gobolka iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Deegaanka iyo Tamarta; Xubin hore oo Golaha Issaquah ah iyo Guddoomiyaha Golaha.

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Madaxa Xogta ee Shaybaarrada Crosswalk, siinaaya dowladaha hoose agabka qiiqa aqalka dhirta lagu koriyo; Xiriiriye Jaamacadeed hore (Affiliate Faculty), Waaxda Qorshaynta iyo Naqshadaynta Magaalooyinka ee UW; Saynisyahan Hore ee halka Breakthrough Energy oo qaabaynaya kala guurka tamarta nadiifka ah iyo korontada.

**Waxbarashada:** PhD ee Deegaanka, University of Illinois; Shahaadada Jaamacadda ee Bayoolajiga, Cornell University.

**Adeegga Bulshada:** Mutadawac Kooxda Waxqabadka Degdegga ah ee Bulshada; mutadawac ka shaqeeya maktabadda dugsiga carruurtayda iyo Bangiga Cuntada iyo Dharka ee Issaquah; u adeegay guddiyada goboleedka ee ka hadlaya arrimaha degmada iyo ilaalinta salmonka.

**Bayaanka:** Sida Senatarkaaga Gobolka ahaan, waxaan ku dhisi doonaa shaqadayda labada xisbi ee sharci-dejinta si aan kor ugu qaado guryaha la awoodi karo, dhaqaale xooggan, maalgashiga gaadiidka, iyo ilaalinta hawadeena, biyaha, kaymaha, iyo dhul-beereedka. Anigoo ah hooyo dugsi dadweynaha, waxaan sii wadi doonaa inaan u dagaalamo waxbarashada K-12, daryeelka carruurta oo la awoodi karo, iyo waddooyinka shaqooyinka iyo jaamacadaha ee qof walba oo da'yar u qalmo.

Xafiiska dhexdiisa, waxaan mudnaan siiyay baahiyaha bulshadeena, sida hagaajinta badqabka Highway 18, booliiska iyo shaqaalaha amniga dadweynaha, iyo maalgashiga caafimaadka habdhaqanka. Waxaan taageeray sharciyada caqliga saliimka ah ee hubka si loo ilaaliyo carruurta iyo bulshada, iyo xukun adag si loo ilaaliyo dhibaneyaasha weerarka. Marka la eego asalka aan ku leeyahay tamarta nadiifka ah iyo sayniska, waxaan horumariyay siyaasado abuura shaqooyin iyadoo la daboolaayo baahiyaha korontada ee bulshooyinkeena iyo ganacsiyadeena sii kordhaaya.

Waxaan sii wadi doonaa inaan la tacaalo caqabadaha maxalliga ah – iyo hanjabaadaha federaalka ee xuquuqdeena iyo dhaqaalaha. Waxaan ahay cod mabda' leh oo u doodaya siyaasado ku saleysan xogta oo taageera qoysaskeena iyo ganacsiyada yaryar, anigoo isla markaa u taagan xuquuqda taranka, dugsiyadeena iyo maktabadaheena, iyo tallaabooyinka wax looga qabanayo isbeddelka cimilada.

*Waxaa taageeray: Dab-damiska Eastside; Ficilka Ilaalinta Washington (Washington Conservation Action); Ururada Shaqaalaha; Guddoomiye Bob Ferguson; Xildhibaan Kim Schrier; Xeer Ilaaliyaha Guud Nick Brown; Meeyarrada Issaquah, Maple Valley, Sammamish, North Bend; iyo qaar kaloo badan.*

## Chad Magendanz

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)



(425) 395-4895
info@magendanz.com
Vote4Chad.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Guddoomiyihii hore ee Guddiga Dugsiga Issaquah oo loo doortay Aqalka Wakiillada (2013-17); Ka shaqeeyay Waxbarashada (Xubinta Darajada), Tacliinta Sare, Farsamada & Horumarinta Dhaqaalaha, Xeerarka, iyo Guddiyada qoondeynta; Loo magacaabay shan maalgelin dugsi ee labada xisbi iyo guddi hawleed tayo leh

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Macallin Sayniska Kombuyuutarka (Bellevue SD); Horumariye Softiweer (Microsoft, Nike, Panasonic, iwm.); Sarkaalka sabmariinka quusaha ee Ciidamada Badda ee U.S.

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Macallinnimada CWU; Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Injineernimada Korontada Iyo Kombuyuutarka ee Cornell University

**Adeegga Bulshada:** U doodaha Sare ee PTA; Mutadawaca Microsoft TEALS; Taliye Ciidamada Mareykanka; Martigeliyaha AFS; Guddiga Shabakadda Waxbarashada ee Eastside; Degane ku nool Tiger Mountain oo leh xaas (36 sannadood) iyo laba wiil (oo ka qalin jebiyay MIT iyo University of Utah)

**Bayaanka:** Wakhti ay sii kordhayaan kala qaybsanaanta iyo kala fogaanshaha Olympia, codbixiyeyaasha degmada 5aad waxay haystaan fursad ay hoggaamiye madax-banaan, oo la xaqiijiyay dib ugu soo celiyaan sharci dejinta gobolka.

Anigoo ah Wakiilkii hore ee Gobolka, waxaan si joogto ah dadka uga horumariyaa siyaasadda. Waxaan dhisay isbahaysi labada xisbi si aan natiijooyinka dhabta ah u gaarsiiyo qoysaska Washington, oo ay ku jiraan horumarka taariikhiga ah ee waxbarashada cilmiga sayniska kombuyuutarka, amniga dadweynaha, teknolojiyada soo baxaya, iyo hoggaaminta gorgortanka lagu laba jibaarayo maalgelinta gobolka ee dugsiyada iyada oo la dhimmayo canshuuraha guryaha ee degmooyinka magaalada hareeraheeda.

Taariikhdaydu waa mid gaar ah. Waxaan u shaqeeyay anoo ahaa sarkaalka sabmariinka quusa ee Ciidamada Badda, ka shaqeeyay horumarinta softiweerka ee Microsoft, iyo hadda waxaan wax ka dhigaa cilmiga sayniska kombuyuutarka ee Degmada Dugsiga Bellevue. Waayo-aragnimadaasi waxa ay qaabaysay ballan-qaadkaygii ahaa in aan casriyeeyo dowladda, oo aan ka dhigo mid tayo leh oo furfuran, iyo in aan hubinno in aan maalgelinayno mustaqbalka, oo aanan khasaarin doolarka canshuur-bixiyeyaasha.

Maanta, Olympia waxay aad diiradda u saartaa guulaha xisbiga halkii ay ka ahaan lahayd baahiyaha maalinlaha ah. Qoysaska ayaa wajahaya canshuuro cusub oo rikoor ah, kharashyo kordhay, iyo dowlad dareemaysa si aad u sii kordhaysa in aanay waxba u la socon. Waxaan u tartamayaa inaan soo celiyo dheelitirka, raadiyo xalal wax ku ool ah, oo aan gobolkeena u keeno natiijooyin muuqda. Waxaan diyaar u ahay inaan mar kale adeego oo aan la shaqeeyo labada xisbi si aan Washington uga dhigo mid dheelitiran, la awoodi karo, oo lala xisaabtami karo. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Wakiilka Jagada Lr. 1

# Janice Zahn

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)



(360) 718-5673
info@janicezahn.org
www.janicezahn.org

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wakiilka Gobolka, Guddiyada: Dowladda Hoose, Guriyeynta, Miisaaniyadda Dakhliga iyo Gaadiidka; Xubinta Golaha Bellevue (2017-2025)

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Madaxa Injineerka iyo Maareeyaha Dhismaha Hawlaha Dadweynaha, Dekedda Seattle; Injineer Qaab Dhismeedka, Injineerrada Berger/ABAM

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda iyo Shahaadada Mastarka Injineerinka Madaniga iyo Fulinta Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, University Of Washington; Leadership Eastside; Leadership Tomorrow

**Adeegga Bulshada:** Ururka Dugsiyada Bellevue, Wakiil; The Sophia Way, Xubinta Guddiga; Shabakadaha Nafaqeynta, Xubinta Guddiga; Ururka Qaranka ee Magaalooyinka, Guddiga Agaasimeyaasha; Machadka Shiinaha ee Injineerrada, Xubinta Guddiga La-talinta; Dugsiga Caalamiga ah ee PTA; Dugsiga Hoose ee Puesta del Sol PTA; Hoggaamiyaha Girl Scout; Hoggaamiyaha PEPS; Guddiga Gaadiidka Bellevue, Guddoomiyaha; Ololaha Bixinta Bulshada Dekedda Seattle, Guddoomiye; Guddiga Cilmi-baarista Gaadiidka, Xubinta Guddiga; iyo qaar kaloo badan.

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan u adeego sidii wakiilkaaga, anigoo Olympia keenaaya dowladda hoose iyo khibradda gaadiidka. Sida soogalootiga jiilka koowaad ahaan, injineer, iyo shaqaale dadweyne oo nolosheeda oo dhan, waxaan keenay natiijooyin la taaban karo oo leh sharciyada daryeelka caafimaadka, hoy la'aanta, iyo kaabayaasha. Xalalkayga mas'uuliyadda dhaqaale leh, dadka-u-horeysiiya waxay kor u qaadaan bulsho kasta. Si wada jir ah, waxaan u dhisi doonaa Washington halkaas oo qof walba uu ku horumari karo.

Taageerooyinka: Dab-damiyeyaasha; Macallimiinta; Waalidnimada Qorsheysan; Golaha Shaqaalaha Gobolka; Shaqooyinka Dhismaha; Tallaabada Ilaalinta Washington; Dimuqraadiyiinta 41aad iyo Degmada King; Guddoomiye Bob Ferguson; Senatar Lisa Wellman; Wakiilka My-Linh Thai; Xildhibaan Adam Smith; Xildhibaan Suzan DelBene; Xubinta Golaha Claudia Balducci; Meeyarrada iyo Xubnaha Golaha ee Bellevue, Mercer Island, Issaquah, Sammamish, Newcastle, iyo in ka badan!

# John Whitney

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)



(425) 208-6109
info@votejohn.org
votejohn.org

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Midna

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Waxaan ku riyaaqay shaqo 35 sannadood oo aan ka shaqeynayay kooxaha maamulka ee dhiseyaal kala duwan iyo shirkadaha guryaha.

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Ganacsiga, University of Denver.

**Adeegga Bulshada:** Muddo 30 sanno ah, waxaan u heellannaa qaabaynta nolosha - hagidda carruurta, lamaaneyaasha da'da yar, iyo dadka waaweyn iyada oo loo maraayo daraasadaha Baybalka iyo wacyigelinta kaniisadda. Waxaan safarro diin faafin ku tagay waddamo kala duwan oo dunida saddexaad ah halkaas oo rajada si ba'an loogu baahan yahay. Waxaan u shaqeeyay si aan ugu adeego qoysaska hoy la'aanta ee dhibaataysan—u furitaanka gurigeena iyo taageeridda bangiga cuntada ee kaniisadda. Dadaalladani waa qayb ka mid ah wicitaan nolosha oo dhan ee lagu caawinayo kuwa kale.

**Bayaanka:** Waxaan qoyskayga ku koriyay Bellevue. Noloshayda waxaan ku qaatay u adeeggida bulshadeena oo loo maraayo iimaan, ma aha siyaasad. Laakiin waan ka daallay inaan daawado Olympia oo iska indha tiraysa qiyaamkeena-- oo hadda waxaan u istaagaaya inaan noo dagaalamo. Waxaan dhimmi doonaa canshuurta, waxaan mudnaanta siin doonaa badqabka dadweynaha anigoo yaraynaya dambiyada, waxaanan dalban doonaa inaan ku laabano aasaaska waxbarashada.

Waxaan keenayaa waayo-aragnimo nololeed oo dhab ah, ma aha ballanqaadyo madhan. Olympia waxay u baahan tahay inay joojiso khasaarinta doolarkeena canshuurta ka dibna ay kor ugu qaadayso si ay u daboosho mashruucyadooda ay xiiseeyaan. Waxaan diyaar u ahay inaan kor u istaago oo aan natiijooyin, kuu helo - dadweynaha, maahan keliya khadka xisbiga.

# Senatarka Gobolka

## Vandana Slatter

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)



(425) 777-0579
friendsofvandanaslatter@gmail.com
vandanaslatter.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Senatar, Degmada Sharci-dejinta 48-aad; *Guddoomiye ku-xigeenka-* Deegaanka, Tamarta, Guddiga Teknolojiyada; *Xubin-* Caafimaadka/Daryeelka Muddada Dheer, Guddiyada Horumarinta Tacliinta Sare/Shaqaalaha; *Guddoomiye wadaag-* Sayniska, Hal-abuurka, Kutlada Teknolojiyada; 2021-24 Sharci-dejiyaha Sannadka ee Ururka Ardayda ee WA; Wakiilkii hore ee Gobolka ee Degmada Sharci-dejinta 48-aad, Xubin Golaha Bellevue.

**Khibrad Xirfadeed Kale:** 20+ sannadood ahaa saynisyahan caafimaad oo ka shaqeeya shirkadaha hormuudka ah ee bayoteknolojiyada oo ay ku jiraan Amgen iyo Genentech; farmashiiste caafimaad oo sharciyeysan.

**Waxbarashada:** Dhakhtarka Farmashiyaha, UW; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, UW; Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga (Farmashiyaha), UBC.

**Adeegga Bulshada:** Golaha Madaxa Jaamacadda ee UW Evans School; Guddiga La-talinta ee Xarunta Ruckelshaus; Guddiga Adeegyada Deegaanka; Youth Link Board (Guddiga Isku Xirka Dhallinyarada); Guddiga Aasaaska Isbitaalka Overlake; Guddiga Gobolka ee Farmashiyaha; Guddiga Aasaaska NARAL ProChoice; Lake Hills Urban Farm.

**Bayaanka:** Sida Senatarkaaga Gobolka ahaan, waxaan keenayaa khibrad saynisyahan ahaan, xirfadyahan daryeel caafimaad, hooyo iyo waalid ciidan oo ku faanaya si aan wax uga qabto mudnaanta maxalliga ah iyada oo ay jirto hubanti la'aan federaali ah. Waxaan bixiyay maalgelinta guryo la awoodi karo, I-405, gaadiidka dadweynaha, iyo dugsiyada maxalliga ah–anigoo diidaya canshuuraha cusub ee ganacsiyada yaryar iyo daryeelka caafimaadka. Anigu waxaan ahay musharaxa keliya ee tartankan ee haysta diiwaanka u dagaalanka qiyaamka aan wadaagno: ilaalinta xuquuqda taranka, xasilloonida kirada qoysaska, taageerada soo galootiga iyo shaqaalaha.

Waxaan kafaala qaaday sharci bixinaaya agabka badqabka dadweynaha iyo maalgashiga caafimaadka habdhaqanka. Waxaan u codeeyay si loo balaariyo tababarada shaqada, xoojinta sharciyada hubka, wax ka qabashada isbeddelka cimilada, dhimmista deynta caafimaadka, iyo inaan hubiyo in isbitaaladu furnaadaan. Anigoo ah hoggaamiyaha kafaala qaadaya "Xogtayda Caafimaadkayga" --mid ka mid ah sharciyada sirta caafimaadka ee qaranka ee ugu xooggan, iyo wax ka beddelka dastuurka ee ilaalinta xuquuqda ilmo iska soo rididda, waxaan ahay u doode la xaqiijiyay ee xorriyadda shakhsi ahaanneed.

Waxaan ahay mushkilad-xalliye oo ay xogtu waddo matalaaya kala duwanaanta bulshadeena iyo ruuxa hal-abuurka leh. Qof kastaa wuxuu u qalmaa fursad uu ku horumaro - waxaan sii wadi doonaa dagaalka si aan taas u suurtageliyo.

Taageerooyinka: Degmada King, Dimuqraadiyiinta 48-aad; Golaha Shaqaalaha Gobolka; Ururka Waxbarashada Washington; Ilaalinta Codbixiyeyaasha; U doodeyaasha Waalidnimada Qorsheysan; Kalkaaliyeyaasha; Hoggaamiyeyaasha Senatka Pedersen, Dhingra iyo saaxiibada Senatka; Wakiilka Ceymiska (Senatarkii hore ee 48-aad) Kuderer; Xildhibaan Randall; Khasnajiga Pellicciotti; Guddoomiye Locke; Xubinta Golaha Balducci; Meeyarrada Redmond, Bellevue, Kirkland, ka badan!

## Amy Walen

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)



(425) 381-1909
amy@amywalen.com
www.voteamywalen.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wakiilka Gobolka ee hadda; Duqa Magaalada Kirkland 2014-2018; Xubinta Golaha Magaalada Kirkland 2009-2019

**Khibrad Xirfadeed Kale:** In ka badan 20 sanno oo waayo-aragnimo ah sida mulkiilaha iyo madaxa fulinta ee ganacsiyada qoyskeena ahaan

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Sharciga, University of Queensland Law School; Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, Cilmiga Siyaasadda, University of Queensland

**Adeegga Bulshada:** Waxaan had iyo jeer ka shaqeeyay sidii aan nolosha uga dhigi lahaa mid u wanaagsan dadka bulshadayda, anigoo u adeegaya doorarka mutadawacnimada iyo madaniga ah ee ururada sida Food Lifeline, Adeegyada Eastside Youth, PorchLight iyo Studio East, iyo xaqiijinta deeqaha waxbarasho ee ardayda si ay u galaan Machadka Farsamada ee Lake Washington (Lake Washington Institute of Technology). Maadaama aan ahay qof ka badbaaday kansarka, waxaan sidoo kale mudnaanta siiya inaan taageero adeegyada qoysaska ay saameeyeen kansarka.

**Bayaanka:** Waxaan 15-kii sanno ee la soo dhaafay ku bixiyay kasbashada kalsoonida codbixiyeyaasha Degmada 48aad—markii hore anigoo ahaa Xubinta Golaha Magaalada Kirkland iyo Duqa Magaalada, haddana anigoo ah Wakiilkaaga Gobolka. Waxaan u tartamayaa Senatarka Gobolka maxaa yeelay degmadaan waxay u qalantaa hoggaan la xaqiijiyay, la heli karo—qof wax dhegaysta, yimaada, oo keena natiijooyin dhab ah.

Olympia, waxaan ka shaqeeyay sidii nolol la awoodi karo oo ammaan ah loogu samayn lahaa qoysaska Eastside. Waxaan ansixiyay sharci si looga saaro deynta caafimaadka warbixinnada amaahda, balaarinta helitaanka guryo la awoodi karo, taageeridda caafimaadka dabeecadda iyo badqabka dadweynaha, iyo difaaca xorriyadda taranka. Anigu ma aha oo keliya mid kafaala qaada sharciyada—waxaan ka shaqeeyaa sidii aan u gaarsiin lahaa dhammaadka.

Waxaan sidoo kale ahay mulkiilaha ganacsi yar, Hooyo, iyo qof ka badbaaday kansarka. Waxaan shakhsi ahaantayda la kulmay nidaamyo burburay, waxaanan u keenaa naxariis, mas'uuliyad dhaqaale, iyo wax ku oolnimo dood kasta oo siyaasadeed. Waxaan ogahay waxa bulshooyinkeena ay wajahayaan—maxaa yeelay waan ku noolaa oo waana ku dhex hoggaamiyey.

Tani waa wakhti u baahan degdeg, isla xisaabtan, iyo waayo-aragnimo. Dadka aad ku kalsoon tahay ayaa igu kalsoon—Dimuqraadiyiinta, ururada shaqaalaha, iyo mulkiileyaasha ganacsiga yar. Waxay arkeen shaqada aan qabtay waxayna ogyihiin inaan sii wadi doono inaan u soo muuqdo degmadaan. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan sii wado u adeegiddaada anigoo ah Senatarkaaga Gobolka ee xiga.

# Wakiilka Jagada Lr. 1

## Osman Salahuddin

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)



(202) 240-8370
osman@electosman.com
www.electosman.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wakiilka Gobolka, Degmada Sharci-dejinta 48aad; Xubinta Golaha Magaalada Redmond

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Waayo-aragnimadii hore waxaa ka mid ah Lataliyaha Aaladda Caafimaadka, Fred Hutchinson Cilmi-baare Kansarka, Maamulaha Hawlgelinta Bulshada Degmada King, iyo mulkiilaha dukaan kafee

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Neurobiology (Bayoolajiga Neerfaha) & Taqasus Yar Ingiriis, University Of Washington (Madaxweynaha Ururka Ardayga; Ka Qalin Jebiyay LWSD)

**Adeegga Bulshada:** Xubinta Guddiga Isbahaysiga Xulashada Gaadiidka, Aasiyaanka Jasiiradyahanka Baasifigga Ameerikaanka ee Xoojinta Madaniga ah, OneRedmond Foundation, Nidaamka Deegaanka Shaqooyinka Caafimaadka, Qareennada Caawinaaya Carruurta Baahan; Xubin ka tirsan Guddiga Waxbarashada Farsamada & Xirfadda LWSD, Dab-damiska iyo Badbaadinta Eastside; Tababarihii hore ee dhallinyarada kubadda kolleyga ee Redmond

**Bayaanka:** Sida Wakiilkaaga Gobolka ahaan, waxaan diiradda saarayaa inaan keeno natiijooyin - horumarinta amniga dadweynaha, gaadiidka, iyo ilaalinta deegaanka anigoo u dagaalamaya shaqaalaha iyo ganacsiyada yaryar. Sida Xubin ka tirsan Golaha Redmond oo noloshayda oo dhan ahaa Eastsider, waxaan fahamsanahay mudnaanta maxalliga ah: guryo la awoodi karo, dugsiyo adag, helitaan daryeel caafimaad, iyo ilaalinta xorriyaddeena. Waxaan u tartamayaa inaan u adeego bulshadeena si daacadnimo leh iyo go'aan qaadashada natiijooyin caqli-gal ah.

*Taageerooyinka: Senatar Maria Cantwell; Xildhibaan Suzan DelBene; Guddoomiye Bob Ferguson; Xubinta Golaha Degmada Claudia Balducci; Meeyarrada Redmond, Bellevue, iyo Kirkland; Dimuqraadiyiinta 48-aad; Ururka Waxbarashada WA; Golaha Shaqaalaha Gobolka; Dab-damiska Redmond; Ururka Ganacsiga WA; Isbahaysiga Waalidnimada ee Qorsheysan; iyo qaar kaloo badan!*

## Dennis Ellis

(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)



(425) 829-9250
info@vote4dennis.com
www.vote4dennis.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Shirkadda Boeing: Falanqeeyaha Maaliyadeed ee Wax iibsiga Sare, Falanqeeyaha Kereditka, Falanqeeyaha Maaliyadeed Sare, Maamulka Hantida Khatarta Sare, Falanqeeyaha Maaliyadda. Waxaan sidoo kale ka helay khibrad ganacsi oo la taaban karo xagga xisaabaadka, maaliyadda, maamulka, dhismaha, wax soo saarka, horumarinta ganacsiga, iyo la-talinta intii lagu jiray 34 sanno ee aan Redmond joogay. Xirfadahaan waxay noqon doonaan kuwo faa'iido leh sida wakiilkaaga ahaan. Ugu dambeyntii, waxaan sidoo kale ahay halyeey hore oo ku faanaya Ciidamada Cirka ee Mareykanka waxaanan ku dhaartay in aan taageerayo oo difaaci doono Dastuurka Dalka Mareykanka. Waxaa iga go'an oo aan ku sii jirayaa dhaartayda.

**Waxbarashada:** Gonzaga University, Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Ganacsiga; Seattle University, Shahaadada Mastarka ee Dhaqaalaha

**Adeegga Bulshada:** Kaniisadda Timberlake, Guddoomiyaha Jamhuuriga ee Degmada Sharci-dejinta 48aad

**Bayaanka:** Sharci-dejiyeyaasha hadda jira waxay soo jeedinayaan isla siyaasadihii fashilmay: canshuuraha sii kordhaaya, dowlad weyn, iyo xakamaynta xad-dhaafka ah. Waxaan u baahanahay aragti cusub, oo muxaafid ah oo ku saabsan arrimaha kor u qaadaya qiimaha nolosha oo sii xumaynaya tayada nolosha ee bulshooyinkeena. Taas ayaan bixin doonaa. Canshuuraha xad dhaafka ah waxay kor u qaadaan qiimaha cuntada, gaaska, guryaha, iyo hawlaha ganacsiga, waxay dadweynaha siiyaan faa'iido yar, waxayna warshadaha ka saaraan deegaanka. Marka la i doorto, waxaan ku bixin doonaa wakhti si aan u dhimmo canshuuraha iyo khidmadaha, baabi'inta barnaamijyada qaaliga ah, iyo dib ugu soo celinta maamulka dadka Washington.

Waxaa taageeray KCGOP iyo Jamhuuriyiinta Degmada Sharci-dejinta 48aad

# Degmooyinka Golaha Degmada King



# Madaxa Fulinta

## Girmay Zahilay



campaign@electgirmay.com
electgirmay.com

**Waxbarashada:** University of Pennsylvania (Shahaadada Sharciga); Wharton School of Business Certificate (Shahaadada Dugsiga Ganacsiga ee Wharton); Stanford University; Dugsiga Sare ee Franklin

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha, Golaha Degmada King; Guddiga Sound Transit; Qareen Hore, PerkinsCoie

**Bayaanka:** Waxaan ku faanayaa inay i taageereen Guddoomiyaha Gobolka Bob Ferguson, Xildhibaan Pramila Jayapal, Xildhibaan Adam Smith, Xeer Ilaaliyaha Guud Nick Brown, U doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada La Qorsheeyay, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Dimuqraadiyiinta Degmada King, hoggaamiyeyaasha ganacsiga iyo inta ugu badan ururada shaqaalaha. Waxaan kasbaday taageeradooda sababtoo ah rikoodhkayga aan lala barbardhigi karin cid kale iyo aragtidayda cad ee mustaqbalka Degmada King.

Dad badan ayaa wax walba si sax ah u sameynaya haddana weli dib u dhacaya. Kadib tobanaan sanno oo ballanqaadyo fashilmay iyo qorshe aan isbeddel lahayn, dhammaanteen waan niyad jabsanahay. Waxaan sameyn karnaa si ka wanaagsan. Madaxa fulinta ahaan, waxaan si joogto ah diiradda u saari doonaa isla xisaabtanka. Doolar kastaa oo canshuur ah waa inuu keenaa bulshooyin ammaan ah, caafimaad qaba, oo la awoodi karo.

Waan ogahay sida ay u adag tahay in la daboolo baahiyaha nolosha. Waxaan ku soo barbaaray Koonfurta Seattle anigoo ay i korisay hooyo keliya ka dib markii qoyskeena uu ku yimid qaxooti ahaan. Waxaan la kulanay hoy la'aan, waxaan ku noolayn guryaha dadweynaha, waxaana ku tiirsanayn kaararka raashinka. Maanta, waxaan ahay nin xaasle ah iyo aabbe ku korinaaya isla qoyskiisa halkan. Taasi waa waxa i wada sidii aan dowladda uga dhigi lahaa mid si ka wanaagsan ugu shaqeysa qof walba.

Khibraddaas ayaa sidoo kale igu hoggaamisay nolol adeeg ah. Waxaan karaani ka ahaa Aqalka Cad ee Maamulka Obama, waxaan ka shaqeeyay sharciga ee halka shirkadaha ugu sareeya ee qaranka, waxaanan aasaasay oo maamulay urur qaran oo aan faa'iido doon ahayn oo waxbarashada dhallinyarada ah. Waxaan xirfaddayda shaqo ku kharash gareeyay ballaarinta fursadaha iyo keenista natiijooyinka.

Sida Guddoomiyaha Golaha ahaan, waxaan hoggaamiyey shaqada lagu maalgelinayo xarumaha soo kabashada balwadda cusub, maalgelinta nidaamka jawaab-bixiyeyaasha koowaad ee ammaanka dadweynaha, ansixinta sharciyada ka hortagga ka saarista si dadka loo dejiyo, horumarinta istiraatijiyadda ka hortagga rabshadaha hubka ee Degmada King, kordhinta mushaharka ugu yar, iyo maalgelinta kumanaan guryo la awoodi karo oo cusub.

Kuwani waa xalal dhab ah. Madaxa Fulinta ahaan, waxaan si toos ah u wajihi doonaa caqabadaha degdegga ah ee na haysta—soo afjaridda hoy la'aanta, hagaajinta amniga dadweynaha, difaacidda xuquuqda taranka, ballaarinta daryeelka la xiriira balwadda, wax ka qabashada isbeddelka cimilada, iyo ka caawinaadda ganacsiyada yaryar inay kobcaan. Haddii aad diyaar u tahay hoggaamiye cusub oo wax qabta, sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Claudia Balducci



info@claudiabalducci.com
claudiabalducci.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Sharciga, Columbia University; Shahaadada Jaamacadda, Providence College; Xarunta Sharciga Haweenka ee NW (Codka Sharciga)

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Degmada (Guddoomiye 2020-2023); Ku-xigeenka Guddoomiyaha Sound Transit; Meeyarkii Hore ee Bellevue

**Bayaanka:** Degmada King waxay ku sugan tahay marxalad adag — ganacsiga sidii caadiga ahaydna ma shaqeynayso. Deris badan ayaa laga saaray qiimaha. Hoy la'aannimada weli waa dhibaato. Ka-noqoshada xuquuqda waxay khatar ku tahay badqabka iyo dhaqaalaha bulshadeenna. Wakhtiyadan aan la hubin waxay u baahan yihiin hoggaamin la xaqiijiyay tobanaan sano oo aan keeno. Aniga ayaa ah musharaxa keliya ee leh waayo-aragnimo fulineed oo hoggaaminaya hay'ad weyn iyo rikoodh hagaajinta nidaamyada jaban. Sida Madaxa Fulinta ahaan, waxaan hubin doonaa in doolar kasta uu keeno natiijooyin dhab ah oo la cabbirri karo. *Seattle Times ayaa iigu yeertay "kan ugu habboon ee ku hoggaamin kara gobolka maalmo wanaagsan."*

Waxaa iga go'an inaan noqdo "Maamulaha Guryaha" ee Degmada King, waxaan keenay kumanaan guryo cusub ah oo aan dhigay aasaaska boqolaal kun oo kale, iyo sidoo kale hoyga degdegga ah iyo guryaha taageerada leh. *Urbanist ayaa taageeray qorshahayga ah in la dhiso 44,000 oo kale, isagoo ku tilmaamay "mid hammi leh oo la gaari karo."*

Horrey u ahaan jiray hoggaamiye amni oo heer degmo ah, waxaan isku dheelitiri doonaa isla xisaabtanka iyo naxariista si aan bulshooyinka u sugo amnigooda. Ururka Moms Demand Action ayaa i siiyay "Sharaf Musharax" sababtoo ah yareynta rabshadaha hubka *iyo shariifkii hore Sue Rahr ayaa taageertay "fahamkayga nidaamka, awoodda aan u leeyahay in aan isbeddel sameeyo, iyo shaqadayda joogtada ah ee ku wajahan bulshooyin ammaan ah."*

Waxaan ka adkaaday mucaaradad xooggan si aan u ballaariyo tareenka fudud ee Eastside waxaanan u keenayaa adeegga South County ka hor jadwalka, marka lagu daro hagaajinnada gaadiidka dadweynaha iyo lugeeyeyaasha/baaskiillada. *Transportation4WA waxay iigu yeertaa "hoggaamiyaha aan la isku qilaafi karin ee gobolka ee ballaarinta tareenka fudud, amniga gaadiidka, & dhisidda waddooyinka socodka ee guud ahaan degmada."*

Waxaan adeegsan doonaa khibraddayda sharciga si aan ula dagaalamo faragelinta federaalka, laga bilaabo caddaaladda taranka ilaa xuquuqda soogalootiga iyo LGBTQ+. *Hagaha Codbixiyeyaasha Horusocodka ah wuxuu ammaanay aragtidayda ku saabsan "degmo midaysan, firfircoon, oo cimilada u wanaagsan halkaas oo dhammaan deganeyaashu ay ku barwaaqoobi karaan."*

Ballanqaadkayga adiga kugu aaddan: hoggaamin la xaqiijiyay si loo gaarsiiyo natiijooyin geesinimo leh *iyo* kuwo la gaari karo. *Waxaa taageeray: The Seattle Times; Dab-damiyeyaasha; Dimuqraadiyiinta Degmada King ; Golaha Guryaha La Awoodi Karo; ransportation4WA; Qabiilka Snoqualmie; La Guulayso Dumarka; Isbahaysiga Ganacsiga Eastside; Ururada Shaqaalaha; 18 Duq Magaalo; in ka badan 100 hoggaamiyeyaal la doortay iyo kuwa bulshada.*

## Golaha Degmada Lr. 1

### Rod Dembowski



(206) 922-8822
info@vote4rod.com
www.vote4rod.com

**Waxbarashada:** Dugsiyada Dadweynaha ee Renton; Georgetown University, Maamulka Ganacsiga & Dowladda, cum laude; UW Law School.

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Degmada; Hore: Qareenka shaqada gaarka ah; Falanqeeyaha Maaliyadda

**Bayaanka:** Rod Dembowski waa Xubin Golaha oo diiradda saaraya bulshada, natiijooyinka ku jihaysan, oo ku xidhan adeegga iyo ka go'an inuu horumariyo nolosha deganeyaasha degmada King. Rod, oo leh rikoor la xaqiijiyay oo ah sameeye siyaasado madax-bannaan oo horumarsan, waligiis ma seegin cod. Waxaa loo magacaabay Masuulka La Doortay ee Sannadka ee Ururka Degmooyinka. Rod wuxuu heellan yahay in uu wax ku ool ah uga jawaabo dhibaatooyinka ugu waaweyn ee gobolka: caafimaadka iyo badbaadada, awoodda wax iibsiga, ilaalinta, iyo saboolnimada.

*Caafimaadka & Ammaanka.* Rod ayaa hogaaminayay dadaallada lagu maalgelinayo Barnaamijka Jawaabta Dhibaatada Goboleedka ee Waqooyiga Degmada King, kaas oo isku xira xirfadlayaasha caafimaadka maskaxda iyo kuwa ugu horreeya ee ka jawaaba xaaladaha degdegga ah. Rod wuxuu taageeray Machadka Daryeelka Dhaqanka ee Harborview, wuxuu sii waday in la furo rugaha caafimaadka dadweynaha, wuxuuna ka shaqeynayaa in la dhiso xarumaha daryeelka degdegga ah iyo kooxaha jawaabta moobilka, guud ahaan degmada. Rod wuxuu kordhiyay ammaanka Metro Transit, wuxuu abuuray barnaamijka iibsashada hubka ee Degmada King, wuxuuna hirgeliyay nidaamyada kormeerka waxtarka leh ee fulinta sharciga.

*La awoodi karo*. Sida Guddoomiyaha Guddiga Miisaaniyadda, Rod wuxuu ka shaqeeyay inuu maareeyo kharashka barnaamijyada degmada King, isagoo hubinaya waxtarkooda iyo horumarinta dib-u-habeynta. Wuxuu yareeyay soo jeedimaha canshuurta iyo kharashaadka, wuxuu ka dhigay gaadiidka dadweynaha mid la awoodi karo, wuxuuna hubiyay in waayeelka iyo halyeeyada naafada ah ay helaan dhimista canshuurta hantida ee ay kasbadeen.

*Ilaalinta*. Rod wuxuu helay in ka badan $100 milyan oo loogu talagalay jardiinooyinka, waddooyinka socodka, goobaha furan iyo biyaha ee waqooyiga degmada King. Wuxuu afar jibaaray maalgelinta Barnaamijka Mustaqbalka Ilaalinta ee Degmada King. Wuxuu qoray sharci lagu yareynayo gaaska aqalka lagu koriya dhirta ee Metro Transit, wuxuuna ansixiyay qorshaheenna tallaabooyinka cimilada.

*Taageeridda Kuwa U Baahan.* Rod wuxuu aaminsan yahay awoodda Degmada King inay nolosha beddesho oo ay caawiso deriskeenna baahan. Wuxuu ka shaqeeyay furitaanka hoyga haweenka waayeelka ah ee Kenmore iyo hoyga Oaks ee Shoreline. Wuxuu kordhiyay maalgelinta taageerada cuntada wuxuuna ka shaqeynayaa sidii uu u hubin lahaa in qofna uusan gaajo ugu dhiman degmada King.

*Taageerayaasha waxaa ka mid ah:* Waalidnimada la qorsheeyay, Waxqabadka Ilaalinta Washington, Dab-damiyeyaasha Shoreline/ Northshore, Ururka Shaqaalaha MLK, Mashiiniisteyaasha, Hawl-wadeennada Gaadiidka, Dallaalyaasha Hantida Ma Guurtada, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Gudoomiyaha Gobolka Ferguson, Xildhibaan Jayapal & DelBene, Duqooyda Magaalada Degmada 1aad oo dhan.

**Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta xaqiiqda saxda ah ee bayaannada musharaxa iyo cabbirka.**

# Golaha Degmada Lr. 3

## Sarah Perry



(206) 228-0505
sarah@electsarahperry.org
electsarahperry.org

**Waxbarashada:** Seattle University iyo Ohio State baranaaya hoggaanka isbeddelka, cilmiga siyaasadda

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Degmada King, mulkiile hore ee ganacsi yar, madaxa fulinta urur aan faa'iido doon ahayn

**Bayaanka:** Ka dib markii ay qabatay in ka badan 700 kulan oo ay la yeelatay deriska, mulkiileyaasha ganacsiyada yaryar, kuwa ka jawaaba xaaladaha degdegga ah, iyo kuwo kale intii lagu jiray muddadii ugu horreysay, iyo iyadoo heshay kumanaan jawaabood oo ku saabsan sahanka sannadlaha ah ee degmada oo dhan, Sarah waxay si qoto dheer u fahamsan tahay mudnaanta degmada, waxayna leedahay rikoor muujinaya inay wax u qabatay, oo ay ku jiraan in ka badan $275 milyan oo maalgashi ah oo ku saabsan Degmada 3.

Maadaama maalgashiga kaabayaasha iyo badbaadada ay yihiin mudnaanta ugu sareysa ee degmada, Sarah waxay mudnaanta siisay badbaadada waddooyinkeena iyo buundooyinkeena, waxay ballaarisay helitaanka gaadiidka lagu kalsoonaan karo, waxayna heshay maalgelin federaal ah oo loogu talagalay waddada cusub ee baaskiilka Eastrail, waxayna diyaarisay ballaarinta tareenka fudud, iyadoo taageertay maalgelinta Gaadiidka Snoqualmie Valley. Waxay sidoo kale kordhisay maalgelinta ku aaddan shariifowgeena si ay u kordhiyaan roondada aagagga aan la midowga ahayn.

Sarah oo ah halyeey deegaanka, waxay mudnaanta siisaa biyo nadiif ah, deegaan caafimaad qaba, iyo meelaha furan. Iyadoo ka go'an inay guryaha la awoodi karo ay noqdaan kuwo la heli karo dhammaan heerarka dakhliga, waxay abuuraysaa dhiirigelin dhanka deegaanka ah si loo dhiso unugyo guri oo badan waxayna u qoondeysay in ka badan $166 milyan oo loogu talagalay guryaha la awoodi karo iyo kuwa taageerada leh. Sarah, oo ah hooyo iyo mulkiilaha ganacsi yar oo hore, waxay fahamsan tahay cadaadiska dhaqaale ee aan wajahayno iyo baahida loo qabo in laga saaro caqabadaha aan loo baahnayn ee guusha dhammaan. Waxay u taagan tahay dhaqaalaha magaalooyinka iyo miyiga, iyadoo taageereysa ganacsiyada yaryar iyo beeraha.

In kasta oo ay jirto hubanti la'aanta federaalka, Sarah waxay si adag u taageertaa rugaha caafimaadka iyo adeegyada degdegga ah. Codkeena, waxay ku dhisi doontaa rikoodhkeeda hoggaaminta fikirka leh iyo natiijooyinka diiradda saaraya, iyadoo ilaalinaysa caafimaadka, xuquuqda, iyo barwaaqada dadka shaqeeya ee adag ee gobolkeena ugu yeera guriga.

*Waxaa taageeray Qabiilka Snoqualmie Indian; Xubnaha Kongareeska Schrier, DelBene, Smith; Guddoomiyaha Ferguson; Guddoomiyaha Dhulalka Dadweynaha Upthegrove; sagaal duq magaalo oo maxalli ah; Tallaabada Ilaalinta Washington; Dab-damiyeyaasha Eastside iyo Redmond; Ururka Shaqaalaha MLK iyo Golaha Ganacsiga Dhismaha; Golaha Guryaha La Awoodi Karo; Waalidnimada Qorsheysan; Dimuqraadiyiinta Degmada King; Dimuqraadiyiinta LD 1aad, 5aad, 12aad, 41aad, 45aad, iyo 48aad; iyo in ka badan 200 oo hoggaamiye la soo doortay iyo kuwa maxalli ah.*

## Rob Wotton



(425) 241-3445
rob@robwotton.com
robwotton.com

**Waxbarashada:** MBA, Pacific Lutheran University; BA, Maamulka Ganacsiga iyo Cilmiga Siyaasadda, University of Puget Sound

**Shaqo iyo Xirfad:** Bangiga Bulshada; Xubinta Golaha Magaalada Snoqualmie

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan abuuro Degmada King *oo ka xoog badan, ka ammaan badan, oo la awoodi karo*. Degmadayadu waxay buuxdaa karti, balse waxa aynu u baahan nahay hoggaan mudnaanta siinaya waxa ugu muhiimsan. Waxaan xaqiijin doonaa in doollar-ka canshuurtaada si xikmad leh loo adeegsado, diiradduna ay tahay badbaadada dadweynaha, la-awoodi-karaanta guryaha, iyo fursadda dhaqaale.

Anigoo ah hoggaamiye ganacsi maxalli ah, hoggaamiye guddiyo aan-faa'iido-doon ahayn, iyo xubin golaha magaalo, waxaan dhisay rikoore xallinaya dhibaatooyin iyadoo la dhex shaqeynayo xayndaabyada maaliyadeed ee jira. Waxaan caawiyay ururo inay ka gudbaan caqabadahooda ugu adag. Waxaan hoggaamiyaa anigoo *si qoto dheer u dhegaysta, si geesinimo leh u tallaabsada, oo keenaaya isbeddel waara*.

Ammaanka dadweynuhu waa mudnaanta koowaad. Anigoo ah Guddoomiyaha Badbaadada Dadweynaha ee magaalada aan ku noolahay iyo xubin ka tirsan Guddiga Sharci Goboleedka, Ammaanka, iyo Caddaaladda, waxaan sii wadi doonaa u-doodista sii haynta xarumaha lama-huraanka ah anagoo adeegsanayna xalal caqli-gal ah oo naxariis leh, sida ballaarinta helitaanka daaweynta caafimaadka dhimirka iyo balwadda. Waxa aynu ilaalin karnaa bulshooyinkeena annagoo si sharaf leh u wajahna sababaha aasaasiga ah.

La-awoodi-karaanta guryaha waa arrin shakhsi ah. Waxaan rabaa in carruurtayda—iyo tiinna—ay yeeshaan ikhtiyaarka ay halkan ku noolaadaan. In ka badan toban sano, waxaan isu keenay hoggaamiyeyaasha bulshada, khubarada guryaha, iyo maalgeliyeyaasha si loo abuuro xalal dhab ah. Horumar baan sameynay, waxaana diyaar u ahay inaan shaqadan ka dhigo mid heer-degmo ah si loo ilaaliyo oo loo ballaariyo guryaha la awoodi karo.

Sidoo kale waxaan u doodayaa shaqooyinka maxalliga ah iyo hal-abuurnimada. Waxaan aasaasay SnoValley Innovation Center si aan u siiyo kheyraad bilaash ah shirkadaha bilowga ah iyo ganacsiyada. Markii COVID ay ku qasabtay ganacsiyo inay xirmaan, waxaan caawiyay tiro badan oo ganacsiyo ah si ay u helaan gargaarkii ay u baahnaayeen annagoo keenay in ka badan $3 million oo gargaar ah dhaqaalaha maxalliga ah. Markii ay u baahdeen caawinta buuxinta shaqooyinka, waxaan abuuray, maamulay, isla markaana is-maalgeliyay SnoValleyJobs.com, anigoo isku xiray in ka badan 50,000 raadiyeyaasha shaqada ah iyo 150 loo-shaqeeye.

Waxaan la imaanayaa *tamar, khibrad, iyo hab-dhaqan natiijo-diirran*. Wadajir, waxa aynu u dhisi karnaa Degmada King oo qof walba u shaqeysa. Aan hore u soconno—wadajir. Waxaan sharaf u arki lahaa inaan kasbado codkaaga.

# Golaha Degmada Lr. 5

## Peter Kwon



(425) 417-8454
PeterSeaTac@gmail.com
www.PeterKwon.com

**Waxbarashada:** Shahaado-Bellevue College/University of Washington: Shabakadda iyo Xisaabinta Kombuyuutarka; Ururka Magaalooyinka Washington, Shahaadada Hoggaaminta Dowladda Hoose.

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Sare ee Nidaamyada, Farsamada Dhijitaalka ah; Agaasimaha Mashruuca, Korean American Institute (Machadka Kuuriyaanka Ameerika).

**Bayaanka:** Koonfurta Degmada King waxay u qalantaa hoggaamiyeyaal xalliya dhibaatooyinka – ma aha oo keliya kuwa ka hadla. Markii xaafaddayda ay la kulantay xatooyo boosto, waxaan abaabulay oo aan helay sanduuqyo boosto oo sugan. Markii waayeellada ay ku dhibtoonayeen ilaalinta deyrarkooda, waxaan abaabulay nadiifinta xaafadaha. Kadib markaan arkay dadaalladayda heer-hoose oo helaya natiijooyin, derisyadu waxay igu dhiirigaliyeen inaan u tartamo golaha magaalada.

Waxaan u soo shaqeeyay sida Xubinta Golaha ee Magaalada SeaTac muddo toban sanno ah anigoo leh rikoor guul leh. Anagoon kor u qaadin canshuuraha magaalada, waxa aanu u rognay hoos u dhac dhaqaale mid xad-dhaaf ah anagoo balaadhinay jardiinooyinka, yaraynta wakhtiyada ka jawaabta booliiska 40%, iyo kordhinta adeegyada aadanaha. Magaalada SeaTac ma laha hoy la'aan - waxaan u helnaa guryo.  Waxaan ka caawinay furitaanka 30 xarumo cusub oo lagu xanaaneeyo carruurta.  Intii lagu jiray cudurka faafaha, waxaanu ilaalinay adeegyada muhiimka ah, waxaanu siinay deeqo ganacsiyada halgamaya, waxaanu mudnaanta siinay baahiyaha dadkayaga aadka u nugul. Waxaanu dhisnay in ka badan 2,000 oo guri oo la awoodi karo oo laga dhisay saldhigyada tareennada fudud.

Hadda waxaan u tartamayaa Golaha Degmada King si aan u keeno isla anshaxa maaliyadeed, hoggaaminta bulshada loo hormariyo, iyo muhimadda wada shaqeynta ee halka Degmada King. Waxaan diiradda saari doonaa kordhinta helitaanka adeegyada caafimaadka habdhaqanka iyo dadweynaha, guryaha la awoodi karo, hagaajinta amniga dadweynaha, iyo ballaarinta gaadiidka.  Waxaan caawin doonaa ganacsiyada yaryar, tababarada ururka shaqaalaha, iyo barnaamijyada tababarka shaqada si aan u hubiyo in qof kasta oo degane ah uu horumari karo.

Waxaan aaminsanahay in madaxda la doortay ay tahay inay dhegaystaan. Subax kasta oo Axad ah tobankii sanno ee la soo dhaafay, waxaan diyaar ka ahaa dukaannada kafeega xaafadda si aan u maqlo welwelka iyo fikradaha deganeyaasha. Waxaan ka shaqeeyaa Guddiga Ururka Qaranka ee Magaalooyinka oo aan ka soo shaqeeyay in ka badan 20 guddiyada gobolka iyo komishannada horumarinta nolosha ee Koonfurta Degmada King.

Aad ayaan ugu faraxsanahay in ay i taageeraan hoggaamiyeyaal badan oo deegaanka ah, xubnaha bulshada, iyo u doodeyaasha shaqada. Si kastaba ha ahaatee, taageerada ugu muhiimsan waa adiga. Waxaa sharaf ii ah inaan kasbado codkiina oo aan kugu matalo, khibrad, hawlkarnimo, edeb, iyo dadaal qoto dheer oo aan u hayo bulshadeenna.

## Steffanie Fain



(253) 237-3361
steffanie@steffaniefain.com
www.steffaniefain.com

**Waxbarashada:** Seattle University Law School, Macalester College

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareenka daryeelka caafimaadka iyo shaqaaleynta; Madaxweynaha Guddiga Xarunta Caafimaadka ee Harborview

**Bayaanka:** Koonfurta Degmada King waxay u qalantaa hoggaamin adag oo keenta natiijooyin dhab ah. Muddo aad u dheer, bulshadeenna waa la iska indho-tiray marka laga hadlayo kheyraadka iyo taageerada. Waxaan u tartamayaa Golaha Degmada King si aan mudnaan uga dhigno baahiyadeenna: hoos ugu dhigno kharashaadka maalinlaha ah, xoojinta ammaanka dadweynaha, dhisidda guryo badan, iyo horumarinta helitaanka adeegyada caafimaadka dhimirka iyo daaweynta balwadda.

Dhammaanteen waan daalnay nidaamyo jabay iyo ballanqaadyo maran. Sida qareen ahaan, hooyo ilmo u dhigtaan dugsiyada dadweynaha ah, oo xubin ka ah PTSA ah, iyo Madaxweynaha Guddiga Wakiillada ee Harborview, waxaan xirfaddayda u huray isku keennida dadka si aan u xallino dhibaatooyinka. Waxaan garanayaa sida loo helo kheyraadka halka loo baahan yahay, oo waxaan hoggaamiyeyaasha kula xisaabtamayaa inay keenaan natiijooyin. Taasi waa nooca khibrad iyo degdeg ah ee Koonfurta Degmada King u baahan tahay hadda.

Sida musharaxa keliya ee Xisbiga Dimuqraadiga iyo musharaxa keliya ee tartankan, kaas oo si guul leh u hoggaamiyey hey'ad maamul goboleed, waxaan ku faraxsanahay inaan helo taageerada Xildhibaan Adam Smith, 10 duq magaalo oo Koonfurta Degmada King, Madaxa Fulinta Degmada King Shannon Braddock, xubno hadda iyo kuwii hore ee Golaha Degmada King, iyo isbahaysi ballaaran oo ay ka mid yihiin ururada shaqaalaha, hoggaamiyeyaasha ganacsiga, ciidamada gurmadka degdegga ah, iyo u-doodeyaasha bulshada, kuwaas oo igu aaminay inaan horumar dhab ah ka sameeyo ammaanka, hoy la'aanta, iyo awood u lahaanshaha kharashaadka nolosha.

Aniga iyo ninkayga waxaan halkan kula nool nahay laba wiil iyo qoys ballaaran oo noo dhow. Waxaan sidoo kale tababaraa dhallinyarada kubadda kolleyga, waxaan ka shaqeeyaa guddiyada ururrada aan faa'iido doonka ahayn, waxaanan si mutadawacnimo ah ula shaqeeyaa deriska si aan u xoojino Koonfurta Degmada King min hoose ilaa sare. Koonfurta Degmada King waa guryaheena—waxaana iga go'an in aan u dhiso mustaqbal ka nabdoon oo jaban dhammaanteen. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

*Taageerooyin Dheeraad ah: Xildhibaan Marilyn Strickland, Guddoomiyihii hore Gregoire, The Seattle Times, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 47aad, Seattle-Degmada King Ururka Shaqaalaha Dhismaha, LiUNA Local 242, Xubin hore oo ka tirsan Golaha Degmada King Julia Patterson, Guddoomiyeyaasha Sam Cho iyo Toshiko Hasegawa, iyo qaar kaloo badan.*

# Golaha Degmada Lr. 9

## Jude Anthony



(425) 437-4014
jude@electjude.com
electjude.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Sayniska Kombuyuutarka ee University of Central Florida

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Sare ee Horumarinta ee Amazon, hawlgab

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Degmada King si aan bulshadeenna cod ugu yeelo oo aan u xalliyo dhibaatooyinka aan dhammaanteen la kulannay tan iyo intii aan halkan u soo guuray: guryo aan la awoodi karin, ciriiriga safarka, nidaamka canshuurta hantida oo aan dheellitirnayn, iyo cabsi amniga dadweynaha. Waxaan xallin karnaa dhibaatooyinkaan, laakiin waxay u baahan tahay aragti, ficil, iyo dulqaad. Waxaan wada keenay saddexdaba.

Waxaan u baahanahay maskax furan oo raadinaysa talo soo jeedin dadka ay saamaynayaan go'aamadooda. Amazon, waxaan ka dhisay barnaamij tababar oo guuleystay oo loogu talagalay horumarinta barnaamijyada softiweerka ee shaqaalaha aan si wanaagsan loo matalin anigoo si firfircoon uga raadinaya talo soo jeedinta ardayda la daalaa dhacaya. Ololahayga, waxaan dhisayaa xiriirro aan la leeyahay kooxaha gargaarka maxalliga ah iyo xubnaha bulshada. *Sida Xubinta Golaha, waxaan hubin doonaa in codkaaga la maqlo anigoo qabanaya shirar bulsho ka hor inta aanan u codeyn sharciyada.*

Waxaan u baahanahay wakiillo ficil qaada. Ololahaan, waxaan ka tabarucay bangiyada cuntada, waxaan abaabullay ololeyaal deeqo, waxaanan ka qaybgalay mashaariic nadiifin. Maalgelinta adeegyada bulshada waxay inoo badbaadisaa lacag iyadoo yareyneysa baahida daryeelka caafimaadka degdegga ah iyo adeegyada nidaamka caddaaladda dambiyada. *Sida Xubin Golaha ahaan, waxaan mudnaan siin doonaa maalgelinta kooxaha lama-huraanka ah ee horrey u qabanaya shaqada inna quudiya, inna dejisa (hoy siiya), oo nagu ilaalisa ammaan.*

Waxaan u baahanahay kuwa xalliya dhibaatooyinka oo leh fikrado cusub. Waxaan leeyahay soddon sanno oo waayo-aragnimo shaqo ah oo aan ku xallinayo dhibaatooyin adag anigoo adeegsanaya xalal ku saleysan caddeymo. Waxaan qorshaynayaa inaan beddelo nidaamyada canshuurta hanti iyo iibka ee jaban oo aan ku beddelo ilo dakhli oo caddaalad ah oo waara. *Haddii ay jirto rabitaan siyaasadeed, waxaan dhaqan gelin karnaa isbeddelada ay bulshadeennu si aad ah ugu baahan tahay.*

Waxaan ku faanayaa taageerada 314 Action, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Guddoomiyaha Guddiga Farshaxanka Covington Riley Reed, iyo kuwa kale oo ku jira liiska sii kordhaaya ee ElectJude.com. Haddii aad i siiso fursad, waxaan ka faa'iideysan doonaa maalgelinta iyo miisaanka Degmada King si aan u xaqiijiyo cunto, hoy, daryeel caafimaad, iyo fursad guul - *dhammaanteen*.

## Reagan Dunn



info@reagandunn.com
reagandunn.com

**Waxbarashada:** University of Washington School of Law, Order of Barristers (Nidaamka Garyaqaanada); Arizona State University, Magna Cum Laude

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Degmada; Xeer-ilaaliye Federaalka hore (Former Federal Prosecutor); Isku-duwaha Qaranka ee Project Safe Neighborhoods (Barnaamijka Xaafadaha Ammaanka).

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ahayd inaan noqdo u doodahaaga golaha degmada King. Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho si aan uga hortago canshuuraha cusub iyo kuwa aan loo baahnayn, khidmadaha sare, iyo kharashka dowladda ee heer kasta oo ka dhigaaya mid adag in qoysaska shaqeeya ay awoodaan inay ku noolaadaan halkan degmada King.

Waxaan ku faanayaa inaan helay taageerada sagaalka duq magaalo ee aan xisbi lahayn ee degmada, iyo sidoo kale ururo badan oo booliis, dab-damis iyo kuwa ka jawaaba xaaladaha degdegga ah, iyo sidoo kale Dimuqraadiyiin iyo Jamhuuriyiin caan ah. Waxaa sidoo kale la igu maamuusay sida Mas'uulka La Doortay ee Sannadka ee Gobolka Washington.

Dowladda degmada waxay la kulantaa caqabado aad u waaweyn. Waxaan si adag u shaqeyn doonaa si aan u siiyo hey'adaha sharciga qalabka ay u baahan yihiin si ay u yareeyaan dambiyada, waxaanan la dagaalami doonaa si aan canshuurihiinna u hooseeyo. Waxaan sii wadi doonaa inaan mudnaanta siiyo maalgelinta dowladda si adeegyada degdegga ah ee muhiimka ah iyo dayactirka waddooyinka si habboon loo maalgeliyo. Intaa waxaa dheer, waxaan ahay xubin keliya ee Golaha Degmada King oo leh khibrad caddaaladda dambiyada, anigoo sannado badan ka shaqeynayay Waaxda Caddaaladda. Waxaa ii magacaabay Madaxweyne George Bush waxaana u shaqeeyay sidii Xeer-Ilaaliye Federaalka oo leh *Top Secret (Sirta ugu Sareysa)* oggolaansho. Seattle, waxaan ka shaqeeyay Waaxda Argagixisada iyo Dambiyada Rabshadaha ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Mareykanka. Waxaan sidoo kale hoggaamiya hindisaha jinsiga iyo caddaaladda bulshada ee Waaxda Caddaaladda si loola dagaalamo rabshadaha hubka.

Waxaa iga go'an in aan helo xalal dhab ah oo ku saabsan dhibaatada hoy la'aanta ee gobolkayaga waxaanan sii wadi doonaa inaan caawiyo kuwa la ildaran balwadda daroogada iyo khamriga. Maareynta deegaanka iyo ilaalinta goobaha furan ee gobolkeena waa mudnaanta muhiimka ah aniga.

Haddii dib la ii doorto, waxaan adeegsan doonaa aqoontayda degmada, oo aan ku daray sannado khibrad ah oo aan ka helay waaxda gaarka ah iyo tan dawladda, si aan uga caawiyo Degmada King inay sii waddo jidka ay ku gaareyso dowlad hufan oo lala xisaabtami karo.

Adigaan kuu shaqeeyaa, waxaana kaaga mahad celinayaa codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 1

### Ryan Calkins



(206) 682-7328
ryan@ryanforport.com
www.ryanforport.com

**Waxbarashada:** M.A. (Shahaadada Mastarka) Xiriirka Caalamiga ah, Yale University; B.A. (Shahaadada Jaamacadda), Willamette University

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliyaha siyaasadda tamarta, mulkiilaha ganacsi yar oo hore, xirfadle horumarinta dhaqaalaha

**Bayaanka:** Anigoo ah Guddoomiyaha Dekedda, maalin kasta waxaan ka shaqeeyaa in Dekedda Seattle ay noqoto dekedda ugu cagaaran Waqooyiga Ameerika, in la abuurro shaqooyin mushahar-ku-filaan ah oo qoysaska maxalliga ah, isla markaana la hubiyo khibradda ugu wanaagsan ee rakaabka iyo lamaane-yaasha ku sugan SEA iyo dekedda.

Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho si aan dadaalladan u sii wado oo aan u dhiso Deked la jaan qaadda mudnaanta iyo qiyamka mustaqbal ee bulshadeenna.

Dekeddeennu waa matoorka dhaqaalaha ee gobolka, waxayna taageertaa shaqooyin badan oo aan la koobi karin oo kobciya koritaanka dhaqaale. Taasi awgeed, waxaan maalgeliyey horumarinta shaqaalaha, waxaan taageeray ganacsiyada maxalliga ah, waxaanan hubiyey in faa'iidooyinka hawlaha dekeddu si caddaalad ah loo wadaago. Taageeradiinna, waxaan sii hormarin doonaa abuurista shaqooyin tayo-sare leh oo qoysaska sii haya.

Waxa innagu waajib ah in aynu noqono hoggaamiye deegaan. Taas darteed, waxaan hormuud ka noqday u-gudbidda maraakiib iyo qalab aan qiiq lahayn, hagaajinta waxtarka, iyo la shaqeynta shirkadaha diyaaradaha, shixnad-daabulaayaasha, iyo mulkiileyaasha gaadiidka si ay ugu gudbaan tamar waara. Waxaan sii wadi doonaa yareynta kaarboonka hawlgalladeenna, nadiifinta wasakhowga taariikhiga ah, iyo dhimista wasakhowga hawada iyo biyaha ee maxalliga ah.

Waxaan ku dadaaleynaa in SEA yeelato garoon heer-caalami ah oo u qalma malaayiinta rakaab iyo kumannaanka ganacsiyo yaryar ee halkaas ku xirma. Gudaha Dekedda, waxaan horumariyay hal-abuurnimo dedejisa habraacyada laga bilaabo markaad timaaddo garoonka, waxaanan maalgeliyey hagaajinta kaabayaasha. Aan sii wadno ka dhigidda Dakaddeena midka ugu sarreeya Xeebta Galbeed, anagoo ku dhisanayna taariikhdeenna badeed.

*Waxaa taageeray: Dimuqraadiyiinta Degmada King; Dab-damiyeyaasha Dekedda & Seattle; Tallaabada Ilaalinta Washington; Ururka Shaqaalaha MLK, Shaqaalaha Longshore (Dekedda) iyo in ka badan dersin ururo shaqaalo kale; FairVote Washington; Xubnaha Kongareeska Larsen & Smith; Xubnaha Golaha Degmada Dembowski, Perry, Barón, Balducci, Mosqueda, Zahilay; Duqooyda Magaalada Seattle, Bellevue, Redmond, Shoreline & Bothell; iyo qaar kaloo badan!*

## Guddoomiye Jagada Lr. 3

### Hamdi Mohamed



electhamdi@gmail.com
www.electhamdi.com

**Waxbarashada:** University of Washington: Shahaadada Jaamacadda, Shahaadada Mastarka ee Daraasaadka Siyaasadda; Shahaadada Ganacsiga Caalamiga ee Dugsiga Ganacsiga ee Harvard

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Dekedda Seattle iyo Agaasimaha Waaxda ee Magaalada Seattle

**Bayaanka:** Ka Guddoomiyaha Dekedda tan iyo 2021 ahaan, waxaan qabtay doorar hoggaamineed oo muhiim ah, oo ay ku jiraan Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiyaha Guddiga Hantidhawrka. Waxaan ku soo barbaaray qoys shaqaale ah oo ay ku jiraan darawal gaari xamuul iyo shaqaale garoon diyaaradeed, waxaan fahamsanahay sida go'aannada Dekedda ay u saameeyaan nolol maalmeedka, laga bilaabo helitaanka shaqo ilaa sida alaabtu u gaarto bulshadeenna. Waxaan sii wadi doonaa inaan diiradda saaro daah-furnaanta, natiijooyinka, iyo dadka oo aan horumariyo.

Shaqooyinka iyo Tababarka: Waxaan ka caawiyay labanlaabidda maalgashiga horumarinta shaqaalaha, oo ay ku jirto hoggaaminta Barnaamijka Maritime Youth Career Launch, barnaamij $4 milyan ah oo dhallinyarada u diyaarinaya xirfadaha badda. Waxaan sidoo kale horumariyay Xarunta Hal-abuurka Badda, xarun u noqon doonta tababarka shaqada, ganacsiga, iyo dhaqaalaha badda (blue ecomomy), abuurista fursado mustaqbalka ee bilowga iyo ganacsiyada.

Horumarinta Dhaqaalaha: Waxaan ansixiyay Qorshe Horumarinta Raasumaalka oo ah $5.6 bilyan, taas oo abuuraysa shaqooyin iyo kor u qaadista qandaraasyada ganacsiyada maxalliga ah. Waxaan helay $7.1 milyan si loo hagaajiyo waayo-aragnimada garoonka diyaaradaha ee rakaabka iyo shaqaalaha. Waxaa iga go'an in aan sii wado hagaajinta terminal-ka, taageeridda koritaanka xamuulka, iyo xoojinta doorka Dekedda ee horumarinta ganacsiga goboleedka.

Caddaaladda Deegaanka: Waxaan taageeray amarka ilaalinta joogtada ah ee dhulalka cagaaran ee North SeaTac Park waxaanan wada maalgeliyay amarkii ugu horreeyay ee awoodda xeebta ee maraakiibta dalxiiska, taas oo yaraynaysa qiiqa 80 boqolkiiba. Waxaan sidoo kale hoggaamiyey barnaamij $5 milyan ah oo lagu yaraynayo dhawwaaqa guryaha ee ka yimaada garoonka diyaaradaha. Bulshooyinkani waxay xambaarsan yihiin culayska garoonka diyaaradaha goboleedka waxayna mudan yihiin taageero macno leh, taas oo ah sababta, anagoo kaashanayna Senatar Patty Murray, aan u helnay maalgelin federaal ah si aan u ballaarinno shaqadaan.

Muddo-xilleedkayga soo socda, waxaan diiradda saari doonaa taageeridda ganacsiyada yaryar, abuurista shaqooyin qoys-wax ku ool ah, ballaarinta helitaanka ganacsiga iyo gaadiidka, iyo in dekedda lala xisaabtamo dadka ay u adeegto. *Waxaan rajeynayaa inaan kasbado codkaaga.*

Taageerooyinka: Dhammaan Guddoomiyeyaasha Dekedda Seattle, Guddoomiye Ferguson, Xeer Ilaaliyaha Guud Brown, Guddoomiye Upthegrove, Khasnajiga Pellicciotti, Xubnaha Kongareeska, duqooyda magaalooyinka deegaanka, xubnaha golaha, iyo ururrada ay ka mid yihiin SEIU6, IBEW46, iyo Mashiinisteyaasha 751.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Toshiko Grace Hasegawa



(206) 992-7156
toshiko@hasegawaforport.com
www.hasegawaforport.com

**Waxbarashada:** MA (Shahaadada Mastarka) Seattle University; BA (Shahaadada Jaamacadda) Caddaaladda Dambiyada & BA (Shahaadada Jaamacadda) Isbaanish, Seattle University

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxweynaha, Guddiga Dekedda Seattle; mulkiilaha ganacsi WMBE

**Bayaanka:** Waxaan ka faa'iidaystay lix sanno oo aan madax ka ahaa wakaalad ka tirsan Maamulka Inslee si aan u horumariyo abuurista shaqo iyo heer sare oo hawlgal ah. In kasta oo dowladaha gobolka oo dhan ay la kulmaan yaraanta miisaaniyadda, Dekedda Seattle waxay ku jirtaa xaalad dhaqaale oo aad u wanaagsan. Waxaan fulineynaa $5,300,000,000 oo mashaariic raasumaal ah, abuurista shaqooyin qoyska u fiican, iyo qandaraasyo ganacsiyada maxalliga ah. Hoggaankayga hoostiisa, waxaan ballaarinay helitaanka xirfadaha ee bulshooyinka aan si wanaagsan loo adeegsan iyada oo loo marayo heshiisyo lala galay shaqaalaha, iskaashiyo rasmi ah oo lala yeeshay saddex qabiil, maalgeshiyo waxbarasho, tababarro, iyo hindisaha shaqooyinka cagaaran. Waxaan hagaajinnay hannaanka iyo siyaasadaha qandaraasyada si aan u kordhino kharashka la geliyo ganacsiyada ay leeyihiin dadka laga tirada badan yahay iyo haweenka.

Sida hooyada, waxaan rabaa in dhammaan carruurteennu ay dhaxlaan mustaqbal ifaya oo ka sii wanaagsan. Waa inaan hadda tallaabo qaadnaa. Waxaan soo bandhigay Teal New Deal, qorshahayga ah in aan ka dhigo mid aan kaarboon lahayn badda (buluug), iyo in aan dhaqaajiyo dhulalka warshadaha si loo soo saaro, loo keydiyo, loona qaado tamarta nadiifka ah (cagaar). Isku-duwiddan waxay kor u qaadaysaa waaraanshaha *adduunka oo dhan*, iyadoo abuuraysa shaqooyin jiilba jiil *gobol ahaan* kontonka sanno ee soo socda. Waxaan sidoo kale nadiifinnaa goobaha wasakhaysan, waxaanan furnay Beerta Dadka ee Webiga Duwamish halkaas oo salmon-yar ay dib ugu soo noqdeen!

Garoonka diyaaradaha ee SEA wuxuu daboolaa baahiyaha safarka caalamiga ah ee gobolka oo dhan. Si aan u soo jiito oo aan u sii hayo shaqaalaha ka shaqeeya garoonka diyaaradaha, waxaan taageeray in la bixiyo tigidhada orca bilaash ah, alaabada nadaafadda bilaash ah, iyo barnaamij hagaha daryeelka carruurta. Waxaan hoggaaminayaa hirgelinta xarun daryeel carruur oo dhismo ah si aan u daboolo baahida dadweynaha ee fursado badan.

Bulshooyinka garoonka diyaaradaha hadda waxay leeyihiin kalsooni in North SeaTac Park la ilaaliyo, iyo sidoo kale $14,000,000 oo fursado deeq ah oo ka socda dekedda. Waxaan rabaa ka-qaybgal xooggan oo ka dhaca South King oo ku saabsan Qorshaha Guud ee Garoonka Diyaaradaha ee Waara.

Waxaan la kulmi doonaa hanjabaadaha federaalka ee dhaqaalahayaga anigoo abuuraya fursado dadka ay ku horumari karaan. Aynu hubinno in bulshooyinka oo dhan ee degmada ay ka faa'iideystaan kobaca dhaqaale ee $929,000,000 ee ka imaanaya FIFA 2026.

Habkayga wuxuu shaqeeyaa: dhaqaalaha, deegaanka, iyo sinnaanta waxay horumaraan si wadajir ah. Waa saddexda gunaanad ee hoose ee aan leenahay. Waxaa sharaf ii ah inaan idin matalo.

Doorashooyinka Degmada King ma waafajiyaan, wax kama beddelaan, ama dib u eegis kuma sameeyaan bayaannada musharaxiinta iyo cabbirka warqadda codbixinta xaalad kasta oo lagu jiro.

Dhammaan bayaannada waa tarjumaadda erey iyo erey ee dhabta ah, oo ah bayaannada ay soo gudbiyeen musharaxa, guddiga, ama maamulka, laguna dhammeeyay wakhti xaddidan. Sababtaas awgeed, bayaannada la tarjumay ayaa laga yaabaa in meelaha qaarkood aysan kaga caddeyn maxaa yeelay isticmaalka luqadda, fikradaha, iyo sharaxaadda ayaa ku kala duwan luqadaha.

# Golaha Jagada Lr. 1

## Paul Clark



(425) 247-0824
paul@clarkforbellevue.com
www.clarkforbellevue.com

**Waxbarashada:** MSEE (Shahaadada Mastarka), Injineernimada Korontada, University of Washington; Bellevue Essentials iyo Akadeemiyada Bulshada Booliiska, Magaalada Bellevue

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiile, Shaybaarka Factoria; Macallin Xirfadyahan, Qoraa, Injineerka Isgaarsiinta Fiilo La'aanta (Wireless Communications Engineer)

**Bayaanka:** Bellevue waxay ahayd gurigayga in ka badan 25 sanno, waxaana doonayaa inaan hubiyo inay ammaan ahaato, si mas'uuliyad leh u korto, oo ay u shaqeyso qof walba oo halkan ku nool. Mudnaantayda waxaa ka mid ah hagaajinta farqiga shaqaalaha booliiska, yareynta ciriiriga taraafikada , ballaarinta nidaamka jardiinooyinkeena (gaar ahaan meelaha aan adeegyada wanaagsan helin) iyo hagidda horumarinta cusub ee aagagga koritaanka sida bartamaha magaalada, maaha xaafadaha guryaha qoysaska keliya.

Inaan leeyahay ganacsi yar oo teknolojiyadda ah iyo inaan ku dhawwaad toban sanno ka shaqeeyay Guddiga Adeegyada Bulshada iyo Adeegga Rayidka ayaa i diyaariyay inaan keeno natiijooyin. Waxaan keeni doonaa xalal wax ku ool ah oo raacaya mudnaanta deganeyaasha magaalada Bellevue ugu horreyn iyo ugu dambeyn.

Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan hubiyo in Bellevue ay sii ahaato hoggaamiye caalami ah oo dhinaca hal-abuurka iyo fursadaha dhaqaale, iyadoo la hubinayo in kobaca uu noqdo mid feker leh, waara, oo ay taageerto kaabayaasha ay u baahan tahay. Waxaa iga go'an in aan kordhiyo daah-furnaanta go'aamada magaalada anigoo dhegaysanaya, ka qaybgalaya, oo hubinaya in deganeyaashu ay cod ku leeyihiin qaabaynta mustaqbalkeenna.

Waxaan ku faanayaa in mar kale taageero ay siiyeen The Seattle Times, Ethnic Chamber Coalition (Xarunta Isbahaysiga Qowmiyadaha), Xubnaha Golaha Conrad Lee iyo Jared Nieuwenhuis, Xubinta Golaha Degmada King Reagan Dunn, iyo ururo badan oo kale iyo hoggaamiyeyaal bulshada. Waxaan jeclaan lahaa inaan kasbado codkaaga si aan u sii wado horumarka Bellevue, anigoo aan lumin waxa ka dhigaaya mid gaar ah.

## Vishal Bhargava



(949) 874-2907
vishalforbellevue@outlook.com
vishalforbellevue.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Dhismaha; Shahaadada Mastarka ee Qorsheynta Magaalada iyo Gobolka; Shahaadada Mastarka ka socota UCLA.

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada Bellevue, Aasaase Wadaag Caafimaadka Maskaxda ee Hey'ad Aan Faa'iido Doon Ahayn; Guddoomiyaha Qorsheynta; Agaasime, Amazon.

**Bayaanka:** Aniga oo ah kan keliya ee ka socda Xisbiga Dimuqraadiga tartankan, mudnaantaydu waa cadahay: in la ilaaliyo Bellevue oo ammaan ah, oo loo wada dhan yahay, oo la awoodi karo. Qoyskaygu waxay magaalada Bellevue ka dhigteen gurigeenna 12 sanno ka hor sababtoo ah tayada nolosha oo aad u wanaagsan, dugsiyada dadweynaha oo heer sare ah, jardiinooyin qurux badan, iyo xaafado soo dhawweyn leh. Waxaan u tartamayaa in aan kursigayga ku sii haysto Golaha Magaalada si aan u xaqiijiyo in Bellevue ay sii ahaato magaalo horumarsan, badqab leh, oo loo wada dhan yahay.

Anigoo leh khibrad ku saabsan qorsheynta magaalada, waayo-aragnimada hoggaamineed ee teknolojiyada, iyo shan sanno oo aan ku jiray Guddiga Qorsheynta Bellevue, waxaan keenayaa khibrad wax ku ool ah iyo maskax iskaashi. Sida magaalada Bellevue ay u sii korayso, waxaan diiradda saari doonaa bixinta xalal wax ku ool ah oo lagu xallinayo caqabadaha maalinlaha ah: yaraynta ciriiriga gaadiidka, ballaarinta helitaanka guryaha la awoodi karo, iyo wax ka qabashada sicir-bararka nolosha.

Badqabka dadweynaha iyo wanaagga bulshada ayaa ah mudnaantayda ugu sareeya. Waxaan si xoog leh u taageeraa booliiska iyo kuwa ugu horreeya ee ka jawaaba xaaladaha degdegga ah iyo ballaarinta adeegyada caafimaadka maskaxda iyo jawaabaha xaaladaha degdegga ah. Waxaa iga go'an in aan dhiso dhaqaale adag oo maxalli ah oo faa'iido u leh qof walba. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

Waxaa taageeray: Duqa Magaalada Lynne Robinson iyo Golaha Magaalada Bellevue oo dhan, Xildhibaan Adam Smith, Wakiillada Gobolka Zahn, Slatter, iyo Salahuddin, Xubinta Golaha KC Claudia Balducci, Duqeyda Magaalada oo badan ee Eastside, Dab-damiyeyaasha Bellevue, Ururka Haweenka Dimuqraadiga ee KC, Dimuqraadiyiinta KC, Isbahaysiga Ganacsiga Eastside, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada badan.

# Golaha Jagada Lr. 2

## Naren Briar



(425) 331-9187
Naren@briarforbellevue.com
BriarforBellevue.com

**Waxbarashada:** Boston College Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Siyaasadda iyo Dowladda; Falanqeeye Lagu Xusay Harvard; Aqoonyahanka Annexstad Family Foundation.

**Shaqo iyo Xirfad:** Ka-qaybgalaha Bellevue Essentials; Maareeyaha Badeeco Soo Saarka ee Meta AI Pro; Aasaasaha GenocideEdu.

**Bayaanka:** Bellevue waxay la kulmaysaa caqabado federaal ah oo saameynaya dhaqaalahayaga iyo tayada nolosha. *Waxaan mudannahay wax ka wanaagsan Xubinta Golaha oo tobanaan kumanaan oo doolar ku deeqa Donald Trump oona jebiya xeerarka anshaxa*. Waxaan u baahanahay hoggaan cusub oo lala xisaabtami karo oo diiradda saaraya u adeegida qoysaska Bellevue iyo ganacsiyada yaryar.

Waxaan ahay gabadh ay dhaleen qaxooti, xirfadyahan-siyaasad farsamo, iyo hoggaamiye bulsho oo u ordaya inuu keeno fikrado cusub iyo hoggaan mas'uul ka ah Golahayaga.

Haddii aan helo codkaaga, waxaan diiradda saari doonaa hagaajinta la-awoodi-karaanta si shaqaalaha aasaasiga ahi ay ugu noolaan karaan halka ay ka shaqeeyaan, qoysaskana da'da yar ay Bellevue guri u yeelan karaan. Waxaan maalgelin doonaa badbaadada dadweynaha, oo ay ku jiraan caafimaadka dabeecadda iyo u-diyaargarowga xaaladaha degdegga ah. Waxaan ka shaqeyn doonaa sidii aan u dhimi lahaa ciriiriga, ballaarinta gaadiidka, oo aan uga dhigi lahaa waddooyinkeenna kuwo ammaan ah. Waxaan ku guuleysan doonaa dugsiyo dadweynaha oo xooggan, tababar xoog leh, iyo dariiqooyin shaqo oo u diyaariya dhallinyarada shaqooyinka mustaqbalka. Waxaan taageeri doonaa jardiinooyinka, farshaxanka, iyo tayada nolosha. Si aan maamulka magaalada uga dhigo mid jawaab celin leh, waxaan jebin doonaa silos oo aan habeyn doonaa hababka si kor loogu qaado waxtarka.

*Waxaan ahay musharaxa keliya ee tartankan ay taageereen 41aad, 48aad & Dimuqraadiyiinta Degmada King; Duqa Magaalada Lynne Robinson; Xildhibaan DelBene; Dhammaan Wakiillada Bellevue iyo Senatarrada; Wakiilka Caymiska Patty Kuderer; Xubinta hore ee Golaha John Stokes; ganacsiyada yaryar iyo ururada shaqaalaha; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; iyo ka badan!*

## Conrad Lee



(425) 747-0468
electconradlee@gmail.com
www.conradlee.org

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Injineernimada Korontada, U. of Michigan; Shahaadada Mastarka, U. of Washington, Foster School of Business (Dugsiga Ganacsiga ee Foster)

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada Bellevue; Hore u ahaa Duqa Magaalada iyo Ku-xigeenka Duqa Magaalada Bellevue

**Bayaanka:** Waxaad si joogto ah iigu dooratay inaan noqdo codkaaga Golaha si aan u *taageero adeegyada ammaanka dadweynaha, hoos u dhigo canshuuraha, yareeyo kharashka aan loo baahnayn, oo aan abuurro dhaqaale caafimaad qaba*. Sida sicir bararku u sii kordhayo, waxaan sii wadi doonaa inaan u heellanahay siyaasadaha maaliyadeed ee mas'uulka ah si aan canshuuraha u hooseeyaan, anigoo hubinaya in magaalada Bellevue ay si xikmad leh u maalgeliso adeegyada ammaanka dadweynaha, gaadiidka, iyo adeegyada muhiimka ah ee bulshada iyada oo aan la dhimmayn tayada nolosha. Bellevue waxay ku horumartaa go'aamada maaliyadeed ee taxaddarka leh, jawi ganacsi oo caafimaad qaba, iyo dadaalka lagu ilaalinayo tayada nolosha ee sare ee dhammaan deganeyaasha.

Anigoo ah wakiilkaaga lagu kalsoon yahay ahaan, waxaan ahay mid la heli karo, lala xisaabtami karo, oo daah-furan. Adigoo i dhegaysanaya oo ila shaqeynaya, waxaan la tacaali doonaa fursadaha iyo caqabadaha cusub anigoo la sameynaya iskaashi wadajir ah iyo xalal hal-abuur leh.

Marka laga gudbo maareynta maaliyadeed, waxaan xoojiyay bulshadeenna anigoo adeegsanaya ka mid noqoshada iyo fursadaha. Waxaan bilaabay mashruuca Xarunta Dhaqamada Kala Duwan ee Bellevue, anigoo taageeraya dadaallada lagu xusayo laguna xoojinayo kala duwanaanshaha magaaladeenna. Anigoo ah aasaasaha Pathway Foundation iyo Barnaamijkeeda Tababarka Dhallinyarada, waxaan u ololeeyay waxbarashada iyo hagidda si aan u caawiyo jiilka soo socda ee hoggaamiyeyaasha bulshada.

Bellevue waxay leedahay mustaqbal ifaya. Waxaan kuugu mahad celinayaa kalsoonidaada iyo taageeradaada ee ku aaddan dib-u-doorashadayda. Waxaan idinka codsanayaa codkiina iyo kalsoonidaada sii socota si aan idiin matalo.

# Golaha Jagada Lr. 4

## Pradnya Desh



(509) 731-3777
campaign@electdesh.com
www.electdesh.com

**Waxbarashada:** Juris Doctor (Shahaadada Sharciga): Catholic University; Shahaadada Mastarka ee Dhaqaalaha, Shahaadada Jaamacadeedka ee Xiriirka Caalamiga ah: Georgia Tech.

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Bellevue College, Diblomaasi ka tirsan Waaxda Arrimaha Dibadda ee Mareykanka, Aasaasaha Ganacsi Bilow ah.

**Bayaanka:** Bellevue waa magaalo qurux badan. Waxaan qiimaynaa waxbarashada, badbaadada, hal-abuurnimada, sinnaanta, iyo naxariista; balse dowladaha federaalku waxay carqaladaynayaan horumarka, waxayna khatar gelinayaan qiyaamkeena xilli aynu wajahayno dhibaato la-awoodi-karaanta oo ka hor istaagaysa qoysaska da'da yar, macallimiinta, saraakiisha, waayeelka, iyo shaqaalaha in ay halkan ku noolaadaan.

Taasi waa sababta aynu ugu baahan nahay in madax-xisbiga muxaafidka ee dowladda hoose lagu beddelo hoggaamiyeyaal diyaar u ah inay difaacaan qiyaamkeena, lehna waayo-aragnimo ka ballaaran heer maxalli ah si ay u qaadaan tallaabo go'aan-leh. Anigu waxaan ahay diblomaasi hore oo Mareykan ah; waxaan shaqadayda dowladeed ka bilaabay maamulka Clinton. Waxaan gorgortamay heshiisyo ganacsi, waxaan u dooday deegaanka iyo xuquuqda aadanaha, waxaan dhisay barnaamijyo abuuray boqolaal kun oo shaqo, waxaana keenay natiijooyin. Hadda waxaan ahay Guddoomiyaha Bellevue College (waxaa ii magacaabay Governor Inslee). Sidoo kale waxaan ahay Maamulaha Guud (CEO) ee shirkad teknolojiyadeed bilow ah oo shaqooyin iyo fursado ka abuuraysa Bellevue.

Waxaan u dagaalami doonaa: kaabayaal ka fiican oo dadka si dhaqso ah u dhaqaajiya isla markaana yareeya ciriiriga; guryo u sahlaya jiilka xiga inay Bellevue ku noolaadaan iyadoo la ilaalinayo meelaha cagaaran, cimilada, ku-noolaanshaha, socodku u fudud yahay, iyo baaskiil-ku-wadidku u fudud yahay; kororka shaqooyinka, kobcinta ganacsiyada, iyo tababarka shaqaalaha. Waa in lagu xisaabtamo natiijooyin ee ma aha niyad-wanaag. Aan dhisno.

*Taageereen: Guddoomiyaha Gary Locke, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Senatarka Slatter, iyo in ka badan.*

## Jared Nieuwenhuis



jared@jaredforbellevue.com
jaredforbellevue.com

**Waxbarashada:** Daraasaadka Qalin-Jebinta, Brown University; B.A. (Shahaadada Jaamacadda), University of Wisconsin-Madison; Barnaamijka Bellevue Essentials, Magaalada Bellevue

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha, Magaalada Bellevue; Maareeye Sare Xiriirka Dowladda, Ziply Fiber

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ahayd inaan idiin adeego Golaha Magaalada Bellevue siddeedii sanno ee la soo dhaafay. Waxaan diiradda saaray waxa ugu muhiimsan: ammaanka dadweynaha, kobaca fikirka leh, awoodda wax iibsiga, iyo fursadaha dhaqaale.

Waxaan hoggaamiyey dadaallada lagu maalgelinayo waaxda booliiska si buuxda, lagu aasaasayo cutubka booliiska gaadiidka dadweynaha ee Bellevue, iyo lagu bilaabayo hindisaha Keep Bellevue Beautiful (Ku Hay Bellevue Qurux) si wax looga qabto sawir-gacmeedka, qashinka, iyo gaari-gacmeedyada la dayacay. Waxaan sidoo kale u adeegay sidii cod goboleed oo ka hortagga nacaybka Yuhuudda, waxaan taageeray Qorshaha Ilaalinta Deegaanka ee Bellevue, waxaanan u dooday xalal guri oo cusub oo ilaalinaya awoodda wax iibsiga iyada oo la ilaalinayo dabeecadda xaafadda.

Bellevue si xawli ah ayay u koraysaa, koritaankaasna waa inuu ka tarjumaa qiyamka aan wadaagno, ma ahan inuu wax u dhimmo. Hadda in ka badan abid, waxaan u baahanahay hoggaan khibrad leh oo la xaqiijiyay oo leh diiradda cad ee mudnaanta magaalada Bellevue, ma aha ajandayaal dano dibadeed leh. Waxaa iga go'an inaan ilaalino xaafadaha, hagaajinta isu socodka, kor u qaadista tayada nolosheena, iyo hubinta in Bellevue ay sii ahaato meesha ugu fiican ee lagu noolaado, lagu shaqeeyo, iyo qoys lagu kori karo.

Waxaa sharaf ii ah in ay ii taageereen Dab-damiyeyaasha Bellevue, Saraakiisha Booliiska ee Bellevue, Isbahaysiga Ganacsiga Eastside, Raadiyaha Shiinaha Seattle, LiUNA 242, Xubnaha Golaha Bellevue, iyo ururo iyo hoggaamiyeyaal kale oo badan oo ka kala socda dhinacyada siyaasadda oo dhan. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa codkaaga si aan u sii wado u adeeggida iyo wax u qabashada bulshadeenna.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Matthew Rish



(425) 761-2534
mlrish@msn.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Xisaabaadka, Bellevue College; Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno ee Caddaaladda Dambiyada, Bellevue College

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallinka Hoggaamiyaha ee YMCA ee Greater Seattle

**Bayaanka:** Aniga oo ah qof ku soo barbaaray Bellevue oo arkay isbeddellada halkan ka dhacay, waxay ii ahayd farxad weyn. Markii aan ka qaybgalay barnaamijka Bellevue Essentials ee 2021, wax badan ayaan ka bartay sida magaalada loo maamulo iyo isbeddellada lagu samayn karo si wax-ku-oolnimadu u kordho. Si kastaba ha ahaatee, waxaan sidoo kale arkay meelo badan oo aan jeclaa oo xidhmay kuna soo noqon waayay kirada oo qaali noqotay iyo qiimayaal kor u kacay awgeed. Canshuuraha waxay ka mid yihiin kharashaadka ganacsiyadan, taas oo laga yaabo inay culays badan saarto shirkadaha doonaya inay halkan u soo guuraan. Waa in wax laga qabtaa tan.

Waxaan sidoo kale rabaa in booliiskeena helaan wax kasta oo ay u baahan yihiin si loo ilaaliyo badbaadadeenna iyo amnigooda. Markii aan qaadanayay Bellevue Essentials, waxa ugu weyn ee laga doodayay waxay ahaayeen kamaradaha jidhka lagu xidho. Tani waxay u oggolaanaysay in booliiska la aamino marka ay dadka sharciga jebiya la macaamilayaan, isla markaana ay hubiso in sarkaal booliis uusan ku takri-falin xafiiskiisa. Tani weli waa baahi.

JFK wuxuu baray, “ha weydiisan waxa dalku kuu qaban karo, ee weydii waxa aad dalkaa u qaban karto.” Halkan ayaan joogaa, waxaanan rabaa inaan idinka maqlo waxa aynu u qaban karno si aynu isku caawino.

### Claire Sumadiwirya



(425) 606-3624
community@togetherforbellevue.com
www.togetherforbellevue.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Ganacsiga iyo Cilmiga Bulshada, University of Washington; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Seattle University

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar ee Bellevue; xubin guddiga urur aan faa'iido doon ahayn; Guddoomiyaha Degmada hore

**Bayaanka:** Waa sharaf in aan ka mid noqdo Golaha Magaalada Bellevue - dhisidda ballanqaadkayga ah in aan abuurro bulsho ammaan ah, mid loo wada dhan yahay, oo la awoodi karo dhammaan deganeyaasha. Waxaan ahay mulkiilaha ganacsi yar iyo hooyo keliya oo magaalada yimid 1994 si aan u sii wato waxbarashadayda iyo riyooyinkayga. Waxaan nahay magaalo leh qalbi maxalli ah iyo gaarsiin caalami ah, oo haddii aad codkaaga i siiso, waxaan sii wadi karnaa inaan helno xaafado wanaagsan, dugsiyo heer sare ah, iyo dhaqaale hal-abuur leh oo soo jiita hibada adduunka oo dhan.

Aragtidayda magaalada Bellevue waxay ku saleysan tahay maamul wadajir ah, guryo la awoodi karo, ka mid noqoshada dhaqaalaha, iyo caafimaadka bulshada. Waxaan ka ogahay abuurista maqaaxi firfircoon oo ku taal bartamaha magaalada in aan u baahanahay meelaha lagu dhegaysto, lagu barto, iyo lagu wadaago fikradaha. Waxaan u keenaa qiimeyaashan Golaha halkaas oo aan hoggaamin doono doodaha guryaha si loo hagaajiyo helitaanka iyo tayada nolosha, taageeridda adeegyada waayeelka iyo carruurta, kor u qaadidda adeegyada caafimaadka maskaxda, iyo ballaarinta dhismeyaasha cagaaran iyo goobaha cagaaran.

Anigoo ah xubinta golahaaga, waxaan sii wadi doonaa inaan isticmaalo khibraddayda ganacsi iyo ka-qaybgalka bulshada si aan u abuurro Bellevue aan u qalanno.

*Taageerooyin: Duqa Magaalada Bellevue Lynne Robinson iyo Golaha Magaalada oo dhan; dab-damiyeyaasha; Ururka Shaqaalaha MLK, Isbahaysiga Ganacsiga ee Eastside, Ururka Tafaariiqda Washington; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; Naadiga Sierra, Waalidnimada La Qorsheeyay; iyo ka badan!*

# Golaha Jagada Lr. 6

## Lynne Robinson



Allinforlynne2017@gmail.com
Allinforlynne.com

**Waxbarashada:** Doctorate (Shahaadada ugu sareysa shahaadooyinka jaamacadda) ee Daaweynta Jirka, Regis University; BS (Shahaadada Jaamacadda) ee Daaweynta Jirka, Northwestern University; BA (Shahaadada Jaamacadda) Adeegyada Bulshada, CSU Chico

**Shaqo iyo Xirfad:** Duqa Magaalada Bellevue & Xubinta Golaha Magaalada (2013 ilaa iyo Hadda), Mulkiile Hore oo Ganacsi Yar

**Bayaanka:** Aniga oo ah Duqa iyo Xubin Golaha Magaalada, waxaan u heellanahay inaan Bellevue ka dhigo magaalo barwaaqo ah, hal-abuur leh, oo loo wada dhan yahay. Sharaf bay ii noqon lahayd inaan sii wado adeegga adiga, anigoo ku dhisaya horumarkii aan gaarnay: kobcinta dhaqaalaha, abuurista guryo la awoodi karo, maalgelinta baarkyadeenna, iyo qaadashada kala-duwanaanta magaaladeenna. Waxaa iga go'an dadaalka mustaqbal uu qof walba heli karo fursado, adeegyo, iyo tayo nololeed sare.

Waxqabadyo muhiim ah oo igu dhiirrigeliya adeegga waxaa ka mid ah: hoggaaminta koboca dhaqaale ee Bellevue– in ka badan 4000 shaqo oo cusub– iyada oo loo marayo iskaashi lala yeesho loo-shaheeyayaasha gobolku iyo u-doodista ganacsiyada yaryar; guryo la awoodi karo magaalaheenna iyo hormarinta xalal guryo oo heer-gobol ah iyo gabaad degdeg ah; ballaarinta baarkyada, dariiqyada lugeynta, iyo goobaha cagaaran iyo hoos u dhigidda qiiqa gaasaska aqalka-dhirta lagu koriyo.

Waxaan kormeerray maalgelinta gaadiidka, oo ay ku jiraan wadooyin ammaan ah oo iskuul iyo tareenka fudud, waxaana mudnaanta siiyay badbaadada dadweynaha anigoo hirgeliyay hindisayaal ay ka mid yihiin unugga jawaabta dhibaatooyinka ee CCAT. Haddii aad ii codeyso, waxaan ku sii xoojin doonaa rikoorkan hoggaanka feejigan ee fikirka-leh.

*Taageerooyinka waxaa ka mid ah: Governor Bob Ferguson; KC Councilmembers Claudia Balducci, Reagan Dunn; dhammaan Wakiillada iyo Senatarada Gobolka ee Bellevue; 4 Xubnood oo Golaha Bellevue ah; Duqyada dhammaan magaalooyinka waaweyn ee gobolka; Sierra Club; Seattle Times; KC Federation of Democratic Women; iyo kuwo kale oo badan.*

## Nicole Myers



(509) 906-2620
nicolemikomyers@gmail.com
nicoleforbellevue.com

**Waxbarashada:** B.S. (Shahaadada Jaamacadda), Injineernimada Guud, Olin College; M.S. (Shahaadada Mastarka), Injineernimada Bayoolajiga Caafimaadka (Biomedical), UC Irvine; Bellevue Essentials (2021)

**Shaqo iyo Xirfad:** U soo shaqeeyay sida Injineer Nukliyeer oo rayid ah ahaan ee dhallinta korontada (Ciidamada Badda)

**Bayaanka:** Sida Bellevue ay u korayso, dadka cusub waa inay la kulmaan farxadda ay ku noolaadaan halkan sida aan u haysannay. Bellevue waxay u baahan tahay guryo dheeraad ah oo ku fiican qoysaska, halkaas oo aan ku korin doono carruurta jawi ammaan ah, iyo guryo la awoodi karo oo loogu talagalay waayeellada iyo dhallinyarada. Waxaan rabaa inaan hubiyo in magaalada aan hadda dhisayno ay nagu faani doonto 50-ka sanno ee soo socda.

Waxaan u ololeeyay dhiirigelinta dhismaha unugyo loo cabbiray qoysaska, waxaa u dooday heer sare oo loogu talagalay xaddidaadda Maqalka meelaha la hurdo ee abaartimentiyaasha. Markaan baaskiil ku socdo oo aan la socdo carruurtayda, waxaan ka fikiraa sida waddooyinkeennu ay qof walba uga dhigaan inay dareemaan mid ammaan iyo raaxo leh. Waxaan sidoo kale fahamsanahay muhiimadda safarka baabuurka ee lagu kalsoonaan karo iyo badqabka dadweynaha, oo ay ku jiraan gaadiidka dadweynaha.

Waxaan ilaalin doonaa goobaha saddexaad, halka aan ku sameyno xiriirada bulshada; guryaha iyo xafiisyada kaligood kuma filna in ay magaalada nooleeyaan. Waxaan ka shaqeyn doonaa habraacyada Bellevue si aan u keeno natiijooyin joogto ah oo qiimo-jaban.

Waxaan si joogto ah ugu qoraa webseedkayga iyo warsidaha si aan ugu wargeliyo dadka deegaanka go'aamada saameynta weyn leh ee magaalada. Waxay tahay inay ku kalsoonaadaan in kaabayaasha aan ugu baahanahay kobaca in si taxaddar leh loo qorsheeyay loona hirgeliyay si xirfadaysan. Dadka waxay leeyihiin filasho sare marka ay yimaadaan Bellevue, waxaana doonayaa inaan ka sii sareyno.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Prasad Anguluri



(425) 956-3371
prasad060@gmail.com
www.voteprasad.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Kharashka Xisaabiyaha (CPA u dhigma); Shahaadada Mastarka ee Ganacsiga, Nagarjuna University, India

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi ee Deegaanka & Ganacsade

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan keeno hoggaamin ku saleysan awoodda dadka, oo wax ku ool ah magaalada Bothell—halkaas oo qorsheyn feker leh, koboc loo dhan yahay, iyo isticmaalka kheyraadka si caqli leh ay abuuraan bulsho ay qof walba ku barwaaqoobi karto.

Ka dib markii aan ku noolaa magaalada Bothell muddo 19+ sano ah oo aan ka shaqeeyay ururka OneBothell, waxaan si weyn u xiiseynayaa in aan dib u isticmaalo garoonkii hore ee Wayne Golf Course si loogu adeego dhammaan deganeyaasha—haddii ay ahaan lahayd beero bulsho, xarun kulanno, ama meelaha kale ee wadaagga ah.

Anigoo leh in ka badan 27 sano oo aan ahay ganacsade tignoolajiyada maaliyadda (fintech), hoggaamiye Ururka Milkiilayaasha Guryaha (HOA), iyo mutadawac muddo dheer ah, waxaan adeegga dadweynaha la imanayaa hal-abuurnimo iyo naxariis. Waxaan iga go'an xaafado ammaan ah, la awoodi karo, oo isku xiran, annagoo ilaalinayna goobooyinka dabiiciga ah isla markaana kobcinayna firfircoonida dhaqaale. Aragtidaydu waxay ku salaysan tahay S.P.A.C.E.: S – Ammaan & Nabadgelyo; P – Qorshayn Ujeeddo leh; A – Guryo la Awoodi Karo; C – Bulshooyin Isku Xiran; E – Sinaanta & Koboca Dhaqaale. Aan dhisno Bothell u shaqaysa dhammaan—degganayaasha, qoysaska, iyo jiilasha mustaqbalka. Waxaan ku sharfanaan lahaa in aan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Shirly Mittelman



(425) 405-5049
ShirlyForBothell@gmail.com
www.shirlyforbothell.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Sayniska – Kalkaalisada; Kalkaaliye Diiwaan Gashan; Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka; La-taliye Naas-nuujinta oo Guddi Caalami ah Shahaadeeyay (IBCLC)

**Shaqo iyo Xirfad:** Kalkaaliye Iskuul (LWSD); Kalkaaliye Naas-nuujinta (UWMC Montlake); Shaqo Shakhsiyadeed IBCLC

**Bayaanka:** Magaalada Bothell ayaa si degdeg ah isu beddeleysa, waxaana dad badan oo deris ah ay wadaageen inay dareemayaan in laga tagay wada hadalka. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan u keeno hoggaamin naxariis leh oo dadka mudnaanta siinaysa, taas oo ka tarjumaysa qiyamka aan wadaagno iyo ilaalinta soo jiidashada magaalada yar ee ka dhigaysa magaalada Bothell mid dareen guri leh. Kobaca waa in uu ahaadaa mid si taxadar leh loo sameeyo, oo ay hagaan deganeyaasha, kuna saleysan waxa ugu muhiimsan: nabadgelyada, wanaagga, bulshada, iyo tayada nolosha.

Sida kalkaaliye caafimaad oo dadweyne, hooyo, iyo deriskaaga, waxaan daryeelaa, xalliyaa dhibaatooyinka, oo aan u dooda dadka nugul maalin kasta. Waxaan la imaan doonaa xirfadahan, oo ay weheliso dadaalkayga iyo caqliga guud, anigoo ka shaqeynaya ilaalinta daboolka geedaha, taageeridda jardiinooyinka iyo waddooyinka loogu talagalay socodka iyo fuulista, iyo hagaajinta ammaanka deganeyaasha da' kasta iyo awood kasta leh.

Tan ugu muhiimsan, waxaan aaminsanahay dhageysiga. Si wadajir ah, waxaan dhisi karnaa Bothell oo caafimaad qabta, isku xiran, oo ammaan ah. Ii codee si aan codkaaga u noqdo. Waxaa taageeray xubinta golaha Jeanne Zornes.

### Jenne Alderks



(425) 780-7150
jennealderks@gmail.com
votejenne.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Arrimaha Dadweynaha, University of Texas; Aqoonsiga Hoggaaminta Dadweynaha, Harvard

**Shaqo iyo Xirfad:** Khabiirka Adeegyada Aadanaha ee Xogta Dhaawaca ah

**Bayaanka:** Sannadkii 2021, waxaan dejiyay aragti geesinimo leh oo ku saabsan mustaqbalka magaalada Bothell waxaanan caddeeyay ujeeddada iyo muhiimadda arrimaha ugu waaweyn ee magaalada soo food saaray. Markaan sinnaanta bartamaha ka dhigay iyo codadka bulshada ku soo daray hannaanka dadweynaha, waxaan ka caawiyay in la dhabeeyo miisaaniyad dheelitiran oo magaalada ah, waaxda booliiska oo si buuxda loo shaqaaleeyay iyo nidaamka daryeelka xaaladaha degdegga ah oo si buuxda loo dhisay. Waxaan sidoo kale taageeray fursadaha dhaqaale, adkeysiga cimilada iyo guryaha la awoodi karo.

Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho si magaalada Bothell ay u sii ahaato bulsho firfircoon, midnimo leh, oo waara. Codkaaga, waxaan sii wadi doonaa inaan ka shaqeeyo hagaajinta isku xirka gaadiidka ee magaalada Bothell iyo inta kale ee gobolkeena, kordhinta fursadaha guryaha ee dadka shaqeeya ee Bothell, ilaalinta dhulka jardiinka ee Shelton View Forest, iyo soo celinta goobtii hore ee Wayne Golf Course jiilasha mustaqbalka.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo Snohomish, Ururka Degmada Snohomish Indivisible, ururada shaqaalaha, Wakiillada Duerr iyo Kloba, Senatar Stanford, Duqa Magaalada Thompson, iyo Ku-xigeenka Duqa Magaalada Al-Kabra. Wax dheeraad ah ka baro votejenne.com.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Brittany Miles



(425) 780-5249
miles4council@gmail.com
www.brittanyforbothell.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda, Williams College

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Badeecada IT

**Bayaanka:** Magaalada Bothell waxay u baahan tahay hoggaamiyeyaal dhegaysta. Himilada Brittany waxaa ka mid ah dhisidda magaalo lagu noolaan karo oo loo dhan yahay dhammaan—halkaas oo qoysaska ay ku koraan, baahiyaha caafimaadka maskaxda la daboolo, oo dhallinyarada ay helaan guryo iyo fursado. Waxay taageertaa horumarinta fursadaha kala duwan ee guryaha si loo hubiyo in magaalada Bothell ay noqoto meel qof walba uu ku noolaan karo.

Waxay tahay ku xigeenka hore ee Ururka Haweenka Codbixiyeyaasha (League of Women Voters) ee Seattle-Degmada King iyo musharax sannadka 2023 ee abaalmarinta adeegyada aadanaha ee North Urban Human Services Alliance (NUHSA) (Isbahaysiga Adeegyada Aadanaha ee Waqooyiga Magaalada). Khibraddeeda adeegga dadweynaha waxaa ka mid ah ka mid noqoshada guddiga Hey'adda Jawaabta Dhibaatada Goboleedka (RCR) iyo ka qayb qaadashada Guddiga Hoosaadka Teknolojiyadda ee Golaha Sharci Dejinta ee Gobolka Washington ee khadka tooska ah ee ka hortagga ismiidaaminta 988 (HB1477). Waxay sidoo kale la shaqeynaysaa The Seattle Times si ay u abuurto madal caafimaadka maskaxda, oo la qorsheeyay in la bilaabo dayrta 2025.

Brittany waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci dejinta 1aad, iyo Xubnaha Golaha Magaalada Bothell Alderks iyo Dodd.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Mark Swanson



(206) 999-6544
Mbswanson11@gmail.com
Swanson4Council.com

**Waxbarashada:** BSAgE, BSME, VDR Ka Jawaabaha Koowaad, Medical Triage and Evacuation (Kala Soocida Caafimaadka iyo Ka Bixinta), Shahaadada FEMA, CPR iyo Caawinta Koowaad.

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineerka Nidaamyada Hawlgab ah, Dayactirka Degdegga ah ee Guriyeynta Jaamacadda, Shaqaale Dhisme hore.

**Bayaanka:** Ku hay dabeecadda Bothell ee u-saaxiibka ah qoysaska iyo waayeelka. Xaddid canshuuraha; taraafikada iyo cufnaanta la waafaji sharciga; xaddid qiimaha korontada, ilaali doorashada macaamiisha; xaddid kordhinta qiimaha biyaha/bulaacadaha; ilaali suundooyinka cagaaran ee SnohoCo, jooji deeqda hadda ee guryaha dabaqa ah.

Mark wuxuu ku soo celin doonaa wicitaannada kala-dirista (dispatch) ee Booliska/Dab-damiska kontoroolka magaalada maxallliga ah. Kuwa ugu horreeya ee ka jawaaba waxay u baahan yihiin kala-dirista Bothell.

Waxaan u baahanahay duq la doorto. Maareeyaha Magaalada cod-bixiyeyaasha lama ay xisaabtami karaan waana ka mushahar badan yahay guddoomiyaha; hayso madax-bannaani ka madaxbannaan siyaasadda Golaha Degmada King (KC Council). Ilaali xaafadaha qoysaska/waayeelka u-saaxiibka ah ee Bothell ee aan nafaqaynay. Yaree magaalo-weynaynta; xaddid canshuurta hantida; ka shaqee taraafikada, baarkin badan; yaree qiiqa; deji cufnaan hoose oo la jaanqaada sharciga gobolka; xaddid qiimaha PSE iyo khidmadaha bulaacadaha; ilaali dookha, ilaali suundooyinka cagaaran; kana saar kaalmada ay guryaha dabaqa ahi ka helaan mulkiileyaasha guryaha. Xaafadahennu waxay u baahan yihiin ilaalin. Iga soo biir. Waxaan u baahanahay duq la doorto. Maareeyaha Magaalada (City Manager) wuxuu ka mushahar badan yahay guddoomiyaha. Soo celi nidaam hubin iyo isku-dheelitir siyaasadeed oo madax-bannaan, ayna magaalo ahaan uga madax-bannaan tahay Golaha KC.

### Rami Al-Kabra



(206) 701-9272
FriendsOfRami@gmail.com
VoteForRami.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga (MBA), Seattle University; Shahaadada Jaamacadda ee Injineerinka Korontada, University of Kentucky

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada; Mutadawac Bulshada; Mulkiilaha Ganacsi Yar

**Bayaanka:** Lix iyo toban sano ka hor, aniga iyo xaaskaygu waxaan xididdo ka dhignay Bothell annagoo ayna soo jiidatay dugsiyo soo-dhawayn leh iyo ruuxa bulshada; kalsoonidaaduna waxay ii suurto gelisay inaan noqdo soogalootigii ugu horreeyay ee loo doorto Golahayaga, tan iyo maalintaasna waxaan u shaqaynayay si fursaddu uga korto deris kasta.

Annaga oo iskaashanayna waxaan ansixinnay qorshe guryo oo dhammaystiran, waxaan dhul u qoondeynay 200 guri oo la awoodi karo, waxaan bilownay jawaab goboleed oo marka hore dira xirfadlayaal caafimaadka dhimirka, waxaana dheellitirnay miisaaniyad mustaqbal u jeedda oo ilaalisa adeegyada aasaasiga ah. Waan ogahay in horumarku muhiim u yahay qoysaska Bothell oo dhan.

Ka soo qaad Golaha Dhallinyarada ee Magaalada oo qaabeeya fikrado cusub, waddooyin iyo guryo loo dhisay cimilada isbeddelaysa, iyo amniga dadweynaha oo ku dhisan daryeel, isla-xisaabtan, iyo xuquuqda madaniga. Aniga oo ay i taageereen Senator Stanford, Wakiillada Duerr iyo Kloba, Duqa Magaalada Thompson, iyo xubno badan oo goleyaasha ah, waxaan diyaar u ahay in hoggaanka aan sii wado. Ma macno bay samaynaysaa in aan shaqadan si wadajir ah u sii wadno? Waan ku sharfanaan lahaa inaan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Lisa Wissner-Slivka



lisa4clydehill@gmail.com
lisa4clydehill.com

**Waxbarashada:** BA (Shahaadada Jaamacadda) ee Daraasaadka Kombuyuutarka, Northwestern University; MBA, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha, Magaalada Clyde Hill; Xubinta Guddiga, Isbitaalka Overlake

**Bayaanka:** Labadii sano ee aan xilka hayay, wax badan ayaan ka bartay waxa ay ka dhigan tahay in aad noqoto masuul la doortay. Meel-marinta xeerarka maxalliga ah, ansixinta miisaaniyadda magaalada, iyo dejinta siyaasadaha magaalada dhammaantood waa qaybaha muhiimka ah ee shaqada, balse hawsha ugu muhiimsan waa awoodda lagu dhageysto si ixtiraam leh loogana barto degganeyaasha kala duwan.

Afarta sano ee soo socda, mudnaantaydu waxaa ka mid ah sii wadidda *taageerada Waaxdeenna Booliska ee heerka sare ah*, ka jawaabidda isbeddellada xeerarka guryaha ee uu gobolku faray *anagoo ilaalinayna bulshadeenna*, *kordhinta daah-furnaanta hawlaha magaalada*, iyo dejinta miisaaniyad magaalada ah oo *hubinaysa sii-joogteynta magaaladeenna*. Bilaha soo socda waa fursad dahabi ah oo uu Golaha Magaaladu si wadajir ah ula shaqeeyo Duqa si loo yeesho aragti wadaag ah.

Taageerooyinka **:** Xubinta Golaha Magaalada Bellevue Jared Nieuwenhuis; Duqa Magaalada Yarrow Point Katy Harris; Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee CH Brian Ouellette; Guddoomiyaha Guddiga Qorsheynta ee CH Mark Kroese.

### Lyn Adams



(206) 953-9537
lyn@lynadams.com
lynadams.com

**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Bayaanka:** Degane muddo dheer ku nool Clyde Hill, oo ku faanaya inuu magaaladaan u arko gurigiisa. Aniga iyo walaalahay waxaan ku soo koray hooska buurta, aniga iyo ninkayga Greg waxaan qoyska ku soo korinay halka sare—cinwaankaas oo aan ku noolayn 40 sano. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan u soo bandhigo aragti cusub iyo xiriir bulsho.

Iyadoo aan ku jiro xirfadda Kheyraadka Aadanaha iyo u heellanida dadka, waxaan qiimeeyaa ka mid noqoshada, daah-furnaanta, iyo wada hadalka ixtiraamka leh. Waxaan aaminsanahay in bulshooyin xooggan lagu dhiso qiimeyaal wadaag ah, aragti, iyo isgaarsiin furan.

Mudnaantaydu waxaa ka mid ah ammaanka dadweynaha, ilaalinta quruxda dabiiciga ah, taageeridda miisaaniyad maskaxeed, iyo ilaalinta dabeecadda magaaladeenna. Waxaan halkan ku leeyahay dareen qoto dheer oo ku saabsan goobtan; saddex jiil oo ka qalin jabiyay UW Husky waxaan weli ku raaxaystaa maadada muusikada waxaanan sii wadaa duubista iyo bandhigyada. Waxaan ku faraxsanahay inaan idiin adeego oo aan idin matalo—deriskayga, qoysaska kale, iyo mustaqbalka magaalada Clyde Hill lynadams.com lyn@lynadams.com

## Golaha Jagada Lr. 3

### Jennifer Michelle Nelson



jennifermichellenelson@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Deegaanka - Northwest University; Bellevue Christian School

**Shaqo iyo Xirfad:** Daryeel Bixiye

**Bayaanka:** Qoyskaygu waxay magaalada Clyde Hill ku noolaayeen tan iyo 1970-yadii, waxaanan u tartamayaa Golaha Magaalada Clyde Hill si aan uga dhabeeyo inaan ilaalino bulshadeenna aan jecel nahay jiilka soo socda.

Magaalada Clyde Hill waxay la kulmeysaa gaabis miisaaniyadeed oo qaab-dhismeed ah. Waa inaan si hufan u isticmaalnaa doolarka canshuur-bixiyeyaasha, anagoo diiradda saareyna adeegyada ugu muhiimsan isla markaana ka fogaanaya kharashka aan loo baahnayn. Waxaan taageeri doonaa miisaaniyad caqli-gal ah oo ilaalisa adeegyada muhiimka ah iyada oo aan si aan loo baahnayn canshuuraha loo kordhin.

Waxaan aaminsanahay in dowladdu ay si fiican u shaqeyso marka ay furan tahay oo lala xisaabtami karo. Waxaan ka shaqeyn doonaa soo celinta talo-bixinta dadweynaha ee go'aamada qorsheynta, hagaajinta isgaarsiinta u dhexeysa magaalada iyo deganeyaasha, iyo hubinta in go'aan kasta oo weyn lagu gaaro si cad oo daah-furnaan leh. Deegaanka dabiiciga ah waa mid ka mid ah hantida ugu weyn ee magaalada Clyde Hill. Waxaan taageeri doonaa siyaasadaha ilaaliya geedahayaga, biyaha dhulka hoostiisa, iyo dabeecadda xaafaddeena iyadoo la raacayo shuruudaha gobolka ee koritaanka waara. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado kalsoonidaada, ka-qaybgalkaaga, iyo codkaaga.

### Brad Andonian



brad@pande-cameron.com

**Waxbarashada:** University of Puget Sound BA (Shahaadada Jaamacadda) dhaqaalaha

**Shaqo iyo Xirfad:** Iskaa u shaqayste tafaariiqda ah

**Bayaanka:** Tan iyo markii aan ku biiray Golaha Magaalada, waxaan ku faraxsanahay fursadda aan u helay inaan ka qayb qaato shaqada muhiimka ah ee lagu maamulo Clyde Hill. Mas'uuliyadahayga waxaa ka mid ah inaan la shaqeeyo Shaqaalaha iyo Golaha si aan u sameeyo waddo buuxisa shuruudaha Gobolka iyadoo la ilaalinayo dabeecadda tuuladeenna. Waxaan sii wadi doonaa inaan hubiyo in ciidankeena booliiska ee heerka sare ahi ay sii wadaan maalgelinta anigoo ka shaqeynaya qorshe muddo dheer ah si loo dheellitiro miisaaniyadda magaalada.

Waxaan jira caqabado badan oo horyaalla bulshadeenna, waxaan sii wadi doonaa inaan noqdo afhayeenka dhammaan deganeyaasha Clyde Hill. Xiriirka shaqo ee aan la leeyahay Duqa Magaalada, Shaqaalaha iyo asxaabta Xubnaha Golaha wuxuu ahaa mid wax soo saar leh; waxaan sii wadi doonaa inaan kusii dhiso tan.

Maadaama aan ahay degane 21 sanno ah, ilaalinta tayada nolosha ee Clyde Hill aad ayay muhiim noogu tahay aniga iyo qoyskeyga--sida ay muhiim ugu tahay qoyskaaga! Waxaan jeclaan lahaa taageeradaada iyo codkaaga bisha Nofeembar! www.bradforclydehill.com

# Golaha Jagada Lr. 5

## Mike Minard

Sawir lama soo gudbin

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Dean Hachamovitch



(425) 455-0636
dean@DeanForClydeHill.com
DeanForClydeHill.com

**Waxbarashada:** A.B. Xisaabaadka, Harvard College; koorsooyinka horumarinta xirfadeed ee Wharton, Dugsiga Maareynta ee Kellogg, Harvard.

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha, Duqa Magaalada Pro Tem (Ku Meelgaarka), Clyde Hill; CVP hore, Microsoft

**Bayaanka:** *Madaxa u Taagan Golaha Clyde Hill*

Maxaa muhiim kuu ah sida qof degan magaalada? Qoyskaygu waxay u guureen magaalada Clyde Hill 24 sanno ka hor, iyagoo ku soo jiitay nabadda iyo dareenka bulshada. Maanta, dhimanaanta miisaaniyadda ee soo noqnoqda waxay khatar gelinaysaa badbaadada iyo xasilloonida aan dhammaanteen qiimeyno. Afar sanno, waxaan si toos ah u wajahay arrimaha, anigoo u doodaya mas'uuliyadda maaliyadeed iyo ammaanka dadweynaha — tusaale ahaan, maalgelinta booliska, ma aha kharashka sare. Sida qayb ka mid ah golahaaga magaalada, waxaan ilaaliyay qiimaha hantida anigoo ka dhigay xeerka magaalada mid cad oo si fudud loo dhaqan gelin karo. Si aan u taageero badbaadada bulshada, waxaan aasaasay Clyde Hill Police Foundation (Hey'adda Booliiska ee Clyde Hill).

Si wadajir ah, weli waxaan sameyn karnaa wax badan si aan magaalada Clyde Hill u sii kobcino. Waxaan ku faraxsanahay inaan sii wado u adeeggida, dhegaysiga, iyo inaan noqdo *u doodehaaga* ee Clyde Hill oo ammaan ah, xasilloon, oo xooggan. Taageerooyinka: Xubinta Golaha Magaalada Bellevue Jared Nieuwenhuis; Duqa Magaalada Yarrow Point Katy Harris; Guddoomiyeyaasha Guddiga Adeegga Bulshada iyo Qorsheynta ee Clyde Hill Brian Ouellette & Mark Kroese

## Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku tabarruceyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo deegaanka:
**Guddiga Kashifaadda Dadweynaha**
www.pdc.wa.gov
Lambarka Lacag La'aanta 1 (877) 601-2828

CODBIXIYAHA
★ MUSTAQBALKA ★

## Hore isku diiwaan geli si aad u codeyso.

Haddii aad tahay ugu yaraan 16 jir, waxaad wakhti kasta hore iskaga diiwaan gelin kartaa oonleenka ama boostada si aad u codeyso.

Waxaanu hayn doonaa diiwaan gelintaada oo aan si toos ah kuugu soo diri doonaa warqad codbixin markii aad u qalanto inaad codeyso.

## Duqa Magaalada

### Lindsey Walsh



(253) 271-8280
lindsey@votelindseywalsh.com
VoteLindseyWalsh.com

**Waxbarashada:** B.S. (Shahaadada Jaamacadda) ee Cilmiga Siyaasadda, Qorsheynta, Iyo Horumarinta, University of Southern California

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha ganacsi yar; Guddoomiyaha Golaha Magaalada Issaquah

**Bayaanka:** Anigoo ah Guddoomiyaha Golahaaga iyo Mayor Pro Tem ku-meelgaar ah, waxaan si gaar ah diiradda u saaray sameynta waxa saxda ah ee qoysaska iyo bulshooyinka Issaquah. Anigaa ah musharraxa keliya ee keenay natiijooyin maxalli ah oo micno leh: *xoojinta badbaadada dadweynaha* iyo kooxaha caafimaadka dabeecadda, u-doodidda gaadiidka maxalliga ah, labanlaabidda maalgashiga *derisyo ammaan ah oo lagu lugeyn karo*, waxaan u dooday *dejinta taraafikada ee ay hoggaamiyaan derisyadu*, iyo kaalmaynta ganacsiyada maxalliga ah iyadoo la bixiyay $1.5 million oo deeqo soo-kabasho ah. Laakiin shaqo badan ayaa weli taagan.

Anigoo noqda Duqa Magaalada, waxaan sii wadi doonaa inaan derisyadeenna ka dhigno kuwo ammaan ah, aan difaaco deegaanka dabiiciga ah, oo aan mudnaanta siiyo deganeyaasha maxalliga ah - *anagoo ilaalinayna ruuxa magaalo-yareedkeena xitaa marka aynu koreyno*. Anigoo ah waalid, deris, iyo la-taliye waxaan sii wadi doonaa dhegaysiga, hoggaaminta daacadnimo leh, iyo gelinta Issaquah mudnaanta koowaad. Sharaf bay ii noqon lahayd inaan kasbado codkaaga.

*Waxaa si sharaf leh u taageeray hoggaamiyeyaasha deegaanka, macallimiinta, iyo ururada u heellan mustaqbalka Issaquah, oo ay ku jiraan 15+ Duq Magaalo iyo Xubnaha Golaha ee deriska ah; 5aad, 41aad, iyo Dimuqraadiyiinta KC; Ururka Waxbarashada Issaquah; Ururka Shaqaalaha MLK; Ficilka Ilaalinta WA.*

### Mark Mullet



(425) 681-7785
info@mulletformayor.com
www.mulletformayor.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Arrimaha Dadweynaha, University of Washington. Xubin Hore ee Golaha Magaalada Issaquah (2009–2013).

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha, Ben & Jerry's ee Issaquah. Senatarkii Hore ee Gobolka (2012–2025)

**Bayaanka:** Waxaan ku faanayaa inaan u tartamayo shaqada riyadayda ee duqa magaalada Issaquah. Ballanqaadkayga adeegga dadweynaha waxaa igu dhiirrigeliyay aabbahay, oo ahaa duqa magaalada ee magaalada aan ku dhashay.  Waxaa sharaf ii ah in aan taageero ka helo duqa magaalada ee hadda xilka haya, Mary Lou Pauly.

Sida aan sameeyay anigoo matalaya magaalada Issaquah ee Senetka Gobolka, mar walba waan dhageysan doonaa walaacyadiinna, waxaan idin noqon doonaa daacad, waxaanan si adag ugu shaqeyn doonaa inaan ka caawiyo magaaladeenna inay horumar gaarto.

Sida duqa magaalada ahaan, waxaan mudnaan siin doonaa yareynta ciriiriga gaadiidka, ilaalinta ammaanka dadweynaha, iyo ilaalinta quruxda dabiiciga ah ee magaalada Issaquah. Waxaan sidoo kale adeegsan doonaa khibraddayda ganacsi yar si aan u dhiso miisaaniyado mas'uul ah oo ka dhigaya magaalada Issaquah mid la awoodi karo oo ku habboon qoysaska iyo ganacsiyada maxalliga ah. Waxaa sharaf ii ah in aan helo taageerooyinka duqa magaalada Issaquah Mary Lou Pauly, duqii hore ee magaalada Issaquah Fred Butler iyo Rowan Hinds, Guddoomiyaha Gobolka Bob Ferguson, Guddoomiyeyaashii hore Chris Gregoire iyo Gary Locke, Xubinta Golaha ee Issaquah Chris Reh, Xubinta Golaha ee Degmada King Reagan Dunn, Ururka Dab-damiyeyaasha ee Eastside Local 1762, iyo kuwo kale oo badan.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Chris Reichley



(775) 741-0781
chrisreichley4citycouncil2025@gmail.com
chris4issaquah.org

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno ee Waxbarashada Guud iyo Maamulka Ganacsiga, Truckee Meadows Community College, Reno NV.

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Laanta Bulshada ee Harborstone Credit Union

**Bayaanka:** Anoo deganaa magaalada Issaquah 11sano ahna xubin firfircoon oo ka mid ah bulshada, waxaa iga go'an inaan ilaaliyo dabeecadda iyo tayada nolosha ee ka dhigta magaaladeenna mid gaar ah anigoo hagaya koritaanka miisaaman oo fikir leh. Anigoo leh in ka badan 20 sanno oo waayo-aragnimo maaliyadeed iyo hoggaamineed, iyo 5 sanno oo aan ahaa Guddoomiyaha Guddiga Kobcinta Dhaqaalaha iyo Guddoomiye ku xigeenka Guddiga Qorshaha Istaraatiijiga ah, waxaan keenaa khibrad xooggan oo ah dhinaca miisaaniyad mas'uul ah, qorsheyn istaraatiiji ah, iyo go'aan qaadasho diiradda lagu saaray bulshada.

Waxaa sharaf ii ah in ay i taageeraan Ururka Caalamiga ah ee Dab-damiska Local 1762, oo matalaya dab-damiska magaalada Issaquah. Amniga dadweynaha waa mudnaanta koowaad, oo ay weheliso maalgelinta caqliga leh ee kaabayaasha iyo siyaasadaha waara ee taageeraya qoysaska shaqeeya, waayeelka, iyo ganacsiyada yaryar. Waxaan aaminsanahay hoggaaminta daah furnaanta leh, lala xisaabtami karo oo dhegaysta oo ku dhaqma daacadnimo. Waxaan u tartamayaa inaan hoggaamiyo, laakiin sidoo kale inaan dhegaysto oo aan keeno xalal wax ku ool ah oo firfircoon oo ka tarjumaya qiyamka aan wadaagno.

Si wadajir ah, waxaan ku ilaalin karnaa magaalada Issaquah inay sii kobocdo. Waxaan qiimeeyaa codkaaga iyo kalsoonidaada.

### Kelly Jiang



(425) 658-9497
kelly4issaquah@gmail.com
kellyjiang.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Cilmiga Injineernimada Deegaanka, UC Berkeley

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada Issaquah, Injineer Tamarta Nadiifka ah

**Bayaanka:** Ka Xubinta Golaha Magaalada Issaquah ahaan, waxaan u codeeyay in la ilaaliyo goobaha furan, la dhiso guryo la awoodi karo oo u dhow gaadiidka dadweynaha, loo oggolaado cufnaan yar oo deegaannada deganeyaasha ah, lana qorsheeyo tareenka fudud. Markii 140 geed si sharci darro ah looga jaray Grand Ridge Park, Issaquah Alps Trails Club (IATC) ayaa qaylo dhaan ka qaaday. Sida Ka Madaxweynaha IATC ahaan, waxaan qaadan doonaa habka bulshada ku saleysan si aan ugu dagaalamo waxa aan dhammaanteen aaminsanahay.

Sida magaalada Issaquah u korayso, waxaa iga go'an in aan helo xalal hal-abuur leh oo ku saabsan caqabadaha la xiriira isku dheelitirka koritaanka, amniga dadweynaha, baahiyaha kaabayaasha, iyo waaraanshaha, anigoo si mas'uuliyad leh u maamulaya lacagaha canshuur bixiyeyaasha. Wadajir, waxaan ka dhigi karnaa guryaha kuwo la awoodi karo, waxaan ka gaajin karnaa taraafikada, waxaan ilaalin karnaa ammaanka dadweynaha, waxaan ilaalin karnaa deegaanka, waxaanan taageeri karnaa ganacsiyada yaryar. *Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.*

*Taageerooyinka: Duqa Magaalada Issaquah Pauly, Senatarka Gobolka Hunt, Wakiilka Gobolka Hall, Xubinta Golaha Degmada King Perry, Xubnaha Golaha Magaalada Issaquah Walsh iyo Marts, Sierra Club, Isbahaysiga Ganacsiga Eastside, Dimuqraadiyiinta Degmada King/5aad/41aad, iyo in ka badan!*

## Golaha Jagada Lr. 3

### Barbara de Michele



(206) 898-5210
barb4council@gmail.com
www.barbdemicheleforcouncil.com

**Waxbarashada:** Washington State University (Shahaadada Jaamacadda ee Waxbarashada Ingiriisiga); Eastern Connecticut State University (Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada Ingiriisiga)

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha ee Issaquah, Hoggaamiye Aan Faa'iido Doon Ahayn; Qorsheeye hore ee Xiriirka Bulshada ee KCDOT

**Bayaanka:** Tan iyo 2019 waxaan u adeegay bulshada anigoo noqday wakiilkiina Golaha Magaalada Issaquah. Intii aan xilka hayay, goluhu wuxuu si guul leh u maareeyay dhibaatadii COVID19, wuxuu dhisay miisaaniyado laba-sanno ah oo la jaanqaadaya qiyaamka bulshada, wuxuu kordhiyay adeegyada caafimaadka aadanaha iyo habdhaqanka, wuxuu soo celiyay awoodda ka hortagga booliiska iyo dab-damiska, wuxuu wax ka qabtay dhibaatada guryaha la awoodi karo, wuxuuna kordhiyay u diyaar garoowga degdegga ah. Waxaan iskaashi goboleed la sameeyay si aan u horumariyo danaha magaalada Issaquah ee arrimaha gaadiidka, caafimaadka, iyo adeegyada aadanaha.

Waxaan kula shaqeyn doonaa si aan u dhisno guulihii hore ee magaalada Issaquah iyo inaan wajahno caqabadaha cusub, gaar ahaan baahiyaha maaliyadeed, guriyeynta, gaadiidka, qorsheynta iyo deegaanka ee bulshadeena.

Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta 5-aad; Dimuqraadiyiinta Degmada King; Guddiga Dalaalyaasha Guryaha ee Seattle- Degmada King; Golaha Ganacsiga Dhismaha Seattle; LiUNA #242; IUOE # 302; Kutlada Siyaasadeed ee Haweenka Qaranka – Washington; Golaha Guriyeynta ee la awoodi karo ee Ururka Dhiseyaasha Mastarka; Senatar Hunt; Wakiillada Callan, Hall, iyo Zahn; Xubinta Golaha Degmada King Perry; Issaquah iyo xubnaha guddiga dugsiga LWSD; iyo madax goboleedka Eastside.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Diogo Magalhaes



magalhaesjsd@gmail.com
dm7272.wixsite.com/diogo-magalhaes-for

**Waxbarashada:** Shahaadada ugu Sareysa ee Sayniska Sharciga (JSD), Cornell University; LL.M., Catholic University; LL.B., Lisbon University

**Shaqo iyo Xirfad:** Aqoonyahan Sharci iyo Bare Sharciga

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Issaquah si aan u keeno hoggaan dheelitiran oo loo wada dhan yahay magaaladan koraysa. Maadaama aan ahay macallin sharci iyo soogalooti jiilkii ugu horreeyay, waxaan noloshayda u huray maamul wanaagga, xallinta dhibaatooyinka hal-abuurka leh, iyo awoodsiinta bulshooyinka kala duwan. Safarkayga oo ka bilaabmay Macau ilaa Portugal ilaa Mareykanka, wuxuu i barray in naxariis iyo dareen-wadaag ay yihiin buundooyin isku xira kala qaybsanaanta.

Si xirfad leh, waxaan u hoggaamiyey goobaha tacliinta, ganacsiga, iyo kuwa aan faa'iido doonka ahayn—maamulayay mashaariic bilyan doolar ah iyo bilaabay barnaamijyo waxbarasho oo kor u qaadaya ka-qaybgalka bulshada. Magaalada Issaquah, waxaa iga go'an inaan dhegaysto cod kasta, hubinta go'aan qaadasho daah furan, iyo horumarinta xalal caqli-gal ah, anshax leh, oo waara oo ku saabsan guryaha, gaadiidka, iyo wanaagga bulshada. Taasi waxaa ka mid ah taageeridda meelaha saddexaad—xarumaha bulshada sida maktabadaha, maqaayadaha, iyo meelaha kale ee soo dhawweynaya halkaas oo dadku ku kulmaan meel ka baxsan guriga iyo shaqada.

Waxaan aaminsanahay in hoggaaminta ku saleysan ka mid noqoshada iyo la xisaabtanka ay qaabeeyaan magaalo qof walba uu dareemo in laqadariyo. Aynu abuurno mustaqbal sharaf leh oo ku saleysan taariikhdeena, kor u qaadista qiyaamkeena wadajirka ah, iyo soo dhawweynta jiilasha soo socda.

### Russell Joe



electrusselljoe@gmail.com

**Waxbarashada:** University of Colorado Boulder, J.D. (Shahaadada Sharciga), Northwestern University, Shahaadada Jaamacadda, Dhaqaalaha iyo Sayniska Siyaasadda

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Arrimaha Dowladda ee Degmada Snohomish ee Siyaasadda Guryaha

**Bayaanka:** In muddo soddon sanno ah, waxaan ku faanayaa inaan magaalada Issaquah ugu yeero gurigeyga. Haddii dib la ii doorto, waxaa iga go'an in aan wax ka qabto arrimaha muhiimka ah sida dhaqdhaqaaqa, kaabayaasha, iyo ilaalinta deegaanka. Si gaar ah, waxaan sii wadi doonaa inaan taageero iibsashada dhulalka kaymaha ee ku teedsan Issaquah Creek iyo meelaha cusub ee furan si loo ilaaliyo. Horumarinta waddooyinka, hareeraha waddooyinka, iyo badbaadada lugeeyeyaasha xaafadaha ayaa ah mudnaanta ugu sarreysa si loo hagaajiyo socodka bulshada iyo isusocodka gudaha magaalada.

Intii aan shaqeynayay, waxaan u shaqeeyay sidii qareen xeer ilaalin, mutadawac, iyo xubin guddiga urur aan faa'iido doon ahayn. Hadda, waxaan ku hawlanahay xallinta caqabadaha helitaanka iyo gaarsiinta guryaha ee Snohomish County. Waxaan diyaar u ahay inaan khibraddayda iyo aqoontayda u adeegsado inaan u adeego deganeyaasha magaalada Issaquah muddo kale.

Taageerooyinka: Senatarka Degmada 5aad Victoria Hunt, Wakiilka Degmada 5aad Zach Hall, Madaxweynaha Golaha Magaalada Issaquah Lindsey Walsh, Xubin Golaha Magaalada Issaquah Chris Reh, Senatarkii Hore ee Degmada 5aad Mark Mullet, iyo Duqii Hore ee Magaalada Issaquah Fred Butler.

## Golaha Jagada Lr. 6

### Katia Zakharoff



(425) 319-0798
katia@katia4issaquah.com
www.katia4issaquah.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda; M.B.A., Istaraatiijiyadaha Maamulka Ganacsiga Yar, RFEI

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar; Guddoomiyaha Siyaasadda Qorsheynta ee Magaalada Issaquah

**Bayaanka:** Magaalada Issaquah waxay i soo dhawweysay anigoo ah soogalooti jiilkii ugu horreeyay iyo mulkiilaha ganacsi yar. Waxaan dareemayaa in la gaaray waqtigii aan wax ku celin lahaa. Anigoo ah Guddoomiyehaaga Siyaasadda Qorsheynta, waxaan dhegaystay oo aan ka shaqeeyay sidii aan wax uga qaban lahaa waxa ugu muhiimsan ee adiga kuu ah: guryaha, adeegyada ammaanka dadweynaha, socodka, geedaha iyo deegaanka, iyo taageerada ganacsiyada yaryar. Caqliga iyo wada shaqeynta bulshada dhabta ah ayaa loo baahan yahay si loo xalliyo caqabadahaan.

Magaalada Issaquah waxay wajihi doontaa wakhtiyo dhaqaale oo adag mustaqbalka. Iyadoo aan leeyahay asalka dhaqaalaha iyo khibrad dhab ah oo ku saabsan miisaaniyadda, waxaan ka shaqeyn doonaa inaan ka dhabeeyo mas'uuliyadda maaliyadeed iyada oo aan la saarin culays deganeyaasha. Waxaa iga go'an inaan ilaaliyo waxa ka dhigaaya magaalada Issaquah mid gaar ah anigoo qorsheynaya mustaqbalka u shaqeeya qof walba.

Waxaan uga mahad celinayaa inaan kasbaday kalsoonida iyo taageerada hoggaamiyeyaasha ganacsiga iyo bulshada ee maxalliga ah, oo ay ku jiraan Isbahaysiga Ganacsiga Eastside, Duqii Magaalada ee hore Fred Butler, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta LD ee 5aad, iyo kuwo kale oo badan. Waxaan ku faraxsanahay inaan kasbado codkaaga iyo iskaashigaaga si aan u dhisno Issaquah oo xooggan wadajir.

### Kevin Nichols



(425) 539-7834
kevin@kevinnichols.org
kevinnichols.org

**Waxbarashada:** Ph.D., M.Eng., iyo B.S., Injineernimada Bayoolojiga

**Shaqo iyo Xirfad:** Saynisyahan, qalabka caafimaadka; Xubin, Guddiga Kormeerka Mashaariicda Raasumaalka ee Degmada Dugsiga Issaquah

**Bayaanka:** Muddo 12 sanno ah, qoyskeygu waxay magaalada Issaquah ugu yeeraan guriga. Sida adiga oo kale, waxaan jecel nahay magaalada Issaquah sababtoo ah dugsiyada wanaagsan, bulshada, iyo deegaanka dabiiciga ah. Oo sida adiga oo kale, waxaan arkaa sida taraafikada sii xumaanaysa iyo qiimaha nolosha oo sii kordhaaya ay khatar ugu yihiin waxa ka dhigaaya magaalada Issaquah mid gaar ah.

Sida saynisyahan ahaan, waxaan leeyahay khibrad xallinta dhibaatooyinka si aan u gaarsiiyo natiijooyin. Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan *hagaajiyo taraafikada* anigoo adeegsanaya gaadiid dadweyne oo caqliyeysan iyo isgoysyada wanaagsan. Waxaan ka shaqeyn doonaa *in aan abuurro guryo la awoodi karo* si carruurteenu ay mustaqbal uga dhistaan halkan, waayeelkeennu ay awoodaan inay joogaan, macallimiinteena iyo kuwa noo qabta gargaarka degdegga. Oo, waxaan la shaqeyn doonaa degmada dugsigeena si aan *u aqoonsanno dhul loogu talagalay dugsiyada* bartamaha Issaquah, ma ahan buuraha.

*Waxaa taageeray:* Sierra Club; Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta ee 41aad, 5aad, Dimuqraadiyiinta Dhallinyarada; Wakiilka Gobolka Hall; Xubinta Golaha Degmada King Perry; Guddoomiyaha Golaha Issaquah Walsh; Xubnaha Golaha Jiang iyo Marts; Agaasimeyaasha Guddiga Dugsiga Coyne iyo Taylor, dheeraad ah.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Tola Marts



tola@tola4issaquah.net
www.tola4issaquah.net

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda / Injineernimada Farsamada (U of MN)

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxa Fulinta Engineerinka

**Bayaanka:** Issaquah gudaheeda, dadka halkan deggan ma awoodaan inay halkan ka shaqeeyaan, dadka halkan ka shaqeeyana ma awoodaan inay halkan degganaadaan. Sababtoo ah guryaha shaqaalahuna kuma filna shaqooyin mushahar nolosha ku filaana malaha.

Dhanka guryaha shaqaalaha, waxaan sii wadi doonaa inaan ku adkaysto (sida aan sameynayay tan iyo markii la iigu doortay 2009) in guryo dheeraad ah oo keliya lagu oggolaado Dooxada, halkaas oo adeegyo iyo gaadiid ay ka jiraan, isla markaana aan ku waajibinno isku-dar qiimayaal oo ay ku jiraan guryo ay awoodi karaan booliiskeenna, dab-damiyeyaashayada, iyo macallimiinteennu.

Dhanka shaqooyinka mushahar nolosha ku filan, waxaan sii wadi doonaa inaan riixo (sida aan sameynayay tan iyo 2009) ka-qaybgalka maamulka heerka sare C-level iyo heshiisyo horumarinta dhaqaalaha oo keenaya loo-shaheeyayaal waaweyn ee gudaha dooxada, halkaas oo ay ka bixin karaan shaqooyin wanaagsan iyo suuq adeeg labaad oo u adeega magaaladeenna.

## Golaha Jagada Lr. 2

### Tracy Banaszynski



tracy@tracyforkenmore.com
www.tracyforkenmore.com

**Waxbarashada:** Yale University, Ph.D. ee Cilmi-nafsiga; University of Wisconsin, B.A. (Shahaadada Jaamacadda) ee Cilmi-nafsiga iyo Cilmiga Bulshada

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Wadajirka ah ee Fulinta, Ururka Aan Faa'iido Doon Ahayn ee Soo Celinta Salmon-ka; Guddoomiyaha, Guddiga Qorsheynta Kenmore

**Bayaanka:** Waxaan ku mahadsanahay oo sharaf ayay ii tahay in aan ku guuleystay doorashadii hordhaca ahayd ee Agoosto. Mahadsanid, Kenmore, kalsoonidaada iyo taageeradaada!

Adeeggayga bulshada wuxuu leeyahay xididdo qoto dheer. Aniga oo ah Guddoomiyaha Qorsheynta, waxaan ka caawiyay hagidda qaybaha ugu horreeya ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Ficilka Cimilada. Aniga oo ah hoggaamiye bulsho, waxaan habeeyay boqolaal mutadawiciin si loo soo celiyo jardiinooyinkeena quruxda badan. Aniga oo ah Xubintaada Golaha, si wadajir ah aynu u abuuri doonna bulsho soo dhoweyn leh oo la awoodi karo; mudnaanta siin doonna soo kabashada salmonka iyo ficilka cimilada; hubin doonna xannaaneyn masuul ah ee kheyraadkeenna maaliyadeed iyo dabiici; waxaana indhaha ku hayn doonna bani-aadannimadeenna wadaagga ah annagoo dhiseyna mustaqbal caddaalad iyo sinnaan ku dhisan oo uu qof walba ku hanaqaado. *Waxaan sii wadi doonaa shaqo adag, dhageysi, hoggaan, iyo iska-abuurid Kenmore firfircoon adiga la jirka. Sharaf bay ii ahaan lahayd in aan kuu adeego. Si xushmad leh waxaan u codsanayaa codkaaga.*

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada King; Dab-damiyeyaasha Shoreline Local 1760; Hagaha Codbixiyeyaasha Horumarinta ee Fuse Washington; Wakiilka Gobolka Duerr; Xubnaha Golaha Kenmore Sasson, Culver, Srebnik, Loutsis; Guddoomiyaha Dab-damiska Adman; iyo in ka badan!

### Joe Marshall



(206) 793-2227
jhmarshall_7@msn.com
www.joe4Kenmore2025.com

**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebiyay Inglemoor; Shahaadada Jaamacadda University of Washington; M.F.A. Cornell University; J.D. University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen Difaaca Dadweynaha; Qareen 25 sanno; hantida ma guurtada, sharciga dowladda hoose.

**Bayaanka:** Waxaan ahay Dimuqraadi iyo ruux u dooda deegaanka oona laba jeer ka soo shaqeeyay Golaha Magaaladaada. Waxaan dhegaystaa oo u istaagaa *adiga.* Guulaha: ansixiyay 121 guri cusub oo raqiid ah lana awoodi karo, hoyga dumarka dhiban; xeerarka deegaanka; ku riixay joogtaynta maaliyadeed bartilmaameedyada ugu sareeya ee magaalada Kenmore, Bayaanka Pride, Hindisaha DEI, Tallaabooyinka Cimilada, jidad cusub, waddooyin baaskiil iyo jardiinooyin. Waxaan ku dhegaystay markii codbixinta Plymouth socotay oo waxaan la dagaallamay xeerka gobolka ee isku dayay inuu aamusiiyo codkaaga.

Waxaan ku soo barbaaray magaalada Kenmore oo qoyskayga halkan ku koriyay. Waxaan ilaalin doonaa deegaanka, abuuri doonaa meelaha bulshada, oo sii wadi doonaa u doodista barkad dadweyne. Sida difaaca dadweynaha, u adeeggida kuwa ugu nugul waxay igu dhiirigelisaa inaan hubiyo in magaalada Kenmore ay si caqli leh u korto oo ay qalbi leh u korto. *Waxaan si qushuuc leh u weydiisanayaa codkaaga.*

Taageerooyinka: Ku xigeenka Duqa Magaalada Kenmore O'Cain, Xubinta Golaha Loutsis, Duqii Hore Baker, Xubinta Guddiga STEP Caitlin Sullivan, Xubnaha Golaha Degmada King Girmay Zahilay iyo Rod Dembowski, Senatarka Dimuqraadiga ee Gobolka Valdez, Wakiilka Pollet.

## Golaha Jagada Lr. 4

### Christina Schiefer



christina4kenmore@gmail.com
www.christina4kenmore.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Xiriirada Dadweynaha, Auburn University

**Shaqo iyo Xirfad:** Tababare barta Crossfit Kenmore

**Bayaanka:** Waxaan ahay mulkiile ganacsi oo qof la wadaagga xirfad ganacsi muddo 14 sanno ah, waalid ka tirsan dugsiyada Northshore, iyo mutadawaciin firfircoon ee bulshada, sidaas darteed waan fahamsanahay waxa magaalada Kenmore u baahan tahay: hoggaamiyeyaal go'aan qaata oo dhageysta *qof kasta* oo ka tirsan bulshadeenna. Waxaan sannado badan ka mid ahaa guddiga ururka xaafaddayda, waxaan ka qayb qaatay mutadawacnimada dugsiyada, waxaanan taageeray ganacsiyada maxalliga ah anigoo ah Safiirka Rugta Ganacsiga.

Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan u dalbado daah-furnaan, u ilaaliyo dabeecadda xaafadaha, oo aan u hubiyo qorsheynta magaalada oo waara oo daboolaysa baahiyaha *dhammaan*, oo ay ku jiraan kuwa ugu nugul, iyada oo loo marayo xalal guri oo macquul ah oo la awoodi karo oo macno u leh *qof walba*. Waxaan aaminsanahay bulsho ay qof walba ku dareemo soo dhawweyn, maqlaan, iyo qiimeyn, halkaas oo goobaha cagaaran iyo deegaanka la ilaaliyo jiilasha mustaqbalka.

Waxaan diyaar u ahay inaan keeno hoggaamin xoog leh, hab-dhaqan dadka ugu horreeya, iyo aragti cusub si aan magaalada Kenmore hore ugu sii wado. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan haysto codkaaga. Waxaa taageeray Isbahaysiga Ganacsiga Eastside, Xubinta Golaha Joe Marshall, iyo ganacsiyo badan oo Kenmore ah.

### Nigel Herbig



nigel@nigelherbig.com
www.nigelherbig.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Isbarbardhigga Diinta iyo Cilmiga Siyaasadda, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Duqa Magaalada/Xubin Golaha, Magaalada Kenmore

**Bayaanka:** Waxaan u tartamay Golaha Magaalada si aan u dhiso Kenmore oo ammaan ah, oo daah furan, waanan fuliyay. Wadajir ayaan u dhisnay in ka badan 6 mayl oo hareeraha waddooyinka iyo waddooyinka baaskiilka ah si aan u wanaajino helitaanka iyo badbaadada qof walba, waxaanan ka dhigay dowladdayada mid furan anigoo ku rakibay kamarad toos ah oo lagu daawado Golaha Deegaanka. Markii kulamada fool-ka-foolka ah dib loo bilaabay, waxaan ku dadaalay inaan sii hayo fursadda Zoom, si aan u hubiyo in codadka dadweynaha badan la maqlo.

Waxaan rabaa inaan sii wado dhismaha magaalo aan dhammaanteen ku faanno inaan ugu yeerno gurigeenna, anagoo sahleeyna tegida *xeebta*, iyo inaan sii wadno shaqadeena si aan u *aasaasno bartamaha magaalada oo leh xulashooyin badan oo maqaayado iyo dukaamo leh*, iyadoo aan sii wadeyno shaqadeena si aan u *ilaalino deegaanka* iyo *dhisno guryo la awoodi karo oo badan*.

*Waxaa taageeray:* Dab-damiyeyaasha, Degmada King iyo Dimuqraadiyiinta Degmada 1aad, Naadiga Sierra, Ururka Shaqaalaha MLK, WABikes, Xildhibaan Suzan DelBene, Xubinta Golaha Degmada Rod Dembowski, *iyo qaar kale oo badan.* Waxaan si xushmad leh u codsanayaa codkaaga si aan u sii wado shaqadaan muhiimka ah.

## Golaha Jagada Lr. 6

### Eric Adman



eric4kenmore@gmail.com
www.eric4kenmore.com

**Waxbarashada:** BA (Shahaadada Jaamacadda), Dhaqaalaha, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Isku-Duwe Wadaag, Hey'ada Adopt A Stream

**Bayaanka:** Kenmore waa bulsho wanaagsan. Waxaan leenahay hanti dabiici ah oo badan sida haraheena, webiyadeena, kaymaheena, dhul qoyanadeena, iyo jardiinooyinkeena. Waxyaabahaas waa in loo ilaaliyo tayada nolosheena, cimilada, duurjoogta iyo soo kabashada salmonka. Waa inaan sii wadnaa inaan ka shaqeyno helitaanka iyo guryo la awoodi karo. Kenmore waa bulsho ammaan ah oo leh adeegyo degdeg ah oo wanaagsan, waana inaan sidaas ku sii haynaa. Waa inaan kobcinaa ganacsiyada cusub iyo kuwa jira. Mas'uuliyadda maaliyadeed waa in ay noqotaa mudnaanta Magaalada. Kenmore waa in ay noqotaa bulsho qof walba soo dhaweynaysa.

Aniga iyo xaaskayga Staci waxaan ku noolayn Kenmore tan iyo markii isku darka sannadkii 1998. Carruurteena waxay aadeen dugsiyada Northshore. Waxaan ka shaqeeyay bulshadeenna anigoo ah kalkaaliye caafimaad, guddoomiyaha dab-damiska, iyo hoggaamiye deegaanka.

Waxaan sharaf ii ah inaan fursad u helo inaan ka mid noqdo Golaha Magaalada Kenmore.

# Ma Guurtay? Magacaaga ma beddelay?

Cusboonaysii Diiwaan Gelintaada Codbixiyaha! Tag barta **VoteWA.gov** ugu dambeyn Oktoobar 27 si aad uga codeyso Doorashada Guud.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Ken Oberman



(425) 327-1511
kenobermanforkirkland@gmail.com
www.kenobermanforkirkland.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga Adabka, Isgaarsiinta Hadalka; Maamulka Ganacsiga Taqasus Yar, San Diego State University

**Shaqo iyo Xirfad:** Ku-xigeenka Guddoomiyaha Iibka ee Hore, Samsung Electronics

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan u keeno hoggaan wax ku ool ah, anshax maaliyadeed, iyo codkaaga oo aan dib ugu soo celiyo Golaha Magaalada. Si ka duwan wakiilkeena hadda, waxaan aaminsanahay in aan dhegaysto deganeyaasha oo aan ka tarjumayo mudnaanta dadka halkan ku nool. Iyadoo aan khibrad fulinneed u leeyahay maareynta miisaaniyadaha balaayiin doolar ah, waxaan si xikmad leh u maalgelin doonaa waxa ugu muhiimsan: adeegyada ammaanka dadweynaha, ganacsiyada maxalliga ah ee kobcaya, iyo ilaalinta jardiinooyinka, geedaha, iyo goobaha furan ee magaalada Kirkland.

Kobaca magaalada Kirkland waa inuu ka tarjumaa baahiyaha bulshadeenna, ee ma'aha ajendaha siyaasadeed ee magaalada Seattle. Haddii ay tahay xulashooyinka guryaha ee dhammaan heerarka nolosha ama maalgashiga xalalka gaadiidka, horumarku waa inuu la jaanqaadaa cabbirka iyo dabeecadda xaafadaha bulshadeenna oo uu la socdaa awoodda kaabayaasha dadweynaha. Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan xoojiyo adeegyada muhiimka ah ee magaalada oo dhan. Magaalada Kirkland waxay u baahan tahay hoggaan marka hore dhegaysta, si daah furnaan ah u dhaqma, oo natiijooyin keena.

Taageerooyinka: Dab-damiyeyaasha Kirkland; Ku-Xigeenkii Hore ee Duqa Magaalada Santos Contreras; Chuck Pilcher, Guddiga Caafimaadka Evergreen; Cassandra Sage, Agaasimihii hore ee Guddiga Dugsiga Lake Washington, iyo in ka badan!

### Jay Arnold



(425) 522-3804
jay@votejayarnold.com
VoteJayArnold.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Kombuyuutarka, Shahaadada Hoggaaminta Dowladda Hoose

**Shaqo iyo Xirfad:** Ku-xigeenka Duqa Magaalada Kirkland, horumariye webseedka iyo la-taliye IT ee ururada aan faa'iido doonka ahayn

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan u adeego idinka iyo magaaladeena quruxda badan ee kobcaysa. Waxaan dib u soo nooleeyay Totem Lake oo aan maalgeliyay jardiinooyin cusub oo la ballaariyay, waddooyinka socodka ee dugsiga, Cross Kirkland Corridor, iyo Green Loop. Waxaan xoojiyay ilaalinta geedaha oo aan taageeray siyaasadaha waara. Waxaan hagaajiyay adeegyada ammaanka dadweynaha, waxaan ku daray xirfadleyaal caafimaadka maskaxda si ay uga jawaabaan kuwa ku jira xaalad adag, waxaan si buuxda u shaqaaleeyay Waaxda Booliiska/Dabka, waxaanan ilaalinayay miisaaniyadda dheelitiran ee magaalada Kirkland iyo qiimeynta deymaha AAA.

Waxaan leeyahay in ka badan 20 sanno oo khibrad ah oo ah hoggaamiye wax ku ool ah oo dhegaysta, shaqadiisa qabta, ra'yi celin ku daro, oo xalliyo xalal wax ku ool ah.

*Mudnaanta:* Ku dabaq casharada laga bartay guulaha Totem Lake si loo gaaro koboc waara mustaqbalka. Abuur guryo la awoodi karo oo badan. Dhiso horumarinnada gaadiidka iyo hagaajinnada gaadiidka dadweynaha ee ka shaqeeya magaalada Kirkland. Ka dhabee in magaalada ay tahay *mid la awoodi karo, bulsho ammaan ah, soo dhawweyn leh, waara, oo firfircoon. Aqbalida la doortay*: Xildhibaan DelBene, Sharci-dejiyeyaasha Gobolka Slatter, Dhingra, Springer, Goodman, Salahuddin; Xubnaha Golaha Degmada Balducci, Dembowski; Golaha Guryaha La Awoodi Karo, Sierra Club. *Waxaan ku weydiisanayaa codkaaga.*

## Golaha Jagada Lr. 3

### Shilpa Prem



(541) 224-5072
Shilpa@VoteShilpaPrem.com
www.electshilpaprem.com

**Waxbarashada:** JD (Shahaadada Sharciga), Suffolk University Law School; BS (Shahaadada Jaamacadda), Bioengineering (Injineernimada Hidaha), Oregon State University; MLA extension studies (Daraasaadka Kordhinta), Harvard University

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen Sare, Amazon; Xubin Guddiga Washington CeaseFire iyo EmergeWA

**Bayaanka:** Sida hooyo, qareen, iyo deris ku faanaya magaalada Kirkland, waxaan u tartamayaa inaan keeno fikrado cusub iyo cod macquul ah oo ku saleysan xogta Golaha Magaalada. Waxaan ku dhashay kuna soo barbaaray Waqooyiga Galbeed ee Baasifigga, hadda waxaan halkan ku korinayaa mataanahayga waxaanan doonayaa in magaalada Kirkland ay noqoto meel qof walba ku horumari karo. Taasi waxay ka dhigan tahay in la abuurro guryo la awoodi karo, in la ballaariyo jardiinooyinka, in la yareeyo taraafikada, in gaadiidka la fududeeyo, in la taageero ganacsiyada yaryar, in la hubiyo ammaanka dadweynaha, iyo in lagu dhaqmo mas'uuliyad dhaqaale. In la gaaro yoolalkan waxay u baahan tahay in la dhex maro arrimo adag iyo in la hubiyo in *dhammaan* codadka la maqlo.

Waxaan ka shaqeeyay talo sare u baahan, anigoo xallinaya dhibaatooyin adag oo dhaqaale ahaan muhiim ah anigoo fasiraya sharciyada, ururinaya xaqiiqooyinka, oo sameynaya go'aanno *si maskax leh uga fikiray*, *caqli-gal ah*. Waxaan keenni doonaa isla hoggaaminta ku saleysan xogta ee magaalada Kirkland. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

*Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada King; dhammaan Senatarrada Gobolka ee daboolaya Kirkland; Duqa Magaalada Kirkland Curtis; Xubnaha Golaha Kirkland Arnold, Sweet, Falcone, Black; Xildhibaan DelBene; Naadiga Sierra; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; Duqooyda Magaalada Bellevue, Redmond; iyo in ka badan.*

### Catie Malik



(206) 349-1265
catiemalik@gmail.com
catiemalik.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka, UW iyo BA (Shahaadada Jaamacadda) Taqasus Yar oo Taariikhda ee Ilbaxnimada Bariga Dhow, iyo Luqadaha UW

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Maaliyadda iyo Hawlgallada Daryeelka Caafimaadka

**Bayaanka:** Maadaama aan ahay degane muddo dheer ee magaalada Kirkland, waxaan arkay magaaladeenna oo koraysa—laakiin dhawaanahan, isbeddelku wuxuu u muuqday mid ka go'an dadka halkan ku nool oo ka shaqeeya. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan codka deganeyaasha iyo milkiilayaasha ganacsiga ugu soo celiyo Golaha Magaalada. Canshuuraha sii kordhaya iyo kharashka ayaa ka saaraya deganeyaasha muddada dheer ku noolaa oo culays saaraya ganacsiyada magaalada Kirkland, iyadoo aan wax faa'iido dadweyne ah laga helin. Waa wakhtigii la sixi lahaa jihada si bulshadeenna loo hormariyo.

Waxaan khibrad u leeyahay maaraynta miisaaniyadaha gobolka, dhisidda kooxo waxqabad sare leh, iyo xallinta dhibaatooyinka adag iyadoo wakhtiga la qabtay uu yahay mid ciriiri ah. Waxaan keeni doonaa hoggaamin ku saleysan xogta iyo natiijooyinka oo diiradda saaraya Golaha Magaalada—anigoo go'aanno ka qaadanaya *natiijooyin la xaqiijiyay*, ee aan ahayn isbeddellada siyaasadeed. Waxaan u doodi doonaa siyaasado *taageeraya* ganacsiyada yaryar, *maalgelin mas'uuliyad leh*, iyo ilaalinta dabeecadda gaarka ah ee xaafadaha bulshadeenna anigoo u qorsheynaya mustaqbalka si taxaddar leh.

Waxaa taageeray; Isbahaysiga Ganacsiga Eastside, Washington Multifamily Housing Association, Safe Eastside iyo derisyo badan oo adiga oo kale ah. *Waxaan rajeynayaa inaan kasbado codkaaga*.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Ken MacKenzie



info@kenmackenzie.org
kenmackenzie.org

**Waxbarashada:** Shahaadada Injineernimada Korontada, Georgia Institute of Technology

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Fulinta ee Urur Aan Faa'iido Doon Ahayn, Agaasime Waaxda Injineernimada Softiweerka oo Hawlgabay, Wakiilka KAN

**Bayaanka:** Magaalada Kirkland waa bulsho qaali ah oo mudan in la ilaaliyo. Waxaan si qoto dheer ugu xiranahay in ka badan 10 sanno oo waayo-aragnimo mutadawacnimo ah, tusaale ahaan, waxaa la ii magacaabay guddiyada Magaalada, Xubin ka tirsan Guddiga Ururka Xaafadda, iyo ka qaybqaate dukumentiyada qorsheynta Magaalada. Waxaan aasaasay urur aan faa'iido doon ahayn oo u adeegga dhallinyarada sannadkii 2018. Waxaan ku korinay carruurteena halkan dugsiyada dadweynaha. Shaqadayda xirfadeed ee aan ku maamulayay kooxo waaweyn iyo miisaaniyado ayaa i baray anshaxa maaliyadeed iyo hoggaaminta.

Waxaan hoggaamin doonaa isbeddelka si aan u noqdo Golaha Magaalada oo diiradda saaraya deganeyaasha, ka jawaabaya, daah-furan, oo macquul ah. Waxaan hoggaamiyey dagaalka guuleystay ee ka dhanka ah canshuurta joogtada ah ee xarunta dabaasha iyo madadaalada ee 2023 sababtoo ah waxay ahayd heshiis xun oo loogu talagalay canshuur bixiyeyaasha. Waxaan u codeyn doonaa horumarinta gaadiidka iyo jardiinooyinka, ka soo horjeedka dhismeyaasha dhaadheer ee isku dhow ee xaafadaha deegaanka, iyo in la xaddido cufnaanta sare meelaha ay ku yaallaan adeegyada taageeraya iyo gaadiidka.

Hadafkaygu waa inaan soo celiyo magaalada Kirkland oo ka soo kabanaysa go'aannada qorsheynta aan la soo dhawweyn sannado badan. Waxaan taageero ka helay hoggaamiyeyaasha xaafadaha, ganacsiga, iyo magaalada ee Kirkland.

### Neal Black



(425) 298-5530
neal@votenealblack.com
votenealblack.com

**Waxbarashada:** J.D. (Shahaadada Sharciga), Georgetown University Law School; B.S. (Shahaadada Jaamacadda) Injineernimada Madaniga, Stanford University

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen, Phinney Black; Xubinta Golaha Kirkland; Xubin Guddiga, Xarunta Sayniska ee Pacific

**Bayaanka:** Waxaan u adeegaa maadaama aan jeclahay magaalada Kirkland! Bulshadeenna ahaan, waxaan ballaarinay jardiinooyinka, waddooyinka socodka, waddooyinka baaskiilka, iyo goobaha furan; waxaan sii xoojinnay ballanqaadkeenna ammaanka dadweynaha anagoo furay saldhigyo dab-damis cusub iyo shaqaalaha ugu fiican ee jawaab-celinta ugu horreeya; waxaan aasaasnay hey'adda ugu horreysa ee gobolka Washington ee jawaab-celinta daryeelka caafimaadka maskaxda; iyo waxyaabo kale oo badan. Waxaan si taxadar leh u qorsheynaynaa guryo ay qoysaska shaqeeya awoodi karaan oo aan sii wadeyno maalgelinta hagaajinta kaabayaasha dadweynaha.

Qoyskaygu waxay ku noolaayeen magaalada Kirkland ku dhawwaad 30 sanno. Waxaa iga go'an in aan hirgeliyo maamul wanaagsan, mas'uuliyad dhaqaale, daah-furnaan, go'aano fikir leh, iyo natiijooyin. Waxaan sii wadi doonaa inaan ka shaqeeyo sidii aan u dhabeyn lahaa inaan magaalada Kirkland u horumarinayno sidii magaalada ugu firfircoon uguna nolol wanaagsan ee gobolka Washington. *Waan ku mahadinayaa codkaaga!*

Taageerooyinka: Xildhibaan DelBene; Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Dhallinyarada ee Degmada King; Isbahaysiga Mas'Uuliyadda Hubka; Naadiga Sierra; Tallaabada Ilaalinta Washington; Isbahaysiga Ganacsiga Eastside; Golaha Guryaha La Awoodi Karo; Waalidnimada La Qorsheeyay; labada xubnood ee Golaha Degmada Kirkland, Balducci iyo Dembowski; Senatarka Gobolka Kuderer; sideed ka mid ah Sharci-dejiyeyaasha Gobolka Kirkland; iyo qaar kaloo badan.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Jon Pascal



(425) 522-3526
jonforkirkland@gmail.com
www.jonpascal.com

**Waxbarashada:** M.S. (Shahaadada Mastarka) ee Injineerinka iyo B.S. (Shahaadada Jaamacadda) Kaymaha, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Golaha Magaalada Kirkland, Injineerka Gaadiidka, Mulkiilaha Ganacsiga Yar ee Kirkland

**Bayaanka:** U adeeggida sidii xubinta golihiina waxay ii tahay sharaf. Waxaan la imaanayaa rikoor la xaqiijiyay oo keenista xalal wax-ku-ool ah, xog-ku-salaysan, miisaaniyad-ogaal ah, oo bulshada u jiheysan, kuwaas oo Kirkland ka dhigaaya ammaan, la-noolaansho leh, oo kobcaysa. *Natiijooyinka waxaa ka mid ah waddooyin lug/baaskiil oo ammaan badan Juanita Drive iyo 124th Avenue, 28 acre oo jardiinooyin cusub, 500+ guri la awoodi karo Totem Lake, wakhtiyo jawaab degdeg ah oo heer-sare ah, iyo adeegyada aadanaha oo la kordhiyay.*

Mudnaantayda: ballaarinta fursadaha guryaha iyadoo la ixtiraamayo dabeecadda xaafadaha, horumarinta jardiinooyinka iyo meelaha furan, hagaajinta gaadiidka dhammaan isticmaaleyaasha iyadoo la hagaajinaayo meelaha ciriiriga ah, maalgelinta dab-damiska iyo booliiska, iyo xoojinta dhaqaalaha magaalada Kirkland. Muddo ka badan 20 sanno, waxaan u adeegay magaalada Kirkland anigoo ka mid ah Guddiyada Qorsheynta iyo Gaadiidka, Guddiga Hagaajinta Gaadiidka ee Gobolka, Isbahaysiga Xaafadda Finn Hill, Isbahaysiga Xaafadaha Kirkland, tababarka Little League, iyo kooxda hawlaha xarumaha ee LWSD. Waxaan sii wadi doonaa dhegaysiga deganeyaasha iyo dhisidda magaalada Kirkland oo xooggan, oo firfircoon oo loogu talagalay qof walba.

Taageerooyinka: Duqa Magaalooyinka Eastside, sharci-dejiyeyaasha gobolka, hoggaamiyeyaasha LWSD, ururada shaqaalaha, dab-damiyeyaasha, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada. *Eeg jonpascal.com.*

### Kurt Dresner



(425) 954-5878
info@kurtforkirkland.com
KurtForKirkland.com

**Waxbarashada:** PhD, Cilmiga Sayniska Kombuyuutarka, University of Texas at Austin; BS, Cilmiga Sayniska Kombuyuutarka/Xisaabta, Harvey Mudd College

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineerka Softiweerka; Guddoomiye Ku-xigeenka Xaafadda Everest; U Doodaha Gaadiidka; Mutadawac Bulsho

**Bayaanka:** Markaad is siiso codkaaga, waxaan si toos ah ula tacaali doonaa caqabadaha ugu waaweyn ee magaalada Kirkland. Guryaha la awoodi karo, gaadiidka, iyo isbeddelka cimilada waxay u baahan yihiin xalal wax ku ool ah oo horrey u eegaya kuwaas oo ka tarjumaya qiyamkeena, wanaajiya tayada nolosheena, oo ka tagaya magaalada Kirkland oo ka wanaagsan carruurteena. Waxaan ilaalin doonaa jardiinooyinka iyo goobaha furan anigoo wax ka qabanaya sicir-bararka si ganacsiyada yaryar, waayeelka, qoysaska, dadka shaqeeya, iyo ardayda ay u kobci karaan. Waxaan sii wadi doonaa dhisidda iskaashiyo maxalli iyo goboleed oo keena natiijooyin.

Iyadoo ay jirto hubanti la'aanta federaalka, magaalada Kirkland waxay u baahan tahay hoggaan mabda' leh oo istiraatiijiyad leh oo diyaar u ah inay Kirkland ka dhigto mid ammaan ah oo soo dhawweyn leh oo leh fursado badan oo qof walba u furan. Waan jeclahay Kirkland, waxaanan aaminsanahay in maalmaheenna ugu wanaagsan ay soo socdaan. Waxay ii ahaan lahayd sharaf inaan haysto taageeradaada. *Aan horrey u socono!*

*Taageerooyinka*: Dimuqraadiyiinta Degmada King ; Duqa Magaalada Kirkland Curtis, Ku-Xigeenka Duqa Magaalada Arnold, Xubnaha Golaha Deegaanka Sweet, Falcone, Black; 25+ Meeyarrada/Xubnaha Golaha deriska ah; Naadiga Sierra; Macallimiinta LWSD; Wadeyaasha Basaska Metro; Senatarrada Stanford, Dhingra, Slatter; Wakiillada Goodman, Kloba, Duerr, Salahuddin; Xubinta Golaha Balducci; *wax badan barta KurtForKirkland.com!*

## Garsoore Maxkamadda Dowladda Hoose

### John Olson



(425) 466-0619
judgeolsonkirkland@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Iyo Shahaadada Mastarka University of Washington; J.D. (Shahaadada Sharciga), University of Puget Sound School of Law

**Shaqo iyo Xirfad:** Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose ee Kirkland tan iyo 2019

**Bayaanka:** Garsoore John Olson wuxuu u adeegay dadka magaalada Kirkland isagoo ah garsoore muddo ka badan 20 sanno – marka hore isagoo ahaa Guddoomiyaha Maxkamadda, hadda wuxuu yahay garsoore wakhti buuxa ah.  Wuxuu si adag uga shaqeeyay inuu horumariyo Maxkamad Bulsho oo ka faa'iideysanaysa kheyraadka bulshada ee jira sida guryaha, soo kabashada balwadda, caafimaadka maskaxda, iyo waxbarashada si ay u caawiyaan kuwa lagu soo oogay dambiyada fudud ee aan rabshadaha lahayn inay noloshooda dib ugu soo celiyaan jidka saxda ah.  Garsoore Olson wuxuu aaminsan yahay awoodda bulshada - dadka deegaanka oo wax ka qabanaya dhibaatooyinka deegaanka.

Kahor inta uusan ka shaqeynin Maxkamadda Kirkland, Garsoore Olson wuxuu u shaqeeyay 29 sanno isagoo ah La-taliyaha Guud ee Ururka Waxqabadka Iskuulada ee Gobolka Washington iyo sidoo kale sarkaalka dhegeysi ee degmada dugsiga ee degmooyin badan oo gobolka ah.

Garsoore Olson waxaa taageeray:  Duqa Magaalada Kelli Curtis, Xubnaha Golaha Kirkland Jon Pascal, John Tymczyszyn, Penny Sweet, iyo Xubin Hore ee Golaha Toby Nixon; Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo Dimuqraadiyiinta Degmooyinka 1aad, 45aad, iyo 48aad

**Codeyntaadu waa mid tirsanta. Waad hubin kartaa.**

**Ka raad-raac warqaddaada codbixinta barta kce.wiki/TrackMyBallot**




**Baraheena Bulshada!**

Ka taag-garee @kcelections goobaha bulshada halka kore ku xusan waxaana laga yaabaa inaan wadaagno sawirkaaga.

**Nala wadaag sawirkaaga codeynta #VotingSelfie!**

## Golaha Jagada Lr. 1

### Jessica Rossman



(206) 321-0603
jlrossman@outlook.com

**Waxbarashada:** J.D. (Shahaadada Sharciga), Dugsiga Sharciga Stanford; Shahaado Jaamacadeedka (Bayoolajiga iyo Bulshada), Cornell University

**Shaqo iyo Xirfad:** Duqa Magaalada (2020-25) & Ku-xigeenka Duqa Magaalada (2018-19), Golaha Magaalada Medina; Qareen

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho sababtoo ah waxaan jeclahay bulshadeenna, waxaana ka go'an inaan ka caawiyo magaalada Medina inay horumar gaarto. Aniga iyo ninkayga waxaan halkan u soo guurnay anagoo wata labadayada wiil markay aad u yaryaraayeen, qoyskeenuna runtii wuxuu ku mahadnaqay xaafadaha ammaan ah, jardiinooyinka quruxda badan, deegaanka nabdoon, iyo dareenka bulshada. Waxaan u shaqeeyaa inaan hubiyo in dhammaan deganeyaasha magaalada Medina ay awoodi doonaan inay ku raaxaystaan tayadaas nolosha - ha ahaato korinta qoys, ku gabowga deegaankaaga, ama bilaabista cutub cusub.

Waxaan soo qabtay laba xilli oo aan ku jiray Golaha, oo ay ku jiraan 6 sanno oo aan ahaa Duqa Magaalada. Waxaan leeyahay rikoor la xaqiijiyay oo ah adeeg daacad ah oo heellan, khibrad qoto dheer oo ku saabsan maamulka maxalliga ah, xirfado sharci oo xooggan, awood aan ku maqlo oo aan si wax ku ool ah ula shaqeeyo aragtiyo kala duwan, fikir istiraatijiyadeed oo ballaaran, iyo maskax "xallin kara" oo wax qaban karta. Waxaan sii wadi doonaa inaan la shaqeeyo -- adiga iyo adiga dartaa – si aan u ilaalino magaalada yar ee quruxda badan oo ammaan ah.

Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Heija Nunn



Heijaformedina@gmail.com

**Waxbarashada:** Dhigtay Bellevue College

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada Medina, Dalaal Hantida Ma Guurtada, Mulkiilaha Ganacsi, Mutadawac

**Bayaanka:** Tan iyo 1997, waxaan si dhab ah u qabanayey shaqada ilaalinta soo jiidashada magaalada yar ee Medina. Waxay ahayd sharaf inaan qoys ku koriyo halkan, iyo inaan iskaa wax u qabso la sameeyo deriska oo xiisaynaya ilaalinta tayada nolosheena gaarka ah, deegaanka dabiiciga ah ee quruxda badan, iyo dhowrsanaanta aan la barbar dhigi karin ee ugu wanaagsan Waqooyi Galbeed.

Ka Xubin Golaha Magaalada ee hadda, Guddoomiyihii hore ee Guddiga Qorsheynta iyo Guddiga Beerta labadaba, mutadawac muddo dheer ee Maalmaha Medina iyo wakiilka hadda ee Degmada King I-Fit, waxaan leeyahay khibrad iyo dhiiragelin lagama maarmaan ah si looga dhabeeyo in magaalada Medina ay sii wado horumarka inkastoo ay jiraan caqabadaha iyo saameynta kobaca goboleedka.

Waxaan ku shaqeyn doonaa magacaaga si aan u sii wado dhismaha bulsho ammaan ah, caqli badan, oo isku xiran anigoo si adag u ilaalinaya soo jiidashada u dhexeeya magaalada iyo miyiga— iyo Green Store! Aynu wada shaqeyno si aan u horumarinno goobaha dadweynaha, badbaadada waddooyinka, adeegyada, iyo teknolojiyadda. Mustaqbalka waa cad yahay.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Laura Davis Bustamante



(425) 894-2931
laurabustamante439@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Washington State University; Shahaadada Jaamacadda, Maamulka Ganacsiga, Washington State University

**Shaqo iyo Xirfad:** Lammaanaha Hantidhawrka PwC (hawlgab); Guddiga Qorsheynta (2021-hadda)

**Bayaanka:** Aniga oo ah wada-hawlgalaha kormeer xisaabeed ee shirkad xisaab dadweyne oo caalami ah, waxaan xirfadeyda ku bixiyay caawinta ururrada in ay horumariyaan xakameynta maaliyadeed iyo in ay ka gudbaan caqabado adag. Isla diiraddaas ayaan u keenayaa Medina anagoo ka shaqaynayna maaraynta kharashaadka sii kacaya iyadoo aan la dhimin adeegyada tayada-sarre ee ay degganeyaashu qiimeeyaan.

Afar sano ee la soo dhaafay, waxaan ka tirsanaa Guddiga Qorshaynta Medina, anigoo noqday Guddoomiye tan iyo Luulyo 2022. Khibraddani waxay ii sii qoto-dhigtay qadarka aan u hayo bulshadan gaarka ah iyo caqabadaha horyaalla, oo ay ku jiraan waajibaadyada Gobolka ee kordhinta cufnaanta guryaha iyo la-awoodi-karaanta. Haddii la i doorto, waxaan u doodi doonaa horumar feker-leh oo waara oo ixtiraama dabeecadda Medina, isla markaana taageera qoysaska muddada dheer deggen iyo kuwa cusub labadaba. Waxaan iga go'an qorshayn feker-leh oo wax ka qabata saameynta kaabayaasha, taraafikada, baarkinka, saqafka geedaha, iwm. —iyada oo aan la khalkhal gelin waxa Medina ka dhigaya meel gaar ah.

Waxaan aaminsanahay daah-furnaan, hoggaan bulshada mudnaanta siiya, iyo maamul masuul ah. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Randy Reeves



(206) 947-9979
randyreeves@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, Suugaanta Ingiriisiga, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Ku-xigeenka Duqa Magaalada, Golaha Magaalada Medina (2022-2025), Guddiga Qorsheynta Medina (2013-2021)

**Bayaanka:** *Golahaaga Magaalada ee Medina si weyn ayuu u hawlanaa*! Waxaan cusboonaysiinay Qorshaha Dhammaystiran, waxaan qornay xeerar ka jawaabaya amarada Middle Housing (Guryaha Dhexe) ee Olympia (HB1110/1337 iyo kuwo kale), waxaanan shaqaalaysiinay Maareeyaha Magaalada oo cusub. Culeysyada goboleed waxay sii wadi doonaan inay dalbadaan feejignaan iyo aragti fog si loo ilaaliyo dabeecadda, ku noolaanshaha, iyo quruxda Medina.

*Waxaan sii ahaan doonaa qof u taagan amniga dadweynaha, mas'uuliyadda maaliyadeed, iyo horumar dhab ah si Medina ay uga sii fiicnaato jiilalka imanaya*. Cusboonaysiinta Xeerka Geedaha iyo yareynta saameynta Middle Housing waa kaliya bilowga.

*Aan sameyno maalgelin caqli-gal ah oo mudnaanteenna wadajirka ah lagu horumariyo.* Taageer booliiskeenna iyo diyaar-garowga degdegga. Yaree saameynta taraafikada si waddooyinku u ahaadaan kuwo ammaan ah. Miisaaniyado taxaddar leh. Kaabayaasha adeegyada oo dhulka hoostiisa la geliyo. Yaree wasakhowga dhawaaqa iyo iftiinka. Horumari ilaalinta geedaha oo yaree saameynta horumarinta. Keen maamul daahfuran, hufan, oo isla-xisaabtan leh. Waxaan ballanqaadayaa inaan sii wado hoggaan geesinimo leh, mas'uul ah, oo iskaashi ku dhisan, anigoo ka tirsan Golaha Magaalada Medina, Jagada 7, waxaana si ixtiraam leh kaaga codsanayaa codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 2

# Daniel Becker



(206) 588-6743
campaign@danielbecker.com

**Waxbarashada:** Valedictorian (heerka ugu sareeya ee tacliinta fasalka), MIHS (2001); Shahaadada Jaamacadda, Maamulka Ganacsiga, University of Washington (2005, oo leh Maamuus)

**Shaqo iyo Xirfad:** Aasaase-Wadaag, CTO & CFO, Kotis Design

**Bayaanka:** Ujeeddadayda waa mid fudud: in aan *hubiyo in Mercer Island ay sii ahaato magaalo tayo sare leh*. Waxaan rabaa adeegyo heer sare ah, carruurteena inay nabad qabaan, iyo in la dhimmo kuleelka dooda siyaasadda. Taasi waa sababta aan halkan ugu koray, iyo sababta aniga iyo ninkayga aan ugu soo noqonay si aan u yeelano qoys noo gaar ah.

Wakhtigii gaabnaa ee aan u adeegaayey sida Xubinta Golaha waxaan diiradda saaray dhegaysiga, barashada, iyo diyaarinta si aan uga qayb qaato waxa uu ahaa Golaha Magaalada oo degan sannadihii u dambeeyay. Waxaan leenahay saldhig adag laakiin waxaan u baahanahay inaan ku dadaalno sidii aan u noqon lahayn kuwo ka sii wanaagsan, anagoo sameynayna go'aanno ku saleysan xogta oo hagaajinaya nolosha deganeyaasha, laga bilaabo waxyaabo gaar ah sida oggolaanshaha iyo isgaarsiinta ilaa waxyaabo waaweyn sida aragtida mustaqbalkeena.

Waxaan ahay qof rajo wanaagsan qaba oo aaminsan in maalmihii ugu wanaagsan ay naga horreeyaan. Waxay ahayd wax cajiib ah inaan la kulmo kumanaan dadka deganeyaasha oo asal kala duwan leh oo maqlo waxa aad rabtaan. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan sii wado shaqada aan idiin qabanayo.

## Golaha Jagada Lr. 4

# Ted Weinberg



(206) 919-3749
tedweinberg@comcast.net
www.ted4mi.org

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka, University of Washington. Shahaado Jaamacadeedka Dhismaha, University of Virginia. Fasalka MIHS ee 1986.

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada Mercer Island. Hoggaamiyaha Teknolojiyadda Macluumaadka, Magaalada Seattle

**Bayaanka: Khibradda Jago Loo Doortay:** Xubin Golaha Magaalada MI.

Sida Xubintaada Golaha Magaalada, waxaan ansixiyay sharci dejinta guryaha la awoodi karo, qorshihii ugu horreeyay ee Waxqabadka Cimilada ee magaaladeenna, kor-u-qaadista canshuurta dib-u-soo nooleynta jardiinooyinkeena, iyo casriyeynta kaabayaasha adeegyada tamarta. Waxaan sii wadi doonaa inaan mudnaanta siiyo ammaanka dadweynaha, ilaalinta jardiinooyinka, wax ka qabashada hoy la'aanta magaalooyinka deriska ah, iyo xoojinta bulshadeenna ganacsi.

Muddo 8 sanno ah oo aan ku jiray adeegga dadweynaha, waxaan ka dhigay dhegaysiga codbixiyeyaasha mudnaantayda ugu sarreysa. Muddo saddex sanno ah ayaan bulshada dhisayay anigoo qabanaya quraac furan oo bil kasta ah maqaayadaha maxalliga ah. Waxaan markaas u adeegsadaa xogtaas si aan go'aan uga gaaro golaha. Waxaan sii wadi doonaa inaan u adeego oo aan bulshadeenna ilaaliyo anigoo adeegsanaya daacadnimo, naxariis, iyo heellanaan aan muujiyay. Waxaan si qushuuc leh u weydiisanayaa codkaaga. Taageerooyinka: Sharci Dejiyeyaasha Gobolka Wellman, Thai, Zahn; Xubnaha Golaha Magaalada Reynolds, Rosenbaum, Weiker; Xubnaha Guddiga Dugsiga Tucker, Lee, Martinez; Duqyaasha Magaalada ee hore Merkle, Clibborn, Newman, Jarrett.

## Golaha Jagada Lr. 6

### Johana Beresky



johana@beresky.org
www.johanaberesky.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Sayniska, Cornell University; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Pepperdine University

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliyaha Hawlaha Ganacsiga & Maareynta

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada sababtoo ah waxaan jeclahay meesha aan ku noolahay. Qoyskeena wuxuu ka kooban yahay saddex jiil oo ku nool Jasiiradda—laga bilaabo carruurteena dugsiyada ilaa awoowayaashooda oo u dhow—sidaas darteed waxaan diiradda saarayaa go'aamada u adeegaya dhammaan da'da kala duwan. Waxaan halkan u soo guurnay ku dhawwaad labaatan sanno ka hor, anagoo ku soo jiitmay xoogga bulshadeenna, hadda waxaan rabaa inaan dib ugu celiyo anigoo isku xiraya aragtiyo kala duwan oo hubinaya in qof walba codkiisa la maqlo.

Khibradayda hoggaaminta kooxaha iyo maaraynta miisaaniyadaha ayaa i baray sida loo maareeyo xaaladaha adag, go'aamada adag loo qaato, iyo sida diiradda loo saaro natiijooyinka waara. Sida xubinta Golaha, waxaan mudnaan siin doonaa xalal caqli-gal ah oo wax ku ool ah oo ku saabsan guryaha, ammaanka, iyo kaabayaasha dadweynaha—iyadoo la ballanqaadayo daah-furnaan iyo siyaasado ku saleysan xogta.

Waxaan horumarin doonaa wada hadal bulsho oo loo dhan yahay oo waxaan u doodi doonaa go'aanno ka tarjumaya qiyaamka wadaagga ah. Mercer Island waa bulsho isku xiran. Iyadoo la ixtiraamayo midba midka kale iyo ujeeddo wadaag, waxaan dhisi karnaa mustaqbal ka tarjumaya waxa ugu wanaagsan dhammaanteen.

### Lisa Anderl



lisa@lisaformi.com
lisaformi.com

**Waxbarashada:** BA (Shahaadada Jaamacadda) ee Barashada Talyaaniga ee Gonzaga University iyo JD (Shahaadada Sharciga) Gonzaga Law School, oo leh maamuus

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada Mercer Island ee Hadda; qareen hawlgab ah

**Bayaanka:** Waxay ii tahay sharaf inaan u adeego sidii xubintaada golaha. Toddobadii sanno ee la soo dhaafay wax badan ayaan qabannay, balse weli shaqo badan ayaa inoo taalla.

Badbaadada dadweynaha waa mudnaan, waxaana aanu shaqaaleysiinnay saraakiil boolis oo dheeraad ah. Waxaan la shaqeynay Eastside Fire and Rescue si loo helo jawaab dab-damis iyo gurmadka caafimaadka (EMS) oo ka wanaagsan. Waxaan casriyeynay nidaamyada biyaha iyo bulaacadaha. Waxaan taageeray horumarrada Luther Burbank waterfront iyo aag cusub oo xirfadaha baaskiil-wadista. Waxaan door hoggaamineed ka qaatay ilaalinta Jardiinooyinkeena in aan lagu dhisin, waxaanan u codeeyay maalgelinta guryaha goboleed ee dadka hoy-la'aanta ah, annagoo ilaalinayna meelaha dadweynaha ee xeryaha. Ugu dambeyn, waxaan ku soo celinnay magaalada xasillooni maaliyadeed, annagoo ilaalinayna deganeyaasha nugul iyo kuwa halista ku jira.

Waxaan sii wadi doonaa inaan ka shaqeeyo ilaalinta xaafadahayaga iyo taageeridda tayada nolosheena. Waxaan ku faraxsanahay taageerada Duqa Magaalada Nice, Ku-xigeenka Duqa Magaalada Rosenbaum, Xubinta Golaha Weiker, iyo xubno badan oo bulshada ka tirsan. Fadlan u codee Lisa Anderl, si aan u sii matalo mudnaantiinna!

## Golaha Jagada Lr. 7

### Julie Hsieh



info@julieformi.org
www.julieformicity.org

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda, Cilmiga Aadanaha, Stanford University; Dhakhtarka Caafimaadka, Baylor College of Medicine

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha, Yuan Ru Art Center; Dhakhtar Qoys (hawlgab); Mutadawac Bulsho

**Bayaanka:** Anigoo 10 sanno deganaa Mercer Island, waxaa sharaf ii ah in ay igu taageereen intooda badan Xubnaha Golaha iyo isbahaysi ballaaran oo hoggaamiyeyaasha bulshada ah. Kalsoonidooda waxaan ku kasbaday adeeg aan daal lahayn oo aan ka qabtay guddiyada maxalliga ah iyo rikoor tabaruceed oo xooggan ee dugsiyadeena iyo bulshada. Waxaan u heellannahay aragti ay carruurtu ku hanaqaadaan, qoysasku u kobcaan, waayeelkuna si sharaf leh u gaboowaan. Anigoo leh waayo-aragnimo ah ganacsade, dhakhtar qoys, iyo hoggaamiye bulsho, waxaan keenayaa hab-dhaqan isu dheelitiran oo wax-ku-ool ah si loogu wajaho caqabadaha magaalada.

Mudnaantaydu waxaa ka mid ah caafimaadka iyo badbaadada dadweynaha, ilaalinta jardiinooyinka iyo meelaha furan, xoojinta ka-qaybgalka bulshada, iyo dib-u-hagaajinta xarunta magaalada. Waxaan taageeraa siyaasadaha kor u qaadaya tayada nolosha jiilasha oo dhan. Waxaan qiimeeyaa aragtiyo kala duwan oo waxaan hoggaamiyaa daacadnimo, wada shaqeyn, iyo naxariis. *Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.*

Taageerooyinka: Xubnaha Golaha Rosenbaum, Reynolds, Weiker, Weinberg; Duqowdii hore Wong, Bertlin, Clibborn, Jarrett, Newman; Wakiillada Zahn iyo Thai; Sierra Club; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; Isbahaysiga Ganacsiga Eastside

### Adam Ragheb



(425) 298-3745
adamrformicc@gmail.com
www.adam-ragheb.com

**Waxbarashada:** Ph.D, Shahaadada Mastarka, iyo Shahaadada Jaamacadda ee Injineernimada Hawada Sare, University of Illinois at Urbana-Champaign

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Nidaamyada oo Sare, Fikradaha Casriga ah & Injineernimada Shirkadaha, Blue Origin

**Bayaanka:** Waxaan ahay Guddoomiyihii hore ee Qorsheynta oo diiradda saaraya bulshada, waxaanan u sharax nahay si aan u ilaaliyo una dhowro xaafadaha ka kooban hal qoys, jardiinooyinka, iyo meelaha cagaaran. Waxaan u ololayn doonaa kaabayaasha lagu kalsoonaan karo, waddooyin ammaan ah oo loo maro dugsiyada, hirgelinta ammaanka baaskiilka korontada, adeegyo booliis iyo gurmad oo xooggan, iyo barnaamijyo adag oo loogu talagalay waayeellada iyo qoysaska. Mercer Island waa halka aniga iyo xaaskayga aan ku korinayno saddexdeena carruur.

Waxaan taageeraa lahaanshaha guryaha oo la awoodi karo anigoo ilaalinaya dabeecadda xaafadda. Olympia waxay hadda amartaa dhismaha afarta unug ka kooban magaalada oo dhan. *Golaha Magaalada, si kastaba ha ahaatee, waxay kontaroolaan cabbirkooda, naqshadooda, iyo baarkinkooda*. Waxaan mudnaanta siin doonaa Xarunta Magaalada oo firfircoon, anigoo ilaalinaya xaafadaha ka ilaalinaya dhismeyaasha waaweyn iyo waddooyinka ciriiriga ah. Kaabayaasheena ayaa gaadhay xadkooda. Ciriiriga aan la xakameynin waxay khatar gelinaysaa badqabka iyo jawaab celinta degdegga ah ee wakhtiga ku habboon. Waxaan haystaa Ph.D ee injineernimada hawada sare, waxaanan keenayaa falanqeyn adag iyo hoggaamin diiradda saaraysa dadweynaha degan xafaada. Ma lihi dano hantida ma guurtada ah oo saameynaya go'aamadayda ku saabsan qorsheynta iyo horumarinta magaalada.

Taageerooyinka: Duqa Magaalada Salim Nice, Xubinta Golaha Anderl, xubnihii hore ee golaha, guddoomiyeyaasha, iyo dad badan oo ka tirsan Jasiiradda. Waxaan diyaar u ahay inaan ku hoggaamiyo anshax iyo diirad.

## Golaha Jagada Lr. 4

### Chris Villasenor



chris@villasenor4newcastlewa.com
villasenor4newcastlewa.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Maamulka Injineerinka, Missouri Science & Technology

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliye Sare ee IT-ga ee SAP, Xubin Hore ee Golaha Magaalada Newcastle

**Bayaanka:** Anigoo 20 sanno deganaa, Xubintii hore ee Golaha Magaalada Newcastle, xirfadle teknolojiyadeed, iyo aabe ku faana, waxaa iga go'an inaan ilaaliyo waxa magaaladeenna ka dhigaya mid gaar ah. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan u ilaaliyo magaalada Newcastle oo ammaan ah, dhaqaale ahaan xooggan, oo soo dhawweynaysa dhammaan dadka. Anigoo ku so barbaaray tuulo yar, waxaan qiimeeyaa bulshada iyo xiriirka. Waxaan doortay magaalada Newcastle si aan qoyskeyga ugu koriyo sababtoo ah amnigeeda, kala duwanaanshaheeda, iyo ku noolaanshaheeda wanaagsan.

Mudnaanteyda waa cad yihiin: xoojinta ammaanka dadweynaha, hubinta awoodda dhaqaale, iyo dhisidda bulsho soo dhawweyn leh oo qof walba ah. Waxaan horumarin doonaa miisaaniyad caqli-gal ah, taageeri doonaa kuwa ugu horreeya ee ka jawaaba, waxaanan u doodi doonaa siyaasado isku dhafan oo ka tarjumaya qiyaamka wadaagga ah ee bulshadeenna. Waxaan mar kale u taaganahay inaan qabto shaqada adag ee booskaan u baahan yahay. Wadajir, waxaan dhisi karnaa Newcastle oo ka xoog badan. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

Waxaan ku faanayaa inay i taageereen Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo Degmada 41aad, Senatarka Gobolka Wellman, Wakiilada Gobolka Thai iyo Zahn, iyo Xubnaha Golaha Newcastle Sherlock, Charbonneau, iyo Burford.

### Kevin Kirkaldie



kirkaldiefornewcastle2025@hotmail.com

**Waxbarashada:** University of Oregon, bartay Dhaqaalaha iyo Isgaarsiinta

**Shaqo iyo Xirfad:** Dalaal Hanti Ma-guurto ee Deganaanshaha

**Bayaanka:** Waxaan rabaa inaan noqdo doorashadaada Golaha Magaalada Newcastle... si aan u badbaadiyo Newcastle! Magaalada Newcastle waa bulsho yar oo saaxiibtinimo leh oo leh nolol tayo sare leh. Waddooyin socod oo dhan. Badqabka waddooyinka Xaafadaha aamusnaanta leh. Laakiin waxaan joognaa meel marxalad isbeddel ah. Sharci dhawwaan la ansixiyay ayaa ku boorinaya kobaca iyadoo aan la xaddidin. Taasi waxay la macno tahay guryo badan oo wada jira, xariiqyo eber ah, meel la'aan baabuurta la dhigto iyo waddooyin khatar badan oo ciriiri ah.

Waxaan taageersanahay kobaca si taxaddar leh loo maareeyo si loo ilaaliyo Newcastle, Newcastle. Waxaan taageeraa kobaca dhaqaale ee la maamulo si loo dhiirigeliyo ganacsiyada tayada leh ee maxalliga ah si ay u dhisaan dakhliga iyagoo yareynaya canshuuraha. In ka badan 30 sanno oo aan suuqgeyn u sameynayay daawadeyaasha telefishinka maxalliga ah, waxaan ogahay sida diiradda loo saaro waxa ugu muhiimsan bulshadeenna. Khibraddayda ku saabsan caawinta dadka iibsashada iyo iibinta guryaha, waxaan ogahay waxa ay dadka ugu qiimeeyaan bulshadeenna.

Waxaan hoggaamin doonaa anigoo ku dhegaysanaya oo ka jawaabaya waxa aad ugu jeceshahay. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa inaad codkaaga i siisid si aan u badbaadiyo jiritaanka magaalada Newcastle maanta iyo in loo hayo jiilasha mustaqbalka.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Jim Quigg



(360) 523-2995
QuiggForNewcastle2025@gmail.com
www.QuiggForNewcastle.com

**Waxbarashada:** J.D. (Shahaadada Sharciga), Seattle University School of Law; Shahaadada Jaamacadda, Seattle University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Soo Iibsiga ee T-Mobile; Xubin Golaha Magaalada Newcastle

**Bayaanka:** Ma rabtaa in magaalada Newcastle ay isu beddesho magaalada Seattle?

Aniga sidoo kale maya.

Aniga iyo xaaskayga qaaliga ah waxaan ka guurnay magaalada Seattle una guurnay magaalada Newcastle si aan u korinno qoyskeenna.  Sida adiga oo kale, waxaan jecel nahay in magaaladeena saaxiibtinimo ay tahay yid *yar*, *degan*, oo aad u *amniga badan.* Waxaa sharaf ii ah inaan idiin adeego anigoo ah xubinta golaha & guddoomiyaha qorsheynta.  Haddii aad ii codeyso, waxaan sii wadi doonaa inaan ilaaliyo tayada noloshaada, qiimaha gurigaaga iyo qoyskaaga.  Waxaan sii wadi doonaa inaan kuu codeeyo *adiga*, maaha kooxaha dibadda ee taageeraya kuwa kale.  Waxaan leeyahay saddex mudnaanta:  *Xaafado Ammaan ah*: Booliiskayagu waxay ilaalin doonaan dabeecadda nabadeed ee magaalada Newcastle iyagoo ka ilaalinaya xaafaddaada dambiyada iyo kuwa xawaare ku socda.  *Canshuuraha Hooseeya* Waxaan sii wadi doonaa in aan yareeyo malaayiin ku baxa kharashka aan loo baahnayn, si qoyskaaga uu u haysto lacagtiisa, oo aanay u bixin canshuur dheeraad ah. *Qiyaamka Bulshada*: Waxaan ilaalin doonaa jardiinooyinkeena aamusnaanta leh, waddooyinka socodka & dhacdooyinka madadaalada, waxaana diidi doonaa dhismaha aan dhammaadka lahayn iyo taraafikada. Waxaan si ku faanid leh ii taageeray Isbahaysiga Ganacsiga ee Eastside oo labada xisbi ah.

### Karin Frost Blakley



(206) 930-0551
karinfornewcastle@gmail.com
www.karinfornewcastle.com

**Waxbarashada:** University of Washington, Shahaadada Jaamacadda Isgaarsiinta, Cum Laude, Phi Beta Kappa

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliyaha Maaliyadda, CRPC, AAMS, LPL Financial

**Bayaanka:** Newcastle waxay ahayd meel aad u fiican oo aan ku koriyay labadayda wiil, waxaana doonayaa in jiilalka soo socda ay helaan isla fursadaas. Tabaruce ahaan, waxay ii ahayd sharaf inaan u shaqeeyo Guddoomiyaha Hazelwood PTSA, Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga Weyn ee Newcastle, iyo Guddoomiyaha Qorsheynta muddo 10 sanno ah. Hadda waxaan diyaar u ahay inaan idin u adeego Golaha.

Waa muhiim in Newcastle ay sii ahaato meel soo dhawweyn leh oo ammaan ah. Jardiinooyinka, waddooyinka socodka, waddooyinka iyo hareeraha waddooyinka waa in si ku filan loo dayactiraa. Amniga dab-damiska iyo booliiska waa in uu ku filnaadaa, waxaana la qorshaynayaa kobaca iyadoo la tixgelinayo suurtagalnimada. Sida aan sameeyay tobanaan sanno, waxaan ballanqaadayaa inaan si adag ugu shaqeeyo u adeeggida magaalada Newcastle si aan u ilaalino tayada nolosheena sare iyo inaan noqdo codkiina Golaha. Intaa waxaa dheer, waxaan keenni doonaa khibraddayda 20 sanno oo ah La-taliye Maaliyadeed.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo 41aad, Senatar Wellman, Wakiillada Thai iyo Zahn, iyo Xubnaha Golaha Sherlock, Charbonneau, iyo Burford.

## Golaha Jagada Lr. 6

### Paul Charbonneau



(425) 635-8231
paul.l.charbonneau@gmail.com
Paulforall.org

**Waxbarashada:** Arday Siyaasadda Dadweynaha Qaranka, University of Michigan. BA (Shahaado Jaamacadeedka)-Cilmiga Siyaasadda, Occidental College. Dugsiyada K-12 ee Newcastle

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha ee Newcastle Kaaliyaha Tababaraha Lagdinta, Hazen. Ku-xigeenka Agaasimaha, Bobman Consulting.

**Bayaanka:** Waxaa la ii doortay Xubinta Golaha ee ugu horreeyay ee ku soo barbaaray magaalada Newcastle, *waxaan u qabtay bulshadeenna:* Hoggaaminta dadaallada lagu soo celinayo $1.28M oo ka yimid gobolka si loogu fuliyo mashaariicda maxalliga ah, labanlaabidda shirarka golaha magaalada si loo dhigo magaalada daah-furnaan badan, iyo ballaarinta adeegyada ammaanka dadweynaha si loo ilaaliyo badqabkaaga.

Waxaan abuuray hindiseyaal cusub oo magaalada ah oo diiradda lagu saaray horumarinta dhaqaalaha, isbeddelka cimilada, bulshadeenna Aasiyaanka-Ameerikaanka ah, iyo caafimaadka habdhaqanka. Waxaan ahaa taageerahaaga wax walba laga bilaabo ku darista nalalka taraafikada iyo hareeraha waddooyinka iyo u dagaalanka dadka waayeelka ah si ay ugu sii nagaadaan guryahooda iyo bulshadeenna LGBTQ+. Waxaa iga go'an inaan noqdo codkaaga dhammaan heerarka dowladda iyo inaan sii wado dhismaha magaalada Newcastle oo firfircoon, ammaan ah, oo la awoodi karo!

Taageerooyinka: *Degmada King & Dimuqraadiyiinta Degmada 41aad, Dab-damiyeyaasha Newcastle, Dadaallada Guryaha, iyo U doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada la Qorsheeyay. Guddoomiyaha Ferguson, Xildhibaan Smith, Senatarka Wellman, Wakiillada Thai & Zahn. Xubnaha Golaha Burford, Sherlock, Villaseñor (Hore), Guddoomiyeyaasha Magaalada, iyo qaar kale oo badan!*

### Maggie Lo



(818) 564-6633
Vote4maggielo@gmail.com
www.vote4maggielo.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Xisaabiyaha Dadweynaha ee Shahaadaysan (CPA); Shahaadada Mastarka ee Xisaabaadka, Louisiana State University; Shahaadada Jaamacadeedka, Utah State University

**Shaqo iyo Xirfad:** Xirfadle Maaliyadeed ee Boeing

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Newcastle si aan Newcastle ugu horeysiiyo. Sida magaaladaheennu u korayo, waa inaan mudnaanta siinnaa baahiyaha deganeyaasha. Waayeelka waa in aan lagu khasbin inay ka baxaan guryahooda sababo la xiriira kororka canshuuraha hantida. Guryaha la awoodi karo waa inay faa'iido u yeeshaan deganeyaasha hadda jira oo aanay ka hor marin kaabayaasha dadweynaha. Ciriiriga gaadiidka iyo koronto la'aanta ma aha qiimaha horumarka laakiin waa calaamado muujinaya qorsheyn xumo. Isku dheellitirka miisaaniyadda ma aha in ay la micno tahay kordhinta canshuuraha ama in la qaldo tayada nolosheena. Ganacsi soo jiidasho leh waa xal guul leh.

Waxaan leeyahay 25 sano oo waayo-aragnimo maaliyadeed ah oo aan ka helay Boeing—16+ sano oo aan hoggaaminayay kooxo—waxaanan keenaa khibrad, mas'uuliyad, iyo hoggaamin si aan u gaarsiiyo natiijooyin. Sida Guddoomiyahaaga Qorsheynta, waxaan dhageystay walaacyadaada waxaanan u dagaallamay daah-furnaanta, ugu dambeyntiina intii lagu jiray hannaanka Xeerka Aagagga Muhiimka ah.

Waxaan noqon doonaa codka degane kasta—maaha danaha gaarka ah ama xisbiyada siyaasadeed. Adeegayga guddiga ururka aan faa'iido doonka ahayn ee *Building Changes (Dhisaya Beddello)* waxay muujineysaa aaminsanaantayda in bulshooyinka mideysan aysan cidna ka tagin. Waxaa taageeray Isbahaysiga Ganacsiga Eastside

## Golaha Jagada Lr. 7

### Sarah Goodman



(425) 271-4037
Goodman4Newcastle@gmail.com
www.goodman4newcastle.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, Whitman College, Walla Walla, WA

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliyaha Sare ee Barnaamijka/Maareynta Mashruuca Teknolojiyadda, Xubin Guddiga - Cancer Pathways

**Bayaanka:** Aniga oo ah Xubin Golaha Magaalada Newcastle, waxaan mudnaanta siin doonaa badbaadada dadweynaha, korriin mas'uul ah, iyo dowlad daah-furan oo jawaab leh. Waxa iga go'an ilaalinta bilicda dabiiciga ah, amniga, iyo ruuxa magaalo-yareedka Newcastle xilli ay bulshadeennu korayso, iyadoo aan la kordhin canshuuraha.

Anigoo leh in ka badan 25 sano oo aan Maareeye Barnaamij (Program Manager) ka ahaa Microsoft, waxaan la imaanayaa xirfado xoog leh oo miisaaniyadeyn, maareynta mashaariic, iyo xallinta dhibaato wada-shaqayn ku salaysan; qalab ay u baahan tahay magaaladeennu si ay u ahaato mid dhaqaale ahaan xasilloon iyadoo weli bixisa adeegyada aasaasiga ah. 20 sano ka hor, aniga iyo saygaygii geeriyooday waxaan doorannay Newcastle maxaa yeelay waxaan rabnay inaan qoyskeenna ku korinno bulsho ammaan ah oo deris-wanaag leh. Wiilkayga ayaan halkan ku koriyey iyadoo magaaladeennu u kortay bulsho firfircoon oo si dhow isugu xiran oo aynu dhammaanteen qiimeyno.

Waxaan aaminsanahay in kala-duwanaanta aragtiyuhu ay xoog leedahay. Waxaa iga go'an dhageysiga, kobcinta wadahadal ixtiraam leh, iyo hubinta in natiijooyinka lagu hago talo-wadaag bulsho. Aan si wadajir ah u shaqeyno si Newcastle ay u sii ahaato magaalo soo dhaweyn leh oo barwaaqo ah jiilalka soo socda. Si ixtiraam leh waxaan kaa codsanayaa codkaaga.

### Andy Jacobs



(425) 891-6741
andy@andyjacobs4newcastle.com
www.andyjacobs4newcastle.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, University of Denver

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha La-Wadaagga ee Access Unlimited USA iyo AU Blendz

**Bayaanka:** Aniga iyo xaaskayga waxaan halkan deganayn sannadkii 1995, maanta-na waxaan ku raaxeysaneynaa inaan awoowe iyo ayeeyo ka noqono magaalada quruxda badan ee Newcastle. Waxaan leeyahay 45 sanno oo waayo-aragnimo ganacsi iyo hoggaamineed—oo ay ku jiraan labaatan sanno oo aan ka shaqeynayay maamulka ee halka Costco anigoo kaalin weyn ka qaatay bilaabista digaagga la dubay ee $4.99 iyo maaraynta hatdoogga ee $1.50 ah!—Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Newcastle si aan uga caawiyo dhisidda bulsho isku xiran, midnimo leh, oo ammaan ah oo qof walba u furan.

Waxaan taageeraa adeegyada badqabka dadweynaha oo xooggan, waddooyin si wanaagsan loo dayactiray, iyo kobaca bulshada oo si xikmad leh loo qorsheeyay. Waxaan taageeri doonaa ganacsiyada maxalliga ah, dhacdooyinka dhaqanka, iyo hindiseyaasha kor u qaada Kala-duwanaanta, Sinnaanta, iyo Ka-mid-noqoshada—maxaa yeelay degane kasta wuxuu mudan yahay in la arko oo la maqlo. Waayo-aragnimadayda nolosha aniga oo Yuhuudi ah waxay ii iftiimisay fahamka micnaha ka mid noqoshada iyo muhiimadda ay leedahay in cod kasta oo bulshada ka mid ahi la maqlo lana qiimeeyo..

Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo Degmada 41aad, Senatarka Gobolka Wellman, Wakiillada Thai iyo Zahn, iyo Xubnaha Golaha Ariana Sherlock, Paul Charbonneau, iyo Sun Burford.

## Golaha Jagada Lr. 2

### Vivek Prakriya



(425) 588-7588
vivek.prakriya@gmail.com
friendsofvivek.org

**Waxbarashada:** University of Washington: Shahaadada Jaamacadda Cilmiga Sayniska Kombuyuutarka, Shahaadada Jaamacadda ee Fiisigiska, Shahaadada Jaamacadda ee Xisaabta (2026); Qalin jebiyeyaasha LWSD

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddiga Adeegyada Aadanaha ee Redmond; Injineerka Softiweerka ee Ganacsi AI Bilow ah; Ex-Amazon

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan golaha keeno fikrado cusub, hoggaan cusub, iyo aragti farsamo oo wax dhisaysa. Waxaan ka qalin jebiyay dugsiyada dadweynaha ee Redmond, waxaan xubin ka ahay Guddiga Adeegyada Aadanaha ee magaalada, waxaana ahay injineer ka shaqeeya ganacsi yar oo halyeey hore ay leeyihiin *Waxaan si sharaf leh ugu faraxsanahay taageerada aan ka helay dhammaan xildhibaannada gobolka ee hadda matala Redmond.*

Golaha dhexdiisa, waxaan mudnaan siin doonaa badbaadada, la awoodi karo iyo ka mid noqoshada. Kumanaan qof ayaa koronto la'aan noqday intii lagu jiray duufaantii xoogga lahayd ee bishii Nofeembar ee la soo dhaafay — waa inaan maalgelin ku sameynaa kaabayaasha waara oo adkaysan kara. Waxaan ka shaqeyn doonaa in waayeellada iyo qoysaska aan laga saarin guryahooda sababo la xiriira qiimaha, waxaan mudnaan siin doonaa jardiinooyin tayo leh iyo gaadiid dadweyne oo la heli karo, isla markaana waxaan ilaalin doonaa deegaanka quruxda badan ee Redmond. Aan dhisno Redmond oo loo diyaariyay mustaqbalka anagoo ilaalinayna waxa bulshadeenna ka dhigaaya mid gaar ah!

*Waxaa taageeray: Dab-damiyeyaasha Redmond; Xildhibaan Suzan DelBene; Isbahaysiga Ganacsiga Eastside; Duqa Magaalada Redmond Birney iyo Madaxweynaha Golaha Magaalada Kritzer; Senatarrada Slatter iyo Dhingra; Wakiillada Walen, Springer, Goodman, Salahuddin; Xubinta Golaha Degmada Perry; Dimuqraadiyiinta Degmada King; Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 45aad, 48aad.*

### Steve Fields



(425) 444-3188
Stevefieldsredmond@gmail.com
electstevefields.com

**Waxbarashada:** BS (Shahaadada Jaamacadda), Xisaabinta, San Diego State University. daraasaadka waxbarashada ee Shahaadada Mastarka. Shahaado Maamulka iyo Maareynta Dowladda

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Maaliyadda iyo Hawlaha Dowladda Mas'uulka Ciyaaraha Dhallinyarada iyo Madadaalada

**Bayaanka:** Ka hor intaadan codeynin, is weydii su'aashan muhiimka ah. Musharaxan ma leeyahay geesinimada uu ugu istaago waxa saxda ah, xitaa markey sahlaneyn ama fududeeyn? Waxaan sii hormariyay baahiyaha guud ee bulshada ballaaran intii aan ka dooran lahaa danta gaarka ah iyo ajendayaasha ciriiriga ah ee xisbiyada siyaasadeed. Daah-furnaanta, gaar ahaan marka khaladaadka la qirto, waa mabda'a aasaasi ah oo hoggaamin wanaagsan iyo ilaalinta kalsoonida dadweynaha.

Waxaan u shaqeeyay si aan u hubiyo in maalgelinteena canshuur-bixiyeyaasha ee ikhtiyaarada gaadiidka, ammaanka dadweynaha, guryaha la awoodi karo, ilaalinta deegaanka, iyo kordhinta jardiinooyinka si taxaddar leh loo fuliyo oo mar walba lala eego baahida dadweynaha kuna dhisan baaritaan.

Mabda'a i hagaya waa inaan adiga ku matalo. Hoggaamiyeyaasha ugu wanaagsan ee la doortay waxay fahamsan yihiin in shaqadoodu tahay inay dhiirigeliyaan dadka oo dhan lana hadlaan, ixtiraamaan kala duwanaanta aragtiyada, oo ay kor u qaadaan fikradaha nolosheena ka dhigaaya mid ka wanaagsan. Golaha magaalada wuxuu u baahan yahay ballanqaad dhab ah, wakhti, aqoon, iyo naxariis. Khibraddayda qotada dheer ayaa loo baahan yahay xilliyada adag ee foodda inagu soo haya, waxaana shaqadaan u qaadanayaa si dhab ah.

## Golaha Jagada Lr. 4

### Melissa Stuart



(425) 683-6222
votemelissastuart@gmail.com
votemelissastuart.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Hoggaaminta Hey'adaha Aan Faa'iido Doonka Ahayn, Seattle University; BA (Shahaadada Jaamacadda) Isgaarsiinta & BA (Shahaadada Jaamacadda) Cilmiga Siyaasadda, Washington State University

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada Redmond; Guddiga Xarunta Wadajirka (Together Center Board); Jago Hore: Agaasimaha samafalka aan faa'iido doonka ahayn

**Bayaanka:** Ka Xubin Golahaaga ahaan, waxaan ahay mid firfircoon, feejigan, oo la heli karo. Waxaan ahay cod joogto ah oo ku saabsan awoodda guryaha la awoodi karo, xoojinta bulshada, iyo adkeysiga cimilada. Afartii sannadood ee la soo dhaafay, waxaan ka shaqeeyay inaan sameeyo go'aanno bulsho-hoggaamin ah, horumarinta sinnaanta, iyo xallinta dhibaatooyinka si hal-abuur leh.

Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho sababtoo ah waxaan aaminsanahay in magaalada Redmond ay noqon karto meel wanaagsan oo lagu noolaado *dhammaan*. Golaha, waxaan keenayaa sannado waayo-aragnimo ah oo ku saabsan jebinta caqabadaha dhallinyarada iyo qoysaska; oo ay ku jiraan shaqadayda Adeegyada Dhallinyarada ee Eastside si loo bixiyo daryeel caafimaad oo dhaqaale ahaan la awoodi karo iyo Treehouse si loo horumariyo guusha waxbarashada dhallinyarada ku jira daryeelka korinta. Waxaan ahay Mutadawac Peace Corps oo Soo Laabtay, Xubin Hore ee Guddiga Sound Transit/Metro Sounding, iyo Guddoomiyihii Hore ee Maktabadda Redmond.

*Taageerooyinka: Degmada King & Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 45/48; Xildhibaan DelBene, Senatarrada: Dhingra & Slatter; Wakiillada: Goodman, Salahuddin, Walen, Zahn; Xubnaha Golaha Degmada King Balducci & Perry; 30+ Duqeyda iyo xubnaha golaha ee Eastside; Redmond Fire Local 2829; Sierra Club; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka.*

### Kay Asai



(206) 972-0345
kay@kayasai.com
kayasai.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga ee Ganacsiga, Suuqgeynta; The University of Kansas

**Shaqo iyo Xirfad:** U Doodaha  Xaafadda iyo Qoyska

**Bayaanka:** Waad ku mahadsan tahay inaad ka qayb qaadatay doorashada hordhaca ah. Ka muwaadin dhalasho qaatay ahaan, hooyo saddex carruur ah leh, iyo degane muddo dheer ku noolaa Redmond, waxaan si toos ah u ogahay sida qiimaha nolosha ay cirka isku shareertay, dambiyada sii kordhaaya, iyo siyaasadaha kala qaybsan ay u culays saaraan qoysaska maalinlaha ah. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan u soo celiyo *maamul daah furan oo caqli-gal ah* oo ka dhigaaya magaaladeena mid ammaan ah, la awoodi karo, oo idinka mas'uul ah.

Waxaan u ololayn doonaa *bulsho aan daroogo lahayn* halkaas oo carruurtu ku ciyaari karaan xaafadaheena iyo jardiinooyinkeena iyaga oo aan waalidkood ka walwalin. Waxaan si buuxda u maalgelin doonaa oo awood siin doonaa booliiska, dab-damiska, iyo EMS, waxaanan diidi doonaa mashaariicda aan muhiimka ahayn ee kheyraadka ka leexinaya ammaanka dadweynaha.

Waxaan *ka soo horjeesan doonaa canshuuraha cusub ama kuwa qarsoon*, waxaan yareyn doonaa kharashaadka aan loo baahnayn, waxaan fududeyn doonaa xeerarka, waxaanan soo dhawweyn doonaa ganacsiyada yaryar ee shaqo abuuraya si dadka ay u awoodaan inay halkan ku noolaadaan, ka shaqeeyaan, horumar sameeyaan, oo ay hawlgab noqdaan. Waxaan difaaci doonaa xuquuqda waalidka iyo hantida, waxaanan ilaalin doonaa mulkiileyaasha hantida gaarka ah ee ka soo horjeeda xeerarka culus. Waxaan si qushuuc leh u weydiisanayaa codkaaga. Waxaa i taageeray Jamhuuriyiinta Degmada 48aad

## Golaha Jagada Lr. 6

### Menka Soni



(401) 830-2434
votemenkasoni@gmail.com
www.votemenkasoni.com

**Waxbarashada:** MBA, Bangiga Maalgashiga; Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga, Lucknow University; Shahaadada Guryaha ee WA, Shahaadada DE&I Carnegie Mellon

**Shaqo iyo Xirfad:** 30 sanno oo hoggaamin: Microsoft, Starbucks, T-Mobile, iyo GM; Aasaasaha/Madaxweynaha, AmPowering

**Bayaanka:** Redmond waxay u baahan tahay hoggaamiye dhegaysta, matala baahiyahaaga, oo u dagaallama mustaqbalka halkaas oo qof walba ku barwaaqoobi karo. Waxaan u tartamayaa sababtoo ah hoggaamintu waxay ka dhigan tahay in la yimaado, dhibaatooyinka la xalliyo, lana garab istaago dadka ka dhigaaya magaaladaan mid xooggan.

In ka badan 30 sannad oo waayo-aragnimo ah oo ku saabsan ganacsiga, adeegga dadweynaha, hoggaaminta madaniga ah, iyo abaabulka bulshada, waxaan dhisay iskaashi abuura shaqooyin, ballaariyo guryaha, taageero ganacsiyada yaryar, ilaaliyo deegaanka, oo u dabaaldego kala-duwanaanta. Anigoo ah hooyo, mulkiilaha ganacsi yar, iyo hoggaamiye mutadawacnimo oo xididdo ku leh Redmond, waxaan keenayaa faham buuxa oo ku saabsan caqabadaha aan wajahayno iyo sida loo xalliyo. Ka Madaxweyne Ku-xigeenka Hey'adda OneRedmond, Guddoomiyaha Farshaxanka ee Redmond iyo Aasaasaha AmPowering (urur aan faa'iido doon ahayn) ahaan, waxaan ka caawiyay kumanaan qof inay helaan kheyraadka. Waxaan diyaar u ahay inaan isla tamartaas iyo qalbigaas keeno Aqalka Magaalada. Aynu wadajir awood leh ugu yeelno magaalada Redmond.

*Taageerada Keliya: Xisbiga Dimuqraadiga ee Deegaanka (Degmada King-LD48-LD45); Duqa Magaalada Redmond Birney, Guddoomiyeyaasha Upthegrove, Kuderer; Senatarrada Dhingra, Slatter, Stanford; Duqa Magaalada Bellevue, Woodinville, Bothell; iyo kuwo kale.*

### Jeralee Anderson



(425) 224-6319
vote@jeraleeanderson.com
www.jeraleeanderson.com

**Waxbarashada:** PhD, University of Washington, Civil & Environmental Engineering; Certificates in Business Administration, Diversity & Inclusion

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxweynaha-Madaxa Fulinta, Sustainable Transport Council; Xubin ka tirsan Golaha Magaalada; Tabaruce Beagle Rescue

**Bayaanka:** Sharaf ayay ii tahay inaan idiin adeego ka Xubin ka tirsan Golaha Magaalada ahaan. Waxaan u tartamayaa dib u doorashada si aan uga dhabeeyo in Redmond ay horumariso oo ay dhisto fursado kala duwan oo loogu talagalay qoysaska, ganacsiyada yaryar, iyo jiilalka mustaqbalka. *Waxaan aaminsanahay in qof walba uu dareemo nabadgelyo, awood, iyo ixtiraam marka uu la macaamilayo dowladda magaalada.*

Ka hoggaamiye fulineed ahaan, injineer dhismaha, iyo ganacsade bulsho, waxaan ku faraxsanahay horumarinta caqliga leh, ilaalinta deegaanka, iyo caafimaadka iyo badbaadada bulshada. Tan iyo 2018, waxaan si guul leh uga wada shaqeynay ansixinta siyaasadaha isbeddelka cimilada, tamarta cagaaran, guryaha la awoodi karo, iyo badbaadada taraafikada. Heerarka kala duwan ee dowladda, waxaan u ololeeyaa gaadiid lagu kalsoonaan karo, helitaanka internetka xowliga, hawada nadiifka ah, iyo biyaha nadiifka ah.

Ka gabadh ay awoowayaasheed ahaayeen halyeeyo hore, xubin ka tirsan qoys urur ah, iyo ka badbaade xadgudub galmo, waxaan u dagaalamaa isla xisaabtanka, ilaalinta, iyo ka mid noqoshada adeegyada iyo kaabayaasha magaalada. Aan wada shaqeyno si aan u maalgelino xasilloonida guryaha, amniga cimilada, iyo mushahar caddaalad ah ee qof walba. *Waad ku mahadsan tahay codeyntaada!*

# CODBIXIYAHA ★ MUSTAQBALKA ★

**16 iyo 17 sanno jirka ayaa hore isku sii diiwaan gelin kara si ay u codeeyaan oo si toos ahna loo diiwaan gelinayo si ay u codeeyaan marka ay gaaraan 18 jir.**

**Si aad u noqoto codbixiyaha mustaqbalka, waa inaad tahay...**

| 16 | | |
|---|---|---|
| Ugu yaraan 16 jir | Muwaadin Mareykan ah | Degan Washington |

### Sideen isku diiwaan geliyaa?

Oonleenka hore isaga diiwaan geli si aad u codeyso barta **VoteWA.gov.**

Waxaad sidoo kale shakhsi ahaan hore isaga diiwaan gelin kartaa Xarunta Codbixinta, ama adigoo boostada ku soo diraaya foomka diiwaan gelinta xaashida ah.

### Maxaa dhacaya markaan is diiwaan geliyo ka dib?

Warqad codbixin ayaa boostada si toos ah laguugu soo diri doonaa doorashada ugu horeysa ee aad u qalanto.

Warqaddaada codbixinta waxaad ku soo celin kartaa boostada - istaambo looma baahna. Hubi inay lahaato shaabadda boostada oo ah ugu dambeyn Maalinta Doorashada.

Ama waxaad warqaddaada codbixinta ku ridi kartaa sanduuqa lagu rido ee sugan ilaa iyo 8 p.m. oo gaw ah Maalinta Doorashada.

**Naga soo dabagal @kcelections oo isticmaal hashtaagga #FutureVoter**

## Golaha Jagada Lr. 1

### James Alberson



(206) 300-0339
info@jamesalberson.com
www.jamesalberson.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Teknolojiyadda Kombuyuutarka - Purdue University; Shahaadada Mastarka oo leh Taqasus Suuqgeynta - Purdue University

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Hadda ee Golaha Magaalada Renton; Mulkiilaha Ganacsi, Sandler Training

**Bayaanka:** Ka Guddoomiyaha Golaha Magaalada ahaan, waxaa iga go'an fikir caqli-gal ah iyo go'aanno caddaalad ah, oo maskax leh oo hagaajinaya tayada nolosha ee Renton. Intii lagu jiray muddo xilleedkaygii ugu horreeyay, waxaan helay waayo-aragnimo qiimo leh iyo aragti ku saabsan wax ka qabashada arrimaha muhiimka ah, horumarinta hindisooyinka muhiimka ah, iyo la shaqeynta deganeyaasha si loo daboolo baahiyaha dhabta ah.

Mudnaantaydu waa isla xisaabtanka, amniga, iyo fursadda. Waa inaan soo celinaa mas'uuliyadda shakhsiga ah, diidnaa dhaqanka cudurdaar sameynta, oo aan si wax ku ool ah u xallinaa arrimaha halista ku ah badqabka dadweynaha. Waxaan sidoo kale diiradda saarayaa ballaarinta fursadaha iyada oo loo marayo kobaca dhaqaalaha ee loo dhan yahay, horumarinta shaqaalaha, iyo helitaanka waxbarasho iyo tababar xirfadeed oo la awoodi karo. Qof kasta oo ku nool Renton waa inuu helo fursad uu ku dhisto nolol u wanaagsan naftiisa iyo qoyskiisa. Codkaaga, waxaan ku dhisi doonaa Renton oo awood badan, oo firfircoon—mid u adeegta inay tusaale u noqoto gobolka.

Taageerooyinka: Meeyarrada Armondo Pavone iyo Denis Law, Xubnaha Golaha Renton Prince, Perez, iyo O'Halloran; Xubinta Golaha Degmada King Reagan Dunn, iyo qaar kale oo badan.

### Michael Westgaard



(206) 370-1987
mikeforrenton@gmail.com
mikeforrenton.com

**Waxbarashada:** Xarunta Waxbarashada Shaqada, iskuul farsamo oo ku yaal Anchorage, Alaska.

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawl-wadeenka Biyaha Wasakhda ee Degmada King. Wakiilka Ururka Shaqaalaha iyo Xubin Guddiga.

**Bayaanka:** Renton waxay noqonaysaa mid aysan shaqaalaha awoodi karin. Waxaan haynaa kirada sare ee Seattle, balse shaqooyinka mushaharkooda sareeyo ma jiraan. Waxaan rabaa inaan keeno shaqooyin badan oo mushahar sare leh magaalada Renton. Waxaan ka caawiyay hoggaaminta hindisaha sharci jeedinta ee ugu yar ee magaalada Renton waxaana taageerayaa hirgelinta si ay dadka degan Renton u daboolaan baahidooda.

Waxaan bixinaa canshuuraha Sound Transit, laakiin lacagtaas waxaa lagu kharash gareeyaa Bellevue iyo meelo kale. Waxaan u dagaalami doonaa saamigeenna. Waxaan u baahanahay guryo la awoodi karo oo badan iyo inaan ka caawino waayeelka inay ku sii nagaadaan guryahooda. Aynu dhisno guryo bulsho oo ku yaal dhul dadweyne oo bannaan. Qof kasta oo si adag u shaqeeya wuxuu mudan yahay meel ammaan ah oo uu ku noolaado. Golaha sharci dejinta ee gobolka ayaa ansixiyay sharci ka hortagaya sicir-bararka kirada. Waxaan rabaa inaan ka dhabeeyo in la dhaqan geliyo. Waxaan ugu baahanahay in xaafadahayaga ay noqdaan kuwo ammaan ah.

Waxaan ku faanayaa in la ii taageero Xisbiga Dimuqraadiga ee Deegaanka, Mashiinisteyaasha Boeing, Shaqaalaha Daryeelka Guriga, Golaha Shaqaalaha ee Degmada King iyo hoggaamiyeyaasha la soo doortay. Si kastaba ha ahaatee, taageerada ugu muhiimsan waa adiga.

## Golaha Jagada Lr. 2

### Carmen Rivera



(425) 466-4143
riveraforrenton@gmail.com
RiveraforRenton.com

**Waxbarashada:** Tiffany Park, Nelsen MS, Lindbergh HS, Seattle University, University of Liverpool

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada Renton, Kaaliyaha Madaxa Jaamacadda, Kaaliyaha Barafasoor Waxbare ah, Seattle University

**Bayaanka:** Anigoo ah degane nolosheeda oo dhan ku noolaa Renton, waxbarre, iyo maareeye hore ee kiiska, waxaan u tartamayaa dib u doorasha sababtoo ah qoysaskeena waxay mudan yihiin magaalo *ammaan ah, la awoodi karo,* oo *lala xisaabtami karo.*
Waxaan ahaa Xubinta Golaha ugu horreeyay ee taageera kordhinta mushaharka ugu yar ee Renton, si loo hubiyo in shaqaalahu ay helaan shaqooyin mushahar fiican leh. Waxaan hoggaamiyey dadaallo lagu maalgelinayo ka hortagga rabshadaha dhallinyarada, lagu ballaarinayo helitaanka taageerada caafimaadka maskaxda iyo dabeecadda, oo lagu dhisayo kalsoonida bulshada iyo fulinta sharciga iyada oo loo maraayo iskaashiga ka wada-jawaabista wadajirka ah. Anigoo ah Xubinta keliya ee Golaha oo leh khibrad toos ah oo adeeg bulsho, waxaan ogahay sida nidaamyada u guuldareystaan iyo halka ay tahay in laga xoojiyo. Waxaan u dagaalamaa qoysaska shaqeeya, ganacsiyada yaryar, iyo xaafadaha leh guryo ammaan ah oo loogu talagalay dhammaan.
Waxaan ahay musharaxa keliya ee tartankaan ee ay taageereen Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo ururada shaqaalaha. Waxaan keenaa waayo-aragnimo nololeed, qiyaam horusocod, iyo diiwaan hawlgal ah. Renton waxay mudan tahay hoggaamiyeyaal soo muuqda, dhegaysta, oo wax qabta. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

### Mary Clymer



(425) 306-3596
Mary@Clymer4Renton.com
Clymer4Renton.com

**Waxbarashada:** Lakeridge Elementary, McKnight MS, Renton HS, Central Washington University, iyo American Musical and Dramatic Academy

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha ganacsi yar ee caafimaadka iyo fayo-qabka

**Bayaanka:** Renton waxay u qalantaa hoggaan wax-ku-ool ah oo bulshada xididdo ku leh, ee aan ku dhisnayn khadadka xisbiyada. Waxaan saddex ahay Mutadawaca Sannadka ee Renton, Guddoomiyihii hore ee Fanka Renton, iyo u-doodaha magaaladeena oo aan ku faano. Sannado adeeg dadweyne iyo adeeg macaamiil ah ayaan ka bartay awoodda dhegaysiga, xal-raadinta hal-abuurka, iyo caawinaadda dadka kale.

Taageeradaydu si toos ah bay uga timaadaa derisyada, hoggaamiyeyaasha deegaanka, iyo kuwa maalgashaday mustaqbalka Renton. Waan imaadaa, waan dhegaystaa, waanan fahmaa waxa ugu muhiimsan dadka halkan ku nool oo ka shaqeeya. Waxa iga go'an xoojinta xiriirrada bulshada, taageeridda korriin fikir-leh, iyo helidda xalal wax-ku-ool ah oo ka tarjumaya baahiyaha kala duwan ee Renton. Mudnaantaydu waxaa ka mid ah badbaadada dadweynaha, taageeridda ganacsiyada yaryar, madadaalo la heli karo, iyo go'aan-qaadasho bulsho-dhexe ah oo keenta codad badan miiska.

Waxa taageeray Duqa Magaalada Pavone, Duqii hore ee Magaalada Denis Law, xubno badan oo golaha hadda iyo kuwii hore ah, mulkiileyaal ganacsi oo yaryar, iyo tiro sii kordhaysa oo xubno bulshada ah. Sharaf bay ii noqon lahayd inaan kasbado codkaaga.

# Golaha Jagada Lr. 6

## Paul Dutton



paul.dutton@futurerenton.com
www.pauldduttonforafuturerenton.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, University of Utah; BS (Shahaadada Jaamacadda) Injineernimada Macdan Qodista, Michigan Technological University

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Madani oo Xirfadle ah, Ka Shahaadaysan Siddeed Gobol oo ay ku jirto Washington

**Bayaanka:** Waxaan u kacayaa sababtoo ah waxaan fahamsanahay in xaaladda hadda jirta aysan shaqeynayn. Waxaan rabaa inaan dhiso Renton oo ammaan ah, la heli karo, oo loo dhan yahay halkaas oo dhammaan dadweynaha magaalada ay heli karaan kheyraadka ay u baahan yihiin si ay u horumaraan. Magaalada Renton ayaa si degdeg ah u koraysa, waxaana ka tagaynaa qoysas badan oo shaqeeya, ganacsiyo yaryar, waayeel, soogalooti, iyo deriskeena LGBTQIA+.

Qoyskayga ayaa magaalada Renton ku noolaa tan iyo 2006. Injineer Xirfadeed oo 25 sanno ah, waxaan ka shaqeeyay mashaariic waaweyn oo Discovery Channel ah laga bilaabo waddooyinka ilaa tareenka fudud ilaa tunnelada. Waxaan fahamsanahay waxa loo baahan yahay si loo xalliyo dhibaatooyinka loona wanaajiyo nolosha dadka. Markaan dhegaysto bulshadeenna, waxaan khibraddayda u adeegsan doonaa inaan wax ka qabto arrimaha amniga, qiimaha la awoodi karo, guryaha, iyo gaadiidka ee magaalada aan jeclahay.

Waxaan ahay aabbe PTA ah, hoggaamiye hore ee Scouts, Rotarian, waxaa i taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King, Transit Riders Union, Washington State Progressive Caucus (Kutlada Horusocodka ee Gobolka Washington), iyo kuwo kale oo badan. Si Wadajir ah, waxaan dhisi karnaa Renton-ta mustaqbalka oo aan dhammaanteen u qalanno.

## Ruth Pérez



(206) 335-8938
ruth@ruthperezforrenton.com
www.ruthperezforrenton.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Sare ee Hoggaaminta Dowladda Hoose, Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Shahaadada Jaamacadda ee Sayniska Isgaarsiinta

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada Renton, mulkiilaha ganacsi yar, iyo La-taliyihii hore ee Guddoomiyaha

**Bayaanka:** Renton waxay i soo dhawweysay anigoo ah haweeney Latina ah oo soo-galooti ah, waxaana nasiib ii ahayd inaan idinku adeegayo sidii Xubin Golaha tan iyo 2014. Khibraddayda sannado badan ee Dowladda iyo u-doodista bulshada ayaa iga caawisay inaan qabto shaqooyin wax ka tara arrimaha nolol-maalmeedka: badbaadada dadweynaha, gaadiidka, deegaanka, iyo adeegyada aadanaha. Badbaadadiinnu waa mudnaantayda koowaad. Waxaan taageeray ku daridda saraakiil boolis si wanaagsan u tababaran, kamaradaha jirka, iyo jawaab-bixiyeyaasha caafimaadka dhimirka si aynu ammaan u ahaanno. Waxaan hormuud ka noqday maalgelin goboleed oo loogu talagalay jardiinooyinka, dariiqyada, adeegyada waayeelka, iyo gaadiidka. Maaddaama Degmada King iyo Gobolka Washington ay farayaan korriin dheeraad ah, waxaan dhegaystay walaacyadiinna, waxaan riixay qorsheyn maxalli ah oo caqli-gal ah oo kharash-wax-ku-ool ah, waxaanan u dagaallamay saamiga caddaaladda ah ee kheyraadka Renton. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan sii wado u adeegidda Renton.

Taageerooyinka: Xildhibaan  Adam Smith, Wakiil. Steve Bergquist, Duqa Magaalada Armondo Pavone, Xubnaha Golaha Prince, O'Halloran, McIrvin, Alberson; Duqooydii Magaalada ee Hore Denis Law iyo Kathy Keolker; Ururka Shaqaalah MLK; Dimuqraadiyiinta Degmada King, iyo in ka badan.

## Garsoore Maxkamadda Dowladda Hoose Jagada Lr. 1

# Jessica Giner



(425) 466-0619
judgeginer@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka (cum laude), Seattle University; Juris Doctorate (Shahaadada Sharciga), Seattle University School of Law

**Shaqo iyo Xirfad:** Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose ee Magaalada Renton

**Bayaanka:** Garsoore Giner waxay u adeegtaa Magaalada Renton iyadoo ahayd Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose tan iyo 2021. Iyadoo leh 20 sano oo waayo-aragnimo sharci oo dheelitiran, waxay tahay go'aan-qaade aqoon leh oo caddaalad ah waxaana lagu qiimeeyay *"Si Aad Ugu Wanaagsan U Qalanta"* Ururka Qareennada Degmada King waxayna heshay qiimeyn sare lix urur qareen oo laga tirada badan yahay.

Garsoore Giner oo asal ahaan ka soo jeeda Koonfurta Degmada King, ayaa abuurtay barnaamijyada Maxkamadda Dowladda Hoose ee Maxkamadda Gaadiidka Dhallinyarada iyo Kalandarka Caafimaadka Maskaxda. Waxay si firfircoon ugu tabarucdaa Barnaamijka Maxkamadda Tijaabada ee YMCA, Garsooreyaasha Fasalka, iyo barnaamijyada waxbarashada madaniga ee Maalinta Dastuurka. Waxay sidoo kale ka tirsan tahay guddi heer gobol ah oo kormeera helitaanka adeegyada lagu soo celinayo kartida caafimaadka maskaxda. Garsoore Giner waxaa loo doortay Madaxweyne Ku-xigeenka Ururka Garsooreyaasha Maxkamadaha Degmooyinka iyo Magaalooyinka ee gobolka oo dhan ay doorteen garsooreyaasheeda kale.

Waxaa taageeray: Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka ee Washington; Ururka Caalamiga ah ee Mashiinisteyaasha & Shaqaalaha Hawada (IAM 751); Dimuqraadiyiinta Degmada King.

## Garsoore Maxkamadda Dowladda Hoose Jagada Lr. 2

# Kara Murphy Richards



(206) 947-3852
Karamurphy@live.com

**Waxbarashada:** Notre Dame Law School, JD 1995

**Shaqo iyo Xirfad:** Maxkamadda Dowladda Hoose ee Renton, Garsooraha Guddoominaya

**Bayaanka:** Garsoore Murphy Richards waxay rajeynaysaa inay sii waddo u adeeggida Renton. Waxaa 2019 magacaabay Mayor Law (Hawlgabay) si loo bilaabo Maxkamadda Bulshada (Community Court) ee ugu horreysay Renton, waxaana la doortay 2021. Kara waxay leedahay xirfad adeeg dadweyne oo ku dhawwaad 40 sanno ah. Waxay u soo shaqeysay sida Shaqaale Bulsho, Sarkaal Kormeere (Probation Officer), U-doodaha Dhibaneyaasha Rabshadaha Qoyska, Qareenka Xeer Ilaalinta, iyo Garsoore ku-meel gaar (Pro Tem) ahaan. Waxay si adag uga shaqeysay in maxkamadda loo geeyo fasallada iyo bulshada, isla markaana bulshada iyo fasalladaba lagu soo dhawweeyo qolka maxkamadda iyada oo loo marayo dhacdooyin sida Maalinta Dastuurka, Maalinta Sharciga, iyo tartamo maxkamadayn majaajillo ah oo kala duwan.

Kara iyo ninkeeda Craig waxay ku nool yihiin Renton Highlands. Waxay leeyihiin lix carruur ah, lix awoowe/ayeeyo u yihiin iyo afar ey oo la jecel yahay. Kara, oo hore uga mid ahayd guddiga Mary's Place iyo Athletes for Kids (Xarunta Mary iyo Ciyaartoyda Taageera Carruurta), waxay sidoo kale ku raaxaysataa inay ka hadasho mowduucyo kala duwan.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Harlan Gallinger



VoteHarlanGallinger@gmail.com
www.HarlanGallinger.com

**Waxbarashada:** M.D. (Shahaadada Dhakhtarnimada) University of Washington School of Medicine; B.S. (Shahaadada Jaamacadda) University of Puget Sound

**Shaqo iyo Xirfad:** Dhakhtar Xaaladaha Degdegga ah; Xubinta Guddiga, Degmada Dugsiga Issaquah

**Bayaanka:** Waxaan codsanayaa fursadda aan ku matalo danahaaga si aan u hago mustaqbalka magaalada Sammamish. Waxaan aaminsanahay in Golaha uu u baahan yahay inuu dadaal dheeraad ah sameeyo si uu u dhegaysto ra'yiga xaafadaha iyo bulshada. Golaha waa inuu noqdaa mid la heli karo oo wada shaqeeya si uu u matalo danaha wadajirka ah ee taageera sababta ay inta badan naga mid ah u guureen halkan: dugsiyo wanaagsan, xaafado ammaan ah, iyo deegaan dabiici ah oo qurux badan.

Qorshe kasta oo lagu darayo unugyo guri oo dheeraad ah Xarunta Magaalada Sammamish waxay u baahan yihiin ka-qaybgal bulsho oo dheeraad ah. In kasta oo guryaha la awoodi karo ay tahay inay mudnaan lahaadaan, waxaan u baahanahay faham cad oo ku saabsan saameynta ay ku leedahay dakhliga canshuurta hantida magaalada. Ma taageeri karno horumarinta aan dhaqaale ahaan waari karin.

Kordhinta canshuuraha waa in ay noqotaa xulashada ugu dambeysa ee wax ka qabashada caqabadaha miisaaniyadda ee magaalada Sammamish. Waxaan leeyahay toban sanno oo waayo-aragnimo ah oo aan ku matalayay danaha bulshadeenna iyo horumarinta miisaaniyad hawleed oo ka badan $400+ milyan oo doolar taas oo bixisa waxbarasho heer caalami ah iyadoo la ilaalinayo dheelitirka lacagta keydka ah iyo heerarka canshuurta oo degan.

### Amy Lam



(425) 281-7042
vote.amylam@gmail.com
amyforsammamish.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka (MFA), Jaamacadda Yale; Shahaadada Jaamacadda, Jaamacadda Brandeis

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Hal-abuurka, Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington

**Bayaanka:** Waxaan deganaa Sammamish 30-sano, sharaf bay ii ahayd inaan noqdo ku xigeenka duqa magaalada. Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho si aan u sii wado aragtida hore-u-fikirka Golahayagu u dejiyay 2022. Waxaan aasaas adag ku dhignay qorshayaasha muhiimka ah sida Qorshaha Waxqabadka Cimilada, Qorshaha Guud ee Gaadiidka, iyo Qorshe Dhammaystiran ee 2024 kaas oo hagi doona kobaca waara ee magaaladeena.

Waxaan si guul leh ugu ololeeyay in la labanlaabo maalgelinta waddooyinka dadka ku socdaan oo la gaarsiiyo $2.4 milyan lix sanno gudahood, taas oo dedejinaysa horumarinta badbaadada dadka lugaynaya. Waxaan sidoo kale u hiiliyay qayb ka mid ah furitaanka Beaton Hill Park, oo la helo waddo loogu talagalay dadka lugeynaya. Afarta sanno ee soo socota, waxaan diiradda saarayaa joogtaynta maaliyadeed, u adkeysiga cimilada aadka u daran, iyo Xarunta magaalada si loo ballaariyo fursadaha guriyeynta, kobcinta dakhliga dowladda ayadoo la helo ganacsiyo cusub, oo aan abuurro meel ay bulshadu isugu timaado.

*Guddiyada:* Guddiga Caafimaadka ee KC (Guddoomiye Ku-Xigeenka), Guddiga La-talinta Qashinka Adag ee KC *Taageerooyinka:* Naadiga Sierra/WA, Dimuqraadiyiinta LD ee 41aad & 45aad, Wakiillada Gobolka Thai iyo Zahn, iyo in ka badan.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Sid Gupta



electsidgupta@gmail.com
sidforsammamish.com

**Waxbarashada:** Bartay Cilmiga Siyaasadda at University of Tulsa; Native Plant Stewardship Program (Barnaamijka Maamulidda Dhirta Dhaladka ah), Washington Native Plant Society

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin ka tirsan guddiga ururka deegaanka aan faa'iido doon ahayn; Xubinta Golaha Magaalada

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho si aan hore ugu sii xaqiijiyo Sammamish mas'uuliyad leh, mid loo dhan yahay, oo barwaaqo ah. Waxaan siddeed sanno ku soo qaatay Guddiga Jardiinooyinka iyo Madadaalada, sida Ilaaliyaha Dhirta Asalka ah, iyo sida Mutadawaca Sannadka 2018 ee magaalada Sammamish. Waxaan toban sanno ku bixiyay u beddelidda hamiga bulshadeenna siyaasad micno leh.

Sii jiritaanku waa in uu udub-dhexaad u noqdo cimiladeenna, gaadiidkeenna, iyo siyaasadaheena maaliyadeed. Si loo la tacaalo caqabadaha ku saabsan ilaalinta deegaanka, isku xirnaanta gaadiidka noocyo badan, horumarinta dhaqaalaha, iyo sinnaanta, waxaan hormariyay iskaashi goboleed anigoo la shaqeynaya guddiyo ay ka mid yihiin Eastside Transportation Partnership (Iskaashiga Gaadiidka ee Eastside) iyo Kokanee Work Group. Waxaan taageerayaa xarun magaalo oo xooggan oo bixisa guryo kala duwan oo la awoodi karo, anagoo ilaalinayna lacagteena Sammamish; hadafka dabool geedo caafimaad qaba, oo hagaya daryeelkeenna iyo istaraatiijiyadeenna maaraynta xaaladaha degdegga ah; iyo xarun bulsho oo u adeegeysa waayeelka, dhallinyarada, iyo ururada aan faa'iido doonka ahayn ee deegaanka. Kala duwanaanshaheenna ayaa ah xooggeenna. Aan noqono kuwo ka sii xoog badan wadajirka.

Waxaa taageeray Waxqabadka Ilaalinta Washington, Sierra Club/WA, Dimuqraadiyiinta Degmada King, & Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 5aad, 41aad, and 45aad.

### Josh Amato



(253) 722-9089
Josh@JoshForSammamish.com
JoshForSammamish.com

**Waxbarashada:** Dhigtay DeVry University; Guddoomiyihii hore ee Sammamish Rotary; Xubinta Guddiga Bulshada Daryeelka Xoolaha Horumarka leh (PAWS)

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar; Guddoomiye Ku-xigeenka Hore ee Guddiga Qorsheynta Magaalada Sammamish

**Bayaanka:** Bulshadeennu waxay u qalantaa dowlad shaqeysa. Laakiin Golaha ayaa lumiyay diiradda — kor u qaadista canshuuraha, dib u dhigista hagaajinnada kaabayaasha, iyo ku liidata qorsheynta xaaladaha degdegga ah. Waxaan ku dadaalli doonaa dowlad keenta horumar la cabbirri karo, si firfircoon u dhegaysata, oo jawaab celin leh.

Waxaan weydiin doonaa su'aalo adag, mudnaan siin doonaa, oo dib u habeyn doonaa miisaaniyadda si aan u abuurro dowlad loo dhan yahay, oo daah furan oo kuu shaqeysa. Waxaan taageersanahay ballanqaadyada lagu sameeyay aragtida asalka ah ee Town Center si loo abuurro guryo loogu talagalay waayeelka iyo qoysaska da'da yar — *maaha in la labanlaabno ilaa 4,000 unug*. Waxaan hagi doonaa kobaca dheelitiran si aan u ballaariyo guryaha waara, u hagaajiyo kaabayaasha, oo u kordhiyo fursadaha gaadiidka dadweynaha anigoo ilaalinaya deegaanka iyo xaafadaha.

Waxaan ku dadaalli doonaa in dhismaha CWU ee bannaan loo beddelo xarun bulsho oo firfircoon. Ka fikir meel ay deriska ku xirmaan jiilal kala duwan, dhacdooyinka dhaqameedna ay nolosha kobciyaan, ganacsiyada yaryarna ay koraan, dukaanka dharka la isticmaalo ee raqiiska ahna uu taageero adeegyada muhiimka ah.
Aynu dhisno Sammamish firfircoon, si wadajir ah. Waxaan si xushmad leh kuu weydiisanayaa codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Lin Yang



(425) 533-2254
linforsammamish@gmail.com
www.linforsammamish.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Siyaasadda Dadweynaha, Cornell University; Shahaadada Mastarka ee Siyaasadda Dadweynaha, Harvard University; MBA, UCLA.

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Isgaarsiinta, Microsoft. Wariyihii hore iyo macallin xisaabeed ee dugsiga sare.

**Bayaanka:** Waxaan ku soo barbaaray Sammamish, waxaan ka qalin jebiyay *Eastlake*, hadda waxaan halkan ku korinayaa carruurtayda. Magaalada Sammamish ayaa si joogto ah ugu jirta meelaha ugu wanaagsan ee lagu noolaado. Waxaan u tartamayaa inaan hubiyo inaanan kaliya ilaalin sumcaddaas, laakiin aan sii wado horumarinta si waayeelka, qoysaska shaqeeya, iyo jiilka soo socda ay u sii wadaan inay ugu yeeraan guriga.

Ka dhallinyaro ahaan, waxaan aasaasay Guddiga Dhallinyarada *Sammamish* si aan ardayda cod ugu siiyo qaabaynta siyaasadaha Magaalada. Dhawwaan, waxaan aasaasay *Sammamish Independent*, oo ah wargeyskeena keliya. Labada waayo-aragnimo waxay xoojiyeen aaminsanaantayda ku saabsan awoodda deganeyaasha hamiga leh ee isu yimaada si ay u buuxiyaan baahiyaha bulshada. Waxaan u baahanahay hoggaan magaalo oo la jaan qaadi kara hammigeenna.

Waxaan mudnaan siin doonaa baahiyaha deganeyaashayada anigoo hagaajinaya awoodda wax iibsiga, kobcinaya ganacsiyada maxalliga ah, maalgelinaya goobaha bulshada, yareynaya goynta korontada, oo ilaalinaya deegaanka. Aan dhisno Sammamish barwaaqo ah oo wadajirta. Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta 5aad/41aad/45aad. Naadiga Sierra, Ururka Shaqaalaha MLK, Isbahaysiga Ganacsiga ee Eastside. Senatarrada Dhingra, Hunt. Xubnaha Golaha Degmada Perry, Balducci, Zahilay.

### Michael Boyer



(206) 310-9638
election@michaelboyer.com
votemichaelboyer.com

**Waxbarashada:** Ph.D. Capella University, MBA University of Dallas, BS (Shahaadada Jaamacadda) ee Injineernimada Warshadaha LSU

**Shaqo iyo Xirfad:** Istiraatijiyadda Ganacsiga, Injineernimada, Hawlaha Fulinta, Mulkiilaha Ganacsi Yar (hawlgabay)

**Bayaanka:** Waxaan ku faanaa inaan magaalada Sammamish ku noolaa 30 sanno, halkaas oo aniga iyo xaaskayga aan ku soo korinay labada wiil ee aan dhalnay. Hadda, si kastaba ha ahaatee, la awoodi karo iyo ilaalinta tayada nolosha waxay noqotay arrin adag oo dad badan ku adag. Waxaan u tartamayaa si aan u dhabeeyo in dhammaan deganeyaasha, iyadoon loo eegin marxaladda nolosha, ay ku horumari karaan.

Shaqadaydu waxay ahayd mid falanqeyn, xallinta dhibaatooyinka iyo hoggaaminta. Maadaama magaalada Sammamish ay la kulmeyso caqabado dhaqaale, koritaan iyo deegaan oo waaweyn, waxaan keenni doonaa khibraddayda shaqo ee tobanaan sanno ah. Waajibaadkaygu waa muwaadiniinteena, ma'aha danaha gaarka ah ama kuwa mustaqbalka. Dhegaysiga, matallaadda, iyo kalsoonida deganeyaashayda waa ballanqaadyadayda.

Ma awoodno inaan canshuur ku soo rogo ama dhisno si aan u gaarno barwaaqo. Mas'uuliyadda maaliyadeed waa mid aad muhiim u ah. Waa inaan ilaalinaa quruxda dabiiciga ah iyo dabeecadda gaarka ah ee Sammamish. Go'aamada iyo maalgelinta waa inay u adeegaan danta guud ee dhammaan deganeyaasha. Waxaan ballanqaadayaa inaan ku dadaallo *barwaaqo*, *ilaalinta* iyo *wanaagga dadweynaha* ficil kasta.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Debbie Treen



(817) 881-3784
Treen2025@gmail.com
Treen2025.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka ee Maamulka Ganacsiga, Seattle University

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxa Sarkaalka Maaliyadda (CFO) Hawlgabay, Cornish College iyo CFO Selections, Duqii hore ee Magaalada Bothell

**Bayaanka:** Magaalada Sammamish waxay ku jirtaa marxalad isbeddel ah, waxaan diyaar u ahay inaan hoggaamiyo anigoo adeegsanaya daacadnimo, khibrad, iyo natiijooyin. Sida Duqii Magaalada ee hore, CFO hawlgab ah, degane muddo dheer ah iyo hooyo, waxaan xaliyay dhibaatooyin adag, maamulay miisaaniyado adag, oo aan u dagaallamay wixii muhiim ah.

Waxaan taageersanahay qorshaha Xarunta Magaalada ee 2000-unug, laakiin waxaan ka soo horjeedaa labanlaabidda ilaa 4000 oo leh dhismeyaal dhaadheer. Kobocan cariiriga ah wuxuu ku adkaan doonaa kaabayaasha dadweynaha wuxuuna si joogto ah u beddeli lahaa magaalada Sammamish. Waxaan la kulannaa canshuuraha dib-u-dhaca, gaabiska miisaaniyadda, iyo horumarka xad-dhaafka ah oo khatar ku ah waddooyinkeena, dugsiyadeena, deegaanka, iyo tayada nolosheena. Shirkadaha guryaha dhisa waxay helaan dhiirigelin iyada oo aan wax faa'iido dadweynaha helin, iyadoo deganeyaasha aan laga qayb gelin go'aamada muhiimka ah.

Waxaan u dagaallami doonaa in magaalada u weynaato si caqli-gal ah oo waara, nidaam maaliyadeed oo adag, iyo hoggaan daah-furan oo dadweynaha ka hormariya danaha gaarka ah. Magaalada Sammamish waxay u baahan tahay hoggaamiyeyaal xirfadlayaal ah oo fahmaya tirooyinka iyo xaafadaha, ilaaliya deegaanka dabiiciga ah, oo sharfaya dabeecadda bulshadeenna. Waa wakhtigii loo baahnaa hoggaamin lala xisaabtami karo, dheelitiran oo leh natiijooyin la xaqiijiyay. *Waa wakhti isbeddel. Dooro Debbie Treen.*

### Karen Howe



(206) 619-3692
Karen@electkarenhowe.com
electhowe.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Whitman College; Stanford Graduate School Waxbarashada Madaxa Fulinta Ganacsiga, Suuqgeynta

**Shaqo iyo Xirfad:** Duqa Magaalada Sammamish & Xubinta Golaha, oo horrey u ahaa sarkaalka madaxa fulinta ee teknolojiyadda

**Bayaanka:** Sida Duqaaga Magaalada iyo Xubinta Golaha, waxaan hagaajinnay waddooyinka, casriyeynay garoomada kubadda, ku daray heerarka adag ee biyaha roobka, iyo cusbooneysiinay xeerarka aagagga muhiimka ah si aan u ilaalino dhul-dhagaxeedka iyo duurjoogta. Waxaan ku faanayaa Qorshayaashayada cusub ee Waxqabadka Cimilada iyo Waaraanshaha, Qorsheyaasha Mastarka ee Gaadiidka iyo Gaadiidka Dadweynaha, iyo Qorshaha Kala-duwanaanta Guryaha. Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho si aan u sii wado horumarka aan gaarnay saddexdii sano ee la soo dhaafay.

Aragtidayda magaalada Sammamish waa inay ahaato mid ammaan ah, qurux badan, soo dhawweyn leh, oo deegaanka iyo dhaqaale ahaan waarta *muddada fog*. Waxaa iga go'an inaan magaalada Sammamish ka dhigo mid lagu noolaan karo, oo leh guryo iyo ganacsi kala duwan, iyo isku xirnaansho hufan oo shaqooyinka, dugsiyada, ganacsiyada, iyo goobaha furan. Iyadoo la heli karo fursado guri oo la awoodi karo oo loogu talagalay macallimiinta, kuwa ugu horreeya ee ka jawaaba, qoysaska da'da yar, iyo hawlgabka, waxaan dhisi karnaa mustaqbal uu qof walba uu heli karo adeegyo iyo nolol tayo sare leh.

*Taageerooyinka: Sierra Club/WA, Waalidnimada Qorsheysan, Dimuqraadiyiinta KC, iyo in ka badan 30 senatarro, wakiillo, duq magaalooyin, iyo xubnaha golaha. Guddiyada: Dabdamiska Eastside, Maareynta Degdegga ee KC, Gaadiidka Goboleedka.*

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Michelle Evans



Michelle@Michelle4Woodinville.com
www.Michelle4Woodinville.com

**Waxbarashada:** B.A. (Shahaadada Jaamacadda) University of Washington, Barnaamijyada Mastarka Gaarka ah ee Northwestern, Duke & Stanford

**Shaqo iyo Xirfad:** Hoggaamiyaha Hawlaha Gaarsiinta ee Sare, Microsoft

**Bayaanka:** Ka Xubinta Golaha ee la doortay ahaan, waxaan mudnaanta siiyay qorsheynta istiraatijiyadeed iyo gaarsiinta kaabayaasha dadweynaha ee magaalada Woodinville ee dib u dhacday. Inta badan Golaha ayaa helay $23 milyan oo deeqo ah si dib loogu dhiso buundada, waddooyin cusub iyo wareegyo lagu daro, laamiyada la ballaariyo, waddooyin lagu daro, buundooyinka la hagaajiyo, iyo si firfircoon loo xalliyo ciriiriga gaadiidka si loo taageero koritaanka ay dowladdu ku amartay.

Waxaan soo gudbinay Qorshahayaga ugu horreeya ee Waxqabadka Cimilada, waxaan dhaqan gelinay ilaalinta kiraystayaasha, iyo guryaha la awoodi karo ee shaqaalaha ee ugu horreeya tobanaan sano. Waxaan ballaarinay badbaadada bulshada annagoo maalgelinay CORE Connect jawaab-bixiyeyaasha xaaladaha degdegga ah, ku daray jawaab-bixiyeyaasha caafimaadka maskaxda, iyo ballaarinta caddaaladda soo celinta iyada oo loo marayo Maxkamadda Bulshada. Hoggaankayaga hoostiisa, magaalada Woodinville waxay ilaalisay miisaaniyad dheelitiran, iyada oo aan la kordhin canshuuraha magaalada, iyadoo la helayo maalgelin goboleed, mid dowlad gobol, iyo mid federaal ah.

Waxaan sii wadi doonaa hirgelinta qorshayaashayada istaraatiijiga ah si aan u horumarinno waddooyinka, waddooyinka socodka, jardiinooyinka, iyo hareeraha waddooyinka, taageeridda ganacsiyada magaalada Woodinville, iyo ilaalinta xaafadaha. Iyadoo aan leeyahay 25+ sanno oo khibrad hoggaamineed ah iyo xididdo qoto dheer oo bulsho, waxaa i taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King, Duqa Magaalada Millman, Ku-xigeenka Duqa Magaalada Randolph, iyo 25+ kale oo ku jira Michelle4Woodinville.com.

### Jeff Lyon



(425) 681-3143
jeff@lyon.vote
lyon.vote

**Waxbarashada:** MBA ee Xisaabaadka, American Military University; BBA, The College of William and Mary

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha, Dimuqraadiga Woodinville; Maareeyaha Injineernimada; Horey Ciidamada Badda ee Mareykanka, Ku-xigeenka Shariifka

**Bayaanka:** Waxaan ahay aabbe, leh xaas, iyo halyeey hore oo u taagan mustaqbalka magaaladayada. Magaalada Woodinville ayaa isbeddelaysa iyadoo ay maamulayaan dowlad mudnaanta siinaysa muuqaalka, ajendayaasha goboleedka, iyo danaha dibadda halkii ay ka horumarin lahaayeen deganeyaasha.

Mudnaantaydu waa *Bulsho Adag*, *Xisaabtanka Badan*, iyo *Gaadiidka Yar*. Waxaan ilaalin doonaa dabeecadda magaalada Woodinville anigoo ku qasbaya isku-darka awoodda wax iibsiga, ilaalinta ganacsiyada yaryar, dhiirigelinta meelaha furan, iyo joojinta qorsheyaasha siyaasadeed ee loogu talagalay guryaha la faquuqay. Waxaan soo celin doonaa mas'uuliyadda maaliyadeed anigoo miisaaniyad dheelitiran, xeer anshax oo la xoojiyay, iyo kharash caqli badan oo mudnaanta siinaya jardiinooyinka xaafadaha iyo amniga halkii laga siin lahaa deeqo aan loo baahnayn horumarinta. Waxaan u dadaalli doonaa in la ballaariyo gaadiidka dadweynaha oo aan ka dhabeeyo in hagaajinnada SR-202 ay u adeegaan deganeyaasha hadda, halkii ay ka abuuri lahaayeen baahi cusub oo ka timaadda horumarinta dhismeyaasha dhaadheer ee cusub.

*Waxaa i taageeray Meeyarradii hore Gary Harris, Elaine Cook, iyo Chuck Price kuwaas oo igu kalsoon inaan soo celiyo dheelitirka, ka-qaybgalka dimuqraadiga, iyo heerarka ugu sareeya ee anshaxa ee dowladda magaalada.*

## Golaha Jagada Lr. 3

### Rachel Best-Campbell



(425) 486-7571
rachel@bestcampbell.com
bestcampbell.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Bayoolajiga Aadanaha oo Diiradda Lagu Saaray Caafimaadka Dadweynaha, Stanford University

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada Woodinville, Hoggaamiye Bulsho, Qoraa

**Bayaanka:** Qoyskaygu waxay si joogto ah ugu noolaayeen Woodinville 25 sanno. Wiilkaygu waxa uu aaday Wellington, Leota, Dugsiga Sare ee Woodinville oo hadda waxa uu dhigtaa kulliyad. Waxaan si mutadawacnimo ah uga shaqeeyay dhammaan 3da dugsi ee awoodaha waxbarasho iyo kuwa ciyaaraha labadaba. Jacaylka aan u qabo Woodinville wuu qoto dheer yahay.

Sida xubinta golahaaga ahaan ayaa u ololaynayaa badqabka lugaynta, horumar waara, la awoodi karo oo magaalada oo dhan, ka caawinaadda ganacsiyada yaryar iyo deganeyaasha arrimaha magaalada. Waxaan ku hoggaamiyey ganacsiyada Old Town dagaalka ay kula jiraan horumarka xad dhaafka ah waxaanan dhammaystiray nidaamka waddooyinka socodka ee Greenbrier iyo Wood Trails.

Waxaan sii wadi doonaa inaan u doodo korriinka macquulka ah aniga oo aan u hurayn dabeecadda gaarka ah ee xaafadahayada. Muhiimaddayda ugu sareysa ayaa ah hagaajinta kaabayaasha oo faa'iido u leh dadka deegaanka, ballaarinta nidaamka gaadiidka dadweynaha , iyo kharashaadka mas'uulka ah si aan uga fogaado kordhinta canshuurta hantida. Waxaan si khushuuc leh kuu weydiisanayaa codkaaga. Taageerooyinka Woodinville: *Meeyarradii hore ee Elaine Cook, Gary Harris iyo James Evans, Woodinville Dimuqraadiga, iyo derisyada welwelsan ee Woodinville (CNW)*

### Amber Wise



wise4woodinville@gmail.com
voteamber.com

**Waxbarashada:** Tababarnimada Hilib Jarista, WeTrain (Waan Tababarnaa)/South Seattle College

**Shaqo iyo Xirfad:** Abaabulaha Siyaasadda/Bulshada, UFCW 300

**Bayaanka:** Woodinville ayaa taagan meel marxalad adag ah, waxaana leenahay doorasho. Waxaan midkood dooran karnaa inaan kobaca na hoggaamiyo oo na qaabeeyo; ama waxaan ku hoggaamin karnaa aragti oo aan wada qabno.

Waxaan ahay hooyo korisa laba carruur ah, Guddoomiyaha Goobaha Dadweynaha, iyo u doode shaqaale oo shaqadoodu kor u qaadayso codadka ku jira dowladda hoose. Waxaan garanayaa sida dadka la isugu keeno si wax loo qabto. Waxaan haysanaa fursado wanaagsan oo aan ku qaabeyn karno bartamaha magaalada cagta lagu mari karo, cagaaran oo u muuquta sida magaalada Woodinville. Waxaan ku faraxsanahay inaan ballaariyo helitaanka dabeecadda iyo xaafadaha iyada oo loo marayo mashaariicda sida Eastrail Trail iyo fursadda xarunta bulshada ee la soo jeediyay ay u keento magaaladeena si aan isugu xirano.

Waxaa i taageeray Dab-damiyeyaasha Woodinville, Duqa Magaalada Mike Millman, iyo Dimuqraadiyiinta Degmada King. Waxaan keenayaa hoggaamin fikir leh, oo loo wada dhan yahay golaha magaalada waxaanan ka shaqeyn doonaa maalin kasta si aan Woodinville uga dhigno meel aan dhammaanteen ku faanno inaan ugu yeerno guri. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Sarah Arndt



(425) 241-6449
info@arndtforwoodinville.com
www.arndtforwoodinville.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Taariikhda, UNC Charlotte, M.A. (Shahaadada Mastarka) Macallinnimada, Western Illinois University, M.Phil. iyo PhD. Taariikh, TCD

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeye Sare oo ka tirsan Ururka Adeegyada Aadanaha ee Waqooyiga Magaalooyinka (The North Urban Human Services Alliance)

**Bayaanka:** Sarah Arndt waxaa ka go'an inay horumariso Woodinville oo barwaaqo ah, oo loo dhan yahay. Sida xubin heellan tan iyo 2022 ahaan, waxay hormuud ka ahayd koritaanka fikirka leh, ballaarinta guryo la awoodi karo, iyo ka shaqeynta horumarinta gaadiidka iyo meelaha dadweynaha. Iyadoo leh asalka waxbarashada, hoggaaminta urur aan faa'iido doon ahayn, iyo u doodista bulshada, Sarah waxay keentaa hab iskaashi oo ku wajahan dowladda magaalada, iyadoo hubinaysa daah-furnaanta iyo ka jawaabidda baahiyaha deriska.

Mudnaanta Sarah waxaa ka mid ah kordhinta guryo la awoodi karo, horumarinta kaabayaasha dadweynaha ee gaadiidka, ilaalinta deegaanka dabiiciga ah ee Woodinville, iyo ballaarinta fursadaha madadaalada. Waxay aaminsan tahay in la isku dheelitiro horumarka iyadoo la ilaalinayo dabeecadda gaarka ah ee magaalada iyo la hubiyo in dhammaan deriska ay helaan guryo degan iyo jardiinooyin firfircoon iyo meelaha dadweynaha.

Hoggaaminteedu waxay ku saleysan tahay dhegaysiga, ka qaybgalka, iyo qaadashada tallaabo si loo dhiso bulsho xooggan. Dib u dooro Sarah si ay u sii waddo shaqada ka dhigaysa Woodinville meel qof walba ku noolaan karo, ka shaqeyn karo, kuna barwaaqoobi karo. Taageerooyinka Keliya: Dab-damiska Eastside IAFF Local 1762, Dimuqraadiyiinta KC iyo Degmada Sharci Dejinta 1aad, hoggaamiyeyaal badan oo la soo doortay iyo deganeyaasha.

### Bobby Amiri



(425) 885-5555
ameri7711@yahoo.com
www.amiri4woodinville.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Sayniska La Adeegsado (B.A.S.) ee Bayoolajiga iyo Kimistariga, *cum laude* — OCU. Shahaado Jaamacadeedka Sayniska (B.S.) ee Injineernimada; Daraasado Heer Sare, UW.

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeye Dallaal Guryo, Iskiis u shaqeyste

**Bayaanka:** Woodinville waxay ku jirtaa xilli muhiim ah. Waxaan u baahanahay hoggaan mudnaanta koowaad siinaya—deganeyaasha, qoysaska, ganacsiyada maxalliga ah, iyo deegaanka. Waxaan ka shaqeyn doonaa ilaalinta waxa ka dhigaaya magaalada Seattle mid gaar ah anigoo horumarinaya korriin caqli-gal ah oo dheellitiran, fursadaha guryaha ee dhammaan da'da, adeegyada badqabka dadweynaha, iyo daah-furnaanta Golaha Magaalada.

Anigu ma ihi siyaasi xirfad leh— waxaan ahay deriskaaga. Waxaan ku noolaa Woodinville muddo 35 sannadood. Aniga iyo xaaskeyga waxaan halkan ku soo korinay todobo carruur, waxaanan doonayaa inaan ilaaliyo bulshadeenna aan dhammaanteen jecelnahay. Anigoo ah maareeye dallaal iyo gorgortamiye, waxaan ka caawiyay kumanaan qoys inay ka gudbaan caqabado adag iyagoo adeegsanaya xalal macquul ah oo caadi ah.

Aynu u qaabeyno mustaqbalkeenna si ula kac ah—hana u oggolaanina korriin aan xad lahayn inay inaga taliso. *Go'aamada aad gaarto ayaa qaabayn doona magaalada Woodinville ee carruurtaadu dhaxli doonaan*. Haddii aad tahay codbixiye markii ugu horreysay, ama aad xididdo qoto dheer ku leedahay bulshadeenna, codkaagu waa muhiim! Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 7

### James Randolph



(650) 260-8025
james4woodinville@gmail.com
james4woodinville.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Sayniska Kombuyuutarka, Southern University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Injineerinka

**Bayaanka:** Waxay ii ahayd maamuus inaan matalo magaaladeena quruxda badan anigoo iga go'an tahay hoggaan bulshada jagada hore dhiga. Muddadii xilkayga ugu horeysay, waxaan la shaqeeyay deriska, ganacsiyada maxalliga ah, iyo wada-hawlgaleyaal goboleedka si aan u helno $21 milyan oo deeqo ah oo loogu talagalay mashaariic muhiim ah. Waxaan sidoo kale u ololeeyay Waddooyinka Socodka iyo Jardiinooyinka Eastrail waxaanan ka caawiyay in saldhigga wareejinta dibadda kaga saaro Woodinville.

Waxaan u tartamayaa inaan ilaalino deegaanka dabiiciga ah, si taxaddar leh u maareyno koritaankeena si aan u horumarinno deegaanka la dhisay, oo aan u kordhino adeegyada maxalliga ah. Waxaan sidoo kale ka shaqeynayaa si loo balaariyo adeegga baska oo nagu xiriirin doona Light Rail—dadaallo yarayn doona taraafikada oo taageeri doona guryaha la awoodi karo.

Waxay noo tahay bilow uun; si wadajir ah waxaan dhabeyn karnaa in Woodinville ay sii ahaato meesha ugu fiican ee lagu noolaado oo aan tallaabo u qaadno waxyaabaha naga dhigi doona kuwo barwaaqo leh, midnimo leh, oo horey u socda. *Waxaa i taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo liis sii kordhaaya oo laga heli karo james4woodinville.com*

### Jaren Hanson



votejarenhanson@gmail.com
votejarenhanson.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda

**Shaqo iyo Xirfad:** Xiriirka Dadweynaha

**Bayaanka:** Woodinville waa meel qurux badan oo ku dhex taal magaalo weynta mashquulka badan ee Seattle oo leh dhul beereed cagaaran iyo xaafado degan. Nasiib darro, dadaal lagu doonayo in lagu qanciyo horumariyeyaasha guryaha, waxaa la hirgeliyay siyaasado sababay dhibaatooyin ba'an oo taraafikada ah iyo ciriiri, kuwaas oo haddii aan si habboon loo xallin, horseedi doona dhibaatooyin waaweyn oo kaabayaasha ah iyo arrimo amni.

Khibraddayda sida sarkaal booliis hore ahaan ayaa i siisay faham toos ah oo ku saabsan badbaadada dadweynaha iyo ilaalinta kaabayaasha. Anigoo ah nin xaasle ah, aabbe ah, iyo muwaadin ku faanaya Woodinville, waxaan doonayaa inaan diiradda saaro ilaalinta waxa ka dhigaaya Woodinville meesha ugu habboon ee lagu noolaado laguna korin karo qoys.

Ka xubinta Golaha Magaalada Woodinville ahaan, waxaan dhagaysan doonaa oo matali doonaa deriskayga si codkooda looga maqlo golaha magaalada oo aan loogu qarin horumariyeyaasha guryaha ee leh jeebabka buuxa.

## Duqa Magaalada

### Aletha Howes

Sawir lama soo gudbin

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Stacy Saal

Sawir lama soo gudbin

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Brad Wheeler

Sawir lama soo gudbin

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Tom Stowe

Sawir lama soo gudbin

pondsailer@msn.com

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Duqa Magaalada

### Joseph D Sabey



**Waxbarashada:** University of Notre Dame

**Shaqo iyo Xirfad:** Sarkaalka Ganacsiga ee Sare - Sabey Corporation.

**Bayaanka:** Sida degane muddo dheer ku nool Hunts Point, waxaan si qoto dheer u daneynayaa ilaalinta dabeecadda gaarka ah ee tuuladeenna anigoo hubinaya inay sii ahaato meel ammaan ah, qurux badan, oo soo dhawweyn leh.

Khibraddayda Guddiga Qorsheynta iyo sida Duqa Magaalada ahaan, waxaan diiradda saaray bixinta hoggaan jawaab celin leh oo daah furan. Waxaa iga go'an inaan ilaaliyo adeegyada ammaanka dadweynaha, ilaalinta deegaanka dabiiciga ah, iyo maaraynta miisaaniyaddeena si mas'uuliyad leh.

Korinta qoyskayga halkan waxay i siinaysaa dan shakhsi ah mustaqbalka Hunts Point.  Waxaa iga go'an inaan hubiyo in tuuladeenna ay sii ahaato guri weyn oo qoysaska loogu talagalay jiilalka soo socda. Waxaan rajeynayaa inaan sii wadno shaqadeena wadajirka ah waxaanan jeclaan lahaa taageeradaada.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Ken Fisher



**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebiyay University of Washington, Shahaadada Jaamacadda Cilmi-Nafsiga

**Shaqo iyo Xirfad:** Maalgelinta Hantida Ma-guurtada ah

**Bayaanka:** Waxaan qadarinayaa fursaddii aan u helay inaan u adeego degganeyaasha Tuulada Hunts Point 16-kii sano ee la soo dhaafay. 14 sano Golaha Tuulada iyo 2 sano Guddiga Qorshaynta.

Waxaan u tartamayaa xilkan si aan ugu sii adeego danihiinna, anigoo la shaqaynaya degganeyaasha, xubnaha Golaha Tuulada, Duqa, shaqaalaha, iyo bulshooyinka deriska ah si aan u ilaalinno joogteynta dawladdeena iyo dabeecadda deggan ee cagaaran ee tuuladeenna. Waa muhiim inaan sii shaqayno gudaha miisaaniyaddeenna, aan canshuuraha hoos u hayno, aan ilaalinno deegaanka, aan si buuxda u maalgelinno booliskeenna iyo waaxyaha dab-damiska, oo aan ka war hayno kaabayaasha. Waxaan sii wadi doonaa inaan idinla shaqeeyo si aan u ilaalinno waxyaabaha macquulka ah oo aan u horumarino kuwa aan sidaas ahayn.

Sharaf bay ii ahaan doontaa inaan helo codkaaga si aan u sii wada shaqayno si loogu ilaaliyo tuuladeenna inay sii ahaato meel cajiib ah oo lagu noolaado sanadaha soo socda.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Ted Frantz



**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Injineernimada Farsamada/Duulimaadka Hawada Sare - Syracuse University, Shahaadada Mastarka - University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Maalgashiga

**Bayaanka:** Afartii sano ee la soo dhaafay, anigoo aha xubin golihiina, waxaan la shaqeeyay golaha iyo duqa si aan u sii wadno dhaqammada Hunts Point isla markaana aan u ilaalinno dabeecaddeeda magaalo-yareed. Sababo la xiriira sharciyo dhawwaan laga ansixiyay Olympia kuwaas oo saameyn doona dabeecadda magaalada, waxaanu sameyn doonnaa inta karaankeennu yahay in aan la tacaalno isbeddelladan khasabka ah ee lagu sameynayo xeerarkeena xeer-nidaaminta dhulka (zoning). Waxaan sii wadi doonaa inaan magaaladeena ku matalo Guddiga Goboleed ee Soo-Kabsashada Salmanka (Regional Salmon Recovery Council), anigoo ka shaqaynaya ilaalinta astaan Waqooyi-galbeed iyo deegaanka aynu ku wada nool nahay.

Waxaan qiimeeyaa welwelkiinna, waxaanan la shaqeyn doonaa duqa iyo golaha si aan uga jawaabno arrimahaas. Haddii mar kale la i doorto, sii wadi doonaa kormeerka maaliyadda magaalada, waxaana mudnaan siinayaa badbaadada dadweynaha iyo dayactirka magaalada.

Mahadsanidiin, waxaan qadarinayaa codkiina.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Jonathan Vossler



**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Maamulka Ganacsiga, Bellevue College

**Shaqo iyo Xirfad:** CEO, Vossler Media Group

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Tuulada Hunts Point si aan ugu adeego degganeyaashayada oo aan uga caawiyo ilaalinta soo jiidashada, nabadgelyada, iyo quruxda dabiiciga ah ee ka dhigta bulshadeenna mid gaar ah. Anigoo ah qof noloshiisa oo dhan ku nool Washington, waxaan si qoto dheer uga walaacsanahay ilaalinta tayada nolosheena anagoo si taxadar leh ugu talagaleyna mustaqbalka.

Khibraddayda ah maamulaha guud ee ku takhasusay hawlaha ganacsiga iyo qorsheynta istiraatijiyadeed waxay ii diyaarinaysaa inaan sameeyo go'aanno xog ogaal ah oo dheelitiran. Waxaan maareeyay miisaaniyado, hoggaamiyey kooxo, oo aan hagay mashaariic adag anigoo adeegsanaya daah-furnaan iyo la xisaabtan. Golaha, waxaan ku dabaqi doonaa xirfadahan si aan u hubiyo in kheyraadka loo isticmaalo si xikmad leh oo faa'iido u leh magaaladeena.

Waxaan aaminsanahay dhegaysiga, wada shaqeynta, iyo isgaarsiinta furan. Mudnaantaydu waa qorsheynta mustaqbalka, ilaalinta ammaanka, iyo kobcinta bulshadeenna oo barwaaqo ah. Hunts Point waa wax ka badan meel lagu noolaado—waa hab nololeed wadaag ah oo leh taariikh hodan ah. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kuu adeego oo kasbado codkaaga.

### Dan Temkin



(425) 351-3030

dan@temkinproperty.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, University of Washington, Cum Laude

**Shaqo iyo Xirfad:** Maalgashade Hanti-ma-guurto.

**Bayaanka:** Waad ku mahadsan tahay kalsoonida aad igu qabtay 14-kii sanno ee aan u adeegayay sida xubinta golahaaga. Waxaan ku noolaa Hunts Point muddo siddeed iyo labaatan sanno ah waxaanan si qoto dheer u qadariyaa tayada nolosha iyo dhaqamada tuuladeenna; waxaan u heellanahay inaan ilaalinayo oo aan horumariyo labadaba. Waxaan sii wadi doonaa inaan taageero maamul maaliyadeed oo wanaagsan anigoo aan kordhin canshuuraha iyo anigoo aan u hurin dayactirka kaabayaasha iyo mashaariicda bilicda. Oo, sida aan horrey u sameeyay, waxaan sii wadi doonaa inaan hoggaamiyo dadaallada lagu horumarinayo goobaha dadweynaha iyo kuwa furan ee bulshadeenna ay ku raaxaystaan sannadaha soo socda. Wakhtigii aan ku qaatay Golaha Magaalada, oo ay la socoto shan iyo afartan sanno oo aan ganacsigayga gaarka ah maamulayay, waxay i qalabaysay xirfadaha iyo khibradda lagama maarmaanka u ah inaan la kulmo caqabadaha iyo fursadaha magaalada afarta sanno ee soo socda. Si ixtiraam leh waxaan kaa codsanayaa codkaaga.

## Duqa Magaalada

### Katy Harris



(425) 243-3009
Katy4Mayor@gmail.com
KatyForYarrowPoint.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga, Stanford University; Casharo ka qaatay Kellogg Graduate School of Management

**Shaqo iyo Xirfad:** Shaqaalaha Dadweynaha, Soo saare, La-taliye, Hooyo

**Bayaanka:** Waxaa sharaf iyo farxad weyn ii ahayd inaan u adeego magaalada Yarrow Point anigoo ah Duqa magaalada. Inta u dhexeysa mutadawiciinta aan caadiga ahayn ee ku jira Guddiyada Beerta, Qorsheynta iyo Wetherill; Golaha naga go'an; iskaashigeenna CHPD ee aadka u karti badan; deganeyaashayada adkaysiga leh ee damiirka leh; iyo shaqaalaheena aan caadiga ahayn, waxaan gaarnay wax badan:

Sanduuqa Boostada ee Bixitaanka, 92aad Hareeraha Waddada, Sally's Alley Dib-u-habeyn, Hoos-u-dhigidda Adeegyada, Guulaha Xawaaraha Dejinta, Istvan's Landing, SUP afar-laabmay, Barnaamijka Tayada Biyaha Harada, Wetherill Advocacy, In ka badan $1M oo maalgelin deeq ah, Kooxda Qorsheynta Cimilada, Habeenada Filimada Sanadlaha ah, Kursiga Wadaagga, Magaalada Geedka, Dib-u-habeynta Pickleball, Sanduuqyada Boostada ee Fort Knox, Instagram, Qorshe Dhammaystiran, Cusbooneysiinta Xeerka Dowladda Hoose ee Aan Horrey Loo Arag, Xalka AV ee u oggolaanaya shirarka tooska ah, si aan u magacaabo dhowr.

Waxaan ku jirnaa wakhti aad u xasaasi ah oo taariikhda degmada, kadib amaro sharciyeed oo khatar ku ah dhaqaalaheena, dabeecadeena, iyo jiritaankeena. Waxaan ballanqaadayaa inaan si daal la'aan ah ugu doodo heerarka iyo mudnaanta sare ee ay deganeyaashu naga filayaan. Waan ku mahadsan tihiin iskaashigiinna.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Greg Hanson

Sawir lama soo gudbin

(425) 598-2131
ghhanson2006@gmail.com

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Charles Porter



(425) 269-1337
charles.h.porter@comcast.net

**Waxbarashada:** Gonzaga University (Xisaabta) & University of Michigan (MBA)

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawlgab Aan Wakhti Buuxa Ahayn

**Bayaanka:** *Hoggaamin la xaqiijiyay. Cod la aaminni karo. Diiradda saaraaya mustaqbalkeena.*

Waxaan ku faraxsanahay inaan u adeego Yarrow Point—sida Madaxweynaha Degmada Biyaha ee Degmada King, Xubin ka tirsan Guddiga Biyaha Roobka, Xubinta Golaha, iyo Meeyar Pro Tem (Ku Meelgaar). Saddex sanno ka hor, waxaad iigu aaminteen inaad ii doorataan Golaha Magaalada, waxaana sharaf ii ahayd inaan idiin adeego.

Waxaan keenay *hab-dhaqan ku saleysan xogta, caqliga guud* oo ku wajahan dowladda hoose. Waxaan ku dadaallaa inaan *dhegaysto marka hore*, barto xaqiiqooyinka, oo aan ku dhaqmo daacadnimo iyo daah furnaan. Waxaan gaarnay horumar dhab ah, laakiin shaqo muhiim ah ayaa naga horreysa: soo celinta adeegga DOT ee Yarrow Point, iska caabinta xadgudubka xeerarka Gobolka, hagaajinta ammaanka taraafikada, iyo maaraynta maaliyadda magaalada si mas'uuliyad leh. Waxaan sii wadi doonaa inaan si adag ugu shaqeeyo magacaaga si aan u ilaaliyo waxa ka dhigaaya Yarrow Point mid wacan oo gaar ah—iyadoo aan u diyaarinayo mustaqbalka. *Si wadajir ah, aan ku sii hayno Yarrow Point mid hore u sii socota.*

## Golaha Jagada Lr. 5

### Brian Vanover

Sawir lama soo gudbin

(701) 997-2376
yptown5@gmail.com

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

# Agaasimaha Degmada Lr. 3

## Tracy Mayclin



(425) 240-4803
TracyforBSDBoard@tracymayclin.com
www.tracymayclin.com

**Waxbarashada:** Qalin-jabiyaha Degmada Dugsiga Bellevue ee Faanka leh; Shahaadada Jaamacadda Washington University ee St. Louis

**Shaqo iyo Xirfad:** Khasnajiga, Golaha PTSA-ga Bellevue; Maareeyaha Xisaabaadka

**Bayaanka:** Degmada Dugsiga Bellevue waxay ku jirtaa xaalad dhaqaale oo adag, iyadoo la kulmaysa kormeerka gobolka sababtoo ah keydka lacagta oo hooseeya iyo kharashaadka oo dhaafaya dakhliga. Waxaan u tartamayaa golaha dugsiga si aan u keeno khibraddayda 20+ sanno ee xisaabaadka si aan u gaaro heerarka maaliyadeed ee ugu sareeya oo aan dib u dhiso kalsoonida. Waxaan ahay qof ku faana inuu ka qalin jebiyay Degmada Dugsiga Bellevue, waalid BSD ah, iyo sarkaal PTSA ah. Waxaan aaminsanahay awoodda isbeddelka ee dugsiyadeenna dadweynaha. Intii lagu jiray tobankii sanno ee la soo dhaafay, waxaan la shaqeeyay macallimiinta, hoggaanka degmada, iyo qoysaska si aan lacag ugu ururiyo taageerada ardayda iyo xoojinta bulshadeenna.

Guddiga Dugsiyada gudaheeda, waxaan ka shaqeyn doonaa sidii loo kordhin lahaa heerka waxbarasho iyo yaraynta farqiga barashada. Waa inaan buuxinnaa baahiyaha gaarka ah ee dhammaan ardaydeenna annagoo adeegsanayna taageero waxbarasho oo la heli karo, taageero luqadeed, iyo habeyno loogu talagalay ardayda wax ku barata siyaabo kala duwan. Waxaan aad uga walaacsanahay heerarka sare ee niyad-jabka, walbahaarka, iyo caqabadaha kale ee caafimaadka maskaxda ee ardaydu la kulmaan. Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan abuurro siyaasad adag oo ku saabsan isticmaalka taleefannada gacanta ee fasallada iyo inaan ka shaqeeyo sidii loo yarayn lahaa saameynta warbaahinta bulshada ee carruurteena.

Wadajir, waxaan uga gudbi karnaa caqabadaha hadda jira oo aan ka dhigi karno Degmada Dugsiga Bellevue mid heer caalami ah.

Waxaa taageeray: Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka ee Washington, Mustaqbalka Wanaagsan ee Dadka Washington, iyo kuwo kale oo badan oo ku yaal tracymayclin.com.

## Marta Trilles



(425) 655-0553
martaforschoolboard@gmail.com
www.martaforbsdstudents.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Dhaqaalaha, University of Valencia; Shahaadada Mastarka ee Suuq-Geynta, ESIC University

**Shaqo iyo Xirfad:** Hoggaamiyaha Hore ee Helitaanka Luqadda, Degmada Dugsiga Bellevue; Xisaabiyahii hore ee Miisaaniyadda

**Bayaanka:** In wiilashaydu ka qalin-jabiyaan Bellevue High waxay ahayd waqti i buuxiyay farxad, rajo, iyo fursad—wakhti ay tahay in uu arday kasta oo degmadayada ka tirsan yeesho. Anigoo ah xubin hadda ka tirsan guddiga dugsiga, maalin kasta waxaan u shaqeeyaa si dugsiyadeennu u bixiyaan taageerada, fursadaha, iyo heer-sarreynta ay ardaydu ugu baahan yihiin inay ku hanaqaadaan. Waxaan hoggaamiyaa anigoo leh ujeeddo: waan dhageystaa, waan tallaabsadaa, waxaanan si aan kala go' lahayn uga shaqeeyaa dhisidda kalsooni, daah-furnaan, iyo iskaashi bulshada dhexdeeda.

Waxaan hormuud ka ahaa jebinta caqabadaha luqadda, anigoo abuuray barnaamijkii ugu horreeyay ee helitaanka luqadda ee degmadu u yeelato qoysaska luqado badan ku hadla—kaas oo hadda noqday tusaale heer-gobol. Anigoo hore u ahaa xakameeye miisaaniyad, waxaan la imaanayaa khibrad maaliyadeed oo hubisa in doollar kasta oo la kharash gareeyo uu horumariyo guusha ardayga, xitaa waqtiyo adag. Korinta carruurteyda afar dal gudahood waxay qaabaysay mudnaantayda ku aaddan qalabaynta ardayda wacyigelin caalami iyo xirfado ay ugu baahan yihiin inay ku guulaystaan adduunka isku xiran ee maanta.

Codkaaga, waxa aynu dhisi karnaa nidaam dugsiyeed oo arday kasta ku hibboobaan, macallin kastana la awoodsiiyo, qoys kastana ka qayb-qaato qaabaynta mustaqbal ifaya.

Taageerada: Bellevue Education Association (Ururka Waxbarashada Bellevue); Degmada King, Dimuqraadiyiinta Degmada 41aad & 48aad; Senatarada Gobolka Wellman & Slatter; Wakiillada Gobolka Thai, Zahn, Salahuddin; Duqa Magaalada Bellevue Robinson iyo Xubnaha Golaha Magaalada Malakoutian, Hamilton, Sumadiwirya; iyo kuwo kale oo badan.

# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Jane Aras



janeforschoolboard@gmail.com
janearas.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada Gaarka ah, UW; Shahaadada Jaamacadda ee Waxbarashada Gaarka ah oo leh Taqasus Cilmi-nafsi, Gonzaga University

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin Hore ee Waxbarashada Guud iyo Midda Gaarka ah; U Doode Bulsho oo ku saabsan Waxbarashada

**Bayaanka:** Waad ku mahadsan tihiin inaad ii doorateen Guddiga Degmada Dugsiga Bellevue sannadkii 2021. Sida waalid, macallin, iyo u doode bulshada, waxaan heellanahay inaan hubiyo in carruur kasta ay hesho waxbarasho tayo sare leh. Intii lagu jiray muddada aan xilka hayay, waxaan diiradda saaray dib-u-dhiska kalsoonida anigoo shaqaaleysiiyay kormeeraha guud ee xooggan iyada oo loo marayo hab iskaashi iyo horumarinta qorshe istiraatijiyadeed oo kor u qaadaya codadka ardayda iyo bulshada.

Waxaan mudnaanta siinayaa daah-furnaanta, sinnaanta, iyo la xisaabtanka, adkaynta isgaarsiinta maaliyadeed iyo la jaanqaadka mudnaanta degmada. Waxaan taageeray hirgelinta barnaamijyada laba-luqadood ee K-12, hirgelinta manhajka ku saleysan xogta, ballaarinta barnaamijyada STEM, iyo horumarinta adeegyada loogu talagalay baahiyaha gaarka ah iyo ardayda heerka sare ah, iyo sidoo kale taageerada caafimaadka maskaxda.

Khibraddayda guud iyo waxbarashada gaarka ah, iyo sidoo kale u doodista sinnaanta, waxay iiga go'an tahay in aan wax ka qabto caqabadaha sida isdhexgalka dhaqanka, takoorka, cagajuglaynta, iyo dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda.

Waxaan ku dadaallaa inaan hagaajiyo xiriirka daneeyayaasha iyo inaan hagaajiyo habraacyada guddiga si aan diiradda u saaro barnaamijyo wax ku ool ah oo natiijooyin leh. Kala duwanaanshaha degmadeena waa hanti awood leh, waxaana aaminsanahay in la sharfo asalka arday kasta iyadoo la taageerayo koritaankooda. Waxaan sii wadi doonaa inaan kor u qaado codadka bulshadeenna oo aan raadiyo xalal faa'iido u leh dhammaan ardayda, anigoo degmada ka dalbanaya inay ka jawaabto natiijooyinka oo aan u doodayo carruur kasta—oo heellan, qalabaysan, oo diyaar u ah inay hoggaamiyaan.

# Sugidda Doorashooyinkeena Si Codeyn Kasta Loo Tiriyo

**Halkan Doorashooyinka Degmada King, hadafkeenu waa inaan qabanno doorashooyin sax ah, sugan, oo la heli karo.**

## Ammaanka Goobta

- Xarunteena waxaa kormeera in ka badan ku dhawwaad 80 kaamirooyinka amniga ah.
- Dadweynaha ayaa naga daawan kara in ka badan 15 kaamiryoonka tooska ah anagoo shaqeynayna inta lagu jiro habeynta warqadda codbixinta.
- Shaqaalaha iyo goobjoogeyaasha waa inay aqoonsi ku soo galaan ugana baxaan goobta looga shaqeeyo warqadaha codbixinta.
- Aagga lagu keydiyo iyo xisaabinta warqadda codbixinta ayaa u baahan aqoonsi iyo mashiinka suulka la saaro labadaba.

## Ammaanka Oonleenka

- Khubaro ku taqasusay amniga internetka oo shahaadeysan ayaa shaqaale ka ah waaxda doorashooyinka iyo IT-ga Degmada King.
- Dhammaan shaqaaluhu waxay qaataan tababarka sannadlaha ah ee ammaanka oonleenka.
- Nidaamyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo xisaabinta codeynta ayaa la kala soocaa si loogu ilaaliyo ammaanka ugu sareeya.
- Nidaamka xisaabinta codeynta waa nidaam gebi ahaanba ah shabakad xiran, kumana xirna internetka.

# Agaasimaha Degmada Lr. 2

## Chinmay Nagarkar



(425) 442-0657
votechinmay@gmail.com
votechinmay.org

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka, Injineerinka Korontada (Shabakadaha Kombuyuutarka), Stanford University, USA

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Sare ee Barnaamijka, Google, Inc.

**Bayaanka:** *Ma Jirto Hibbo Laga Tagaayo*

Sida farsamayaqaan tababar ka helay Stanford oo hoggaaminaya barnaamijyada injineernimada ee Google, waxaan ogahay in waxbarashadu ay furto albaabada. Sida macallin kombuyuutar-sayniska hore ahaan, la-taliye STEM iyo tababarre kubadda cagta, waxaan arkay carruurta oo ku horumaraysa taageero. Gabadheydu waxay ku barwaaqowday barnaamijyada waxbarashada gaarka ah ee Issaquah, wiilkayguna hibadiisa ayaa nagu hoggaamisay inaan guriga wax ku baranno. Hal cabbir dhammaan ma deeqayso, waa kala duwan nahay, laakiin carruur walba waxay mudan yihiin fursad ay ku guuleystaan iyagoo ku tartamaaya garoon siman.

Sida Agaasime ahaan, waxaan dejin doonaa siyaasado mas'uuliyad dhaqaale leh. Kharashka ayaa labanlaabmay shan sanno gudahood, haddana carruur badan ayaa hadda la daalacaya caafimaadka maskaxda iyo dayacaadda waxbarashada. Waxaan si adag ula xisaabtami doonaa nidaamka, anigoo soo celinaya yoolalka ujeeddooyinka degmada oo dhan ee fasallada aan walwalka lahayn, heer sare ee waxbarasho, fikir hal-abuur leh, ka-qaybgalka waalidka, iyo taageerada macallimiinta. Waxaan labanlaabi doonaa maalgelinta tababarka xirfadeed (CTE) oo aan ballaarin doonaa waddooyinka laba-dhibcood si ardaydu ugu qalin-jabiyaan diyaarinta xirfad ama jaamacad.

Xad-dhaafka ardayda waxaa lagu xallin karaa xalal caqli-gal ah. Waxaan ku dadaalli doonaa inaanan u dulqaadan isticmaalka maandooriyaha iyo caga-juglaynta, waxaanan soo afjari doonaa waxyaabaha mashquuliya fasallada si macallimiintu u barraan ardayduna u horumaraan. Dashboard-ka "La Balanqaaday marka loo eego La Fuliyay" oo lagu arko macluumaad cusboonaysiin saddexdii biloodba mar ayaa dhisi doona kalsooni iyo isla xisaabtan dadweyne. Waxaan shaqadayda ku xalliyaa dhibaatooyin adag—aan sidaas oo kale u sameyno dugsiyadeenna. Codee si aad u caawiso in arday walba uu barwaaqoobo!

## Natalie Anderson



(650) 539-8045
ElectNatalieAnderson@gmail.com
electnatalieanderson.com

**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebiyay Dugsiga Sare ee Woodinville

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeye Sare ee Ilaalinta Tayada iyo Xakamaynta, thyssenkrupp Aerospace

**Bayaanka:** Ku dhashay kuna barbaaray Galbeedka Washington, waxaan si qoto dheer ugu xidhanahay bulshada degmada dugsiga Issaquah waxaana iga go'an inaan ka dhabeeyo in dugsiyadeena ay yihiin kuwo ammaan ah, loo dhan yahay, oo horumar leh. In ka badan 20 sanno oo hoggaamin ah dhaqooyinka hawada sare, waxaan keenayaa hab ku saleysan xogta oo natiijooyin leh waxbarashada. Waxaan qadarinayaa qiimaha kala duwanaanta waxaana ka shaqeyn doonaa inaan siiyo arday kasta deegaan waxbarasho oo taageero iyo soo dhawweyn leh. Khibraddayda xirfadeed waxay taageertaa dadaalkayga ku aaddan ballaarinta fursadaha waxbarashada xirfadaha iyo farsamada iyo waddooyinka shaqo ee hal-abuurka leh.

Maadaama aan ahay waalid faan leh oo leh laba arday oo ku jira Degmada Dugsiga Issaquah, waxaan ku qaatay 5tii sanno ee la soo dhaafay inaan iskaa wax u qabso ku sameeyo dugsiga carruurtayda anigoo ah Agaasimaha Guddiga PTA, Macallin Farshaxan, Guddoomiyaha Bandhigga Sayniska, iyo Guddoomiyaha Barnaamijka Akhriska Eagle. Ka qaybgalka degmada dugsiga ee deegaanka ayaa iga caawiya inaan aqoonta wax ku oolka ah u adeegsado arrimaha siyaasadeed ee waaweyn ee degmada soo food saara.

Waxaan kasbaday kalsoonida iyo taageerada ururada iyo hoggaamiyeyaasha deegaanka ee la ixtiraamo: Dimuqraadiyiinta Degmada King; Dimuqraadiyiinta Degmada 5-aad; Ururka Waxbarashada Issaquah; Ururka Waxbarashada Washington; Senatarka Gobolka Victoria Hunt; Wakiilka Gobolka Lisa Callan; xubnaha golaha magaalada ee Renton, Issaquah, Sammamish, iyo Newcastle; Agaasimaha Guddiga Dugsiga Issaquah Matt Coyne; iyo qaar kale oo badan oo ka mid ah hoggaamiyeyaasha bulshada ee degmada. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

# Agaasimaha Degmada Lr. 4

## M Thomas Lazzara



(425) 243-4575
amolazz2006@gmail.com

**Waxbarashada:** Loras College, Dubuque, IA; Ciidamada Badda ee Dalka Mareykanka

**Shaqo iyo Xirfad:** Soo Saaraha WA Life

**Bayaanka:** Ololahani waxa ka go'an in ardayda laga dhigo kuwo diyaar u ah suuqa shaqada iyada oo mudnaanta la siinayo barasho wax-ku-ool ah iyo horumarinta bulsho-shucuureed laga bilaabo Pre-K ilaa fasalka 12-aad. Waxaan aaminsanahay in waxbarashadu ay ardayda qalabayso, kaliya aqoon tacliimeed ma aha ee sidoo kale xirfadaha ay uga baahan yihiin in ay ku kobcaan deegaanada dhabta ah ee nolosha. Intaa waxaa dheer, waxaan aqoonsanahay baahida degdegga ah ee qorshaynta masiibooyinka dugsiyada, gaar ahaan halka ay waxbarashadu kaga kulanto khatarta sii kordheysa ee rabshadaha hubka—*ilmo kasta wuxuu u qalmaa meel ammaan ah oo wax lagu barto*. Ugu dambayn, ilaalinta waxbarasho sinnaansho leh waxay ka bilaabataa barashada hore. Annagoo maalgelinaya aasaasyo adag oo carruurta oo dhan ah, waxaan yarayn karnaa farqiga fursadaha waxaanan dhisi karnaa mustaqbal looga sii wada dhan yahay.

*Birds' Squirms (Gariiryada Shimbiraha)* (563) 940-2019

## Sydne Mullings



(425) 200-5305
info@votesydne.com
votesydne.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Siyaasadda Caalamiga ah, Penn State University; Shahaadada Mastarka ee Isdhexgalka Kombuyuutarka Aadanaha, DePaul University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Guud - Americas Marketing; Shirkadda Microsoft

**Bayaanka:** Aniga oo ah waalid ka tirsan Degmada Dugsiga Issaquah iyo Xubin Guddiga Dugsiga oo hadda xilka haya, waxaan u heellanahay hubinta *Khibrado Waxbarasho oo Heer-sare ah Arday Kasta*. Waan ogahay in waxbarashada dadweynuhu tahay tiirka aasaaska u ah bulsho xooggan oo firfircoon, isla markaana arday kasta uu u qalmo helitaanka barasho tayo sare leh oo u diyaarinaysa guul nololeed oo waarta.

Tan iyo markii aan ku biiray Guddiga Dugsiga 2019, waxaan ka shaqeeyay horumarinta siyaasado kor u qaada guusha ardayga, badbaadada dugsiga, miisaaniyad masuul ah, iyo deegaan waxbarasho oo wax-ku-ool ah oo loo wada dhan yahay. Waxaan falanqeeyay xogta ardayda iyo barnaamijyada degmada si aan u aqoonsado meelaha xoogga leh iyo kuwa u baahan kobcin, waxaanan si joogto ah ula kulmaa ardayda, qoysaska, macallimiinta, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada.

Anigoo leh 18 sanno oo adeeg guddiyo ku jihaysan himilo iyo asal xirfadeed oo ku saabsan maaliyadda, hawlgallada, iyo hoggaaminta, waxaan keenaa waayo-aragnimada iyo go'aan-adayga lagama maarmaanka u ah hagidda caqabadaha iyo kaxaynta horumar joogto ah.

Waxaan ku faanayaa taageerada aan ka helay: Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta 5-aad iyo 41-aad, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Ururka Waxbarashada Issaquah, iyo Kutlada Siyaasadda Haweenka Qaranka ee Washington. Waxaan u heellanahay dhageysiga aragtiyaha kala duwan iyo go'aan qaadasho xikmad leh oo taageerta arday kasta. Waxay ii noqon lahayd sharaf inaan sii ahaado Agaasimahaaga ee Degmada 4-aad. Waxaan si xushmad leh ku weydiisanayaa codkaaga.

# Agaasimaha Degmada Lr. 3

## Angela Meekhof



electangela2025@gmail.com
www.angelameekhof.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka Shaqada Bulshada, University Of Washington; Shahaadada Jaamacadda ee Adeegyada Qoyska/ Bulshada, Michigan State University

**Shaqo** shaqaale bulsho; wakhtigan xaadirka ah waalid guri joog/ mutadawac bulsho

**Bayaanka:** U adeeggida dadka kale waa qiyaam aniga muhiim ii ah. Waxaan tan ku muujiyay shaqadayda sida waalid koriyay carruur, shaqaale bulsho, anigoo taageeraya qaar ka mid ah carruurta iyo qoysaska ugu nugul. Ka shaqeynta sidii agaasime guddiga dugsiga waa sii wadidda dabiiciga ah ee ballanqaadkayga bulshada iyo door ka faa'iideysan doona aragtidayda iyo waayo-aragnimadayda.

Qoyskaygu waxay ku noolaayeen Eastside in ka badan labaatan sanno, waxaanan ku faanayaa inaan carruurtayda wax ku baro Degmada Dugsiga Lake Washington. Waxaan ka qayb qaadanay barnaamijyada muusikada iyo ciyaaraha, waxaan sahaminay waddooyin kale oo waxbarasho heerka dugsiga sare ah, waxaan la tacaalnay caqabadaha adeegyada waxbarashada gaarka ah. Waxaan kaalin firfircoon ka qaatay ururka waalidiinta iyo macallimiinta (PTSA) dugsiyo badan, sidoo kalena waxaan macallin ku-meelgaar ah ahaa intii lagu jiray xilligii cudurka faafay (pandemic). Hadda waxaan si iskaa wax u qabso ka ahay Pantry Packs iyo barnaamijka hagaha Lunch Buddy.

Taageeridda iyo u dabaaldeggidda bulshadeenna kala duwan ee macallimiinta ah, ardayda iyo qoysaskoodu waxay lama huraan u tahay degmadeena inay horumarto, la qabsato oo ay horumarto. Ka agaasimahaaga guddiga dugsiga ahaan, waxaan ka shaqeyn doonaa in la hubiyo in dhammaan codadka la maqlo iyo in siyaasadaha degmada ay ka tarjumayaan baahiyaha kala duwan ee bulshadeenna.

*Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta 1aad, 45aad, iyo 48aad Washington Education Association (Ururka Waxbarashada Washington)-Guddiga Hawlaha Siyaasadda*

## Susan Hughes



(425) 941-7236
electsusanlwsdbrd3@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga, Ganacsiga, University of Arizona; Ka Qalin Jebiyay, Naqshadaynta Gudaha, Harrington College of Design

**Shaqo iyo Xirfad:** Wakiilka Kirada, Kalkaaliye Macallin ee Hore

**Bayaanka:** Anigu waxaan ahay waalid, macallin, iyo xubin ka tirsan bulshada, anigoo in ka badan toban sanno uga soo shaqeeyay Degmada Dugsiga Bellevue sidii kaaliye macallin (paraeducator).

Waxaan si toos ah u arkay waxa ugu muhiimsan **Waxbarashada:** heer sare oo tacliimeed, amniga fasalka, iyo iskaashi daacad ah oo lala yeesho qoysaska. Waxaan taageeraa xuquuqda waalidka, hufnaanta manhajka, iyo diirad saarista waxbarashada tacliimeed - ee aan ahayn waxbarasho shucuur ama mabda' ku salaysan. Ma taageersani fikradda beddelka jinsiga ee dugsiyada. Waxaan u ololayn doonaa miisaaniyad mas'uul ah, barnaamijyo xooggan oo STEM iyo farshaxan ah, taageerada macallimiinta iyo ardayda, iyo horumarinta ilaha caafimaadka maskaxda.

Anigoo leh khibradda taageeridda ardayda, wada shaqeynta waalidiinta, iyo la shaqeynta macallimiinta, waxaan diyaar u ahay inaan u adeego carruurta degmada. Waxaan si xushmad leh kuu weydiisanayaa codkaaga.



# Agaasimaha Degmada Lr. 4

## Aspen Richter



(425) 522-2675
electaspen@gmail.com
electaspen.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga ee Kimistariga, Caltech, iyo Shahaadaynta Dhaqamada Ganacsiga Waara, UCSD

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxweyne Ku-xigeen hore ee Maareynta Badeecooyinka; u doodaha joogtaynta deegaanka ; mutadawac bulsho

**Bayaanka:** Anigoo ah waalid leh saddex arday oo dhigta Degmada Dugsiga Lake Washington iyo ka waalid waxbarashada gaarka ah iyo waxbarashada kartida sare leh ahaan, waxaan keenayaa waayo-aragnimo ballaaran oo nololeed gudaha dugsiyadeena ee jagadaan. Waxaan si qoto dheer oo joogto ah uga qayb qaatay Degmada, anigoo ka shaqeynayay saddex guddi talo-bixin oo Degmada ah, laba PTSA oo dugsi maxalli ah, iyo Golaha PTSA-ga ee heer Degmo. Waxaan u baahanahay agaasimeyaal guddi oo leh xirfado la xidhiidha, xirfado casri ah iyo fikirka "sawirka weyn". Waxbarashadayda isku dhafan ee STEM iyo waayo-aragnimadayda horumarinta softiweerka, maaraynta badeecadda fulinta, iyo sharci-dejinta gobolka iyo hababka sharciyeynta ayaa ku habboon baahidan.

Isbeddelada jadwalka dugsiga sare, waxbarashada gaarka ah, waxbarashada kartida sare leh, iyo kuwo dheeraad ah ayaa qoyskayga iyo kuwo kale su'aal ka keenayaan sida ardaydooda loo taageeri doono. Waa inaan sii wadnaa bixinta waxbarasho heer sare ah oo LWSD ah *dhammaan* ardayda, xitaa iyadoo miisaaniyadaha ay sii adkaanayaan iyo maalgelinta aan la hubin. Inta ugu muhiimsan, waxaan qorshaynayaa inaan ka dhabeeyo Guddiga oo ka jawaabaya oo xiriir la leh qoysaska iyo ardayda.

*Waxaa taageeray afarta kale ee xilalka agaasimaha ee dugsiga Lake Washington iyo dhammaan saddexda duq magaalo ee LWSD.*

*Taageerooyinka waxaa ka mid ah:* Senatarrada Gobolka Stanford, Wellman (Guddoomiyaha Guddiga Waxbarashada Goorta Hore & Waxbarashada K-12); Wakiillada Gobolka Duerr, Thai; Xubinta Golaha Degmada Balducci; 4 Duq Magaalo; 12 Xubno Golaha Kirkland, Redmond, iyo Sammamish; Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 1aad, 41aad, 45aad, 48aad, iyo Degmada King.

## Kim Martin



(206) 702-3770
electkimlwsd4@gmail.com
www.electkim.com

**Waxbarashada:** Maamulka Ganacsiga, Jaamacadda Las Vegas, NV

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar iyo Martigelinta

**Bayaanka:** Carruur kasta waxay mudan yihiin inay helaan barnaamijyo kobcinaya sida farshaxanka, muusikada iyo STEM. Waxaan u tartamayaa inaan ka dhabeeyo in dugsiyadeenu helaan maalgelinta loo baahan yahay si arday kasta uu u haysto fursad uu ku horumaro. Waxaan ka shaqeyn doonaa helitaanka iyo xaqiijinta kheyraadka taageera barnaamijyada dugsiga, dadaallada PTSA, iyo hindisaha waxbarasho—si culayska uusan si buuxda ugu dhicin qoysaska si loo maalgeliyo fursadahaan muhiimka ah.

Qoyskaygu wuxuu Sammamish ku noolaa tan iyo 2017. Waxaan ahay mutadawac firfircoon oo ka tirsan bulshada kaniisaddeenna deegaanka iyo PTSA-ga. Ka waalid ahaan, waxaan hoggaamiyey ilmahayga iyada oo loo maraayo wada shaqeyn, dugsi gaar ah, dugsi guriga, dugsi banaanka iyo waxbarashada dadweynaha—taasoo i siisay aragti ballaaran oo ku saabsan waxa ardayda iyo macallimiintu u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan.

Anigoo leh in ka badan 30 sanno oo waayo-aragnimo hoggaamineed ah oo ku saabsan warshadaha martigelinta iyo mulkiilaha ganacsi yar, waxaan ogahay sida loo maareeyo miisaaniyadaha, loo xalliyo dhibaatooyinka, oo loola shaqeeyo kooxo kala duwan.

Waxaan ahaan doonaa hoggaamiye iskaashi sameeya oo dhegaysta, la shaqeeya qoysaska iyo waxbarayaasha, isla markaana adkeeya iskuulladeenna laga bilaabo gudaha. Waxaan idiin ku shaqayn doonaa si adag—waxaannan ahaan doonaa hoggaamiyihiinna ugu daah-furan uguna isla-xisaabtan badan ee guddiga. Wadajir, waxa aynu dhisi karnaa mustaqbal uu arday kasta taageero helo oo loo diyaariyo guul. Si xushmad leh baan u weydiisanayaa codkaaga.

# Agaasimaha Jagada Lr. 2

## Brian Gaspar



brian@brian4mercerisland.com
www.brian4mercerisland.com

**Waxbarashada:** *Macluumaadka & Farsamada*, SJSU

**Shaqo iyo Xirfad:** *Madaxa Sarkaalka Farsamada*

**Bayaanka:** Magaalada Mercer Island waxay horrey u hoggaamin jirtay dugsiyada gobolka Washington. Hadda, diiwaan gelintu waxay hoos u dhacday 20%, badbaadada ardayda waa la iska indha tiray, iyo waxbarashadu way sii xumaanaysaa—halka kharashkuna uu sii kordhayo. Hoggaanka isla PTA, Golaha Dugsiga, iyo Degmada ayaa ugu yeera arrintaan "si fiican ugu filan". Taasi si fiican uguma filna ilmahayga—ama ilmahaaga.

Waxaan ahay Dimuqraadi, waalid, iyo macallin oo soo kashifay daboolidda dambiile carruur badan wax yeelleeyay halka hoggaanka dugsiga hadda ay doorteen inay ka qariyaan bulshada. Waxaan sidoo kale keenay xalal dhab ah, sida bilaabista fasallo AI oo bilaash ah oo loogu talagalay ardayda magaalada Mercer Island. Waxaan ka tirsanahay Aaminaadda Ilaalinta Goobaha Furan waxaanan dhisay xiriiro u dhexeeya ururada iyo khadadka siyaasadeed si aan u mideeyo waalidiinta, macallimiinta, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada si ay ugu midoobaan waxa ugu muhiimsan: ilaalinta carruurta iyo u diyaarinta mustaqbalka.

Carruurteena waxay u qalmaan degmo ammaan ah, casri ah, oo daacad ah. Waxaan u tartamayaa inaan ardayda ilaaliyo, maaliyaddeena hagaajiyo, oo aan soo celiyo heer sare. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Julian Bradley



julian@bradleyforboard.com
bradleyforboard.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda, Principia College; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, UCLA Anderson School of Management

**Shaqo iyo Xirfad:** Waalid wakhti-buuxa ah & mutadawac; Halyeey hore ee Ciidanka Badda ee Dalka Mareykanka; xirfadle hore ee maaliyadda

**Bayaanka:** Waxaan leeyahay rikoor shaqo oo aan ku shaqeeyo kala duwanaanshaha si aan wax ugu qabto ardaydeenna. Waxaan u soo shaqeeyay anigoo ah Guddoomiyaha Golaha PTA, Guddoomiyaha PTA ee Island Park, tababaraha ciyaaraha, iyo mutadawaciin joogto ah—waxaan gaadhay natiijooyin iyada oo loo marayo iskaashi. Anigoo ah halyeeyga hore ee ciidamada badda ee Mareykanka oo leh shahaadada mastarka ee maamulka ganacsiga iyo taariikh shaqo oo ku saabsan maaliyadda, waxaan keenayaa hoggaan nidaamsan oo daah furan marka ay dugsiyadeena ugu baahan yihiin.

Waxaan mar walba u taagnaa Mercer Island: hoggaaminta mutadawiciinta hindiseyaasha oo ay ku jiraan taageerada jirada disleksiyaha, badbaadada e-baaskiilada, iyo siyaasadda taleefanka gacanta. Waxaan dhisay is-afgarad waalidiinta, macallimiinta, iyo maamuleyaasha, waxaana sii wadi doonaa inaan dalbado heer sare, ammaan, iyo dareen lahaansho dhammaan ardayda.

Dugsiyadeena waxay mudan yihiin hoggaan joogto ah oo mabda' leh, oo ku saleysan adeeg, khibrad, iyo ballanqaad qoto dheer oo loo hayo arday kasta. Waxaan diyaar u ahay inaan hoggaamiyo isla xisaabtan, is-hoosaysiinaya, iyo natiijooyin keenaya. Waxaa si ku faan leh u taageeray  Ururka Waxbarashada Mercer Island, Ku-xigeenka Duqa Magaalada Dave Rosenbaum, Duqii Hore Benson Wong, Agaasimeyaasha Hore ee Guddiga Dugsiga, iyo Xubnaha Golaha Magaalada.

# Agaasimaha Jagada Lr. 4

## Robert O'Callahan



info@robformercerisland.com
rob4mischools.com

**Waxbarashada:** University of Illinois ee Urbana-Champaign; Rice University

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineerka Softiweerka

**Bayaanka:** Waxaan ahay injineer AI, Shirkad bilow ah CTO, iyo macallin saynis, anigoo leh laba carruur oo dhigta Island Park Elementary. Waxaan u tartamayaa guddiga dugsiga si aan u hubiyo in Mercer Island ay sii waddo dhaqankeeda heer-sarreynta tacliineed, iyadoo la jaanqaadaysa baahida arday kasta, isla markaana ay sii ahaato meel ay tacliin adag, dabeecad, iyo bulsho wanaagsan si wadajir ah ugu koraan.

Anigoo ah waalid iyo macallinba, waxaan arkay sida xulashooyinka manhajku u saameeyaan kalsoonida iyo guusha ardayga. Waa in aan dib u eegnaa habkeena xisaabta iyo akhris-qoraalka anagoo adeegsanayna hab-raacyo la xaqiijiyay, ku saleysan caddayn, kuwaas oo kobciya faham qoto dheer oo u diyaariya arday kasta inuu gaaro kartidiisa buuxda.

Qoysasku waxay iskuulladeenna ku aaminaan waxbarashada, badbaadada, iyo wanaagga carruurtooda. Aaminaaddaas waa in si maalmeed ah loo kasbadaa lana ilaaliyaa. Waxaan ka shaqayn doonaa in iskuulladeennu noqdaan kuwo ammaan ah, loo wada dhan yahay, laguna hoggaamiyo daacadnimo. Waa wakhtigii hoggaan lala xisaabtami karo oo dejinaya heer gobol oo lagu daydo, oo dhisa mustaqbal uu arday kasta oo Mercer Island ahi aamini karo.

## Stephanie Burnett



stephanieformischools@gmail.com
stephanieformischools.com

**Waxbarashada:** BS (Shahaadada Jaamacadda) Cilmi-nafsiga Arrimaha Bani'aadamka, Embry-Riddle Aeronautical University; JD (Shahaadada Sharciga), Washington & Lee University; MIHS (1998)

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen ku takhasusay macaamiilada diyaaradaha ee adag, qiimaha sare leh iyo lahaanshaha

**Bayaanka:** Anoo uda dheer deganaa Mercer Island, ka qalin jabiyeye MIHS, iyo ahna waalidka arday dhigata MISD, waxaan si qoto-dheer u daneeyaa guusha dugsiyadeenna. In ka badan toban sano, waxaan isku xilqaamay inaan ka shaqeeyo fasallo kala duwan, oo aan ka qayb qaatay hoggaanka PTA, anigoo dhisaya xiriirro xooggan guud ahaan degmadeenna.

Sida mulkiilaha ganacsi yar iyo qareen, waxaan keenayaa khibrad ballaaran oo ku aaddan falanqeynta siyaasadda, maareynta miisaaniyadda, dhisidda isfaham guud, iyo xallinta dhibaatooyinka. Waxaan u tartamayaa Guddiga Dugsiga si aan u hubiyo in dugsiyadeennu bixiyaan waxbarasho tayo sare leh oo caqabad leh, iyadoo mudnaanta la siinayo wanaagga shucuurta ardayda, la ilaalinayo xasilloonida dhaqaalaha, la mideynayo codadka bulshooyinka kala duwan, lana taageero fasallo loo dhan yahay oo ilmihii walba horumar ku gaarayo.

Degmadeenna ayaa noqota mid ugu xooggan marka qoysaska, macallimiinta, iyo maamulayaasha si daacadnimo leh u wada shaqeeyaan. Waxaan hoggaamin doonaa daah-furnaan, jawaabcelin hufan, iyo aragti fog oo diiradda saareysa ardayda. Waxaa si sharaf leh ii taageeray Ururka Waxbarashada ee Mercer Island, Agaasimayaashii hore ee Guddiga Dugsiga, iyo Xubnaha Golaha Magaalada. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa inaad ii codeyso ee ku aaddan Agaasimaha Guddiga Dugsiga, Jagada 4.

# Agaasimaha Degmada Lr. 1

## Carson Sanderson



(509) 906-1816
electCarsonSanderson@gmail.com
electCarsonSanderson.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Injineerinka ee Cilmi-baarista Hawlaha iyo Injineerinka Maaliyadda, Princeton University

**Shaqo iyo Xirfad:** Kormeeraha Imtixaanka Degmada Dugsiga Northshore; Madaxweynaha, Golaha Waalidiinta HiCap

**Bayaanka:** Anigoo ah hooyo leh laba jinsi ah oo leh afar arday oo leh baahiyo waxbarasho oo gaar ah, waxaan fahamsanahay caqabadaha waalidiinta. Waxaan sannado ku qaatay tabarucaadda dugsiyada, PTAs, iyo Guddiga Waalidiinta HiCap iyo waxbaridda Girl Scouts.

Northshore waa degmo dugsiyeed heer sare waana hoggaamiye goboleed hal-abuur waxbarasho leh, laakiin waxay la kulmaysaa caqabado dhowr ah. Iyadoo aan haysano kormeere guud oo cusub, waxaan u baahanahay guddi dugsi oo leh waayo-aragnimo qoto dheer iyo xiriir adag oo bulshada ah. Waa inaan si wadajir ah uga shaqeyno sidii aan miisaaniyaddeena u dheelitiri lahayn, ugu dagaalami lahayn maalgelinta gobolka dheeraad ah, u dhisi lahayn keydkeena, oo aan u ilaalin lahayn heerka sare ee waxbarashada anagoo taageerayna baahiyaha dhammaan ardayda.

Waxay qaadataa dhammaanteen oo wada shaqeynaya si carruurta iyo qoysaska ay ugu guuleystaan. Waxaan arkay waxa shaqeeya iyo waxa la horumarin karo. Waa inaan si wanaagsan u taageernaa kala-duwanaanshaha maskaxeed ee ardaydeenna, aqoonsiyada dhaqankooda, iyo qaab-dhismeedka qoysaskooda si aan u taageerno caafimaadkooda maskaxeed. Ardayda iyo qoysaska leh luqado kala duwan oo afkooda koowaad ah waa in si wanaagsan loogu caawiyo adeegyada tarjumaadda. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga si aan u difaaco arrimahaan.

Taageerooyinka: Xirfadyahannada Xafiiska iyo Waxbarashada ee Northshore; Ururka Waxbarashada Washington; Degmada Sharci -dejinta 1aad iyo Dimuqraadiyiinta Degmada Snohomish; Senatarka Derek Stanford; Wakiillada Davina Duerr, April Berg, iyo Brandy Donaghy; Duqa Magaalada Mason Thompson; Agaasimaha Guddiga Dugsiga Dr. Jacqueline McGourty; waxaa lagu sii wadi doonaa webseedka.

## Arun Sharma



(425) 287-0067
elect@electarunsharma.com
electarunsharma.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Injineernimada Farsamada, UW Seattle; Shahaadada Jaamacadda ee Injineernimada Farsamada, Jaamacadda Delhi, India

**Shaqo iyo Xirfad:** Farsamo yaqaan Sare (Injineer Sharaf leh) - Boeing

**Bayaanka:** Waxaan ahay injineer, macallin, u doode bulshada, iyo waalid ku faanaya laba Northshore ka qalin-jebiyay—labaduba hadda ka shaqeeya xirfadaha caafimaadka. Waxaan u tartamayaa Guddiga Dugsiga Northshore si aan u taageero horumarinta canuga oo dhan, oo ay ku jiraan barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo kuwa ardayda hibada sare leh.

Waxaan aaminsanahay in la xoojiyo dugsiyadeena dadweynaha iyada oo loo maraayo maalgelin loo siman yahay, mushaharka macallimiinta oo caddaalad ah, adeegyo caafimaadka maskaxda oo balaaran, tacliin adag, helitaan balaaran oo STEAM ah, iyo diyaarinta jaamacadda iyo xirfadaha. Waxaan u ololayn doonaa dugsiyo loo dhan yahay, ammaan ah, oo taageero leh, waxaan maalgelin doonaa macallimiin iyo shaqaale heer sare ah, waxaanan qaadan doonaa go'aanno xog ku saleysan oo ka tarjumaya qiyaamka bulshadeena.

Waxaan taageerayaa miisaaniyad mas'uul ah oo leh isla xisaabtan cad—hubinta in maalgelinta dadweynaha ay horseeddo natiijooyin arday oo la cabbirri karo, oo ay ku jiraan koriinka shucuurta iyo tacliinta, iyo diyaarinta nolosha. Waxaan sidoo kale la shaqeyn doonaa macallimiinta iyo sharci-dejiyeyaasha guud ahaan Washington si aan u dib-u-habeyno qaabka maalgelinta duugoobay ee hore ee asalka ah oo aan u balaarinno waxbarashada aasaasiga ah si ay u daboolaan baahiyaha arday kasta.

Anigoo ka faa’iideysanaayo khibraddayda hoggaamineed ee gaarka ah ee warshadaha gaarka loo leeyahay, waxbarashada sare, adeegga aan faa'iido doonka ahayn, iyo waayo-aragnimada nololeed, waxaan fulin doonaa ballanqaadkayga ah horumarinta canuga oo dhan.
Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-Dejinta 1aad; Senatarrada - Derek Stanford, Manka Dhingra iyo John Lovick; Wakiillada – Shelley Kloba, April Berg, iyo Bandy Donaghy; Xubnaha Golaha – Degmada King Rod Dembowski, iyo Degmada Snohomish Jared Mead

# Agaasimaha Degmada Lr. 4

## Sandy R Hayes



(425) 892-4080
sandyrhayesforschoolboard@gmail.com
sandyhayesforschoolboard.wordpress.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda, University of Washington 1991, JD (Shahaadada Sharciga), University of Washington, 1994

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen, hadda waxaan leeyahay shaqo caddaalad soo celin ah.

**Bayaanka:** Anigoo ah waalid saddex ka qalin-jebiyey dugsiyada Northshore, in aan u adeego Guddiga Dugsiga Northshore lix iyo tobankii sanno ee la soo dhaafay waxay ii ahayd sharaf weyn. Inkasta oo aanu mar walba isku dheelitiray miisaaniyaddeena, haddana weli shaqo baa taalla, oo ay ku jirto u doodista kheyraad maaliyadeed oo loo baahan yahay si arday kasta mid kasta uu ugu hirgalo dugsiga iyo mustaqbalka uu doorto. Waxaan sii wadi doonaa in aan isu keeno codadka waalidiinta, ardayda, iyo macallimiinta si loo bixiyo xirfadaha fikir muhiim ah, hal-abuur, iyo isgaarsiin ee ardaydeennu ay u baahan doonaan kala bar labaad ee qarniga 21-aad, xitaa qarniga 22-aad. Ardaydeennu waa in loo diyaariyaa shaqooyin laga yaabo in aanay weli jirin, adduun si weyn uga duwan kan aynu maanta leenahay.

Waxaan aaminsanahay in arday kasta uu ogaado inuu xubin wax-ku-biirisa uga yahay bulshadeenna, taasna waxay ka bilaabataa in dhammaantood looga hadlo naxariis iyo ixtiraam. Mar walba waxaan ardayda ka dhigay aanna ka dhigi doonaa bartamaha adeeggayga.

Taageerooyinka – Ururada Waxbarashada iyo Xirfadleyaasha Xafiisyada ee Northshore, Dimuqraadiyiinta Degmooyinka 1aad iyo 45aad, Dimuqraadiyiinta Degmooyinka King iyo Snohomish, Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka, mas'uuliyiin badan oo la soo doortay oo maxalli ah, iyo xubno badan oo bulshada ka tirsan

## JoAnn Tolentino



(425) 485-7440
joforschoolboard@gmail.com
votejoann.com

**Waxbarashada:** Wenatchee Valley College, Seattle Pacific University, Taqasus Daaweynta Muusikada

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin muusig oo hawlgab ah, xirfadle iibinta softiweerka, oo xiiseeya horumarinta waxbarashada.

**Bayaanka:** Anigoo ah ayeeyo ka mid ah qoysaska NSD iyo degane muddo dheer, waxaan ku dadaalayaa in arday kasta uu gaaro kartidiisa nidaam dhaqaale ahaan caafimaad qaba. Ka dib markii aan la shaqeeyay baahiyaha gaarka ah iyo dhallinyarada xabsiga ku jirta, waxaan la imid naxariis iyo faham ballaaran oo ku saabsan baahiyaha kala duwan ee ardayda.

Khibraddayda ku saabsan Maamulka, Khatarta, iyo Waafaqsanaanta waa qaybta maqan ee guddiga NSD. Iyadoo ay jirto gaabis dhan $21 milyan, waxaan mudnaan siin doonaa isla xisaabtanka maaliyadeed iyo hantidhawrka si loo hubiyo in lacagaha xaddidan si wax ku ool ah loogu isticmaalo guusha ardayda.

Caddaaladda isboortiga waxay ka dhigan tahay in gabdhaha ay la tartamaan gabdhaha iyo wiilasha ay la tartamaan wiilasha—iyadoo la ilaalinayo daacadnimada tartanka iyo badbaadada ardaydeenna.

Waxaan taageeraa codkaaga, anigoo awood siinaya waalidiinta, macallimiinta, iyo canshuur-bixiyeyaasha si ay u sameeyaan siyaasado. Iyadoo la adeegsanayo go'aanno daah-furan oo bulshada ku saleysan, waxaan qaadan doonaa manhaj kor u qaadaya fikirka muhiimka ah iyo xirfadaha jilicsan. Waa inaan taageernaa macallimiinteena waaweyn oo kor u qaadnaa dhibcaha imtixaanka tijaabada. Iyadoo ku dhawwaad $21,000 arday kasta sannadkii, heer sare waa la gaari karaa. Waa inaan ilaalinaa xakamaynta maxalliga ah ee dugsiyadeena oo aan xasuusnaanaa saameynta dibadda ee laga yaabo inaysan la jaan qaadi karin qiimaha bulshadeenna. Kobaca talooyinka laga helo waajibaadka iyo kooxaha danaha gaarka ah ayaa iska indho-tiri kara baahiyaha maxalliga ah. Go'aamada ku saleysan bulshada waxay ka caawiyaan in siyaasadaha ay ka tarjumaan qoysaskeena. Waalidiinta ayaa si fiican u fahma carruurtooda. *Ku soo dhawoow dugsiyada. Ardayda barwaaqaysan. Wax walba waxay ka bilaabmaan codkaaga.*

# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Kimberlee Kelly



(425) 780-7203
votekellyforschoolboard@gmail.com
kellyforschoolboard.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee waxbarashada, Loyola Marymount University; Shahaadada Macallinnimada; BA (Shahaadada Jaamacadda) Cilmiga Siyaasadda UCLA

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin Shahaadaysan ee K–12 iyo macallin dugsiga goorta hore, khabiir manhajka, iyo tababarre macallin

**Bayaanka:** Sida macallin leh in ka badan 15 sannad oo waayo-aragnimo iyo waalid/u doodaha arday cusub oo soo galaaya Northshore ahaan, waxaan keenni doonaa faham qoto dheer oo ku saabsan caqabadaha iyo fursadaha ay ardayda iyo qoysasku kala kulmaan dugsiyada dadweynaha.

Waxaan u sameeyay *manhajyo loo dhan yahay, adag* oo ka caawiyay ardayda inay xiraan *farqiga waxbarasho ee sannado badan* oo ku saabsan maadooyin kala duwan. Marka laga tago wax baridda, waxaan hoggaamiyey abuurista waaxda cilmiga sayniska kombuyuutarka, hormuud ka noqday hindisaha caafimaadka maskaxda, tababaray macallimiinta guud ahaan dalka oo dhan ee ku aaddan *waxbarid saamayn sare leh oo ku saleysan sinnaanta*, waxaanan ka soo shaqeeyay doorar hoggaamineed heer dugsi iyo degmo.

Ka wakiilkaaga ahaan, waxaan u ololayn doonaa siyaasadaha, dhaqamada, iyo maalgelinta hubinaaya in ardayda iyo macallimiinta Northshore ay guuleystaan—laga bilaabo fasallo yaryar iyo taageerooyinka caafimaadka maskaxda ilaa abuurista jawi waxbarasho oo loo dhan yahay oo soo dhawweynaya *dhammaan ardayda*. Waxaan si aan daal lahayn uga shaqeyn doonaa dib-u-dhiska keydka maaliyadeed anagoo adeegsanayna maalgelin waarta, ee gudaha iyo heer gobol. Waxaan ka shaqeyn doonaa hubinta in ilmo walba uu helo kheyraadka iyo fursadaha gaarka ah ee uu u baahan yahay si uu ugu guuleysto, oo ay ku jiraan helitaanka waxbarashada gaarka ah, farshaxanka, teknolojiyada, iyo xirfadaha diyaarinta jaamacadda iyo shaqada. Waxaan si xushmad leh u codsanayaa codkaaga.

Taageerooyinka: Ururka Waxbarashada Washington (WEA), *ururada shaqaalaha macallimiinta Northshore* (NSEA iyo NEOPA), Dimuqraadiyiinta Degmada 45aad, Senatar Derek Stanford, Xubin Golaha Magaalada Woodinville Michelle Evans

## Lynda Schram



(206) 817-5394
Northshore@voteLynda.com
www.voteLynda.com

**Waxbarashada:** BS (Shahaadada Jaamacadda) ee Fisikiska Universite de Fribourg, Switzerland, Wheaton College,

**Shaqada:** hore: Hewlett Packard, Motorola, Texas Instruments, Macallin. Hadda: Xildhibaan

**Bayaanka:** Da'daydu waa 71, waxaanan deganaa degmadan 35 sano. Waalid firfircoon ayaan ahay oo 5 carruur ah, ayeeyo/awoowe 12, waxaana dhowr ka mid ah awlaaddayda ku jiraan dugsiyada Degmada Northshore. Xubin guddiga PTA ayaan soo ahaa, 25 sanno ayaan wax ka dhigay oo dib-u-eegis ku sameeyay manhajka, waxaanan bixiyay barid gaar ah oo aan ku raaxeystay dhammaan caqabadahaan.

Anigoo ka welwelsan hoos-u-dhaca weyn ee natiijooyinka akhriska iyo xisaabta ee dugsiyo badan, hadda waa lama huraan in si dhab ah diiradda loo saaro *tacliinta iyo manhajka*. Akhrisku waa albaabka waxbarashada. Waxaan la shaqeyn doonaa xubnaha guddiga si aan u helno xalal daboola baahiyaha kala duwan ee ardayda maanta.

Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha ee Gobolka wuxuu ka soo horjeedaa Xuquuqda Waalidiinta, balse wuxuu taageersan yahay in wiilal loo oggolaado musqulaha gabdhaha, qolalka labiska, iyo in wiilal lo oggolaado ciyaaraha gabdhaha. Dowladdeennu waxay khatar ugu jirtaa inay lumiso *balaayiin doolar oo deeqo federaal a*h iyadoo diiddan u hoggaansanaanta xuquuqda federaalka ee Title IX ee nus milyan oo gabdhood. Waalidiinta Degmada Dugsiga Northshore waxa ay haystaan cod xoog leh iyada oo loo marayo agaasimayaasha guddigooda; guddiyada maxalliga ahi waxay adkeyn karaan Title IX waxayna hubin karaan in xuquuqda gabdhaheenna la ixtiraamo.

Waxaan u doodi doonaa *qaybinta masuuliyadda leh* ee kheyraadka dadweynaha*, daah-furnaanta, iyo isla-xisaabtanka* ku aaddan sharciyada iyo siyaasadaha taageera waxbarasho tayo sare leh.

## Agaasimaha Degmada Lr. 2

### Avanti Bergquist



(425) 390-4527
avantibergquist@gmail.com
www.avantibergquist.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Bayoolajiga, Jaamacadda Duke; M.S. Bayokemistari & Bayoolajiga Molikiyuulka, OHSU; M.D., Jaamacadda Louisville

**Shaqo iyo Xirfad:** Dhakhtar Cilmi-nafsiyeedka carruurta, Dhallinyarada, iyo Dadka Waaweyn

**Bayaanka:** Aniga oo ah qof ku faana inuu ka qalin jebiyay Degmada Dugsiga Renton, waalid u ah carruur ku jirta degmada, iyo xaas macallin ka tirsan degmada, waxaa sharaf ii ahayd inaan matalo ardayda iyo bulshada Degmada Dugsiga Renton. Dhab ahaantii ma aysan ahayn dhowr sanno oo fudud, laakiin degmadayada iyo bulshadayadu waxay si wadajir ah isugu soo baxeen si aan ugu dadaalno ardayda iyo shaqaalaha. Waxaan sii wadi doonaa inaan si adag u shaqeeyo si aan u noqdo lammaane iyo xulafo u ah bulshadeenna anagoo ilaalinayna mudnaanta Degmada Dugsiga Renton ee Adeegga, Heer Sare, iyo Sinnaanta. Mid ka mid ah mudnaanta ugu weyn ee aan leeyahay, ka agaasimaha guddiga iyo dhakhtar cilmi-nafsi carruurta ahaan, waa shaqada joogtada ah ee lagu horumarinayo caafimaadka maskaxda iyo waxbarashada bulshada iyo dareenka ee ardaydeenna. Waxaan aad ugu faanayaa iskaashiga bulshada ee gudaha degmadeena ee ardayda Dugsiyada Renton u oggolaanaya inay helaan daryeelka caafimaadka maskaxda. Waxaan si daacad ah u qadarin lahaa taageeradaada si aan u sii wado shaqadaan anigoo ah halyeey heellan oo u taagan arday kasta oo ku sugan Degmada Dugsiga Renton.

## Su’aalaha Soo Noqnoqda ee Codeynta

### ○ Sidee baan u codeeyaa?

Buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga ee tartan walba.

### ○ Ma waxaan isticmaalaa qalin?

Waxaad isticmaali kartaa qalin, qalin qori, qalinka kalarka, ama wax kasta oo si cad u buuxiya goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga.

### ○ Ma inaan ka codeeyaa tartan kasta?

Adiga ayay ku xiran tahay tartannada aad ka codeynayso. Waxaad ka codeyn kartaa hal tartan, laba tartan, ama dhammaan tartannada. Waxaanu xisaabin doonaa codeyn kasta oo aad samayso.

### ○ Maxaa dhacaaya haddii aan fikradayda beddelo ama aan khalad sameeyo?

Xariiq dul mari dookha aadan doonaynin. Markaa ka dib buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga saxda ah.

### ○ Ma inaan warqaddayda codbixinta saxiixaa?

Waa in aad saxiixdo xagga dambe ee bakhshadda soo celinta si warqaddaada codbixinta loo tiriyo. Saxiixaagu uma baahna inuu noqdo mid nidaamsan ama la akhrin karo, laakiin waa inuu u dhigmo saxiixyada aan ku hayno faylkaaga diiwaan gelinta codbixiyaha.

### ○ Sidee baan u soo celiyaa warqaddayda codbixinta?

Waxaad warqaddaada codbixinta ku ridi kartaa sanduuq kasta oo boostada (USPS) waxaa loo baahan yahay inay lahaato shaabadda boostada oo ah Maalinta Doorashada. Waxaad kale oo warqaddaada codbixinta ku soo celin kartaa mid ka mid ah in ka badan 80 sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta ee yaala agagaarka degmada King. Waxaan kugula talinaynaa inaad warqaddaada codbixinta ku soo dirto boostada Jimcaha ka horeeya Maalinta Doorashada ama aad isticmaasho sanduuqa lagu rido inta lagu guda jiro maalmaha ugu dambeeya ee doorashada.

# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Meagan Powell



(425) 524-7514
friendsofmeaganpowell@gmail.com
www.meaganpowell.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Sayniska Bulshada iyo Shahaadada Macallinnimada ee Gobolka Washington, Central Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Qaxwo Sameeye

**Bayaanka:** Waxaan ku soo barbaaray halkan, waxaanan ahay arday ka qalin jebiyay degmada dugsiga Renton. Khibraddayda ardaynimo ayaa igu dhiirigelisay inaan sahmiyo xirfad macallinnimo, iyo khibraddayda ku noolaanshaha magaalada Renton ayaa igu dhiirigelisay inaan u tartamo golaha degmada dugsiga.

Tilmaame muhiim ah oo muujinaya caafimaadka bulshada waa wanaagga dhallinyaradeeda. Marka ardaygu (iyo qoyskooda) si firfircoon uga qayb qaataan nidaamka waxbarashada, natiijooyinka ayaa ka wanaagsan — ma'aha oo keliya ardayda iyo qoysaskooda, balse sidoo kale bulshadeenna inteeda kale.

Waxaan ogahay in guddiga degmada dugsiga ay ku hawlan yihiin xallinta caqabado adag oo sii kordhaaya, laakiin walaacayga, iyo sababta aan ugu tartamayo xilka Agaasimaha Degmada Dugsiga Renton, Jagada 5, waa maqnaanshaha daah-furnaanta, burburka isgaarsiinta, iyo xiriirka sii xumaanaya ee u dhexeeya guddiga dugsiga iyo bulshadeenna. Ma'aha inay sidan ahaato.

Marka la i doorto, diiraddaydu waxay noqon doontaa taageeridda tallaabooyinka saameynta ugu weyn ku leh guusha ardayda, ka dhabeynta in shaqaalaha degmada ay haystaan kheyraadka ay u baahan yihiin, iyo in bulshadeennu ay cod ku leedahay kulanka kasta, saameyn ku leedahay dood kasta, iyo faham cad oo ku saabsan go'aan kasta oo la gaaro.

## Lindsay Jensen



(206) 657-6422
LindsayJensen100@gmail.com
www.JensenForEducation.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Injineernimada Kiimikada iyo Kimistariga, University of Wisconsin – Madison; Shahaadada Sharciga (J.D.), Seattle University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Guud, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Washington

**Bayaanka:** Waxaan si xoog leh u aaminsanahay qiimaha dugsiyada dadweynaha. Carruur walba waa in ay helaan waxbarasho tayo sare leh oo ballaarisa maskaxdooda, u diyaarinaysa xirfadda ay doorteen, kuna xoojinaysa xubnaha bulshadeenna ee dimuqraadiyaddeenna. Ilmo walba wuxuu xaq u leeyahay fursad uu ku guuleysto, ujeeddadaynu waa inaan hubiyo in carruurteenu ay helaan fursadaha ay u baahan yihiin si ay u koraan.

Waxaan la shaqeeyay waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiga ee dugsiga hoose ee carruurtayda si aan u horumariyo hindiseyaal kor u qaadaya waayo-aragnimada waxbarasho ee dhammaan ardayda. Waxaan ka tirsanahay Golaha PTA ee magaalada Renton, anigoo la falgalaya bulshada ballaaran, wax ka qabashada arrimaha degmada oo dhan, iyo u doodista siyaasadaha taageera guusha iyo wanaagga ardayda. Waxaan si toos ah u arkay saameynta ay leedahay ka-qaybgalka waalidka iyo bulshada ee hubinta guusha waxbarasho ee carruurteena.

Waxaan ku jirnaa wakhtiyo aan la hubin oo waxaan wajahaynaa caqabado aan horrey loo arag. Waxaan aaminsanahay inaan la kulmi karno caqabadahaan anaga oo aan u hurin qiyamka bulshadeenna. Wada shaqeyn ahaan, waxaan abuuri doonaa deegaan taageero leh oo adkeysi leh oo u oggolaanaya carruurteena inay ku koraan. Waxaan ahay badeeco ku faan leh oo ka soo baxay dugsiyada dadweynaha iyo qof waalid u ah arday dhigata dugsiyada degmada Renton.

*Taageerooyinka: Wakiillada Gobolka Steve Bergquist, My-Linh Thai; Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 11aad & 41aad, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dhallinyarada Dimuqraadiyiinta Degmada King*

## Agaasimaha Degmada Lr. 1

### Lori Oviatt



(425) 333-5055
lori.oviatt@hotmail.com
www.facebook.com/groups/Oviatt4SchoolBoard

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Waxbarashada Dugsiga Hoose; Shahaadada Mastarka ee Manhajka iyo Teknolojiyadda Waxbarashada; Hoggaaminta WSSDA

**Shaqo iyo Xirfad:** Bixiyaha xalalka waxbarashada, tababaraha hadalka ee shirkadaha caalamiga ah iyo ururada aan faa'iido doonka ahayn

**Bayaanka:** Adeegga dadweynaha ee taageera ardayda iyo qoysaska waa mid ka mid ah qiyamka aan aaminsanahay. Anigoo u tartamaya dib-u-doorasho; ixtiraam iyo mahadnaq ayaa maskaxda ku soo dhacaya. Ixtiraam loo hayo dhammaan shaqaalaha degmada dugsiga, laga bilaabo kuwa nadiifinta ilaa kormeeraha guud, dhammaan codadka ardayda, iyo dhammaan qoysaska dhex mara go'aannada waxbarasho ee waaweyn ee carruurtooda. Mahadnaq adiga; waxaan jeclaan lahaa inaan si shaqsi ah ugu mahadceliyo; bulshada Degmada Dugsiga Riverview (RSD) ee taageertay dugsiyadeenna iyo adeeggayga 20-kii sano ee la soo dhaafay.

Waxbarashada dadweynuhu waa muhiim, waxayna fursado siisaa qof walba. RSD gudaheeda, guddigeennu wuxuu ku faanaa hubinta in go'aamadeenna lagu sameeyo aragti maxalli ah si loo xaqiijiyo inaan ka ilaalinno ardaydeenna iyo shaqaalaheena in ay badbaado iyo caafimaad ku joogaan. Waxaan ku faraxsanahay, oo sharaf ii ah inaan qayb ka noqdo go'aamadan muhiimka ah. Mahadsanid dhammaan kuwa la wadaaga oo sii wada inay codkooda la wadaagaan guddiga.

## Agaasimaha Degmada Lr. 5

### Sabrina Parnell



(206) 255-2117
sabrina@sabrina4schoolboard.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, Xiriirada Dadweynaha, Gonzaga University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Ganacsiga

**Bayaanka:** Sida agaasimaha golaha degmada dugsiga ee 10-kii sanno ee la soo dhaafay iyo degane ku faanaya magaalada Snoqualmie Valley in ka badan 20 sanno, waxaan la taagnaa qoysaska, macallimiinta, iyo ardayda xilliyadii ugu adkaa ee degmada—laga bilaabo carqaladeynta cudurka faafa ilaa halganka socda ee hannaanka miisaaniyadda gobolka Washington.

Waxaan si toos ah u arkay sida adkeysiga uu u egyahay. Waxaan ka caawiyay hagidda go'aannada adag, waxaan diiradda saaray guusha ardayda, waxaanan ka shaqeeyay sidii aan dugsiyadeenna u adkeyn lahaa isla markaana uga jawaab celin lahaa. Laakiin shaqada adag way sii socotaa.

Hadda in ka badan abid, waxaan u baahanahay hoggaan joogto ah oo yaqaana degmadeenna si fiican oo diyaar u ah inuu qaabeeyo mustaqbalkeeda. Waxaa iga go'an xalal wax ku ool ah, wada hadallo daacad ah, maamul daah-furan, iyo in la hubiyo in arday kasta uu helo waxbarashada ay mudan yihiin. Si wadajir ah, waxaan sii wadi doonaa inaan hore u soconno. Ardaydeennu wax ka yar taas ma mudna.

## Agaasimaha Degmada Lr. 1

### Melissa Johnson

Sawir lama soo gudbin

(253) 709-0949
johnsonforstudents@gmail.com
www.JohnsonForStudents.com

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Agaasimaha Degmada Lr. 4

### Gary Fancher



garysvsdschoolboard@gmail.com
site-feyyqf8j6.godaddysites.com

**Waxbarashada:** College of the Canyons; Bellevue College

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Dugsiga; Maamule Hore ee Barnaamijka Microsoft; Maamulaha Siyaasadda iyo Habraaca

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii tahay inaan raadiyo muddo kale oo aan ku sii wado u doodista ardaydeena, qoysaskeena, iyo macallimiinteena guddiga degmada dugsiga SVSD. Iyadoo aan leeyahay siddeed sanno oo adeeg ah, waxaan ka caawiyay ballaarinta maalgelinta Waxbarashada Gaarka ah, ilaalinta shaqaalaheena wanaagsan, iyo hubinta mas'uuliyadda maaliyadeed, taas oo badbaadisay malaayiin canshuur bixiyeyaasha.

Degmadeena waxay ku horumartaa hoggaamin xooggan, macallimiin heellan, iyo la-hawlgaleyaasha bulshada ee ku lug leh. Waxaa iga go'an inaan kordhiyo codka iyo ka-qaybgalka dhammaan daneeyayaasha, waalidiinta, hoggaamiyeyaasha ganacsiga, iyo xubnaha bulshada si go'aamada ay uga tarjumaan aragtideena wadajirka ah. Waxaan taageersanahay himiladeenna iyo aragtideena cusub, casriyaynta dugsiyadeena da'da ah, kor u qaadista ammaanka, iyo dhiirigelinta goobaha waxbarashada hal-abuurka leh.

Anigoo carruurtayda wali ku jiraan dugsiyadeena, waxaan qiimeeyaa iskaashiga adag ee bulshada. Waxaan sii wadi doonaa inaan si wadajir ah ula shaqeeyo qoysaska, shaqaalaha, iyo xubnaha guddiga si aan u hubiyo in arday kasta uu helo kheyraadka iyo fursadaha uu ku guuleysto. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa codkaaga si aan u sii wado dhismaha mustaqbalka halkaas oo arday kasta uu ku barwaaqoobi karo.

## Agaasimaha Degmada Lr. 1

### Jennifer McMaster



voteforjennifermcmaster@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Sayniska Guud ee Ashford University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Qandaraaska

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan u adeego sida Agaasimaha Guddiga Dugsiga ee Degmada Dugsiga Tahoma. Qoyskaygu waxa ay ka mid ahaayeen bulshadaan muddo 35 sanno ah, ninkayga iyo wiilashaydana waa ay ku faanaan in ay Tahoma ka qalin jabiyeen. Waxaan xiriir qoto dheer la leeyahay degmada, anigoo u soo shaqeeyay tabaruc iyo xubin shaqaale heellan in ka badan 20 sanno.

Tahoma waxay leedahay asaas adag, waxaana iga go'an inaan ku dhiso iyada oo aan aqoonsanayo awoodeena wadajirka ah iyo meelaha aan ka hagaajin karno. Waxaan aaminsanahay in aan si wada jir ah ula shaqeyno ardayda, shaqaalaha, iyo bulshada si loo helo xalal sharfaysa taariikhdeena anagoo samaynayna mustaqbalka.

Markaan soo dhawaaneyno sanadguurada 100-sanno ee degmada oo aan fulineyno Qorshahayaga Istiraatijiyadeed ee cusub, waxaan kugu martiqaadayaa inaad ku biirto wada hadalka. Had iyo jeer waxaan diyaar u ahay inaan dhegaysto su'aalahaaga, u dabaaldego guulahayaga, oo aan ka hadlo welwelkaaga. Waad ku mahadsan tahay kalsoonidaada iyo codkaaga Guddiga Dugsiga Tahoma, Jagada 1.

## Agaasimaha Degmada Lr. 2

### Susan Balthaser



Susan4TSD@outlook.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Caafimaadka Shaqada, University of Utah; B.S. (Shahaadada Jaamacadda) Daaweynta Degdegga ah, Jaamacadda Pittsburgh

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Barnaamijka Caalamiga ah ee Deegaanka, Caafimaadka, iyo Ammaanka, Microsoft; Hore EMT-Paramedic

**Bayaanka:** Sida waalidka laba arday oo dugsiyada Tahoma dhigta iyo mutadawac bulsho muddo dheer ah, waxaan si qoto dheer uga walwal qabaa daryeelka carruurteena iyo qoysaskeenna. Taariikhdayda ah EMT-Paramedic-kii hore, tababare dhallinyaro, iyo hoggaamiye Scout waxay ka tarjameysaa ballanqaadka nolosha oo dhan ee adeegga iyo isku xirnaanta. *Waxaan aaminsanahay in arday walba u qalmo helitaanka waxbarasho tayo sare leh, jawi nabdoon, oo si isku dhow loo wada leeyahay.* Marka ardaydu dareemaan in la taageerayo oo la maqlayo, waxay awood u helaan inay koraan, u hanaqaadaan, oo gaaraan awooddooda buuxda.

Anigoo ah Agaasimahaaga hadda ee Guddiga Dugsiga, waxaan ka shaqeeyay in la hubiyo maamul mas'uul ah, miisaaniyad daah-furan, iyo go'aanno naxariis leh oo ku saleysan xog. Waxaan ku faanayaa in aan ka caawiyay ansixinta qorshaheenna istaraatiijiga ah ee 5-sanno—aragtidii ay qaabeeyeen codadka bulshadeenna. *Waxaan sii wadi doonaa shaqadayda ka saaridda caqabadaha—laga bilaabo dhibaataynta ilaa ciriirinta iyo welwelka amniga—si ardaydu ugu mashquuli karaan barashada, koritaanka, iyo u diyaar-garowga mustaqbalka.* Mahadsanid fursadda aad i siisay in aan sii wado adeeggida.

*Waxaa taageeray macallimiinta — Ururka Waxbarashada Tahoma (WEA-PAC)*

## Agaasimaha Degmada Lr. 3

### Ric Lewis

Sawir lama soo gudbin

riclewis@outlook.com

**Waxbarashada:** Brigham Young University, Cilmiga Kombuyuutarka

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineerka Softiweerka

**Bayaanka:** Waxaan ku mahadsanahay fursadda aan ugu adeego Guddiga Waxbarashada. Si joogto ah ayaan indhahayga ugu arkaa daryeelka ay macallimiinta iyo shaqaalaha degmadayadu u muujiyaan carruurteena.

Doorashada iyo qiimeynta sannadlaha ah ee Agaasimaha Guud waa shaqada ugu saamaynta badan ee guddigu qabto. Waxaan ku faanayaa in aan ka qayb qaatay go'aanka guddiga ee lagu magacaabay Dr. Callison inay noqoto Agaasimaha Guud. Isku-darka fikir qoto dheer iyo heerar adag ayaa ka dhigaya qof aad ugu habboon inay hoggaamiso degmadayada.

Sannadkii tegay waxaan degmada u jihaynay wareegyo horumar joogto ah oo xog lagu hago si loo qiimeeyo loona wanaajiyo natiijooyinka ardayda, waxaana cusboonaysiinay diiradda amniga ardayda. Sidoo kale waxaan dib-u-habeyn ku samaynay habraacyadeenna shaqaaleynta, annagoo kordhinnay tayada iyo hufnaanta. Shaqo ayaa weli inoo taalla; weli waxa jira fursado korriin oo ku saabsan natiijooyinka dugsiyada hoose iyo waxbarashada gaarka ah. Anagoo bulshada la kaashanayna, waxaan horumarinaynaa qorshe fog oo wax looga qabto ciriiriga. Waxa kale oo aan ku faraxsanahay fursadaha soo socda ee laga faa'iidaysan doono AI si ay uga noqoto dedejiye waxbarasho.

## Agaasimaha Degmada Lr. 4

### Nina Rose



(503) 729-3927
333ninarose@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Suuqgeynta iyo Ganacsiga

**Shaqo iyo Xirfad:** Mutadawac Bulsho, Halyeey Hore ee Ciidanka, Mulkiilaha Ganacsi Hore

**Bayaanka:** Sida waalid leh laba gabdhood oo dhigta Degmada Dugsiga Tahoma iyo mutadawac heellan ahaan tan iyo 2016, waxaan si sharaf leh ugu adeegey doorka hoggaanka oo ay ku jiraan Guddoomiyaha PTO, tababaraha ciyaaraha dhallinyarada, iyo qaban qaabiyaha dhacdooyinka bulshada. Khibradahan waxay i siiyeen faham xoog leh oo ku saabsan baahiyaha ardaydeena, qoysaskeena, iyo macallimiinteena. Waxaan sidoo kale ahay halyeey dagaal oo ka tirsan Ciidanka Mareykanka oo keena anshax, daacadnimo, iyo ballanqaad qoto dheer oo ku saabsan adeegga.

Waxaan u tartamayaa guddiga dugsiga si aan u hubiyo in arday kasta uu u dareemo ammaan, taageero, iyo dhiirigelin si uu u koro. Waxaan mudnaanta siin doonaa guusha ardayda, waxaan u doodi doonaa taageerada macallimiinta, waxaanan horumarin doonaa hoggaaminta daah furnaanta iyo wada shaqeynta. Waxaan aaminsanahay sinnaanta waxbarashada—hubinta in arday kasta uu helo kheyraadka iyo fursadaha ay u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan.

Haddii aan helo codkaaga, waxaan keenayaa hoggaan dheelitiran, khibrad adduun oo dhab ah, iyo qalbi ku aaddan adeegga guddiga. Aynu wada shaqeyno si aan u abuurno mustaqbal adag oo loogu talagalay dhammaan ardayda Tahoma.

### Kristi Krumperman



**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda: Cilmiga Siyaasadda iyo Taariikhda; Shahaadada Mastarka: Macallinnimada

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Istuudiyo iyo Agaasimaha Dugsiga Goorta Hore ee Ash and Elm

**Bayaanka:** Magacaygu waa Kristi Krumperman, waxaan ahay macallimad heellan iyo maareeyaha ganacsi yar oo ku taqasusay waxbarashada goorta hore carruurta yaryar. Ku dhawwaad toban sanno ka hor, qoyskaygu wuxuu doortay Maple Valley sababtoo ah dugsiyadeeda heerka sare ah. Maanta, laba ka mid ah saddexdayda carruur waxay dhigtaan dugsiyada degmada, taasoo sii xoojisay heellankayga bulshadaan.

Anigoo leh waayo-aragnimo labadaba fasalka iyo maamulka ganacsiga, waxaan keenayaa aragti dhammaystiran oo ku saabsan caqabadaha iyo fursadaha horyaalla dugsiyadeena. Waxaan u heellannahay hufnaanta go'aan-qaadashada, badbaadada ardayda, waxbarashada horumarsan, iyo iskaashiga adag ee dugsiga iyo bulshada.

Carruur kasta waxay u qalantaa deegaan waxbarasho oo ammaan ah, taageero leh, oo diiradda saaraya mustaqbalka. Ka xubin ka tirsan guddiga dugsiga ahaan, waxaan u ololayn doonaa siyaasado fikir leh oo si wadajir ah ula shaqeyn doona waalidiinta, macallimiinta, iyo bulshada si loo horumariyo heerka sare ee dugsiyadeena.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

## Agaasimaha Degmada Lr. 5

### Zach Butala



(757) 513-6849
butalafortahoma@gmail.com
ButalaforTahoma.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Dhaqaalaha Tirakoobka, Akadeemiyaha Ciidanka Badda ee Mareykanka

**Shaqo iyo Xirfad:** Duuliye Diyaaradeed oo Ganacsi, Taliyaha Ciidanka Keydka Badda (ma aha taageero DoD)

**Bayaanka:** Aniga oo ah aabbe saddex arday oo Tahoma dhigta iyo degane muddo dheer ah ee MV, waxaan si qoto dheer uga walaacsanahay dugsiyadeenna iyo bulshadeenna. Waxaa sharaf ii ahayd in aan laba sanno oo isku xiga la i doorto CRES' Volunteer-of-the-Year, waxaana geli doonaa sannadkayga saddexaad ee STMS' Family Support Partner.

Maadaama aan hore u ahaa Taliyaha Keydka Ciidanka Badda, waxaan hoggaamiyey kooxo iyada oo aan ka gudubnay caqabado adag anigoo dhegaysanaya, kalsooni dhisaya, oo wada shaqeynaya. Taasi waa habka joogtada ah, wada shaqeynta, iyo adeegga ku saleysan ee aan u keeni doono guddiga. Waxaan rabaa inaan mideeyo bulshadeenna iyadoo aan ku saleyneyno ballanqaadkeenna wadajirka ah ee ardayda iyo macallimiinta, iyadoon loo eegin kala duwanaanshaheenna.

Ma raadinayo taageerada xisbiyada siyaasadeed, laakiin waxaan raadinayaa taageerada dhammaan Tahoma. Waxaan aaminsanahay in dugsiyadu ay tahay inay na mideeyaan. Iyadoo la adeegsanayo daah-furnaan weyn, wada shaqeyn, iyo ixtiraam, waxaan wajihi karnaa caqabadda/fursadda kasta oo aan sii wadi karnaa hagaajinta Tahoma. Waxaan diyaar u ahay inaan dhegaysto, barto, oo aan u adeego si xushmad iyo ujeeddo leh, ee ku aaddan Tahoma. Taageerooyinka: *Ururka Waxbarashada Washington; Ururka Waxbarashada Tahoma*

### Elizabeth (Liz) Karkoski-Gardner



karkoskigardner.district5@gmail.com
journeytodistrict5.com/elizabeth-karkoski-gardner

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Kalkaalinta Caafimaadka, Lewis-Clark State College. Shahaadada ugu Sareysa Shahaadooyinka Jaamacadda ee Barashada Kalkaalisanimada (Nursing Practice), University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Kalkaalisada Daryeelka Degdegga ah ee Wadnaha iyo Xididdada

**Bayaanka:** Sida guddoomiyaha TES PTO ahaan, fursadaha aan u helay inaan si dhow ula shaqeeyo hoggaamiyeyaasha degmada ayaa iga dhigay mid ka warqaba arrimaha hadda jira, aan ka warqabo isbeddelada miisaaniyadda la xiriira, oo aan si fiican u fahmo aragtida mustaqbalka. Ardayda Tahoma waxay mudan yihiin fursad ay ku gaaraan guusha ugu sareysa ee waxbarasho iyaga oo aan u huraynin wanaagga bulsho/caafimaadkooda nafsiyeed. Waa inay dareemaan ammaan inay aadaan dugsiga iyagoo ah naftooda dhabta ah iyada oo aan la jeesjeesin oo ay hagaan macallimiin iyo shaqaale dareema qiimeyn shaqadooda. Dhismo xiriirro kalsooni leh oo xooggan waxay xaqiijinayaan guusha degmada iyo bulshadeenna.

*Sida Agaasimaha Guddiga Dugsiga Degmada 5 waxaan ballanqaadayaa inaan u doodo arday kasta, macallin kasta, iyo qoys kasta, inaan hubiyo mas'uuliyadda maaliyadeed ee xubnaha bulshadeenna, inaan joogteeyo waajibaadkayga, iyo inaan had iyo jeer dhegaysto anigoo maskax furan leh. Waxaan si sharaf leh ii taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 5aad, Dimuqraadiyiinta Degmada King, iyo Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka.*



## Degmooyinka Ujeeddada Gaarka ah ayaa si **Dheeraad Khaas** u ah

Doorasho kasta, codbixiyeyaasha ayaa awooda inay codkooda ka dhigaan mid la maqlo oo ku aaddan cidda ay jecel yihiin inay ku matalaan heerarka kala duwan ee dowladda. Doorashooyinka maxalliga ah ayaa siiya codbixiyeyaasha fursad ay ku doortaan cidda ku matali lahayd dowladda hoose, ka bilaabato degmada iyo xubnaha golaha magaalada, ilaa iyo duqa magaalooyinka.

Degmooyinka Ujeeddada Gaarka ah waa qaybo khaas ah oo ka tirsan dowladdeena hoose. Degmooyinkani waxay bulshooyinkeena u qabtaan hawlo gaar ah, ka bilaabato jardiinooyinka ilaa iyo korontada. Marka ay codbixiyeyaashu doortaan wakiillada Degmooyinkooda Ujeeddada Gaarka ah, waxay saamayn muhiim oo lagama maarmaan ah ku yeelanayaan bulshadooda.

## Guddoomiye Jagada Lr. 1

### Di Irons



(206) 949-2917
diirons@aol.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno, Bellevue College

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxweynaha iyo agaasimaha shirkad yar oo wax qaybinta oo ay leedahay haweeney

**Bayaanka:** Waxay noqon lahayd sharaf inaan u adeego bulshadeenna, iyo inaan bixiyo hoggaan iyo jihayn sida awoodda Guddoomiyaha Dab-damiska.

Waxaan ku noolaa magaalada Issaquah muddo ka badan 35 sanno. Aniga iyo ninkayga waxaan halkan ku soo korinay labadayda carruur. Dhanka bariga waa meel gaar ah, waxaana nasiib u leenahay inaan halkan ku noolaano, oo aan ku hareeraysanahay quruxda dabiiciga ah.

Sida madaxweynaha iyo agaasimaha shirkad qaybinta walxaha isku-dhafka ah oo guuleysatay, waxaan fahamsanahay muhiimadda ay leedahay bixinta adeeg lagu kalsoonaan karo, mas'uuliyadda maaliyadeed, iyo ilaalinta diyaar garoowga hawlgalka. Khibraddayda shaqo waxaa ka mid ah abuurista iyo kormeerka miisaaniyadaha, kormeerka shaqaalaha, isku dubaridka hawlaha ganacsi ee kala duwan, iyo ilaalinta isgaarsiinta furan. Sida Guddoomiyehaaga Dab-damiska, waxaan ballanqaadayaa inaan sii wado adeegga heerka sare ah ee Degmada Dab-damiska 10 bixiso, iyo inaan sii wado hubinta u hoggaansanaanta iyo ilaalinta kheyraadka dadweynaha. Waxay noqon lahayd sharaf inaan matalo bulshadeenna.  Waxaan si xushmad leh u codsanayaa oo aan uga mahad celinayaa tixgelinta codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Toni Nielsen



**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno ee Maamulka Ganacsiga, AA Suuqgeynta, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Dab-damiska 2024- Hadda, Hawl-wadeenka Rideshare, Mulkiilaha Ganacsi Yar

**Bayaanka:** Waxay ii ahayd farxad inaan u adeego deganeyaasha Degmada Ilaalinta Dabka ee 10 tan iyo markii la ii magacaabay Abriil 2024. Waxaan u tartamayaa inaan buuxiyo 5-ta sanno ee ka harsan muddadan.

Waxaan ahay qof asal ahaan ka soo jeeda Seattle & 40-kii sanno ee la soo dhaafay waxaan ku qaatay beertayda Issaquah. Waxaan ahay hooyo leh 3 wiil oo waaweyn iyo ayeeyo leh 4 wiilal yaryar oo firfircoon. Qoysku aad ayuu ii muhiim yahay. Waxaan si mutadawac ah ugu adeegaa koox samatabixin duurjoog ah oo maxalli ah, mararka qaar waxaan dhalo ku quudiyaa xayawaanno yaryar oo dhogor leh oo kaynta ah oo agoome ah oo la badbaadiyey, ama waxaan dhex maraa qoryo si aan u soo qabto kuuleey-cali banjar dhaawacmay ama madaxa xoor-dubburka uga siibo dhalo mayoonees.

Maadaama aan ahay mulkiilaha ganacsi yar, waxaan leeyahay xiriir adag oo aan la leeyahay bulshadeenna waxaanan rajeynayaa inaan la falgalo kuwa igu xeeran. Waxaan sharaf ii ah inaan ku weydiisto codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 3

### Michael Dowling

Sawir lama soo gudbin

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Ray Mullen

Sawir lama soo gudbin

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Josh Pratt



Prattfd16@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada Seattle Pacific University

**Shaqo iyo Xirfad:** Kabtanka EMS (Adeegga Gurmadka Caafimaadka), Waaxda Dab-damiska ee Kirkland

**Bayaanka:** Muwaadiniinta Kenmore iyo Lake Forest Park, waxaan idinka codsanayaa taageeradiina. Waxaan ahay degane 22 sanno ah oo Kenmore, halkaas oo aniga iyo xaaskayga aan ku korinayno saddexdeena carruur ah. Waxaan ku qaatay dhammaan noloshayda shaqo ee qaangaarka ah sidii adeegaha dadweynaha. 20-kii sanno ee la soo dhaafay waxaan u shaqeynayay sida dab-damiye Magaalada Kirkland, siddeed sanno intaa ka horna sida macallin Degmada Dugsiga Northshore ee Dugsiga Sare ee Inglemoor.

Sida dab-damiye ahaan, waxaan si gaar ah ugu habboonnahay inaan aqoonsado baahiyaha waaxda kobcaysa ee ku jirta kala guurka, iyo inaan ka caawiyo hoggaaminta Dab-damiska Shoreline RFA inta lagu jiro muddadan kobaca. Sida Guddoomiyaha ahaan, waxaan rajeynayaa inaan sii wado heerka adeeg ee aad ka filan karto shaqaale heellan oo xirfadleyaal ah, anigoo ballaarinaya adeegyada la bixiyo si loo hagaajiyo amniga bulshadeenna.

Waad ku mahadsan tahay kalsoonidaada iyo codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Rick Webster



(206) 300-9379
rwebster1000@icloud.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Maamulka Dhismaha, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Xirfadyahan Dhismaha oo Hawlgabay

**Bayaanka:** Hadda waxaan u adeegayaa sida Guddoomiyaha Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King 16 tan iyo 2019.

Waxaan ahaa degane ku nool Kenmore 40 sanno. Waxaan hawlgabay ka dib 45 sanno oo aan ka shaqeynayay dhismooyinka ganacsiga ee aagga Puget Sound. Waxaan u shaqeeyay tababarre mutadawac ah ee labadaba kubadda softball-ka iyo kubadda kolleyga muddo sannado badan ah. Waxaan ka qayb qaadanayay mashaariic badan oo bixiya guryo dakhligoodu hooseeyo. Waxaan aaminsanahay in aan bulshadeenna dib wax ugu siiyo.

Asalka aan ku leeyahay warshadda dhismaha ayaa i siiyay tababar ballaaran oo ku saabsan xiriirka aadanaha iyo xallinta dhibaatooyinka hal-abuurka leh, anigoo indhaha ku haya kharashka ugu dambeeya. Waxaan adeegsan doonaa sannado khibrad ah oo aan ku shaqeynayay si aan u dhiirigeliyo mas'uuliyadda maaliyadeed anigoo raadinayaa in aan kor u qaado heerka adeegga ee degmadeena

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Andy Adolfson



andy.adolfson@gmail.com

**Waxbarashada:** Bellevue Community College, Taliska Dab-damiska iyo Maamulka; Dugsiga Caafimaadka ee University of Washington Shahaadada Xirfadyahan Daryeelka Caafimaadka Degdegga

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Degmada 25 (la magacaabay Julaay 2025); Dab-damis hawlgab ah (38 sanno)

**Bayaanka:** Akhrintaada bayaankan, waxaan runtii aad uga mahad celinayaa wakhti iyo dadaalkaaga aad siisay go'aannada codbixinta; Waxaan rajeynayaa inaan kasban doono codkaaga.

Asalkayga waxa ka mid ah in ka badan 44 sanno oo aan ku jiray adeegga dab-damiska, oo ka bilaabay tabaruce 1981 iyo noqday shaqaale dab-damis si buuxda ah 1985. 35 sanno oo aan shaqeynayay waxaan ka tirsanaa Waaxda Dabka ee Bellevue, halkaas oo aan ka soo gudbay darajooyinka oo aan ku joojiyay ku xigeenka madaxa hawlgallada Sebtembar 2023.

Horaantii sannad waxa aan aqbalay casuumaad ah in aan buuxiyo jago ka bannaan Guddiga Guddoomiyeyaasha, waxaanan hadda doonayaa in aan adeeggayga bulshada u fidiyo hannaanka doorashada . Waayo-aragnimadayda adeegga dab-damiska waxay kabi doontaa tan Guddoomiyeyaashaada kale ee Dab-damiska kuwaas oo gacan ka gaysta khibraddooda muhiimka ah. Waxaan ku dadaalli doonaa inaan ahaado mid la heli karo, furfuran iyo mas'uul maaliyadeed anigoo raadinaya heerka ugu sareeya ee adeegga adiga iyo qoyskaaga. Waad ku mahadsan tahay tixgelintaada.



## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Kristopher Belfield



Belfield4KCFD27@outlook.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Port Angeles, Kulliyadda Peninsula, Shahaadooyinka Warshadaha/Farsamada

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Iibka - Microsoft, Mutadawac Hore FF/EMT/SRT FCFD

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan sii wado inaan u adeeggida sidii mid ka mid ah Guddoomiyeyaasha dab-damiska Fall City. Waxaan si sharaf leh ugu shaqeeyay sidii dab-damis mutadawac ah laga bilaabo 2017 ilaa 2021. Sannadkii 2022, waxaa sharaf ii ahayd in la ii xusho lana ii magacaabo guddoomiyaha.

Ka shaqeynta sidii dab-damis iskaa wax u qabso ah ayaa i siisay aragtiyo aan qiimo lahayn oo ku saabsan baahiyaha waaxdeena iyo caqabadaha ay dab-damiyeyaasheena la kulmaan maalin kasta. Waxaan bartay in mid ka mid ah siyaabaha ugu wanaagsan ee aan ku ilaalin karno bulshadeenna inay tahay inaan taageerno baahiyaha kuwa ugu horreeya ee ka jawaabaya xaaladaha degdegga ah. Waxaan aaminsanahay inaan isku dheelitiri karno baahiyaha waaxda anagoo ilaalinayna wanaagga dhaqaale ee bulshadeenna. Waxaan dhiiragelin doonaa isgaarsiinta furan iyo wada shaqeynta bulshadeenna, dab-damisyada, iyo maamulka si isku mid ah. Wadajir, waxaan hubin karnaa in bulshadeenna ay helaan adeegyada degdegga ah ee ugu wanaagsan ee la heli karo, oo ay taageerayaan hab dhaqaale oo mas'uul ah. Waxaan si xushmad leh ka codsanayaa taageeradaada si aan u sii wado u adeeggida bulshadeenna weyn.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Thomas C Johnston



commissioner@thejohnstons.net

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Fiisigiska, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Mashruuc, Systems Interface, Inc.

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ahayd inaan idinku matalo Guddiga Dab-damiska 26-kii sanno ee la soo dhaafay.

Ujeeddada Guddigu waa in uu kormeero hawlgalka Adeegyada Dab-damiska iyo Adeegyada Caafimaadka Degdegga ah ee bulshada aan u adeegno. Mudnaantaydu mar walba waxay ahayd inaan bixiyo adeegga ugu wanaagsan ee suurto galka ah anigoo xasaasi ka ah kharashaadka la xiriira.

Waan wada ognahay in qiimaha nolosha ee aaggaan uu si aad ah u kordhayo, canshuuraha hantiduna waa qayb weyn oo ka mid ah tan.  Guddigu waxay ku dadaashay inay sii wado maalgelin deggan oo joogto ah oo ku saabsan adeeggan muhiimka ah iyadoo si joogto ah u raadinaysa siyaabo ay u noqoto mid hufan oo wax ku ool ah. Waxaan jeclaan lahaa codkaaga iyo taageeradaada si aan u sii wado hoggaaminta adeeggan muhiimka ah ee dadweynaha. Waad mahadsan tahay!

## Guddoomiye Jagada Lr. 1

### Mark D. Mulich



mdmulich@att.net

**Waxbarashada:** BS SUNY-Brockport, MBA Xavier University, MS Western Governors University

**Shaqo iyo Xirfad:** Falanqeeye Nidaamyada, Costco Wholesale, Inc

**Bayaanka:** Waxaan xilkan la imaanayaa iskudar gaar ah oo ah khibrad ganacsi iyo adeeg gurmad. Dhanka xirfadda, inaan ka shaqeeyay warshadda teknolojiyada macluumaadka in ka badan 35 sano, anigoo taageeraya hawlgallo ganacsi oo fara badan. Intaas waxaa dheer, waxaan 12 sano u adeegay dab-damiye mutadawac ah iyo 15 sano EMT/Paramedic. Isku-darka khibradahani waxay i siisay faham dhammaystiran oo ku-dhaqan ah baahiyaha degmada dab-damiska.

Waxaan ku noolaa Galbeedka Washington sagaalkii sanno ee la soo dhaafay waxaana 6dii sano ee u dambeeyay deganaa Maple Valley iyo degmadeeda dab-damiska. Juun 2024, waxaa la ii magacaabay Guddiga Guddoomiyeyaasha Dab-damiska si aan u buuxiyo boos bannaan, kadib 2 sanno oo aan si firfircoon uga soo qaybgalayay shirarka guddiga anigoo xubin bulsho ah.

Waxaan aad ugu diyaar ahay inaan la hadlo degane kasta oo degmada. Waxaad igala so xiriiri kartaa ciwaankan iimeelka: MMulich@MapleValleyFire.org

### Leslie Hamada



(206) 892-8197
lesliehamada@comcast.net

**Waxbarashada:** Eastern Washington University University of Washington Evergreen State College Shahaadada Hoggaaminta WSSDA

**Shaqo iyo Xirfad:** Iskuduwaha Caawinaadda Degdegga ah Kent United Methodist Church

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan noqdo codka shaqaalaha iyo dadka deegaanka ee Degmada Dab-damiska Maple Valley # 43 laga bilaabo Hobart, Ravensdale ilaa Maple Valley, Covington. Waxaan ka helay caawinaad ka timid shaqaalaha gurmadka degdegga ah. Marka aad dareento inaad ugu xun tahay oo aad u baahan tahay caawinaad, way yimaadaan. Waxaan sii wadi lahaa bixinta adeegyada heer sare ah ee dabka iyo baahiyaha degdegga ah. Maareynta miisaaniyado waaweyn oo aan horey uga soo shaqeeyay shaqooyinkeygii hore ee xirfadeed waxay yareyn doontaa waqtiyada jawaabta ee waaxda iyo heerarka caymiskaaga oo hooseeya. Guddoomiyahaaga waa inuu diyaar u ahaado inuu u hadlo baahiyahaaga haddii loo baahdo, markhaatina ka bixiyo Olympia. Sannad ka hor, waxaan hoggaaminayay KSD Levy oo aad ugu baahnaa in la ansixiyo. Ka dib markii uu laba mar fashilmay, way guuleysatay. Waxaan u adeegay bulshadeenna siyaabo kala duwan muddo sannado badan ah. Waxaa sharaf ii ahayd in la i siiyo shahaadada Muwaadinka Sannadka ee Magaalada Covington

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Russell Calcote



rcalcote4kcfd43commissioner@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Qaybta Cilmiga ee Bayoolajiga, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Dab-damiye

**Bayaanka:** Derisyadayda qaaliga ah,

Waxaan ku faanaya inaan idin ku adeegay sidii mid ka mid ah guddoomiyeyaashiina dab-damiska afartii sanno ee la soo dhaafay, waxaanan qadarin doonaa taageeradiinna si aan u sii wado adeegga. Waxaan ka mid ahaa bulshada Maple Valley tan iyo 2013, markii aan ka bilaabay dab-damiye iskaa wax u qabso/EMT Waaxdii Dab-damiska ee Maple Valley, iminkana sidii degane bulshada weyn ee quruxda badan.

Si weyn ayaan u aaminsanahay muhiimadda ah in waaxdeennu buuxiso baahiyahayaga hadda iyo kuwa mustaqbalka iyadoo weli ilaalinaysa mas'uuliyad maaliyadeed. Dabeecadda bulshadeennu si joogto ah ayay isu beddeshaa, waxaana ka shaqeyn doonaa in waaxdu ay la jaan qaaddo isbeddelkaas. Mahadsanid tixgelintaada, waxaan rajaynayaa inaan ku tiirsanaan karo codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

### Craig Hooper



(206) 817-3019
hoop2878@aol.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Cilmiga Adabka, Maamulka Ganacsiga - WSU. Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno ee Maamulka Dab-damiska

**Shaqo iyo Xirfad:** Dab-damiye Hawlgabay

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho Degmada Dab-damiska ee Degmada King 43. Anigoo ah Guddoomiyaha hadda jira ee D43 7-dii sano ee la soo dhaafay, waxaan ka qayb galay hannaanada go'aan-qaadashada ee u suurto geliyey bulshooyinkeenna adeeg dab-damis oo ammaan ah, wax ku ool ah, isla markaana hufan oo loogu adeego muwaadiniinta aagga Maple Valley, dhammaantoodna kharash macquul ah. Sannado ka hor waxaan qaadannay go'aanka inaan qandaraas la galno Maamul Goboleedka Dab-damiska ee Puget Sound, taas oo noo suurto gelisay in aan casriyeyno qalabkeenna iyo xarumahayaga si aan u siino adeeg ka wanaagsan bulshadeenna iyo shaqaalaheena dab-damiska. Waxaan sii ahaan doonaa ilaaliye wanaagsan oo maalgelintayada ah, waxaanan qaadan doonaa go'aanno ka faa'iideeya adeeggeenna iyo ammaankeena.

Waxaan rajaynayaa inaan sii wato adeegga Guddoomiyaha ee Degmada Dab-damiska ee KC 43, waxaanan codsanayaa taageeradiinna.

## Guddoomiye Jagada Lr. 1

### Brian Robertson



(206) 601-4667
brian.d.robertson66@gmail.com

**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Bayaanka:** Amniga bulshadeenna ayaa ah mudnaantayda ugu sareysa. Waxaan u shaqeeyay KCFD 45 (Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King 45) in ka badan 14 sanno, waxaan fahamsanahay doorka muhiimka ah ee degmada dab-damiska ay ku leedahay ilaalinta nolosha iyo hantida.

Sida Guddoomiyaha Waaxda Dab-damiska, waxaan hubin doonaa in kheyraadka loo isticmaalo si hufan oo mas'uuliyad leh; taageero aan siiyo shaqaalaha dab-damiska, u fududeeyo tababar, qalab, iyo shaqaale ay u baahan yihiin; inaan yareeyo wakhtiyada gargaarka degdegga qaato, ah oo lagu kalsoonaan karo; iyo inaan dhiirigeliyo daah-furnaanta iyo isgaarsiinta furan ee dadweynaha.

Bishii Janaayo, KCFD 45 waxay bilaabeen heshiis adeeg la leh Dab-damiska & Badbaadinta ee Eastside. Waxaan sameyn doonaa dadaalkeyga ugu fiican si aan u matalo dadka degan degmada. Waxaan aaminsanahay in maareynta maaliyadeed ee xooggan iyo kalsoonida dadweynaha. Si wadajir ah, waxaan u joogteyn karnaa adeeg dab-damis oo ah mid jawaab celin leh oo ay la xisaabtami karaan dadka ay u adeegto. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Michael Beard



**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga, Akadeemiyaha Ciidamada Badda ee Dalka Mareykanka, Shahaadada Mastarka ee Cilmiga Adabka, Gonzaga University

**Shaqo iyo Xirfad:** Gaashaanle Dhexe, Waaxda Dab-damiska ee Bellevue.

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ahayd inaan u adeego anigoo ah Guddoomiye muddo lix sanno ah. Waaxdeenu waxay soo martay isbeddelo waaweyn si ay ula jaanqaado bulshadeenna sii kordheysa, waxaana ku faraxsanahay inaan saameyn ku yeeshay go'aannadan.

Waxaan ku dhashay halkan waxaanan ka qalin jabiyay Cedarcrest sannadkii 94. Ka dib markii aan wakhtiga ku qaatay Ciidanka Badda, waxaan ku soo laabtay guriga 2014 si aan carruurtayda u siiyo fursad ay ku koraan halkan.

Waxaan rajeynayaa in aan xirfaddayda iyo khibraddayda u adeegsado in aan hage u noqdo ururkan. Waxaan sidoo kale aqoonsan doonaa taariikhda iyo dhaxalka waaxda dab-damiska ee weyn ee aan dhammaanteen ku tiirsannahay si ay noo ilaaliso. Waxaan idinka codsanayaa inaad tixgelisaan inaad sii wadaan saameynta Degmadeena, oo aad ka dhabeysaan guusha iskaashigeena muddada dheer ee Dab-damiska iyo Badbaadinta ee East Side, iyo cusbooneysiinta Benefit Service Charge (Kharashka Adeegga Dheefta) si loo maalgeliyo Degmadeena. Waxaan rabaa inaan kaaga mahad celiyo taageeradaada labadaba dadaal.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Doug Halbert



(206) 356-3684
halbert172@gmail.com

**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Ku-xigeenka Taliyaha Dab-damiska

**Bayaanka:** Anoo mid ka mid ah Guddoomiyeyaashaada Dab-damiska ee hadda, waxaan leeyahay khibrad tobanaan sanno ah oo ku saabsan hoggaaminta adeegga dab-damiska iyo ballanqaad qoto dheer oo ku aaddan u adeeggida bulshadeenna si daacadnimo, isla xisaabtan, iyo daah furnaan leh. Taariikhdayda xirfadeed waxay ka kooban tahay in ka badan 37 sanno oo aan ku jiray adeegga dab-damiska, halkaas oo aan ka soo kacay darajada dab-damis ilaa ku xigeenka taliyaha, anigoo helay aqoon toos ah oo ku saabsan hawlgallada, tababarka, miisaaniyadda, iyo maaraynta xaaladaha degdegga ah. Khibraddaan waxay i siisay awood aan ku sameeyo go'aanno xog ogaal ah oo dheelitira ammaanka dadweynaha, mas'uuliyadda maaliyadeed, iyo qorsheynta muddada dheer.

Muddadii ugu horreysay ee aan xilka hayay, waxaan mudnaanta siiyay maamul daah furan oo hufan, anigoo hubinaya in codadka dadka magaalada iyo shaqaalaha waaxyaha la maqlo lana ixtiraamo. Waxaan aaminsanahay in go'aan qaadashada wadajirka ah ee fikirka leh, waxaana si dadaal leh uga shaqeeyay inaan ilaaliyo kalsoonida dadweynaha anigoo adeegsanaya isgaarsiin cad iyo wakiilnimo jawaab celin leh. Waxaa iga go'an inaan u ololeeyo dab-damiska ee casriga ah, si wanaagsan loo qalabeeyay, oo ay la xisaabtami karaan dadka ay u adeegaan.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Dominik Faunce



info@votedominik.org

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda iyo Jarmalka; MPA, Maareynta Degdegga ah — labadaba UNC Charlotte

**Shaqo iyo Xirfad:** Shaqaale Dowladeed

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan keeno khibraddayda maamulka xaaladaha degdegga ah ee Woodinville Fire & Rescue si aan uga caawiyo bulshadeenna si ay u noqoto mid adkaysi badan. Waxaan haystaa Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha ee Maareynta Degdegga ah, shahaadooyinka FEMA, waxaana leeyahay lix sanno oo waayo-aragnimo dowladeed ah heer federaal, gobol, iyo degmo. Waxaan ka shaqeeyay Waaxda Amniga Gudaha ee Mareykanka xilligii maamulka Biden, halkaas oo aan ka shaqeeyay hey'ado kala duwan si aan u xoojiyo la xisaabtanka iyo daah-furnaanta dadweynaha. Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan ka qayb geliyo in badan dadka diyaarinta xaaladaha degdegga ah, taageero dab-damiyeyaashayada iyo shaqaalaha xuquuqdooda ay ku abaabullan karaan urur shaqaale, iyo inaan ka caawiyo hagaajinta isku-duwidda magaalooyinka, degmooyinka dab-damiska ee ku dhow, Degmada King, iyo gobolka Washington si loo ilaaliyo bulshadeenna.

Taageerayaasha waxaa ka mid ah Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Degmada 1aad ee Sharci Dejinta, Wakiillada Shelley Kloba iyo Davina Duerr, Dimuqraadiyiinta Dhallinyarada ee Degmada King, iyo Ku-Xigeenka Duqa Magaalada Woodinville James Randolph.

### Ryan Blakemore



(425) 518-1768
Reblakemore@gmail.com
voteblakemore.com

**Waxbarashada:** Ka qalin jebiyay Dugsiga Sare ee Woodinville; waxaanan afar sanno dhigtay Central Washington University anigoo daba joogay waxbarasho sare.

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha iyo hawl-wadeenka ganacsi, yar, oo qoys leeyahay ee deegaanka.

**Bayaanka:** Woodinville waa magaaladayda hooyo. Halkan ayaan ku barbaaray, waxaana hadda isla bulshada aan jeclahay ku korinayaa qoyskeyga. Waxaan u tartamayaa Guddoomiyaha Dab-damiska & Badbaadinta si aan u hubiyo in degmadayadu sii ahaato mid si wanaagsan u diyaarsan, si fiican loo shaqaaleeyey, isla markaana si hufan uga jawaabta baahiyaha sii kordhaya ee derisyadeenna.

Anigoo leh asal hoggaamineed oo ganacsi yar, waxaan la imaanayaa mas'uuliyad maaliyadeed, qorsheyn istiraatiiji ah, iyo ballanqaad adag oo ku aaddan badbaadada dadweynaha. Mudnaantaydu waa taageerida dab-damiyeyaasha iyo shaqaalaha gurmadka degdegga ah, annagoo siinayna kheyraadka, tababarka, iyo qalabka ay u baahan yihiin, iyadoo la ilaalinayo daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka canshuur-bixiyeyaasha aan u adeegno.

Waxaan aaminsanahay korriin fikir-leh, iskaashi xooggan oo lala yeesho degmooyinka deriska, iyo qorsheyn gurmad oo firfircoon si loo wajaho caqabadaha sida khatarta dababka duurka iyo kororka dadka. Woodinville waxay u qalantaa hoggaan dhegaysta, sii qorsheeya, kana dhigaya badbaadada bulshada mudnaanta koowaad—anigana waxa iga go'an inaan hoggaankaas bixiyo.

## Guddoomiye Jagada Lr. 1

### Peter Zevenbergen



(425) 765-5429
peter@zevenbergenforcommissioner.com
www.zevenbergenforcommissioner.com

**Waxbarashada:** University of Washington, BA (Shahaadada Jaamacadda), Foster School of Business

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliyaha Amaahda iyo Hoggaamiyaha Laanta

**Bayaanka:** Tan iyo markii la i magacaabay Jagada #1, waxaa iga go'nayd inaan ku adeego, bixiyaha khidmadaha. Diiraddaydu waa in la bixiyo biyo nadiif ah, nidaam bulaacadeed oo ammaan ah oo lagu kalsoonaan karo, iyo in la ilaaliyo aragti fog oo ku saabsan caafimaadka iyo badbaadada bulshadeenna. Waxaan mudnaanta siinayaa maareyn masuul ah oo kharash-wax-ku-ool ah oo adeegyada (utilities) ah si aan u kasbado kalsoonidaada uguna ilaaliyo deegaanka.

Sannadkii aan idin u adeegayay waxaan bartay in doorka degmadayada adeegga uu ka baxsan yahay keliya biyaha—wuxuu lama huraan u yahay badbaadada dabka, jawaabta xaaladaha degdegga ah, iyo fayadhowrka. Qorshayn mustaqbal fog (tobannaan sano) ayaa lama huraan u ah la qabsiga koritaanka iyo hubinta dayactirka joogtada ah ee kaabayaasha. Waxaan u heellanahay hoggaan fikir-leh, mustaqbal-u-jeedda si loo daboolo baahiyaha bulshadeenna maanta iyo berriba.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Suzi O'Byrne



(206) 650-8034
suziobyrne@comcast.net
suziobyrne.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Ingiriiska - University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Kormeeraha Isgaadhsiinta ee 911 Hawlgabay - Booliis- Dab-damiska - EMS

**Bayaanka:** *Fadlan dib ii dooro sidii wakiilkaaga Guddiga Guddoomiyeyaasha CCUD!*

Waxaan si xooggan ugu heellanahay u hoggaansanaanta tayada biyaha, horumarinta kheyraadka, iyo adeegyo lagu kalsoonaan karo oo kharashkoodu uu hooseeyo adiga dartaa! Dayactir dhammaystiran oo kaabayaal iyo dabeecad adeeg dadweyne oo togan waa sifooyin laga filayo CCUD. Waxaa iga go'an in aan la mid noqdo ama aan ka bato filashooyinkaas anigoo matalaya bixiyeyaasha khidmadaha degmada.

Anigoo ah qof ku dhashay Puget Sound oo ku nool Newcastle in ka badan 50 sanno, waxaan bilaabay tabaruc ahaan Guddoomiyaha Jardiinooyinka ee Newcastle (2007–2011). In ka badan 18 sanno ayaan u tabarucayay Magaalooyinka Newcastle iyo Bellevue. In ka badan 30 sanno oo waayo-aragnimo ah oo Kormeeraha 911 ah ayaa mar kale iftiimisay muhiimadda sahay biyo lagu kalsoonaan karo oo qof walba gaarta! Waxaan soo dhawweynayaa mas'uuliyadda sii socota ee ilaalinta qiimayaasheenna hoose iyo tayada kaabayaasha oo sarreysa, annagoo isla mar ahaantaas buuxinayna baahiyaha deegaanka iyo dalabaadka kororka dadka iyo horumarinta ee degmadayada!

## Guddoomiye Jagada Lr. 3

### Kim William Lane



(425) 765-2852
lanekim841@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga, Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, P.E.

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawlgab - Injineer, Maareeyaha Mashruuca & Dhismaha

**Bayaanka:** Sida guddoomiye ahaan, shaqadaydu waa inaan matalo bixiyaha qiimaha / macaamiilka maamulka Degmada Adeegyada Tamarta ee Coal Creek. Si kasta oo adeeggu si wanaagsan loo maamulo, waa muhiim in macaamiisha la matalo marka laga hadlayo maaliyadda iyo hawlaha ururka.  Tan iyo markii aan qabtay xilka guddoomiyaha sannad ka hor, tani waxay ahayd diiraddayda ugu weyn ee go'aan kasta.

Waxaan ku noolaa magaalada Newcastle in ka badan soddon sano, waxaan soo koriyey qoys, waxaanan ku raaxaystay abaalmarinno gaar ah oo aaggaan bixiyo, waxaanan ahaa oo welina ahay macmiil ka tirsan Degmada Adeegyada Tamarta ee Coal Creek.    Khibrad hore oo ku saabsan injineernimada iyo maamulka gudaha adeegyada la nidaamiyay waxay i siisaa waayo-aragnimo aan ku fahmo arrimaha saameeya go'aamada la qaadanayo.   Degmada Adeegyada Tamarta ee Coal Creek waxay si adag uga shaqeysaa inay biyahaaga ka dhigto kuwo ammaan ah iyo inay qiimahaaga hoos u dhigto intii suurtagal ah, waxaana ka caawiya guddoomiyeyaasha inay hubiyaan in tani sii socoto.




## Ku codee afka Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, ama Fiyatnamiiska!

**Waxaad isku qori kartaa inaad hesho warqaddaada codbixinta iyo dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqadda dookhaaga ah.**

Hal mar isku qor oo dhammaan doorashooyinka mustaqbalka waxaad heli doontaa:

- warqadaha codbixinta,
- buug-yaraha codbixiyeyaasha,
- warqadaha iyo isgaarsiinta,
- adeegga macaamiisha (taleefan/ iimeel), iyo
- agabyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo waxbarashada

Booqo **kce.wiki/languages** si aad isku qorto maanta!

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Pete Eberle



(425) 681-9715
mtcphe@msn.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Issaquah iyo Dugsiga Injineernimada Badda ee Calhoon MEBA

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxa Injineerka  Badda oo saaran Doonyaha Rakaabka ee Gobolka Alaska

**Bayaanka:** Waxaan degane ka ahaa aagga aan la midoobin ee Degmada King oo ku yaalla aagga adeegga ee Degmada Biyaha 90 muddo 66 sanno ah. Waxaan daawaday bulshadeenna oo koraysa sannadihii la soo dhaafay waxaana aad uga warqabaa caqabadaha horyaalla bulshadeenna. Waxaan la shaqeeyay dhowr kooxood oo bulshada ah kuwaas oo dhiirrigeliya ka-qaybgalka bulshada la leh dowladaha hooseiyo bixiyeyaasha adeegyada.

Markii ugu horraysay waxaa la iigu doortay Guddiga Agaasimayaasha ee Degmada Biyaha ee Degmada King–90 sannadkii 2019 waxaana dhammeystay muddadii ugu horreysay ee lixda sanno ahayd. Waxaan u arkaa guddigeenna inay yihiin koox la shaqeysa maamulka si ay macaamiisheena ugu bixiyaan adeegga ugu wanaagsan ee qiimaha hadda lagu dalaco. Waxaan sidoo kale aaminsanahay in aan nidaamyadeenna iyo kaabayaasha dadweynaha ku hayno xaaladda ugu wanaagsan ee suurtogalka ah si aan u siino adkeysiga iyo adeeg la isku halleyn karo. Waxaan leenahay waajib ku aaddan bulshadeenna oo ah inaan hoggaamino dadaalladan. Dabcan ma aanan sameyn karin dhammaan tan taageerada dadweynaha la'aanteed.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Patrick C Stanton



pcsmontis@outlook.com

**Waxbarashada:** B.S. (Shahaado Jaamacadeedka) Shahaadada Mastarka ee Injineernimada Madaniga Injineernimada Deegaanka, MBA

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliye

**Bayaanka:** Anoo musharax u ah Guddoomiyaha Biyaha, waxaan leeyahay go'aan adag oo aan ku ilaalinayo kheyraadkeena ugu muhiimsan—biyaha. Iyadoo la fahmayo kaabayaasha iyo xiisaha mas'uuliyadda, waxaan ujeeddadayda tahay inaan hubiyo biyo nadiif ah, ammaan ah, oo la heli karo oo qof walba gaara. Habkayga wuxuu isku daraa aragti fog oo daah furnaan iyo ka-qaybgalka bulshada, isagoo mudnaanta siinaya ilaalinta, waaraanshaha, iyo hufnaanta. Waxaan aaminsanahay in aan dhegaysto deganeyaasha, la shaqeeyo deriska, oo aan maalgashado teknolojiyadda suga mustaqbalkeena. Waxaan diyaar u ahay inaan u adeego si daacadnimo leh, mas'uuliyadda deegaanka aan ilaalinayo, iyo inaan nidaamyada biyaha aan ka dhigno kuwo adkaysi leh oo lagu kalsoonaan karo.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Marenah Ryan



**Waxbarashada:** Waxaan diyaarinaya Shahaado Jaamacadeedka Falanqaynta Xogta, Bellevue College; Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Jimicsiga, University of Tennessee

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamule, Degmada Biyaha ee Degmada King 123

**Bayaanka:** Waxaan si sharaf leh ugu adeegay degmadayada biyaha ee maxalliga ah in ka badan hal sano, waxaanan helay waayo-aragnimo toos ah oo ku saabsan hawl-maalmeedka iyo qorshaynta muddada-dheer ee sii wadda nidaamkeena biyaha ee si habsami leh u shaqeeya. Waxaan ku dadaalaya in la hubiyo adeegyo biyo oo lagu kalsoonaan karo, ammaan ah, oo la awoodi karo oo loogu adeego bulshadeenna. Tani waa bulshadeenna, biyahaheenna, iyo mustaqbalkeenna. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan sii wado u adeegidda bulshadeenna.



## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Aleksandra Kachakov



A.D.Kachakov@outlook.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga (MBA), Cleveland State University; Shahaadada Mastarka ee Cilmiga Adabka, Jaamacadda Veliko Tarnovo.

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliye Sare, Slalom

**Bayaanka:** Waxaan leeyahay in ka badan 20 sano oo waayo-aragnimo ah oo ku saabsan horumarinta, maareynta, iyo la-talinta ururo balaaran oo kala duwan. Waxaan u adeegay Adeegyada Tamarta ee Magaalada Bellevue anigoo hoggaaminayay kooxaha maamulka, adeegyada macaamiisha, iyo istiraatiijiyadda shirkadaha. Waxaan leeyahay khibrad sare oo ku saabsan xallinta dhibaatooyinka adag, hagaajinta adeegyada, taageeridda macaamiisha, hagaajinta maalgashiyada, iyo dhisidda kalsoonida dadweynaha.

Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan sii wado u adeegida Degmadaada Biyaha ee Woodinville *si aan bulshadayda si macno leh dib wax ugu celiyo*. Geynta adeegyada biyaha iyo bullaacadda oo ammaan ah oo lagu kalsoonaan karo ayaa muhiim u ah caafimaadka dadweynaha iyo tayada nolosha. Bixinta adeegyada muhiimka ah waxay u baahan tahay maarayn mas'uuliyad leh, wax ku ool ah, iyo hufnaan leh ee kaabayaasha, filashooyinka macaamiisha, iyo iskaashiga goboleedka.

*Iyadoo aan leeyahay asalka maamulka adeegyada biyaha iyo la-talinta ganacsiga, waxaan Guddiga Guddoomiyeyaasha keeni doonaa aragti qiimo leh oo kala duwan iyo taageeridda Degmada si ay u gaarto hadafkeeda. Waxaan si qushuuc leh u weydiisanayaa codkaaga.*

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Ryika Hooshangi



(425) 224-6008
Ryika@outlook.com

**Waxbarashada:** Catholic University of America, JD (Shahaadada Sharciga); George Washington University, BA (Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka)

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen

**Bayaanka:** Anigoo ah deggane muddo dheer ka tirsana Sammamish iyo Guddoomiyehaaga hadda jira, waxaa iga go'an in bulshada loo hubiyo adeegyo biyo iyo bulaacado oo ammaan ah, oo lagu kalsoonaan karo, oo la awoodi karo. Anigoo leh asal ballaadhan oo ku saabsan siyaasadda dadweynaha iyo sharciga, waxaan keenayaa khibradda looga baahan yahay in lagu wajaho caqabadaha si Degmadu ay u sii ahaato hormuud goboleed oo bixisa adeegyo biyo iyo bulaacado oo tayo sare leh.

Waxaan sii horumarin doonaa mas'uuliyadda maaliyadeed iyo deegaan marka ay soo baxaan caqabado sida maareyn mas'uuliyad leh oo biyaha ah, korriinka goboleed, iyo ilaalinta biyo-cabid ammaan ah annagoo ka difaacayna sahayda biyaha wasakhaha, isla markaana ku maalgelinayna teknolojiyadda casriga ah ee daaweynta ee buuxisa heerarka ugu sarreeya.

Waxay ii ahayd farxad inaan u adeego bulshadeenna, waxaanan sii wadi doonaa inaan diiradda saaro tayada biyaha anigoo kobcinaya daah-furnaan iyo ka-qaybgal bulsho oo dhexmara degganeyaasha. Wadajir, ayaan uga shaqeyn doonnaa dhismaha mustaqbal adkaysi leh oo deegaan ahaan waara, annagoo ilaalinayna kheyraadkeenna dabiici ee qaaliga ah jiilalka imanaya.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Wayne DeMeester



(425) 868-1144

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka in Maamulka Ganacsiga

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliyaha Maalgelinta ee Diiwaan gashan

**Bayaanka:** Waxaan sharaf u arkaa inaan u adeego sidii Guddoomiyehaaga Degmada Biyaha. Mudnaantayda koowaad waa in aan bixiyo biyo la cabo oo ammaan ah oo lagu kalsoonaan karo. Degmadayada biyo ee madax-bannaan waxay tan iyo 1969 bixinaysay biyo saafi ah oo abaal-marinno ku guuleystay, iyadoo ka mid ah kuwa ugu kharashka hooseeya Galbeedka Washington. Degmaddu waxay biyaha ka keenta biyo-keydyo dhulka hoostiisa (aquifers) si ay ugu adeego in ka badan 10,000 qof oo ku nool cirifka waqooyi ee Sammamish. Biyahan saafiga ahi waxay ka soo qulqulaan 5 ceel, iyagoo aan kiimiko taaban, kuna soo gaara adiga. Hadafkaygu waa inaan ilaaliyo oo aan dhawrno kheyraadkan weyn ee adeegsadayaasheenna. Waad ku mahadsan tahay codkaaga!

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Pat Sutherland



(425) 205-0497
voteforpatsutherland@gmail.com

**Waxbarashada:** Dhammeeyay Dugsiga Sare ee Inglemoor 1977,

**Shaqo iyo Xirfad:** Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore - 07/01/1993 - 07/01/2025

**Bayaanka:** Waxaan u heellanahay inaan horumariyo adeegyada muhiimka ah ee bulshadeenna, anigoo leh 32 sano oo waayo-aragnimo ah oo aan ka helay degmada adeegyada tamarta ee Northshore. Waxaan habaynta hawlaha si fiican u habeeyey si aan u kordhiyo waxtarka iyo isgaarsiinta. Injineernimada, waxaan casriyeeyay hannaanka oggolaanshaha, taas oo badbaadisay lacagta degmada iyo hagaajisay bixinta adeegyada. Waxaan ka qayb qaatay casriyeynta kaabayaasha server-ka iyo dib-u-habaynta nidaamyada shabakadda, taas oo kor u qaadday waxqabadka iyo amniga.

Waxaa iga go'an inaan ilaaliyo qiimeyaal caddaalad ah, kor u qaaddo daah-furnaanta, oo aan sameeyo go'aanno maskax leh oo horrey u sii socda oo anfacaya dhammaanteen. Khibraddayda gacanta ku haynta ayaa i siisay aragtiyo ku saabsan waxa si fiican u shaqeynaya iyo sida aan u xoojin karno nidaamyadeenna mustaqbalka. Waxaan diyaar u ahay inaan keeno aragti wax ku ool ah, xog ogaal ah, oo bulshadeenna u horreysa oo ku wajahan guddiga.

Si wadajir ah, waxaan ku dhisi karnaa aasaaska adag ee Northshore si aan u hubinno mustaqbal lagu kalsoonaan karo oo gaara jiilasha soo socda. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

### Brent Smith



(206) 200-2826
smithdawg85@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Dhaqaalaha, BA, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Wakiilka Guryaha oo Shahaadaysan iyo Qiimeeyaha Guryaha oo Shahaadaysan

**Bayaanka:** Sida Guddoomiyehaaga Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore ahaan, mudnaantaydu waxay noqon doontaa in aan diiradda saaro biyo nadiif ah oo qiimo jaban iyo nidaamyo bullaacad oo ammaan ah, maamul maaliyadeed oo xooggan oo ku saabsan lacagaha dadka bixiya, iyo ilaalin mas'uul ah oo ku saabsan xarumaha degmada.

Waxaan diyaar u ahay inaan sii wado guulaha degmada anigoo sii wanaajinaya hufnaanta maaliyadeed iyo tan urureed iyo sidoo kale u diyaargarowga masiibooyinka ee degmada oo dhan. Muddo siddeed sanno ah aan ahaa xubin la doortay ee golaha magaalada Kenmore, in ka badan 25 sanno oo aan ahaa mulkiilaha ganacsi, iyo 30 sanno oo aan ku jiray ballanqaadyada adeegga bulshada, waxaan muujiyay kartidayda ah inaan si wax ku ool ah ula shaqeeyo kuwa miisaaniyadda iyo siyaasadda sameeya ee bulshadeenna.

Waxaa iga go'an inaan si adag ugu shaqeeyo dadka bixiya qiimaha adeegyada ee Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore, waxaana jeclaan lahaa inaan helo codkaaga. Aniga iyo xaaskeyga waxaan ku noolayn degmada muddo 38 sanno ah.

## Guddoomiyaha Degmada Lr. 3

### Rita J. Miller

Sawir lama soo gudbin

(253) 347-8589
ritamiller23@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka Ee Kalkaalinta; PhD ee Waxbarashada

**Shaqo iyo Xirfad:** Maktabadlaha Caafimaad; Macallin Kalkaaliye (hawlgab)

**Bayaanka:** Magacaygu waa Rita J. Miller waxaanan raadinayaa dib-u-doorasho booska Guddoomiyaha, Degmada Lr. 3 ee Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 1. Xilkaas waxa la iigu doortay laba sano ka hor si aan u buuxiyo boos bannaan. Khibraddayda nololeed ayaa i diyaarisay, maadaama aan leeyahay asal caafimaad oo aad u xooggan anigoo sannado badan ahaa kalkaaliye caafimaad iyo bare kalkaalinta. Markaan helay shahaadada Mastarka ee kalkaalinta, waxaan kalkaalinta ka dhigay laba Iskuul Kalkaalin oo kala duwan. Intii aan xilkaas hayay ayaan qaatay Ph.D. ee Waxbarashada, anigoo sii ahaanaya bare kalkaalinta. In badan oo aan ku sugnaa goob isbitaal ayaa i bartay faahfaahinta adag ee sida isbitaal loo maamulo iyo noocyada khilaafaadka ay la tacaalaan isbitaalladu. Wakhtigan, Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 1 waxay wajahaysaa jaris miisaaniyadeed oo dowladdu samaysay, taas oo adkaynaysa bixinta adeegyo ay hore u bixin jirtay. Aniga oo ah Guddoomiyaha hadda jooga, waxa aan ku jiraa doodaha iyo qorsheynta wax ka qabashada khasaaraha maaliyadeed ee lama filaanka ah.

Hadafkaygu marka dib la i doorto waa in aan sii wado shaqada aan hadda wadno si aan bulshada ugu helno daryeel caafimaad oo ugu fiican. Waxaan aaminsanahay in qof kasta oo bulshada ka tirsan uu u qalmo daryeelka uu u baahan yahay oo uu xaq u leeyahay. Ujeeddadayda waa in aan ka qayb-qaato caafimaadka iyo fayo-qabka bulshadeenna ay dhammaantood u qalmaan. Si xushmad leh, waxaan weydiisanayaa codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Rick Polintan



rick.polintan@gmail.com

**Waxbarashada:** University of the Philippines, AB Dhaqaalaha

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha, Degmada Isbitaalka Lr. 1; Ku-Xigeenka Guddoomiyaha, Jaaliyadda Filibiin ee Seattle

**Bayaanka:** Bulshadeenu waxay u qalantaa daryeel caafimaad oo gaar ah, Valley Medical Centre waa inay ahaato meel uu qof kastaa ka helo daryeel tayo leh iyadoon loo eegin dakhli ama asal. Maadaama aan wajahno dhimista la filayo ee Medicaid-ka federaalka iyo caqabadaha sii socda ee caymiska gaarka ah, waa lama huraan in aan helno hoggaan adag si aan u ilaalino oo loo xoojiyo isbitaalkeena.

Anigoo ah Guddoomiyahaaga hadda, waxaan si adag uga shaqeeyay in Valley Medical Center ay dhaqaale ahaan xoog u ahaato, isla markaana shaqaalaha lagu ixtiraamo, lagu taageero, lana siiyo daryeel caddaalad ah. Anigoo leh khibrad urur shaqaale iyo hoggaamiye bulsho ahaan, waxaan keenaa ballanqaad ku saleysan caddaalad, isla xisaabtan, iyo in dadka la hormariyo.

Qoyskaygu wuxuu deganaa degmadaan tan iyo 1992, waxaana si toos ah ugu tiirsanayn Valley Medical Center marka ay timaado daryeelka caafimaad ee degdegga ah. Waan ogahay sida uu isbitaalkani muhiim ugu yahay bulshadeena.

Haddii mar kale la i doorto, waxaan: Taageeri doonaa daryeel bukaan-ku-saleysan iyo helitaan daryeel oo loo siman yahay, gaar ahaan deriskeenna nugul; Ilaalin doonaa daahfurnaan iyo masuuliyad maaliyadeed si loo helo xasillooni waarta; U istaagi doonaa daryeel caddaalad ah iyo taageero shaqaalaha isbitaalka-waayo daryeelka tayada leh wuxuu ka bilaabmaa kuwa bixiya.

Waxaan sharaf u arkaa inaan kasbaday kalsoonida iyo taageerada hay’adaha la ixtiraamo sida, oo ay ku jiraan Dimuqraadiyiinta Degmada King, AP ACE PAC, iyo SEIU 1199NW.

Si wada jir ah, waxaan u dhisi karnaa isbitaal jawaab celin leh, adkeysi leh, diyaarna u ah inuu daboolo baahiyaha qof kasta oo bulshadeena ah. Waxaan si xushmad leh u waydiisanayaa codkaaga ku aaddan Guddoomiyaha Jagada Lr. 4- si aan u sii wadno shaqadan muhiimka ah, wadajir.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

### Carol Barber

Sawir lama soo gudbin

runanddance@aol.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka ee ka socota CWU, Shahaadada Mastarka ee Cilmi-Nafsiga CWU

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliyaha Guurka iyo Qoyska oo hawlgab noqday

**Bayaanka:** Waxay ii ahayd farxad inaan u adeego sidii guddoomiye ee Valley Medical Center (Xarunta Caafimaadka ee Valley) 6-dii sanno ee la soo dhaafay. Waxaa jiray caqabado badan. Waxaan la kulannay cudur faafa iyo xiritaan. Markii aan ka soo baxnay taas waxay ahayd inaan qiimeyno isbahaysigeenna istiraatiijiyadeed ee ku aaddan University of Washington. Nasiib darro, waxay ahayd go'aankeenna in tani aysan noo shaqeynayn. Marka aan eegno lixda sanno ee soo socota, waxaan gebi ahaanba uga bixi doonnaa UW. Waxaan raadin doonaa isbahaysi kale oo suurtagal ah. Waxaan la tacaali doonaa arrimaha cusub ee soo baxa. Anigoo ah guddoomiyaha ugu muddada dheer, waxaan rajaynayaa inan wajaho caqabadahan

Waad mahadsan tahay.

# Ma Ogtahay?

Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ee Degmada King ayaa ah habka ugu wanaagsan ee aad si toos ah warqaddaada codbixinta ugu soo celin karto Xarunta Doorashada. Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta waa ammaan, ku habboon, oo furan ilaa daqiiqadda ugu dambeysa! Warqadaha codbixinta ee lagu soo celiyo sanduuqa lagu rido Maalinta Doorashada ayaa loo dammaanad qaadaa in loo tixgeliyo inay ku yimaadeen wakhtigii loogu talagalay haddii lagu rido sanduuqa 8:00 p.m. ka hor.

- ✓ aan la faragelin karin
- ✓ midkiiba 1000 rodol
- ✓ boolal kula xiran shubka
- ✓ dab-damiye ayaa ku dhex jira
- ✓ habab qufullo oo badan
- ✓ shaabado muujinaya faragelinta






## Guddoomiyaha Degmada Lr. 1

### Nancy J Stewart



(425) 949-5484
njstewart.hu@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Hoggaaminta Ururada, Gonzaga University; Shahaadada Jaamacadda Maamulka Isbitaalka, Eastern Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxa Fulinta Caafimaadka ee Hore, U Doodaha Bukaanka, iyo Mutadawac Bulsho

**Bayaanka:** Caafimaadka wanaagsan waa qayb muhiim ah oo ka mid ah nolosha firfircoon ee hodanka ah ee aan ku noolaan karno. In bulshadeena laga helo daryeel tayo leh oo naxariis ku dhisan waa shuraakada ugu fiican ee lagu gaari karo caafimaadka ugu wanaagsan. Maadaama ay tahay isbitaal ay shan-xiddigood ku qiimeeyeen Medicare/Medicaid, qiimeynta A ee Leapfrog, iyo 50ka isbitaal ee ugu sareeya Mareykanka, waxaan aaminsanahay in EvergreenHealth uu yahay lammaaneheena aan caadiga ahayn. Markii ugu horreysay waxaan ogaaday daryeelkan gaarka ah anigoo ah bukaan.

Maadaama aan daryeel noloshayda beddelay ka helay EvergreenHealth, waxaan si firfircoon uga mid ahaa ururka anigoo ah shaqaale, ka dibna hoggaamiye tan iyo 2012. Waxaan ka shaqeeyay sidii aan u gaari lahaa jagada Agaasimaha Fulinta ee Isbitaalka iyo Daaweynta Gaarka ah halkaas oo aan la shaqeeyay dhakhaatiirta, hoggaamiyeyaasha, kalkaaliyeyaasha, iyo shaqaalaha taageerada si aan u ballaariyo una hagaajiyo bixinta daryeelka bukaanka gudaha iyo dibadda. Ka dib markii aan ka tagay EvergreenHealth bishii Juun ee 2023, waxaa sharaf ii ahayd in la ii magacaabo Guddiga Guddoomiyeyaasha bishii Agoosto ee 2023. Waa sharaf inaan la shaqeeyo guddoomiyeyaasha kale si aan u matalno bulshadeenna aan u adeegno.

Waxaan ku salaysanahay maskaxda bukaanka marka hore; fahamka qiimaha daryeelka naxariista leh, tayada leh ee ay bixiyaan kooxo aan ku kalsoonaan karno. Ka hoggaamiye daryeelka caafimaadka ahaan, waxaan fahamsanahay caqabadaha ay wajahayaan maamuleyaasha isbitaalka iyo kooxaha si ay u bixiyaan daryeelkaas. Iyadoo ay jirto isbeddel joogto ah oo ku yimaada adeegyada caafimaadka, waa inaan had iyo jeer noqonaa daryeel caafimaad oo tayo leh, bukaanka ugu horreeya oo leh ballanqaad korriin iyo mas'uuliyad dhaqaale, annagoo la qabsanayna si aan u daboolno baahiyaha bulshadeenna. Wadajir ayaan ugu dadaaleynaa inaan gaarno go'aanno istiraatijiyadeed si aan u sii wanaajino tayada daryeelka aan bixino.

Waxaan idinka codsanayaa codkiina si aan u sii wado inaan u adeego xilkan, mar walba anigoo ka go'an in daryeelkiina uu ahaado udub dhexaadka go'aan kasta oo aan qaadano.

## Guddoomiyaha Degmada Lr. 2

### Suzanne Greathouse



(206) 465-8833
suzanne_greathouse@yahoo.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Waxbarashada, University of WA; Shahaadada Mastarka ee Isgaarsiinta Farsamada, Western WA University

**Shaqo iyo Xirfad:** Aasaase-Wadaag/Mulkiilaha REPS VR - Softiweerka Tababarka Xaqiiqada Muuqaalka

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan hadda ka mid ahay Guddiga Guddoomiyeyaasha EvergreenHealth, anigoo la i magacaabay Sebtembar 17, 2024. Waxaan u tartamayaa inaan sii wado bixinta hoggaamin joogto ah oo khibrad leh oo loo baahan yahay hey'addan muhiimka ah ee u adeegta baahiyaha caafimaad ee bulshadeenna sii kordheysa.

Taariikhdaydu waxay ka kooban tahay ku dhawwaad 20 sanno oo aan ka shaqeynayay qaybta gaarka ah anigoo hoggaaminayay kooxo waaweyn iyo mashaariic adag, iyo sidoo kale sannado badan oo aan ka shaqeynayay adeegga dadweynaha ee maxalliga ah. Waxaan ka mid ahaa Guddiga Qorsheynta ee Kenmore, Guddiga Guddoomiyeyaasha ee Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore, iyo Guddiga Agaasimeyaasha ee Xarunta Waayeelka ee Northshore. Waxaan hadda ahay aasaasaha iyo madaxa fulinta ee shirkad tababar software-ka ah xaqiiqada dhabta ah, waxaanan keenaa aragtida mulkiilaha ganacsi yar, oo ka go'an la xisaabtanka, hal-abuurka, iyo adeegga.

EvergreenHealth gudaheeda, waxaan sii wadi doonaa inaan hubiyo daryeel tayo sare leh, ballaarinta helitaanka, iyo in la qaato go'aanno caqli-gal ah oo waara. Waxaan aaminsanahay in aan qaadanno hal-abuurnimada si aan ugu sii jirno hormuudka daryeelka caafimaadka—annagoo ka faa'iidaysanayna teknolojiyadda iyo hab-raacyada ku saleysan caddeynta si loo wanaajiyo natiijooyinka bukaanada loona sii hayo daryeel la awoodi karo.

Taageeridda shaqaalaha isbitaalkayaga waa mudnaanta koowaad - iyagu waa laf-dhabarta EvergreenHealth. Waxaan u doodi doonaa maalgelin lagu xoojinayo tababarka, shaqaaleynta, iyo taageerada goobta shaqada si ay u kobcaan oo ay u sii bixiyaan daryeel heer sare ah.

Joogtaynta maaliyadeed sidoo kale waa lama huraan. Maadaama bulshadeennu korto, waa in EvergreenHealth sii ahaataa mid xooggan, hufan, oo si firfircoon uga jawaabta baahiyaha isbeddelaya. Waxaan ka shaqayn doonaa hubinta maamul-ilaalin feejigan oo mas'uul ah oo kheyraadka dadweynaha ah.

Ugu dambeyn, waxaan aaminsanahay in nidaamkeena daryeelka caafimaad uu ka tarjumayo dadka uu u adeegayo. Waxaan ahaan doonaa dhegayste firfircoon, waxaanan la falgeli doonaa degganayaasha iyo hoggaamiyeyaasha, anigoo ka shaqaynaya in EvergreenHealth sii ahaato lamaane caafimaad oo lagu kalsoonaan karo, bulshaduna hormuud u tahay. Si xushmad leh ayaan kaa codsanayaa codkaaga si aan ugu sii adeego si dedaal leh, khibrad leh, iyo aragti cad oo ku wajahan mustaqbalka EvergreenHealth.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

### Gary Harris



(425) 877-1502
Gcharris3@comcast.net

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Farmashiyaha iyo Shahaadada Jaamacadda ee Cilmi-nafsiga, University Of Washington; Shahaadada Hoggaaminta Dowladda Hoose, Gobolka Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Farmashiiste (hawlgab), Mulkiilaha/Maamulaha Hideaway Lodge B&B

**Bayaanka:** Waxaan ku noolaa aagga adeegga EvergreenHealth Kirkland muddo 50 sanno ah waxaanan ahay mulkiilaha ganacsi ee magaalada Woodinville. Waxaan ahaa Guddoomiyaha PTA iyo qof la siiyay Abaalmarinta Golden Acorn. Waxaan leeyahay 30 sanno oo waayo-aragnimo farmashiyaha ah oo ku saabsan goobaha isbitaalka iyo caafimaadka. Maadaama aan ahay Macallin Shahaado Sare leh oo ku takhasusay Sonkorowga, waxaan ka caawiyay horumarinta barnaamijkii ugu horreeyay ee waxbarashada bukaanka ee iskuduwidda cilmiga kala duwan ee gobolka Washington, waxaana ka caawiyay habaynta habraacyada daawooyinka sonkorowga. Waxaan u shaqeeyay Guddiga Farmashiyaha ee gobolka muddo koow iyo toban sanno ah, waxaanan ahaa qoraaga ugu weyn ee shuruucda xaqiijinaya xuquuqda haweenka ee doorashada, iyo sharciga u baahan in la diiwaangeliyo dhammaan daawooyinka la xakameeyo ee gobolka. Sharaf ayay ii ahayd inaan helo Abaalmarinta Heerka Sare ee Ku Dhaqanka Farmashiyaha oo ay bixisay School of Pharmacy.

Waxaan u shaqeeyay sidii guddoomiye-wadaag ololaha horumarinta maalgelinta ee UW's Be Boundless, anigoo ka caawiyay in la keeno $50 milyan oo loogu talagalay School of Pharmacy (Dugsiga Farmashiyaha). Waxaan u shaqeeyay Golaha Magaalada Woodinville afar sanno waxaana ahay duqii hore ee magaalada. Waxaan ka shaqeynayay anoo la taliye ah EvergreenHealth Community tan iyo 2021 waxaana ku raaxaystay ka qayb qaadashada hantidan weyn ee bulshadeenna.

Khibraddayda sannado badan ee daryeelka tooska ah ee bukaanka, maamulka barnaamijka, kormeerka maaliyadeed, iyo adeegga bulshada ayaa iga dhigaya mid si gaar ah ugu qalma inaan u adeego sida Guddoomiyaha EvergreenHealth. Waxaan kuu shaqeyn doonaa si aan mar walba u bixiyo khibradda ugu wanaagsan ee bukaanka. Waxaan hubin doonaa in doolarka canshuurtaada ee ku soo gala EvergreenHealth si wax ku ool ah loo isticmaalo si loo helo loona sii hayo shaqaalaha ugu fiican, si loo taageero baaritaannada iyo hababka daaweynta ee ugu hal-abuurka badan, iyo in daryeelka caafimaadka ahaado mid la awoodi karo. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.

### Robin Campbell



(425) 224-7639
robin4evergreenhealth@gmail.com
www.Robin4EvergreenHealth.com

**Waxbarashada:** BA (Shahaadada Jaamacadda) Zoology (Goobaha Barbaarinta Xayawaanka), UNC Chapel Hill; PhD Microbiology & Immunology (Makrobe-nololeedka & Ilaalinta jidhka), Wake Forest University School of Medicine

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha hadda xilka haya, EvergreenHealth; Maamulaha Bioteknoolajiyada (hawlgab)

**Bayaanka:** Waxaan aaminsanahay in qof walba uu u qalmo helitaanka daryeel caafimaad oo heer-sare ah. 2024, waxa sharaf ii ahayd in la i magacaabo Guddiga Guddoomiyeyaasha ee Degmada Isbitaalka Dadweynaha ee Degmada King #2 (EvergreenHealth), oo u adeegta Bothell, Duvall, Kenmore, Kirkland, Redmond, Sammamish, iyo Woodinville. Hadda waxaan raadinayaa in la i doorto muddo buuxda.

Anigoo hore u ahaa EvergreenHealth Community Advisor, isla markaana leh xirfad nololeed oo daryeelka caafimaadka iyo culuunta nolosha, waxaa iga go'an ballaarinta helitaanka, hagaajinta natiijooyinka, iyo xoojinta isbitaalka bulshadeenna. Intii aan xilka hayay, waxaan diiradda saaray mas'uuliyadda maaliyadeed iyo ballaarinta adeegyada aasaaska u ah. Mudnaantayda koowaad waxa ka mid ah ballaarinta helitaanka daryeelka aasaasiga ah iyo adeegyada caafimaadka dabeecadda, iyadoo la hubinayo in kheyraadka isbitaalka si wax-ku-ool ah loo adeegsado. Waxaan la imaanayaa 25 sano oo waayo-aragnimo ah oo goleyaal dadweyne iyo gaar ah, waxaana haatan ka tirsanahay Guddiyada Maaliyadda, Maamul-wanaagga (Governance), Tayada & Badbaadada, iyo Levy. Sidoo kale, waxaan kasbaday Health Care Governance Certification oo ka timid Washington State Hospital Association.

Waxaan ku faani karnaa in EvergreenHealth ay ka mid tahay 50-ka isbitaal ee ugu sareeya dalka, taasoo caddeyn u ah shaqaalaheenna heellan iyo bulshada na taageerta. Waxaan sii taageeri doonaa siyaasad dhiirrigelisa dhaqan naxariis, hal-abuurnimo, iyo adeeg, iyadoo la ilaalinayo heer-sareynta bixinta daryeelka.

Waxa i taageeray: Duqooyda Magaalada Kelli Curtis (Kirkland), Nigel Herbig (Kenmore), Mike Millman (Woodinville); Wakiillada Gobolka Amy Walen (LD 48) iyo Davina Duerr (LD 1); iyo dhammaan Guddoomiyeyaasha hadda xilka haya ee EvergreenHealth.

Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga. Wadajir, waxa aynu ilaalin karnaa oo xoojin karnaa daryeel tayo sare leh oo bulshadeennu filayso oo ay u qalanto.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Mark L. Bowers



(425) 941-7788
mark4svh@gmail.com
bowers4commissioner.com

**Waxbarashada:** University of Washington Kaaliyaha Dhakhaatiirta, Shahaadada Mastarka ee Kaaliyaha Dhakhaatiirta University of Nebraska

**Shaqo iyo Xirfad:** Kaaliyaha Dhakhtarka ee isbitaalada Degmada King, Sarkaalka Caafimaadka ee Ciidanka Badda (Hawlgab)

**Bayaanka:** Helitaanka daryeel caafimaad oo maxalli ah, la awoodi karo, oo ka-hortag ah waa walaac ay qabaan xubnaha bulshadeenna, waxaana ka jawaabi karaa caqabadahaas Snoqualmie Valley Hospital. Dimuqraafiyadda isbeddelaysa waxay dalban doontaa helitaan ballaaran oo daryeelka caafimaadka haweenka, caafimaadka dhimirka, carruurta, daawada shaqada/ciyaaraha, iyo adeegyada waayeelka ah. Wakhtigan, adeegyadaas waa meel fog oo safar dheer u baahan. Waxaa ina hor yaal caqabado badan oo u baahan hoggaan khibrad-leh, waayo-aragnimo, iyo aragti.

Waxaan keenaa 40 sano oo waayo-aragnimo ah anigoo ah bixiye daryeel caafimaad oo shahaadooyin ka haysta isbitaallada Fred Hutchinson, Virginia Mason, Valley, Boeing, Overlake, Proliance, iyo isbitaallada Halyeeyada Hore. Waxaan hoggaamiyey hawlgallo gargaar caafimaad oo Haiti iyo Uganda ah. Maadaama aan hore u ahaa tababare jimnaasiyad, lugeeye buuraha, iyo baraf-lugeeye, waxaan si fiican u fahamsanahay baahida daawada ciyaaraha. Adeeggii aan u qabtay Guddiyada Qorsheynta Siyaasadda iyo Horumarinta ee Issaquah ayaa sidoo kale i diyaariyey tallaabadan xigta.

Intii uu socday xirfadeyda, daryeel caafimaad oo naxariis-leh ayaa ahaa xoogga igu dhaqaajiya. Waxaan qadariyaa taageerada xooggan ee codbixiyeyaasha valley, waxaana si ixtiraam leh u codsanayaa codkaaga iyo taageeradaada sii socota. Tayo, natiijooyinka ugu wanaagsan, joogteyn!

### Robert Angrisano



svhdist4@gmail.com
svhdist4.com

**Waxbarashada:** University of Oregon, Maamulka Ganacsiga, Shahaadooyin Caafimaad oo badan

**Shaqo iyo Xirfad:** EMT iyo EKG Farsamoyaqaan, Swedish Hospital; EMT Waaxda Dab-damiska ee Snoqualmie

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Guddiga Isbitaalka Snoqualmie Valley sababtoo ah waxaan si qoto dheer uga walaacsanahay caafimaadka bulshadeenna waxaanan aaminsanahay inaan ballaarinno helitaanka daryeel tayo leh oo qof walba ah.

Waxaan hadda ka mid ahay Guddiga Maaliyadda ee Isbitaalka, halkaas oo aan bishii dib u eegis ku sameeyo macluumaadka maaliyadeed ee muhiimka ah si aan uga caawiyo hubinta daah-furnaanta, isla xisaabtanka, iyo maaraynta maaliyadeed ee xooggan. Waxaan leeyahay aragti toos ah oo ku saabsan caqabadaha isbitaalkayaga uu wajahaayo—iyo tallaabooyinka aan qaadi karno si aan u horumarinno adeegyada iyo natiijooyinka.

Muddo ka badan 35 sanno, waxaan u shaqeynayay sidii Dab-damis/EMT. Waxaan u dooda oo taageeraa dadkeena da'da ah iyo kuwa leh caqabadaha garaadka, horumarinta, iyo jidh ahaaneed. Waxaan sidoo kale la shaqeeyaa dhallinyarada dooxadayada, anigoo abuuraya oo fulinaya barnaamijyo diiradda saaraya maandooriyeyaasha halista ah sida fentanyl. Si xirfadle ah, waxaan ka shaqeynayay in ka badan 30 sanno oo aan ku jiray doorka fulinta ganacsiga waxaanan u adeegay 17 sanno sidii Guddoomiyaha Dab-damiska. Hoggaankayga caafimaadka, ganacsiga, iyo dadweynaha, waxay ii siinayaan aragti gaar ah oo dheelitiran.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Jen Carter



jcarter817@hotmail.com

**Waxbarashada:** University of Chicago, Shahaadada Jaamacadda

**Shaqo iyo Xirfad:** Khabiirka Teknolojiyadda Macluumaadka Caafimaadka

**Bayaanka:** Tan iyo 2019, waxaa sharaf ii ahayd inaan bulshada u adeego anigoo ka mid ah guddoomiyeyaasha isbitaalka bulshada, Snoqualmie Valley Health. Si wadajir ah, waxaan ku dhex soconay wakhtiyo muhiim ah; taageeridda jawaab celintayada COVID-19, bilaabidda adeegyo cusub, iyo qorsheynta mustaqbalka ee Valley ee sii kordhaysa. Waxaa laga yaabaa inaad i aragtay anigoo jooga rugaha tallaalka ee baabuurta lagu maro ama soo dhaweynaya deriska teendhooyinka gargaarka degdegga ah inta lagu jiro dhacdooyinka bulshada.

Waxaan taageeray furitaanka rugta daryeelka degdegga ah ee bulshadeenna waxaanan hormuud ka ahaa horumarinta rugta cusub ee North Bend, ballaarinta xarunta isbitaalka, iyo mashiinka ugu horreeya ee mammogaraafiga ee Valley.

In ka badan 20 sanno oo aan ku jiray IT-ga daryeelka caafimaadka, waxaan ka caawiyay isbitaalada dalka oo dhan inay horumariyaan daryeelka iyada oo loo marayo hal-abuurnimo. Halkan aan degan nahay, waxaan dhiirageliyay kala guurkeenna nidaamka diiwaanka caafimaadka elektarooniga ah ee casriga ah, taasoo hagaajinaysa tayada, badbaadada, iyo helitaanka bukaankeenna. Waxay ahayd sharaf inaan u adeego, waxaana jeclaan lahaa codkaaga si aan u sii wadno dhisidda daryeel heer sare ah oo ku dhow deegaankeena.

## Guddoomiye Jagada Lr. 1

### Perry Wilkins



(425) 785-8414
perrycwilkins@yahoo.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Bayoolajiga

**Shaqo iyo Xirfad:** Khabiirka farsamada ee cilmiga nolosha

**Bayaanka:** Waxaan ahaa Guddoomiyaha Jardiinooyinka tan iyo markii la aasaasay Degmada jardiinooyinka. Tani waa jago aan mushahar lahayn oo aan si dhab ah u qaato. Bulshada waxaan uga mid ahay qof aad u firfircoon, had iyo jeer maskaxda ku haya Jardiinooyin badan oo u wanaagsan Fall City. Waxaan si adag oo muddo dheer ah uga shaqeeyay in Jardiinka Bernard, oo ku yaal gadaasha The Roadhouse, loogu deeqo degmada Jardiinka ee Fall City. Waxaan ku jirnaa habraaca dhammaystirka tan, waxaana dhawaan loo furi doonaa dadweynaha. Haddii aad doorato inaad i doorato, waxaan ku sii socon doonaa jidkan si aan u sameeyo Jardiinooyin badan oo ka sii wanaagsan oo Fall City.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

### Travis Klaas



**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Dhulka, Western Washington University; Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada, Western Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Hydrogeologist (Khabiir Cilmiga Biyaha Dhulka Hoostiisa)

**Bayaanka:** Waxaan ku faraxsanahay fursadda aan ugu adeego Degmada Jardiinooyinka ee Fall City. Baarkyadeennu waa ka badan yihiin goobo cagaaran; waa meelo la isugu yimaado oo saaxiibtinimo ka dhalato, derisyaduna ku xirmaan, dareen ka-tirsanaan ahna koro. Xiriirradan ayaa ka dhigaya Fall City meel bulsho isu-dhow oo cajiib ah lagu noolaado. Waxaan xiise gaar ah u leeyahay kordhinta fursadaha isu-imaatinka bulshada, taageeridda qorshayn madadaalo oo loo wada dhan yahay, iyo dhisidda xiriirro adag oo hagaajiya isku-xirnaanta baarkyada. Haddii la i doorto, waxaan ka shaqayn doonaa xoojinta iskaashiga hay'adaha dadweynaha iyo ururrada aan faa'iido-doon ahayn si loo taageero himilada Degmada.

Inkasta oo aragtiyaha mustaqbalka Fall City ay kala duwanaan karaan, hal shay ayaa cad: qof walba wuu ka faa'iidaystaa baarkyada, meelaha furan, iyo bulshooyin adag. Waxaan diyaar u ahay inaan la shaqeeyo Guddoomiyeyaasha kale ee Jardiinooyinka si aan ugu dhisno shaqada wanaagsan ee durba socota oo aan u qaabayno hindisayaasha baarkyada ee mustaqbalka ee ka tarjumaya baahiyaha iyo qiyamka degganeyaashayada. Mahadsanidin taageeradiina.

# Qaraarka Wadajirka ah ee Senatka Lr. 8201

Sharci-dejinta ayaa soo jeediyay wax-ka-beddelka dastuurka ee oggolaanaya in lacagta ku jirta sanduuqa daryeelka muddada dheer ee Washington la maalgashado. Wax-ka-beddelkaan wuxuu oggolaanayaa in sanduuqa gobolka ee loogu talagalay bixinta dheefta daryeelka muddada dheer ee waayeellada iyo dadka naafada ah ee u qalma loo maalgashado sida sharcigu uu u oggol yahay.

Ma tahay in wax-ka-beddelkaan dastuurka la:

Ansixiyo

Diido

## Bayaanka sharaxaadda

**Sharciga Sida uu Hadda u Jiro**

Dastuurka Gobolka Washington wuxuu guud ahaan mamnuucayaa in lacagta dadweynaha lagu maalgeliyo saamiyada shirkadaha gaarka loo leeyahay. Tani waxay ka dhigan tahay in lacagta gobolka lagu maalgelin karo oo keliya noocyada dammaanad dakhli go'an, sida curaarta dowladda iyo shirkadaha iyo shahaadooyinka debaajiga.

Dastuurku wuxuu hadda ka dhaafitaan xaddidaaddaan ugu sameeyaa dhowr maalgelino. Ka dhaafitaankan waxay khusaysaa lacagta hawlgabka dadweynaha ama sanduuqa hawlgabka, sanduuqyada magdhowga shaqaalaha, iyo lacagta lagu hayo sanduuq aaminaad ee ku aaddan faa'iidada dadka naafada koriinka ah leh, taas oo u oggolaanaysa sanduuqyada in loo maalgashado sida sharcigu u oggolaanayo, oo ay ku jiraan saamiyada shirkadaha gaarka loo leeyahay. Guddiga Maalgashiga Gobolka Washington ayaa maalgeliya oo maamula sanduuqyadaas.

Sannadkii 2019, sharci-dejiyeyaasha waxay abuureen barnaamijka caymiska daryeelka muddada-dheer. Barnaamijku wuxuu bixiyaa lacag lagu bixiyo qaar ka mid ah adeegyada daryeelka muddada-dheer, sida daryeelka xarumaha waayeellada, oo ku socota ka-faa'iidaystayaasha barnaamijka ee u baahan in nolol maalmeedka laga caawiyo. Sida uu dhigayo sharcigaas, shaqaaluhu waxay bixiyaan khidmadaha ku aaddan caymiska daryeelka muddada-dheer ayagoo laga jarayo mushaharka, oo khidmadahaas waxaa lagu shubaa Koontada Aaminaadda Adeegyada Muddada-Dheer iyo Taageerooyinka. Sida ku cad qodobka hadda ee Dastuurka, lacagta lagu hayo Koontada Aaminaadda laguma maalgelin karo saamiyada shirkadaha gaarka loo leeyahay.

**Saameynta Wax-Ka-Beddelka La Soo Jeediyay Haddii La Ansixiyo**

Wax-Ka-Beddelkaan wuxuu u oggolaanayaa lacagta ku jirta Koontada Aaminaadda Adeegyada Muddada-Dheer iyo Taageerooyinka in lagu maalgashado saamiyada shirkadaha gaarka loo leeyahay, haddii sharcigu oggolaado. Dakhliga maalgashiga ee Koontada Aaminaadda waxaa keliya oo loo isticmaali karaa adeegyada daryeelka muddada-dheer iyo taageerooyinka ee loogu talagalay ka-faa'iidaystayaasha barnaamijka, oo ay ku jiraan waayeellada iyo dadka naafada ah.

## Bayaanka lagu taageerayo

**Ansixi 8201 si loo hubiyo in maalgelinta daryeelka muddada dheer ay u jiraan marka aan u baahannahay**

8201 waxay u baahan tahay in 100% dakhliga maalgashiga uu kasbado Sanduuqa Aaminaadda Daryeelka Mudada Dheer ee gobolka loo isticmaalo adeegyada daryeelka muddada dheer ee waayeellada iyo dadka naafada ah ee nugul. Dadka Washington waxay doonayaan inay ku noolaadaan sharaf marka ay duqoobaan. 8201 waxay taageertaa himiladaan wadaagga ah, iyadoo xoojinaysa faa'iidada Sanduuqa Aaminaadda si ay u caawiso waayeellada iyo dadka naafada ah ee Washington iyada oo ilaalinaysa canshuur bixiyeyaasha.

**8201 waa cabbirka sharciga ee caqli-gal ah kaas oo hubinaaya in doolarka canshuurta uu meel dheer gaaro**

Sharciga hadda jira wuxuu maalgelinta Sanduuqa Aaminaadda ku xaddidaayaa xulashooyinka soo celinta hooseeya oo keliya, sida curaarta dowladda iyo shahaadooyinka keydka. 8201 wuxuu u oggolaanayaa Sanduuqa Aaminaadda in la maalgashado si loo soo saaro faa'iidooyin sare. Habkaan la xaqiijiyay waxaa maamuli doona Guddiga Maalgashiga ee Gobolka Washington ee madax-bannaan oo aan dhinacna u janjeerin, kaas oo ku xiran heerarka ugu sareeya ee mas'uuliyadda maaliyadeed.

**Ansixi 8201 si loo kordhiyo maalgelinta iyada oo aan saamayn ku yeelan canshuur bixiyeyaasha**

8201 waxaa la filayaa inay kobciso Sanduuqa Aaminaadda ilaa iyo $67 bilyan 50-ka sanno ee soo socda, lacagtaas oo loo isticmaali karo in lagu kordhiyo faa'iidooyinka dadka naafada ah iyo waayeellada iyada oo aan waxba ku kacayn canshuur bixiyeyaasha. Dakhliga sare wuxuu la micno yahay lacag badan oo daryeel ah – oo u wanaagsan waayeellada, dadka naafada ah ee Washingtoni, qoysaskooda, iyo canshuur bixiyeyaasha!

**8201 waxay leedahay taageero xoog leh ee labada xisbi oo ka socota dhinac walba oo siyaasadeed**

Waa dhiiragelin marka hoggaamiyeyaasha labada xisbi ay ku heshiiyaan wax - waxaana habkaan caqliga leh ansixiyay tiro aad u badan oo ka tirsan sharci-dejiyeyaasha xisbiga Dimuqraadiga iyo Jamhuuriga. 8201 waxaa taageera kalkaaliyeyaasha, ururada, ganacsiyada, iyo kooxaha matalaya malaayiin waayeellada Washingtonian iyo dadka qaba xaaladaha horey u jiray. *U Codee Ansixinta!*

## Bayaanka looga soo horjeedo

**Diid beddelkaan dastuurka,** mar kale.

Codbixiyeyaasha gobolka Washington horey ayay u diideen soo jeedintaan oo ah in lacagta canshuur bixiyeyaasha lagu maalgeliyo saamiyada gaarka loo leeyahay iyo shirkadaha (2020, SJR8212). Aasaaseyaashii gobolka waxay ka ilaaliyeen lacagaha dadweynaha maalgeshiyada halista leh ayagoo dejiyay tallaabooyin ilaalin ah oo ku jira Dastuurka gobolka oo mamnuucaya maalgeshiyada suuqa saamiyada ee shirkadaha ee lacagaha canshuurtaada.

**Diid beddelaadyada dastuurka ee ku khamaarra lacagtaada ayagoo adeegsanaya suuqa aan xasilloonayn.**

SJR 8201 waxay baabi'ineysaa ilaalinta sanduuqa Adeegyada Muddada Dheer iyo Taageerada (Long Term Services and Support (LTSS)), barnaamij bilyanno doolar ah oo la aasaasay 2020. Dadka Washington weli xaq uma laha inay helaan faa'iidooyinka barnaamijka laakiin taageerayaasha ayaa *mar kale* ku weydiisanayaa inaad ka saarto ilaalinta muhiimka ah ee Dastuurka. Hadda, waxaa lagu ilaaliyaa maalgeshiyo *sugan* sida bonds-ka federaalka, gobolka iyo degmada, kuwaas oo taageera bulshadeena -- *isticmaalka wanaagsan ee doolarka canshuurta*. Suuqyada saamiyada iyo maalgeshiyada gaarka ah ayaa si weyn u kala duwan, *iyadoo aan wax dammaanad ah lahayn*, iyo baahiyaha faa'iidada lama oga barnaamijkan aan la tijaabin. Sanduuqa LTSS wuxuu u jiraa inuu ka caawiyo dadka Washington inay helaan daryeelka muddada dheer marka aan duqoowno ama aan wajahno naafanimo. *Marka mala-awaalka suuqa uu guuldareysto, canshuur bixiyeyaasha iyo ka-faa'iideystayaasha ayaa la kulmi doona cawaaqibta taasoo loo maraayo dhimmista ku timaadda dheefta ama kordhinta canshuuraha.*

**Diidmada beddelaadyada dastuurka waxay bixisaa xasillooni iyo hubanti dheeraad ah.**

Inaan sii wadno maalgelinta lacagteena dadweynaha ee curaarrada federaalka, gobolka iyo dowladda hoose waxay taageertaa kaabayaasha dadweynaha ee aan dhammaanteen ku tiirsannahay. Diidmada SJR 8201 waxay bixisaa qorsheyn iyo xasillooni wanaagsan.

**Diid SJR 8201**

Gobolkeena iyo LTSS waxay u baahan yihiin mas'uuliyad maaliyadeed, uma baahna khamaarka maaliyadeed. Diid SJR 8201 si loo ilaaliyo maalgelinta oo sugan, xasilloon, oo diiradda saaraya u adeeggida dadka ku tiirsannaan doona.

## Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Xaqiiqada: Tan iyo 1981, Guddiga Maalgashiga Gobolka Washington ee madax-bannaan ayaa si amni oo wax ku ool ah u maamulay in ka badan $200 bilyan oo loogu talagalay hawlgabyada, sanduuqa keydka waxbarashada jaamacadda, iyo waxyaabo kale, iyadoo celcelis ahaan heerka koritaanka uu yahay 8% sannadkii. Waa inaan hubinnaa in Sanduuqa Aaminaadda ee Daryeelka Muddada Dheer uu koro si uu ula socdo *kororka kharashaadka iyadoo la ilaalinayo canshuur bixiyeyaasha*. Tiro aad badan oo sharci-dejiyeyaal labada xisbi ah ayaa ansixiyay cabbirkan. *Ansixi 8201* si Sanduuqa Aaminaadda ee WA si uu *ugu adeego waayeellada da'da ah iyo dadka naafada ah.*

## Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Taageerayaasha waxay tilmaamayaan soo celinta lacagta oo la hubo oo ah $$bilyanno in ka badan muddo 50 sanno ah laakiin dabcan, taas lama hubo. Sannadkii 2008, Guddiga Maalgashiga Gobolka waxaa ka lumay -26.2% iyo 2022 waxaa ka lumay -12.9%. Waa sida suuqa saamiyada uu u shaqeeyo. Hoos u dhacyada mustaqbalka ama burburyada suuqa, marka lacag soo-celinta ay yaraato, dheefta waa in la jaraa ama waa in sicirka canshuurtu kor u kaco. Marka la barbar dhigo soo celinta *la hubo* ee curaarta dowladda hoose oo ah 3-5%, doorashada waa caddahay. Aan maalgelin nafteena ku samayno, ma ahan Wall Street. *Diid SJR 8201*.

## Dooda Waxaa Diyaariyay:

**Justin Gill,** APRN, RN, Guddoomiyaha Ururka Kalkaaliyeyaasha Gobolka Washington; **Bob Ferguson,** Guddoomiyaha, Dimuqraadi; **John Braun**, Senatarka Gobolka, Hoggaamiyaha laga tirada badan yahay, Jamhuuri; **Carma Matti-Jackson**, Maamulaha Guud, Ururka Daryeelka Caafimaadka Washington; **Cathy Knight**, Agaasimaha Gobolka, Wakaalada Deegaanka Ururka WA ee Gabownimada; **Dani Rice**, Daryeelaha dadka qaba Ootiisamka iyo Down Syndrome

**Xiriirka:** 206-451-7139; Ana@approve8201.org; Approve8201.org

## Dooda Waxaa Diyaariyay:

**Bob Hasegawa**, Senatarka Gobolka, Dimuqraadi, Degmada 11aad; **Peter Abbarno**, Wakiilka Gobolka, Jamhuuri, Degmada 20aad; **Mark Schoesler**, Senatarka Gobolka, Jamhuuri, Degmada 9aad; **Joe Schmick**, Wakiilka Gobolka, Jamhuuri, Degmada 9aad

**Xiriirka:** (360)786-7616; bob.hasegawa@leg.wa.gov

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Wadajirka ah ee Senatka Lr. 8201

HA NOQOTO MID AY XALLIYAAN, SENATKA IYO GOLAHA WAKIILLADA EE GOBOLKA WASHINGTON, GUDAHA KULANKA SHARCI-DEJINTA EE LA ISUGU YIMID:

IN, doorashada guud ee soo socota ee gobolkaan lagu qabanayo xoghayaha gobolka waa inuu u gudbiyaa codbixiyeyaasha u qalma ee gobolka ee ku aaddan ansixintooda iyo hirgelintooda, ama ay u diidaan, wax-ka-beddelka Qodobka XXIX, qaybta 1 ee Dastuurka gobolka Washington si uu u akhriyo sidaan soo socota:

Qodobka XXIX, qaybta 1. Iyadoo aan loo eegin qodobbada qaybaha 5, iyo 7 ee Qodobka VIII iyo qaybta 9 ee Qodobka XII ama qayb kale ama qodob kale oo ka mid ah Dastuurka gobolka Washington, lacagaha kasta ee lacagta hawlgabka dadweynaha ama sanduuqa hawlgabka, sanduuqa aaminaadda caymiska warshadaha, ((~~ama~~)) lacag lagu hayo aaminaad loogu talagalay dadka naafada koriinka leh, ama lacag lagu bixinaayo adeegyada daryeelka muddada dheer iyo taageerada waayeellada iyo dadka naafada ah ee u qalma waxaa lagu maalgashan karaa sida sharcigu uu oggol yahay. Dakhliga maalgashiga ee ka yimaada sanduuq si loo bixiyo adeegyada daryeelka muddada dheer iyo taageerooyinka waayeellada u qalma iyo dadka naafada ah waxaa loo qoondeeyay adeegyada iyo taageerooyinka muddada dheer ee ka faa'iideystayaasha barnaamijka.

HA NOQOTO MID DHEERAAD AH OO LA GO'AAMIYEY, In wax-ka-beddelkaan uu yahay hal wax-ka-beddel oo keliya oo ku dhex jira macnaha Qodobka XXIII, qaybta 1 ee Dastuurka gobolka.

Sharci-dejinta waxay ogaatay in isbeddelka ku dhex jira wax-ka-beddelka ay ka kooban yihiin hal qorshe oo isku dhafan oo loogu talagalay maalgelin si loo bixiyo adeegyada daryeelka muddada dheer iyo taageerada waayeellada iyo dadka naafada ah ee u qalma. Haddii wax-ka-beddelkaan loo arko in uu yahay wax-ka-beddelo gaar ah, qaraarka wadajirka ah gabi ahaanba waa buray oo ma laha awood iyo saamayn dheeraad ah.

HA NOQOTO MID DHEERAAD AH OO LA GO'AAMIYEY, In sharci dejinta, iyadoo la raacayo awooddeeda hoos timaadda RCW 29A.36.020(3), ay qeexdo ciwaanka warqadda codbixinta iyo sharaxaad kooban waa inay akhriso "Sharci dejinta ayaa soo jeedisay wax-ka-beddelka dastuurka ee oggolaanaya in lacagta ku jirta sanduuqa daryeelka muddada dheer ee Washington la maalgashado. Wax-ka-beddelkaan wuxuu oggolaanayaa in maaliyadda gobolka ee loogu talagalay bixinta dheefta daryeelka muddada-dheer ee waayeellada iyo dadka naafada ah ee u qalma la maalgashado sida sharcigu uu u idmay.

Ma tahay in wax-ka-beddelkaan dastuurka la:

Ansixiyo..........

Diido .........."

HA NOQOTO MID DHEERAAD AH OO LA GO'AAMIYEY, In xoghayaha gobolka uu sababo in ogeysiiska wax-ka-beddelkaan dastuurka lagu daabaco ugu yaraan afar jeer inta lagu jiro afarta toddobaad ee ka horreeya doorashada wargeys kasta oo sharci ah ee gudaha gobolka oo dhan.

**--- DHAMMAAD ---**

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Medic One – Beddelaadda Canshuurta Jirta ee Adeegyada Caafimaadka Degdegga ah

Golaha Degmada King ayaa hirgeliyay Xeerka Lr. 19950 ee khuseeya maalgelinta nidaamka adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan degmada oo dhan. Ma tahay in Degmada King loo oggolaado inay beddesho canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso iyadoo soo rogaysa canshuuraha hantida ee caadiga oo ah $0.25 ama ka yar oo ka mid ah kunkii doolar ee qiimaha la qiimeeyay mid kasta oo ah lix sanno oo isku xigta, oo ururinta bilaabanayso 2026, sida ku cad Xeerka Lr. 19950 ee Degmada King, si loo sii wado maalgelinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One:

Haa

Maya

*Qoraalka cabbirkan oo dhammeystiran ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 120.*

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.069)*

## Bayaanka sharaxaadda

Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaasha, Soo Jeedinta Lr. 1 waxay Degmada King u oggolaan doontaa inay soo rogto canshuurta hantida caadiga ah heer aan ka badnayn $0.25 halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada King. Hanti leh qiime la qiimeeyay oo ah $844,000, canshuurta ugu badan waxay noqon doontaa qiyaastii $211 sannadkii ugu horreeya. Dakhliga ka soo baxa canshuurta waxaa loo isticmaali doonaa in lagu maalgeliyo adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan Degmada oo dhan iyo daryeelka caafimaadka degdegga ah sida lagu sharxay Xeerka Lr. 19950 iyo RCW 84.52.069. Canshuurta waxaa la oggolaan doonaa muddo lix sanno ah iyadoo ururinta bilaaban doonto 2026. Canshuurta waxay ka dhaafitaan ku sameyn doontaa xaddidaadaha heerka ee ku xusan RCW 84.52.043 laakiin waxay ku xirnaan doontaa xaddidaadaha cutubka 84.55 ee kordhinta canshuurta sannadaha labaad ilaa lixaad. Waayeellada, halyeeyada hore, iyo dadka naafada ah ee u qalma ayaa xaq u yeelan doona ka dhaafitaan canshuur sida ku cad RCW 84.36.381.

**Wixii su’aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Helen Chatalas**
Agaasime Ku-xigeenka
(206) 263-8560
helen.chatalas@kingcounty.gov

# Bayaanka lagu taageerayo

Reagan Dunn, Greg Markley, Tom Rea
YesonMedicOne.com

Medic One waxay badbaadisaa nolosha. Sannadkii hore, dab-damiyeyaasha iyo shaqaalaha gurmadka degdegga ah ayaa ka jawaabay in ka badan 255,000 oo wicitaanno caafimaad oo 9-1-1 ah (mid kasta qiyaastii 2 daqiiqo kasta). Nidaamka Medic One waxaa loo aqoonsaday inuu yahay mid ka mid ah nidaamyada adeegyada caafimaadka degdegga ah ee ugu wanaagsan adduunka. Heerka badbaadada wadno-istaagga halkan ayaa ka mid ah kuwa ugu sareeya ee la soo sheegay meel kasta—dhibaneyaasha wadno-istaagga halkan waxay 2 ilaa 3 jeer uga badan yihiin inay ka badbaadaan marka loo eego magaalooyinka kale. Daryeelka caafimaadka ee heer sare ah waxaa heli kara qof kasta adigoo si fudud u garaacaya 9-1-1, iyadoon loo eegin xaaladda caafimaad, goobta, duruufaha, ama wakhtiga maalinta.

Canshuurta Medic One ma aha canshuur cusub. Waxay sii wadaysaa maalgelinta barnaamijka bixiya adeegyada degdegga ah ee muhiimka ah ee qof walba oo ku nool Degmada King. Codbixiyeyaasha Degmada King waxay ku taageereen Medic One in ay ansixiyaan canshuuraha la soo rogo in ka badan 45 sanno. Dib-u-cusboonaysiintan waxay *hoos* u dhigaysaa heerka ugu badan ee canshuurta hanti-dhaqaale ah $0.015, taasoo ka dhigaysa $0.25 halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay. Iyadoo la adeegsanayo heerka canshuurta la soo jeediyay, mulkiileyaasha guri qiimihiisu yahay $850,000 waxay sannadkii bixin doonaan $212 si ay u helaan daryeel caafimaad oo heer caalami ah oo degdeg ah oo lagu helo daqiiqado gudahood.

Waxaan ku tiirsanahay Medic One inay joogto marka aan u baahanahay, 24 saacadood maalintii, maalin kasta. Hadda waa markeena inaan u garab istaagno Medic One. Ku biir dab-damiyeyaasha iyo shaqaalaha gurmadka si aad dib ugu cusboonaysiiso ballanqaadkaaga. Dhaha Haa ee ku aaddan Medic One oo u codee Haa Soo Jeedinta 1 ee Degmada King.

# Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

# Dib U Cusbooneysiinta Kor-U-Qaadista Canshuurta ee Waddooyinka iyo Hareeraha Waddooyinka Ammaanka Ah

Golaha Magaalada Bothell ayaa ansixiyay Xeerka Lr. 2456 ee khuseeya dib u cusbooneysiinta kor-u-qaadista canshuurta ee waddooyinka iyo hareeraha waddooyinka ammaanka ah ee wakhtigeeda dhammaanayso.

Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay dib u oggolaanaysaa maalgelinta Hagaajinnada Waddooyinka iyo Hareeraha Waddooyinka Ammaanka ah waxayna dejin doontaa heerka ugu badan ee wadarta canshuurta caadiga oo ah $1.65/$1,000 qiimaha la qiimeeyay sannadka 2026. Hagaajinnada waxaa ka mid ah dayactirka waddooyinka, godadka iyo dib-u-sameynta; hareeraha waddooyinka, meelaha laga gudbo waddooyinka iyo kaabayaasha ammaanka gaadiidka; iyo mashaariic kale, dhammaan sida lagu sharxay Xeerka. Caddadka kordhay ee canshuurta lasoo rogay waxaa loo gudbin doonaa xisaabinta xaddidaadda canshuurta oo sagaal sanno ah ilaa iyo 2035. Waayeellada, halyeeyada hore, iyo kuwa kale ee u qalma ayaa laga dhaafi doonaa sida waafaqsan sharciga Gobolka.

Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa inaad
**Ansixiso ama Diido**
Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Magaalada Bothell waxay soo jeedinaysaa cusbooneysiinta cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta ee 2016 ee ku saabsan Waddooyinka iyo Hareeraha Waddooyinka Ammaanka ah (Safe Streets and Sidewalks) si loo sii wado bixinta amniga gaadiidka, hagaajinta lugeeyeyaasha iyo baaskiillada guud ahaan magaalada si loo ilaaliyo loona kordhiyo nolosha nidaamka gaadiidka ee Bothell iyo in la hagaajiyo amniga dhammaan isticmaaleyaasha.

Hagaajinta Waddooyinka iyo Hareeraha Waddooyinka Ammaanka waxaa ka mid ah: dayactirka iyo hawlgallada; hagaajinta ilaalinta waddooyinka si loo yareeyo kharashka mustaqbalka ee dayactirka nidaamka waddooyinka; hagaajinta ammaanka; dhismaha hagaajinta hababka gaadiidka kala duwan oo mudnaanta leh; kaabayaasha lugeeyeyaasha iyo baaskiillada; helitaanka la hagaajiyay ee isku xirka gaadiidka dadweynaha; iyo hagaajinta isgoysyada mudnaanta leh.

Soo jeedinta waxay beddeli doontaa kor-u-qaadista canshuurta Waddooyinka iyo Hareeraha Waddooyinka Ammaanka ee 2016 oo ay ansixiyeen codbixiyeyaasha, iyo, sida cabbirka dhammaanaya, Magaalada waxay damacsan tahay inay sii waddo inay dalbato warbixinno sannadle ah oo ku saabsan horumarka iyo dhammaystirka mashaariicda canshuurta. Maalgelintaan heellan waxaa lagu dari doonaa deeqo iyo maalgelino kale oo maxalli ah.

Soo jeedintaan waxay dib u ansixinaysaa heerka kor-u-qaadista canshuurta ee $0.50/$1,000 qiimaha lagu qiimeeyay oo la oggolaaday 2016 waxayna kordhinaysaa maalgelinta sagaal sanno oo kale ilaa 2035. Heerka ugu badan ee canshuurta guud ee Magaalada 2026 (oo ay ku jiraan kharashaadka hadda jira, kor-u-qaadista canshuurta ee ammaanka dadweynaha 2018, iyo cabbirkan) wuxuu noqon doonaa $1.65/$1,000 qiimaha la qiimeeyay.  Tani waxay u dhigantaa koror ku yimaada heerka guud ee canshuurta 2026 oo ah $0.18/$1,000 qiimaha la qiimeeyay marka la barbar dhigo 2025 (taas oo ay ku jirtay kor-u-qaadista canshuurta ee 2016).

Hanti qiimaheeda yahay $999,000, kharashka wuxuu noqon doonaa qiyaastii $41.60 bishii ama $499 sannadkii. Waayeellada danyarta ah ee u qalma, halyeeyada hore ee naafada ah, iyo kuwa kale ee naafada ayaa laga yaabaa inay u qalmaan in laga dhaafo canshuurta hantida oo buuxda ama qayb ahaan. www.bothellwa.gov/SafeStreetsSidewalksMeasure

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Erin Leonhart**
Agaasimaha Shaqooyinka Dadweynaha
425-806-6810
Erin.Leonhart@bothellwa.gov

# Bayaanka lagu taageerayo

Ryan Ellis, Jenne Alderks, Jeanne Zornes
prosafestreetscommittee@gmail.com

Tan iyo markii codbixiyeyaashu ansixiyeen kor-u-qaadista canshuurta Waddooyinka iyo Hareeraha Waddooyinka Ammaanka ah (Safe Streets and Sidewalks) sannadkii 2016, deganeyaasha magaalada Bothell waxay ka faa'iideysteen hagaajinnada hareeraha waddooyinka iyo waddooyinka magaalada oo dhan - hareeraha waddooyinka cusub ee la dhisay, calaamadaha nalalka ammaanka iyo calaamadda lugeeyeyaasha ee isgoysyada, hagaajinta laamiga iyo buuxinta godadka. Ardayda dugsiga hoose, dhexe, iyo sare ee magaalada Bothell hadda waxay leeyihiin waddooyin ammaan ah oo loo maro dugsiga.

Kor-u-qaadista canshuurta ayaa sidoo kale ka caawisay helitaanka $13 milyan oo dheeraad ah oo maalgelin ah oo ka timid gobolka, mahadsanid codbixiyeyaasha mudnaanta siiyay amniga waddooyinka.

Inkastoo horumar la sameeyay, haddana waxaa jira in ka badan 2,000 oo mashruuc oo aan weli helin maalgelin, 10% waddooyinka magaalada Bothell waxaa lagu qiimeeyay inay yihiin kuwo aad u liita ilaa heer dhexdhexaad ah, waxaana sii socda walaaca ay deganeyaasha ka qabaan tayada waddooyinka iyo meelaha ay baahida u qabaan hareeraha waddooyinka.

Cusbooneysiinta canshuurta iyada oo loo marayo Soo Jeedinta 1 waxay bixin doontaa hagaajinnada ammaanka meelaha u dhow jardiinooyinka, joogsiyada gaadiidka dadweynaha iyo adeegyada kale ee dadweynaha iyo sidoo kale isgoysyada halista ah, waxayna sidoo kale hagaajin doontaa tayada laamiga meelaha ay u baahan tahay guud ahaan magaalada.

Deganeyaasha waxay sii wadaan inay ammaanka iyo hagaajinta socodka u arkaan inay yihiin mudnaanta ugu sareysa. U codeynta ansixinta Soo Jeedinta 1 waxay si dhab ah u qaadataa walaacyada deganeyaasha iyadoo mudnaanta la siinayo dayactirka waddooyinka iyo hagaajinta ammaanka ee ardayda, lugeeyeyaasha, baaskiil wadeyaasha, rakaabka gaadiidka dadweynaha iyo darawallada.

Taageer Waddooyinka iyo Hareeraha Waddooyinka Ammaanka ah ee Magaalada Bothell. U codee in la ansixiyo Soo Jeedinta 1.

# Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

# Curaarta Ammaanka Dadweynaha iyo Xarunta Dayactirka

Golaha Magaalada ee Magaalada Mercer Island ayaa ansixiyay Xeerka 25-13 ee khuseeya soo jeedin lagu maalgelinayo Ammaanka Dadweynaha iyo Xarunta Dayactirka. Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay Magaalada u oggolaanaysaa inay naqshadeyso, dhisto, oo ay qalabayso dhismeyaal u adkaysan kara dhul-gariirka oo ka tirsan Qaybta Khatarta IV si ay hoy ugu noqdaan Waaxda Booliiska, kooxaha Dayactirka Shaqada Dadweynaha, Xarunta Hawlaha Degdegga ah, Teknolojiyadda Macluumaadka, Nidaamyada Macluumaadka Juqraafiyadeed, iyo Adeegga Macaamiisha; ay bixiso ilaa iyo $103,160,000 oo ah curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya muddo ah ugu badnaan 25 sanno; iyo in la soo rogo canshuuraha hantida ee sannadlaha ah ee xad dhaafka ah si dib loogu bixiyo curaarta, sida ku cad Xeerka 25-13.

Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo:

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa **Haa ama Maya** ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: 60% codeyn haa ah iyo soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee codbixiyeyaasha dhiibtay warqadaha codbixinta doorashadii guud ee ugu dambeysay (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(b))*

## Bayaanka sharaxaadda

Xarumaha joogtada ah ee adeegyada muhiimka ah ee Magaalada Mercer Island ayaa duugoobay ama fashilmay oo u baahan in la beddelo. Xarumahani waa muhiim si loo sugo ammaanka dadweynaha, jawaabta degdegga ah iyo tan duufaanta, waddooyin si wanaagsan loo ilaaliyo oo ammaan ah, dayactirka biyaha iyo bullaacadaha, ka saarista barafka adag iyo barafka soo da'a, iyo jardiinooyin ammaan ah oo nadiif ah, aagagga furan, iyo waddooyinka socodka.

Soo Jeedinta 1 waxay u oggolaanaysaa Magaalada inay soo saarto curaarta si loo maalgeliyo naqshadaynta iyo dhismaha Xarunta Ammaanka Dadweynaha iyo Dayactirka, taasoo beddeli doonta Dhismaha Shaqada Dadweynaha ee hadda jira, goobta dayactirka, iyo xarumaha booliiska ee ku meel gaarka ah. Xarunta cusub waxay siin doontaa goob joogto ah Waaxda Booliiska ee Magaalada, kooxaha Dayactirka Shaqada Dadweynaha, Xarunta Hawlaha Degdegga ah, Teknolojiyadda Macluumaadka, Nidaamyada Macluumaadka Juqraafiyadeed, iyo Adeegga Macaamiisha.

Xarunta Ammaanka Dadweynaha iyo Dayactirka waxaa laga dhisi doonaa dhulka Magaalada ee goobta Dhismaha Shaqada Dadweynaha ee hadda jira iyo Hoolka Magaalada ee si joogto ah loo xiray. Xarunta la soo jeediyay waxaa ku jiri doona saldhig booliis iyo dhismo xafiis, dhismo dayactir, barxad hawlgal, xarumaha lagu daadiyo iyo lagu dhaqo, iyo meelaha lagu keydiyo baabuurta, qalabka, iyo agabka oo daboolan. Dhismeyaashan waxaa loo naqshadeeyay Qaybta Khatarta IV si ay ugu adkaystaan dhacdooyin dhul-gariirk oo waaweyn. Xaruntu waxay taageeri doontaa kordhinta waxtarka hawlgalka, kordhinta cimriga gaadiidka iyo qalabka, hagaajinta jawaabta degdegga ah, iyo soo celinta adeegga macaamiisha ee fool-ka-fool.

Soo Jeedinta 1 waxay oggolaanaysaa soo saarista ilaa $103,160,000 oo curaarta waajibaadka guud ah iyo soo rogista canshuuraha hantida ee dheeraadka ah si dib loogu bixiyo curaarta muddo 25 sanno ah. Tani waxay u dhigantaa qiyaastii $55 bishii guri qiimihiisu yahay $2,000,000.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Andrea Larson**
Karaaniga Magaalada
(206) 275-7793
cityclerk@mercerisland.gov

## Bayaanka lagu taageerayo

Russel Federman, Robert Sulkin, Benson Wong

Booliiska ilaaliya xaafadaha iyo ganacsiyada bulshadeenna waxay ka shaqeeyaan teendhooyin ku meel gaar ah, taasoo ka dhigaysa in aan la heli karin shahaado. Waaxda Shaqada Dadweynaha (PWD) waxay sii waddaa adeegyada, waddooyinka nadiifka ah, iyo jardiinooyinka nadiifka ah. Laakiin waxay ka shaqeynayaan dhismeyaal duugoobay oo burburaya. Dhismeyaasha ku meel gaarka ah iyo kuwa sii burburaya ee isku dhafan waa kuwo aan waxtar lahayn oo aan waarayn. Maadaama shaqaalaha ay ku kala firirsan yihiin Jasiiradda, jawaabta degdegga ah iyo hawlaha Magaalada way adagtahay in la isku dubarido. Dhismeyaashan ma awoodaan inay sii wataan ujeeddadoodii loogu talagalay, qalabka iyo gaadiidka qiimaha leh ee Magaalada ayaa bannaanka lagu daayaa, oo ay soo gaaraan cimilada, taasoo yaraynaysa cimrigooda.

Soo Jeedinta 1, oo si wadajir ah ay u ansixiyeen Golaha Magaalada, waxay maalgelin doontaa Xarun Cusub oo Ammaanka Dadweynaha iyo Dayactirka si ay u bixiso goobaha shaqada ee casriga ah ee u adkaysan kara dhul-gariirka heerka IV ee shaqaalaha muhiimka ah iyo qalabka. Waxay ka caawin doontaa Magaalada inay shaqaaleysiiso oo ay sii haysato saraakiisha booliiska iyo shaqaalaha PWD, taasoo hagaajinaysa jawaabta degdegga ah iyo tan barafka.

Kama hadlayno raaxo, laakiin waxaan ka hadlaynaa badbaado aasaasi ah iyo shaqeyn. Hoolka Magaalada ayaa la xiray markii kharashka ka saarista asbestoska uu ka badnaa qiimihiisa, iyo dhismaha PWD ayaa sannado badan aan helin hagaajin ku filan.

Haddii aad haa ugu codeyso Soo Jeedinta 1, waxay isku keenni doontaa Adeegyada Ammaanka Dadweynaha iyo shaqooyinka Magaalada ee ugu muhiimsan, taasoo taageeraysa kooxaha gurmadka ee ugu horreeya isla markaana u oggolaanaysa jawaab celin degdeg ah, hufan, wax ku ool ah, oo isku dubaridan oo ka dhacda Mercer Island.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Mike Cero
www.miforss.com

Baaritaan adag ayaa muujinaya in naqshadda ay soo jeedisay Magaalada ay tahay mid aad u xad-dhaaf ah. Dhismaha la soo jeediyay ayaa ku dhawwaad labanlaab ka weyn dhismeyaasha hadda jira. Goobta keydinta ee daboolan ayaa ah 4.7 jeer ka weyn aagga hadda jira. Goobta xafiiska ayaa la soo jeediyay inay noqoto 44% ka weyn goobta hadda jirta, hase yeeshee shaqaale badan ayaa ka shaqeeya meel fog. Awoodda gaadiidka booliiska ayaa la qorsheeyay in la ballaariyo 50%. Si kastaba ha ahaatee, kororka dadweynaha ee la qiyaasay tan iyo 1990 waa ka yar yahay 1% sannadkii, waxaana la filayaa in is diiwaan gelinta ardayda ay hoos u dhacdo. Magaalada ayaa ururinaysa awood aan loo baahnayn oo aad u badan taas oo ku kacaysa kharash weyn oo laga fogaan karo canshuur-bixiyeyaasha.

Curaarta la soo jeediyay oo ah $103,000,000 ayaa ku kici doonta Canshuur Bixiyeyaasha Jasiiradda $174,000,000 oo dulsaar ribo ah. Guriga qiimihiisu yahay $2,300,000, taasoo ka dhigan 46% kordhin sannadle ah oo ku saabsan Canshuurta Hantida Magaalada, ama $660 sannadkii. In ka badan 25 sanno, canshuuraha dheeraadka ah waxay noqonayaan ku dhawwaad $19,000.

Xalka fudud waa in mashruuca la yareeyo si uu uga tarjumayo bisaylka Magaalada. Sidoo kale, waa in la tirtiro waxyaabaha aan muhiimka ahayn sida xarunta jimicsiga gaarka ah, qolalka labiska ee waaxyaha kala duwan, iyo daboolka baabuurta ee dhammaan baabuurta Magaalada.

Ku hadal magaca deriskaaga, kuna dheh Magaalada inay dib ugu noqoto qorshe sameynta adigoo ku codeynaya *Maya* Soo Jeedinta 1.

## Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Magaalada Mercer Island waxay u baahan tahay xarumo ammaan ah, shaqeynaya, oo adkaysi leh hadda. Kooxda naqshadaynta waxay soo gudbiyeen qorshe ku habboon oo ilaaliya hantida muhiimka ah, kordhiya faa'iidada bulshada, isla markaana hubinaaya in adeegyada Magaalada ay jiraan marka aad u baahan tahay. Soo Jeedinta 1 waxay mideynaysaa adeegyada muhiimka ah ee Ammaanka Dadweynaha iyo Dayactirka, iyadoo ilaalinaysa maalgelinta ka dhigaysa Magaalada Mercer Island magaalo adeeg buuxa leh, isla markaana hubinaysa inaan si wax ku ool ah uga jawaabno marka ay dhacaan xaaladaha degdegga ah.

Yaan lagugu marin habaabin xisaab khaldan iyo isbarbardhigyo been ah. Baro xaqiiqooyinka ku saabsan https://safe-mi.org/GetTheFacts.

## Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

# Beddelaadda Canshuurta ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Renton Lr. 403 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 20-24/25 ee khuseeya canshuur beddelaad ah oo loogu talagalay waxbarashada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha xad dhaafka ee soo socda, oo beddelaaya canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, looguna talagalay kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee uusan Gobolku maalgelin:

| Sannadka Ururinta | Canshuurta La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha La Qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.33 | $58,217,253 |
| 2028 | $1.34 | $61,514,773 |
| 2029 | $1.33 | $64,320,460 |
| 2030 | $1.32 | $66,735,516 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 20-24/25 lana raacayo xaddidaadaha sharciga ee heerarka canshuurta iyo caddadka wakhtiga canshuurta la soo rogo. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))*

## Bayaanka sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1 waxay Degmada Dugsiga Renton u oggolaanaysaa inay beddesho canshuurta barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee hadda jirta taas oo dhici doonta dhammaadka sannadka 2026. Canshuuraha laga soo ururiyo canshuurta beddelka ah waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada aan si buuxda loogu maalgelin Gobolka Washington, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, dhimmista tirada fasallada, teknolojiyadda, manhajka, dayactirka iyo hawlgallada, adeegyada nafaqada, amniga, la-talinta, taageerada shucuurta bulshada, ciyaaraha iyo hawlaha dugsiga dhexe iyo sare, iskuulka xagaaga iyo kobcinta iskuulka kadib, barnaamijyada muusigga iyo farshaxanka ee dugsiga hoose, macallimiinta beddelka ah, kalkaaliyeyaasha, cilmi-nafsiga, la-taliyeyaasha, adeegyada ardayda waxbarashada gaarka ah, iyo barnaamijyada kale ee taageerada ilmaha oo dhan. Horumarinta la codsaday waxaa loogu talagalay in lagu fuliyo waajibaadka sharciga ama filashada bulshada ee barnaamijyada dugsiga. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa bogga degmada www.rentonschools.us.

Canshuurta beddelaadda ah ee barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee afarta sanno ah ee la soo jeediyay ayaa oggolaanaysa ururinta canshuuraha si loo bixiyo ilaa $58,217,253 sannadka 2027, $61,514,773 sannadka 2028, $64,320,460 sannadka 2029, iyo $66,735,516 sannadka 2030. Heerka canshuurta ee halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay si loo soo saaro caddadyadaan waxaa lagu qiyaasayaa inuu noqon doono $1.33 sannadka 2027, $1.34 sannadka 2028, $1.33 sannadka 2029, iyo $1.32 sannadka 2030. Heerka canshuurta saxda ah iyo qaddarka la ururinayo waxaa laga yaabaa in la hagaajiyo iyadoo lagu salaynayo qiimaha dhabta ah ee qiimeynta la qiimeeyay ee hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada iyo xaddidaadaha uu soo rogay sharciga Gobolka wakhtiga canshuurta. Waxaa laga yaabaa in ka dhaafitaannada canshuuraha la helo, wac Waaxda Qiimeynta ee Degmada King, 206-296-3920.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Randy Matheson**
Agaasimaha Fulinta ee Xiriirada Bulshada
(425) 204-2345
randy.matheson@rentonschools.us

# Bayaanka lagu taageerayo

Ray Kusumi, Jacqueline Connell, Joshua Sieck

Codkaaga ee ku aaddan cusbooneysiinta canshuurta wuxuu u oggolaanayaa Dugsiyada Renton inay sii wadaan ballanqaadkooda waxbarasho tayo sare leh fasal kasta. Canshuurta Barnaamijyada Waxbarashada & Hawlgallada waxay bixisaa in ka badan 14% miisaaniyadda hawlgalka dugsiyada. Doolarka canshuurta ee maxalliga ah waa muhiim si loo maalgeliyo barnaamijyada muhiimka ah ee aan si buuxda loogu maalgelin Gobolka Washington, sida shaqaalaha amniga/ammaanka, waxbarashada gaarka ah, macallimiinta beddelka ah, shaqaalaha nadaafadda, barashada goorta hore ee ka hor-K, la-taliyeyaasha caafimaadka maskaxda, kalkaaliyeyaasha, iyo in ka badan.

Kani maaha canshuur cusub. Sannado badan, codbixiyeyaasha Degmada Dugsiga Renton waxay sii wadeen inay taageeraan canshuurtaan si ay u maalgeliso barnaamijyada ardayda iyo shaqaalaha muhiimka ah ee dugsiga. Dugsiyada Renton waxay qiimeeyaan taageeradaada, waxayna si xikmad leh u isticmaalaan lacagtaada, iyagoo leh rikoor tusaale ah oo ku saabsan maaraynta maaliyadeed, taas oo ka tarjumaysa maamul maaliyadeed oo xooggan.

Cabbirkan wuxuu faa'iido u leeyahay qof walba. Dugsiyada wanaagsan waxay si togan u saameeyaan xaafadaha, waxayna dhisaan bulshooyin xooggan, iyagoo ilaalinaya qiimaha hantideena. Iyada oo heerka canshuurta isku dhafan ee degmada uu hoos ugu dhacay $3.39, haa ku codeynta waa guul qof walba u ah. Ku soo biir kumanaanka deriskaaga ah ee sii wada taageerada maalgashigaan muhiimka ah ee carruurteena iyo dugsiyadeena adigoo u codeynaya haa Cabbirka 1.

# Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

**Soo Jeedinta Lr. 2**

# Beddelaadda Canshuurta ee Teknolojiyada iyo Mashaariicda Raasumaalka

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Renton Lr. 403 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 23-24/25, ee khuseeya canshuur raasumaal si loo maalgeliyo teknolojiyada waxbarashada iyo hagaajinnada dugsiga. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha xad dhaafka ee soo socda, oo beddelaaya canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si loo sii wado maalgelinta qalabka teknolojiyada waxbarashada, kaabayaasha iyo hagaajinnada iyo dib-u-habeynta, casriyaynta iyo hagaajinta xarumaha dugsiga ee hore u jira:

| Sannadka Ururinta | Canshuurta La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha La Qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.72 | $30,000,000 |
| 2028 | $0.69 | $30,000,000 |
| 2029 | $0.65 | $30,000,000 |
| 2030 | $0.62 | $30,000,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 23-24/25. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 2

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))*

## Bayaanka sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 2 waxay Degmada Dugsiga Renton u oggolaanaysaa inay beddesho canshuur hore oo loogu talagalay dib-u-hagaajinta xarumaha dugsiga taas oo dhici doonta dhammaadka sannadka 2026. Canshuurta beddelaadda ah ee hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha ee la soo jeediyay waxay sii wadi doontaa maalgelinta qalabka teknolojiyadda waxbarashada, kaabayaasha iyo hagaajinta, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: (1) helidda, rakibidda, hirgelinta iyo casriyaynta teknolojiyadda degmada oo dhan, teknolojiyadda ardayga, manhajka dhijitaalka ah ee isku dhafan, nidaamyada iyo xarumaha waxbarashada STEM, tababarka teknolojiyadda ee macallimiinta si ay u taageeraan waxbarashada fasalka, iyo qalabka kale ee teknolojiyadda waxbarashada, kaabayaasha, nidaamyada iyo xarumaha; iyo (2) sameynta hagaajino iyo casriyayn kale oo ku saabsan nidaamyada iyo xarumaha teknolojiyadda ee Degmada.

Canshuurta beddelaadda ah ee hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha ee la soo jeediyay waxay sidoo kale sii wadi doontaa maalgelinta kharashaadka lagu dayactirayo, casriyaynayo, hagaajinaayo iyo kor loogu qaadayo xarumaha dugsiyada ee jira, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: (1) sameynta hagaajinta caafimaadka, badbaadada, amniga, waxtarka tamarta, waxbarashada, ciyaaraha, xarumaha iyo kaabayaasha; (2) wax ka qabashada heerarka waxqabadka dhismaha nadiifka ah, oo ay ku jiraan Xeerka Dhismeyaasha Nadiifka ah ee Washington; iyo (3) helitaanka dhul iyo xuquuqaha dhul ahaan goobaha xarumaha cusub iyo kuwa la ballaariyay ee Degmada.

Canshuurta hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha ee afarta sanno ah ee la soo jeediyay waxay oggolaanaysaa ururinta canshuuraha si loo bixiyo $30,000,000 sannad kasta laga bilaabo 2027 ilaa iyo 2030. Heerka canshuurta ee halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay si loo soo saaro caddadyadaan waxaa lagu qiyaasayaa inuu noqon doono $0.72 sannadka 2027, $0.69 sannadka 2028, $0.65 sannadka 2029, iyo $0.62 sannadka 2030. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa bogga Degmada www.rentonschools.us. Waxaa laga yaabaa in ka dhaafitaannada canshuuraha la helo, wac Waaxda Qiimeynta ee Degmada King, 206-296-3920.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Randy Matheson**
Agaasimaha Fulinta ee Xiriirada Bulshada
(425) 204-2345
randy.matheson@rentonschools.us

# Bayaanka lagu taageerayo

Ray Kusumi, Jacqueline Connell, Joshua Sieck

Canshuurta beddelaadda ah ee hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha/teknolojiyadda waa muhiim u ah ardaydeenna iyo macallimiinteena, iyadoo dib loo cusbooneysiinayo maalgelinta muhiimka ah ee la ansixiyay 2022-ka afarta sanno ee soo socota, ilaa 2030-ka. Maadaama maalgelinta aasaasiga ah ee waxbarashada gobolka ay ku filnaan weyday teknolojiyadda fasalka iyo dayactirka dugsiga, canshuurtaan waxay hubinaysaa in dugsiyadeenu ay sii ahaadaan kuwo u qalma guul. Adigoo u codeynaya tallaabadan, waxaad taageeraysaa baahiyaha muhiimka ah sida qalabka casriga ah ee ardayda iyo shaqaalaha, helitaanka internetka oo la hagaajiyay guriga iyo dugsiga, iyo amniga internetka oo la xoojiyay. Maalgelintaan waxay sidoo kale siin doontaa teknolojiyadda caawinaadda ardayda leh baahiyaha waxbarashada gaarka ah iyo farsamayaqaannada loo baahan yahay si loo ilaaliyo qalabkeena. Muhiim ahaan, canshuurtaan ma soo kordhinayso canshuur cusub; waxay keliya cusbooneysiinaysaa hindise dhammaanaya oo muujiyay qiimaheeda. Tan iyo 2016, heerka canshuurta deegaanka ayaa hoos u dhacay 36%, taasoo muujinaysa sida aan uga go'an tahay maaraynta maaliyadeed ee mas'uulka ah iyadoo weli mudnaanta la siinayo waxbarashada. Codkaaga ee canshuurta beddelaadda ah ee hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha/teknolojiyadda waa cod u ah mustaqbalka carruurteena — hubinta inay haystaan agabyada iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay ugu koraan adduunka dhijitaalka ah. Aan isugu imaanno inaan maalgelino waxbarashada ardaydeennu ay mudan yihiin!

# Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Kor-U-Qaadista Canshuurta ee Adeegyada Daryeelka Caafimaadka

Guddiga Degmada Isbitaalka Dadweynaha ee Degmada King Lr. 1, Degmada King, Washington (Valley Medical Center) ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 1066 ee khuseeya ku soo rogista canshuurta hantida caadiga ah ee degmada. Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay bixin doontaa maalgelin dheeraad ah oo hawlgal iyo raasumaal ah oo loogu talagalay Valley Medical Center si ay u bixiso adeegyada isbitaalka iyo daryeelka kale ee caafimaadka ee deganeyaasheeda iyo dadka kale ee ay u adeegto Valley Medical Center. Waxay oggolaanaysaa ugu badnaan heerka canshuurta hantida caadiga ah oo ururinta ay bilaabanayso 2026 oo ah 75 senti ka mid ah $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay. Caddadka canshuurta 2026 ayaa loo isticmaali doonaa ujeeddada la xiriirta xisaabinta xaddidaadaha canshuuraha ee sannadaha ku xiga. Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa inaad **Ansixiso ama Diido** Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Degmada Isbitaalka Dadweynaha ee Degmada King Lr. 1 waxay maamushaa Xarunta Caafimaadka ee Valley Medical Center. Waxay bixisaa adeegyo caafimaad oo isbitaal ah, adeegyo caafimaad oo aan isbitaal ahayn, iyo adeegyo kale oo caafimaad oo loogu talagalay dadka degan degmada isbitaalka dadweynaha iyo dadka kale ee ay u adeegto degmada.

Sida ku cad sharciga Gobolka, degmooyinka isbitaalka dadweynaha waxaa loo oggol yahay inay soo rogaan canshuurta hantida caadiga ah heer dhan ugu badnaan 75 senti halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay, ujeeddaduna tahay hawlgalka iyo dayactirka isbitaalka iyo xarumaha kale ee caafimaadka iyo adeegyada. Sababtoo ah sharciga Gobolka wuxuu xaddidayaa inta ay canshuuraha kordhin karaan iyada oo aan oggolaanshaha codbixiyeyaasha la helin, heerka canshuurta ee Valley Medical Center ayaa sannadihii la soo dhaafay hoos ugu dhacay qiyaastii 29 senti sannadkii 2025.

Guddiga Guddoomiyeyaasha ee Valley Medical Center oo si dadweyne loo doortay ayaa go'aamiyay in ay lagama maarmaan tahay oo ay dan ugu jirto dadka degan ee ay adeegto Valley Medical Center in la codsado oggolaansho si loo kordhiyo heerkeeda canshuurta hantida caadiga ah ilaa 75 senti halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay laga bilaabo 2026, taas oo noqonaysa koror qiyaastii 46 senti ah marka loo eego heerka hadda jira. Canshuurtaan waxay siin doontaa maalgelin dheeraad oo hawlgal iyo hagaajinta waaweyn ee dhismayaasha ah si loo taageero bixinta adeegyada isbitaalka iyo adeegyada kale ee daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan maalgelin lagu sii wado adeegyada degdegga ah ee badbaadinta nolosha, daryeelka ka hortagga, iyo adeegyo kale oo caafimaad oo loogu talagalay bulshada ay u adeegto Valley Medical Center.

Caddadka canshuurta ee 2026 ayaa loo isticmaali doonaa ujeeddooyinka xisaabinta xaddidaadaha canshuuraha ee Degmada sannadaha ku xiga.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Elizabeth Nolan**
Madaxa Sarkaalka Isgaarsiinta iyo Suuqgeynta
(425) 690-3112
liz_nolan@valleymed.org

## Bayaanka lagu taageerayo

Carol Barber, Anthony Berkley, Dustin Lambro
LevyOutreach@gmail.com

Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 1 ee Degmada King, oo loo yaqaan Valley Medical Center, waxay u adeegaysay bulshadaan ku dhawwaad 80 sanno. Anagoo ah xubno ka tirsan bulshada, waxaan aragnay baahiyaha daryeelka caafimaadka oo sii kordhaaya oo isbeddelaya, waxaana Valley ay si adag ugu shaqeynaysaa inay la jaan qaaddo baahiyahaas.

Marka kuwa aan jecel nahay ay u baahan yihiin caawinaad caafimaad – xaalad degdeg ah, baaritaanno joogto ah, ama daryeel gaar ah – helitaanka daryeel caafimaad oo tayo sare leh waa inuu ahaadaa mid u dhow guriga.

*Ku codee Haa Soo Jeedinta Lr. 1 ee Isbitaalka si loo sugo mustaqbalka daryeelka deegaanka*. Valley waxay bixisaa adeegyo isbitaal oo muhiim ah 24 saacadood maalintii, oo ay ku jiraan dhalmada, dhaawacyada iyo daryeelka degdegga ah, iyo daryeelka daran ee isbitaalka.

*Ku codee Haa si daryeelka caafimaadku uu ugu dhawwaado gurigaaga*. Hel daryeelka aad u baahan tahay halka aad ku nooshahay. Helitaanka daryeel heer sare ah oo dhowr daqiiqo u jira waxay ka dhigan tahay walaac yar, safarro gaagaaban, iyo wakhti badan oo lala qaato kuwa aad jeceshahay.

*Ku codee Haa si xirfado looga dhiso gudaha Koonfurta Degmada King*. Shaqaalaha Valley waxaa ka go’an inay u adeegaan bulshadeenna sidii qoys. Waxay u baahan yihiin xasillooni, mushahar tartan leh, iyo fursado ay ku bartaan oo ay kula koraan bulshadeenna.

Nagu soo biir ee ku codeynta *Haa* si aan u wajahno caqabadahaan oo aan dib ugu cusbooneysiino taageerada Valley Medical Center - isbitaalkeena madax-bannaan ee bulshada iska leh.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Beddelaadda Canshuurta ee Dayactirka, Hagaajinta iyo Hawlgalka

Ma tahay in Jardiinka iyo Aagga Adeegga Madadaalada ee Northshore loo oggolaado inay soo rogaan canshuuraha hantida caadiga oo ah shan senti ($.05) ama ka yar oo ka mid ah kunkii doolar ee qiimeynta la qiimeeyay muddo lix (6) sanno oo isku xigta ah?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: 60% codeyn haa ah iyo midkood (1) soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee tirada codbixiyeyaasha ka dhiibtay warqadaha codbixinta gudaha degmada canshuurta doorashadii guud ee ugu dambeysay ama (2) haddii soo bixitaanku ka yar yahay 40% ee tirada codbixiyeyaasha ka dhiibtay warqadaha codbixinta gudaha degmada canshuurta doorashadii guud ee ugu dambeysay ka dib tirada codadka haa waa inay noqotaa 60% ka mid ah 40% ee tirada codbixiyeyaasha ka dhiibtay warqadaha codbixinta gudaha degmada canshuurta doorashadii guud ee ugu dambeysay (RCW 36.69.145)*

## Bayaanka sharaxaadda

Haddii la ansixiyo, Soo Jeedinta 1 waxay cusbooneysiin doontaa soo rogitaan canshuur hanti oo lix sanno ah oo loogu talagalay Aagga Adeegga Jardiinka iyo Madadaalada ee Northshore (NPRSA), laga bilaabo 2026. NPRSA waa degmada ujeeddada gaarka ah ee dayactirta laba xarumood oo dadweyne: Xarunta Waayeelka ee Northshore iyo Xarunta Caafimaadka & Daryeelka iyo Caafimaadka Dadka Waaweyn, oo u adeegta deganeyaasha magaalada Bothell, Kenmore, Woodinville, waqooyiga degmada King iyo koonfurta degmada Snohomish.

Maalgelinta canshuurta waxaa loo isticmaali doonaa dayactirka dhismeyaasha loo baahan yahay, beddelka kaabayaasha duugoobay, casriyaynta si loo hubiyo badbaadada iyo helitaanka, hagaajinta waxtarka tamarta, iyo horumarinta kale ee xarumaha loo baahan yahay. Canshuurta ayaa sidoo kale maalgelin doonta dayactirka joogtada ah si loo ilaaliyo xaaladda iyo isticmaalka xarumaha.

Cabbirku wuxuu u oggolaanayaa NPRSA inay ururiso canshuurta hantida heerka aan ka badnayn $.05 halkii $1,000 ee qiimaha canshuurta lagu qiimeeyay; ama qiyaastii $50 sannadkii ($4.17 bishii) guri leh qiime canshuur lagu qiimeeyay oo ah hal milyan oo doolar. Canshuurtii hore ee bixinaysay maalgelin la mid ah ayaa la filayaa inay dhacdo dhammaadka 2025.

Adeegyada iyo barnaamijyada ku dhex jira dhismeyaasha NPRSA waxaa bixiya Xarunta Waayeelka ee Northshore, oo ah urur aan faa'iido doon ahayn oo gooni ah. Barnaamijyadaan waxay ka mid yihiin adeegyada caafimaadka, hawlaha jimicsiga iyo daryeelka, cuntada bulshada, iyo adeegyo kale oo loogu talagalay dadka waayeelka ah iyo dadka naafada ah.

Haddii cabbirka la ansixiyo, NPRSA waxaa loo oggolaan doonaa inay canshuurta hantida soo rogto sannad walba muddo lix sanno ah si ay u maalgeliso hagaajinta dhismeyaasha iyo hawlaha dayactirka. Haddii cabbirkan aan la ansixin, canshuurta hadda jirta ayaa dhacaysa oo maalgelintaan lama cusbooneysiin doono.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Christine Scotton**
Maamulaha Barnaamijka
(425) 219-6941
nprsa@bothellwa.gov

## Bayaanka lagu taageerayo

Patricia Gustafson, Vincent Keane, David Baker
vote.yes.on.NPRSA.prop1@gmail.com

Aagga Adeegga Jardiinooyinka iyo Madadaalada ee Northshore (NPRSA) ayaa leh oo dayactira dhismeyaasha ay isticmaalaan Xarunta Waayeelka ee Northshore (NSC), oo ah urur aan faa'iido doon ahayn oo muhiim ah oo sannad walba u adeega in ka badan 5,000 oo waayeel ah, shakhsiyaad naafada ah, iyo daryeeleyaashooda. Barnaamijyada NSC waxay la dagaalamaan amni darada cuntada, kor u qaadaan caafimaadka, taageeraan dhallinyarada baahiyaha gaarka ah leh, waxayna yareeyaan go'doonka bulshadeenna.

NSC waa xarunta keliya ee waayeelka ee gobolkeena oo awood u leh inay bixiso barnaamijka caafimaadka maalinta dadka waaweyn. Tusaale ahaan, markii barnaamijka caafimaadka maalinta dadka waaweyn ee u dhow uu xirmay horraantii sannadkan, NSC waxay awooday inay bixiso adeegyo loogu talagalay waayeellada ay saameysay. Dhammaan ka qaybgaleyaasha waxay ka caawiyaan sii wadidda iyo ballaarinta barnaamijyada qiimaha leh, maadaama lacagaha canshuurta ay si sharci ah ugu xaddidan yihiin isticmaalka dayactirka, ilaalinta, iyo hawlgalka dhismeyaasha iyo xarumaha, ee aan loogu talagalin kharashaadka barnaamijyada shakhsiyeed.

Mahadsanid kor-u-qaadista canshuurta ee 2019 oo ay ansixiyeen codbixiyeyaasha, guddiga NPRSA, oo leh maamul daah-furan oo heellan, waxay beddeleen saqafyada duugoobay, nidaamyada HVAC, waxayna hagaajiyeen ammaanka. Rikoorada kharashka canshuurta oo dhammaystiran, daqiiqadaha, iyo fiidiyowyada kulamada ayaa laga heli karaa nprsawa.org.

Kor-u-qaadista canshuurta lixda sanno ah waxay celcelis ahaan ku kacaysaa qiyaastii $4.17 bishii (guri qiimihiisu yahay $1 milyan) si ay u sii furnaato, ammaan u ahaato, oo soo dhawweyn u ahaato jiilalka hadda iyo mustaqbalka ee NSC. Ku codee "haa" si loo taageero caafimaadka, wanaagga, iyo adkeysiga bulshadeenna oo dhan.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 19950

XEER la xiriira maalgelinta iyo bixinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One; oo bixinaaya u soo gudbinta codbixiyeyaasha u qalma ee Degmada King, doorashada khaaska ah ee Nofeembar 4, 2025, ee ah soo jeedin lagu maalgelinayo adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan degmada oo dhan iyadoo la oggolaanayo sii wadidda canshuurta hantida caadiga ah muddo lix sanno oo isku xigta, oo ururinta bilaabanayso 2026, heer ah $0.25 ama ka yar oo ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay, si loo bixiyo adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One.

HORDHAC:

Nidaamka Adeegyada Caafimaadka Degdegga ah ee Medic One ("EMS") ee Degmada King, oo si guud loogu yaqaan Medic One, waa iskaashi isku dhafan oo ay maalgeliso dadweynaha oo ka dhexeeya degmada, magaalooyinka, degmooyinka dab-damiska, maamul goboleedyada dab-damiska, isbitaalada, iyo Jaamacadda Washington (University of Washington).

Medic One/EMS waa nidaam jawaab celin heerar kala duwan leh oo ku saleysan qaabka caafimaad goboleedka iyo iskaashiga wadajirka ah. Adeegyada ay bixiyaan shaqaalaha EMS waxaa laga soo qaatay heerarka ugu sareeya ee tababarka caafimaadka, dhaqamada iyo daryeelka, caddeynta sayniska, iyo kormeer dhow oo ay sameeyaan dhakhaatiir khibrad u leh daryeelka EMS. Waxaa ku jira taageerada nolosha aasaasiga ah ee ay bixiyaan magaalada, degmada dab-damiska, iyo maamulka dab-damiska ee goboleedka ee farsamayaqaannada caafimaadka degdegga ah, taageerada nolosha sare ee ay bixiyaan dhakhaatiirta caafimaadka tababaran ee Jaamacadda Washington / Harborview Medical Center, iyo barnaamijyada taageerada goboleedka ee bixiya tababarka deganeyaasha iyo shaqaalaha EMS, xakamaynta caafimaadka goboleedka, iyo horumarinta tayada. Nidaamka Medic One/EMS ee Degmada King waxaa loo aqoonsaday inuu yahay mid ka mid ah barnaamijyada adeegyada caafimaadka degdegga ah ee ugu wanaagsan dalka. Waxay badbaadisaa kumanaan naf sannad kasta, iyadoo bixisa adeegyo badbaadin naf ah celcelis ahaan labadii daqiiqo kasta. Marka la barbar dhigo bulshooyinka kale, dhibaneyaasha wadno-istaagga ayaa laba ilaa saddex jeer u badan inay ku badbaadaan gudaha Degmada King. Sannadka 2023, Degmada King waxay gaartay heer badbaadin boqolkiiba koow iyo konton ee xanuunka wadno-istaagga, taas oo ka mid ah heerarka ugu sareeya ee laga soo sheegay dalka.

Bixinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan degmada oo dhan waa ujeeddada dadweynaha ee Degmada King. Degmada King waxay taageertaa adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One iyada oo adeeg goboleed ah oo u baahan doorka hoggaamineed ee joogtada ah ee degmada. Degmada waa inay sii waddaa inay hoggaamiso oo ay qaadato mas'uuliyadda hubinta horumarinta nidaamsan iyo dhammaystiran iyo bixinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One guud ahaan degmada oo dhan.

Walaaca ku saabsan hubinta sii wadidda barnaamijka Medic One/EMS ee guud ahaan degmada oo dhan waxaa wadaagga magaalooyinka Degmada King, degmooyinka ilaalinta dabka, iyo maamul goboleedyada dab-damiska kuwaas oo ka qayb qaata barnaamijyada adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One.

Maalgelin joogto ah oo loogu talagalay nidaamka Medic One/EMS ee goboleedka ayaa loo baahan yahay si loo sii wado adeeggan muhiimka ah ee deganeyaasha degmada King.

HA NOQOTO MID AY AMARTAY GOLAHA DEGMADA KING:

QAYBTA 1. **Ansixinta magaalooyinka ka badan 50,000 oo dadweyne ah.** Ayada oo la raacayo RCW 84.52.069, ka hor inta aan loo gudbin codbixiyeyaasha Degmada King ee halka doorashada gaarka ah ee Nofeembar 4, 2025, oggolaanshaha in soo jeedintaan canshuurta ee degmada oo dhan lagu daro warqadda codbixinta waxaa laga heli doonaa awoodda sharci-dejinta ee aqlabiyadda ugu yaraan boqolkiiba shan iyo toddobaatan ee dhammaan magaalooyinka degmada ee ah in ka badan 50,000 oo dadweyne.

QAYBTA 2. **Qeexitaannada.** Qeexitaannada qaybtaan ku jira ayaa khuseeya dhammaan xeerkan ilaa in mawduuca si gaar ah qaab kale loogu qeexo mooyaane.

A. "Degmo" waxaa loola jeedaa Degmada King.

B. "Canshuurta" waxaa loola jeedaa canshuurta caadiga ah laga qaado canshuurta hantida, oo loogu talagalay ujeeddo gaar ah iyo

muddada lagu bixiyay xeerkan oo ay oggolaadeen codbixiyeyaasha si waafaqsan sharciga gobolka.

C. "Lacagta Canshuurta" waxaa loola jeedaa caddadka lacagta lafaha ah ee ay soo gelisay canshuurta, dakhli kasta oo dulsaar ah oo ka soo gala lacagta iyo dakhliga ka soo baxa maalgelin kasta oo ku meel gaar ah ka dib oggolaanshaha canshuurta.

QAYBTA 3. **Magdhowga Magaalada Seattle.** Waxaa la aqoonsaday in magaalada Seattle ay maamusho oo ay maalgeliso barnaamijka adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One kaas oo ka madax bannaan barnaamijka degmada laakiin qayb ka ah nidaam

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 19950

goboleedka gaarsiinta.  Dhammaan dakhliga canshuurta ee lasoo ururiyay iyadoo la raacayo canshuurta la oggolaaday ee xeerkan laga soo ururiyay hantida la canshuuri karo ee ku taal xuduudaha sharciga ah ee magaalada Seattle waa in dib loo celiyo oo loo wareejiyo magaalada Seattle oo loo isticmaalo keliya barnaamijka adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Seattle Medic One iyadoo la raacayo RCW 84.52.069.

QAYBTA 4.  **U soo gudbinta canshuurta ee codbixiyeyaasha.**  Si loo bixiyo maalgelinta lagama maarmaanka ah ee nidaamka Medic One/EMS iyadoo la raacayo awoodda RCW 84.52.069, golaha degmada wuxuu u soo bandhigi doonaa codbixiyeyaasha degmada soo jeedin oggolaanaysa soo rogitaan canshuur hanti oo caadi ah muddo lix sanno oo isku xiga, iyadoo ururinta ay bilaabanayso 2026, heer aan ka badnayn $0.25 halkii kun oo doolar ee qiimaha la qiimeeyay.  Sida ku cad sharciga gobolka, canshuurtaan waxaa laga dhaafayaa xaddidaadaha heerka sida uu dhigaayo RCW 84.52.043, laakiin waxay ku xiran tahay xaddidaadaha sannadaha labaad ilaa lixaad ee lagu soo rogay cutubka 84.55 RCW.

QAYBTA 5.  **Dabaajiga dakhliga canshuurta.**  Marka laga reebo dakhliga canshuurta ee loo wareejiyay magaalada Seattle sida ku cad qaybta 3 ee xeerkan, dhammaan dakhliga canshuurta waa in lagu shubaa sanduuqa adeegyada caafimaadka degdegga ah ee degmada.

QAYBTA 6.  **Kharashyada u qalma.**  Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaasha u qalma ee degmada, dhammaan dakhliga laga helo canshuurta ee xeerkan waxaa loo isticmaali doonaa si waafaqsan RCW 84.52.069.

QAYBTA 7.  **Ku baaq doorasho gaar ah.**  Si waafaqsan RCW 29A.04.321, doorasho gaar ah ayaa loogu baaqayaa Nofeembar 4, 2025, si loo tixgeliyo soo jeedin oggolaanaysa canshuurta hantida caadiga ah oo dheeraad ah oo loogu talagalay ujeeddooyinka lagu sharxay xeerkan.  Agaasimaha doorashooyinka waa inuu sababo ogeysiis in la siiyo xeerkan sida waafaqsan dastuurka gobolka iyo sharciga guud iyo in uu u gudbiyo codbixiyeyaasha degmada ee u qalma, ee doorashada gaarka ah ee la sheegay, soo jeedinta hadda ka dib hore loo wado.  Karaaniga golaha waa inuu u shahaadeeyo soo jeedintaas agaasimaha doorashooyinka, isagoo u qoran qaab ahaan sida soo socota:

SOO JEEDINTA KOOWAAD:  Golaha Degmada King ayaa hirgeliyay Xeerka _____ ee khuseeya sii wadidda maalgelinta nidaamka adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan degmada oo dhan. Haddii Degmada King loo oggolaado inay beddesho canshuurta dhacaysa iyadoo soo rogaysa canshuur hanti oo joogto ah oo ah $0.25 ama ka yar oo ka mid ah kunkii dollar ee qiimeynta la qiimeeyay mid kasta oo ka mid ah lix sanno oo isku xigta, iyadoo la ururinayo laga bilaabo 2026, sida ku cad Xeerka Degmada King ___, si loo sii wado bixinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One:

Haa _____

Maya _____

QAYBTA 8.  **Heshiiska isku dhafka deegaanka**.  Maamulaha degmada waxa loo idmaday oo la farayaa in uu heshiis isku dhaf ah la galo magaalada Seattle ee la xiriira barnaamijka Medic One, si loo fuliyo qodobbada qaybta 3 ee xeerkan.

QAYBTA 9.  **Buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka.**  Agaasimaha doorashooyinka waxaa halkan lagu siiyay oggolaansho oo laga codsanayaa in uu diyaariyo oo qaybiyo buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka, si waafaqsan K.C.C. 1.10.010, doorashada gaarka ah ee loogu baaqay xeerkan, kharashka buug-yaraha in lagu daro qayb ka mid ah kharashka doorashada.

QAYBTA 10.  **Ka-dhaafitaanka.**  Canshuuraha hantida caadiga ah ee dheeraadka ah ee xeerkan oggol yahay waxaa lagu dari doonaa wax kasta oo canshuur dhaaf ah oo hanti dhab ah oo uu oggolaaday RCW 84.36.381, haddii sharcigaas uu wax ka beddelo golaha sharci dejinta ee gobolka inta lagu jiro muddada canshuurtaan.

QAYBTA 11.  **Ansixinta.** Shahaadaynta soo jeedinta ee karaaniga golaha degmada ee ku aaddan agaasimaha doorashooyinka ee Degmada King si waafaqsan sharciga ka hor doorashada Nofeembar 4, 2025, iyo fal kasta oo kale oo waafaqsan maamulka iyo ka hor taariikhda dhaqan gelinta xeerkan waa la ansixiyay oo la xaqiijiyay.

QAYBTA 12.  **Kalagoynta.** Haddii wax qodob ah oo ka mid ah xeerkan ama dhaqankiisa oo ku aaddan qof ama xaalad kasta laga helo inay tahay mid aan ansax ahayn, inta ka hartay xeerka ama ku dhaqankiisa ma ay saameynayo qodobka dadka kale ama xaaladaha kale.

# Runtu waa muhiim




**Inta u dhexeysa dooda xisbinimo ee halka dhinac raacsan iyo xogta khaldan, mararka qaarkood dariiqa loo maro runta ayaa noqon kara mid aan caddeyn. Waxaad halkan ka heli kartaa qaar ka mid ah talooyinka loo maro sidii aad u heli lahayd xaqiiqooyinka:**



## Su'aal xogta.

Haddii aad oonleenka ku aragto wax jahawareer ah ama aad ka maqasho saaxiib, xubin ka mid ah qoyskaaga, ama qof wax isla wadaagtaan, daqiiqad qaado si aad u ogaato halka macluumaadka uu ka yimid. Ogaanshaha in xogta la yaqaano oo la aaminni karo waxay kaa caawini kartaa inaad ogaato in xogtu run tahay iyo in kale.



## Si maskax leh uga fikir.

Waxay noqon kartaa mid waxtar leh (gaar ahaan marka aad shay si xooggan dareen ugu hayso) inaan daqiiqad qaadano oo aan ku dabaqno xiisaha xaaladda. Is celi si aad uga fiirsato dhowr su'aalood oo fudud: Yaa soo gudbinaaya macluumaadkan? Waa maxay sababtu? Goorma ayaa markeedii ugu horeysay la daabacay? Maxaa kale oo iga caawini kara inaan ogaado?



## Raadso fikrado kala duwan.

Raadinta macluumaadka laga helo ilo leh aragtiyo iyo asallo kala duwan waxay ka caawin kartaa inaad hesho waddada ugu cad ee loo maro macluumaadka runta ah.




## Anaga na weydii!

Shaqaalaha Doorashooyinka Degmada King waxay u heellan yihiin inay adiga iyo codbixiye kasta siiyaan doorashooyin sax ah, la heli karo, oo daah furan. Si wadajir ahaan ah, waxaan u leenahay khibrad boqolaal sanno ah. Naga soo wac taleefanka 206-296-VOTE (8683) ama iimeel noogu soo dir halka **elections@kingcounty.gov**.

Adams, Lyn 35
Adman, Eric 41
Adolfson, Andy 86
Alberson, James 53
Alderks, Jenne 33
Al-Kabra, Rami 34
Amato, Josh 56
Amiri, Bobby 59
Anderl, Lisa 48
Anderson, Jeralee 52
Anderson, Natalie 68
Andonian, Brad 35
Angrisano, Robert 101
Anguluri, Prasad 33
Anthony, Jude 25
Aras, Jane 67
Arndt, Sarah 59
Arnold, Jay 42
Asai, Kay 51
Balducci, Claudia 21
Balthaser, Susan 80
Banaszynski, Tracy 40
Barber, Carol 98
Beard, Michael 89
Becker, Daniel 47
Belfield, Kristopher 86
Beresky, Johana 48
Bergquist, Avanti 76
Best-Campbell, Rachel 58
Bhargava, Vishal 28
Black, Neal 43
Blakemore, Ryan 90
Blakley, Karin Frost 49
Bowers, Mark L. 101
Boyer, Michael 57
Bradley, Julian 72
Briar, Naren 29
Burnett, Stephanie 72
Bustamante, Laura Davis 46
Butala, Zach 82
Calcote, Russell 88
Calkins, Ryan 26
Campbell, Robin 100
Carter, Jen 101
Charbonneau, Paul 50
Clark, Paul 28
Clymer, Mary 53
Dembowski, Rod 22
DeMeester, Wayne 95
de Michele, Barbara 38
Desh, Pradnya 30
Dowling, Michael 84
Dresner, Kurt 43
Dunn, Reagan 25
Dutton, Paul 54
Eberle, Pete 93
Ellis, Dennis 19
Evans, Michelle 58
Fain, Steffanie 24
Fancher, Gary 79
Faunce, Dominik 90
Fields, Steve 51
Fisher, Ken 62
Frantz, Ted 63
Gallinger, Harlan 56
Gaspar, Brian 72
Giner, Jessica 55
Goodman, Sarah 50
Greathouse, Suzanne 99
Gupta, Sid 56
Hachamovitch, Dean 36
Halbert, Doug 90
Hamada, Leslie 87
Hanson, Greg 64
Hanson, Jaren 59
Harris, Gary 100
Harris, Katy 64
Hasegawa, Toshiko Grace 27
Hayes, Sandy R 74
Herbig, Nigel 40
Hooper, Craig 88
Hooshangi, Ryika 95
Howe, Karen 57
Howes, Aletha 60
Hsieh, Julie 48
Hughes, Susan 70
Hunt, Victoria 16
Irons, Di 83
Jacobs, Andy 50
Jensen, Lindsay 77
Jiang, Kelly 37
Joe, Russell 38
Johnson, Melissa 79
Johnston, Thomas C 87
Kachakov, Aleksandra 94
Karkoski-Gardner, Elizabeth (Liz) 82
Kelly, Kimberlee 75
Kirkaldie, Kevin 49
Klaas, Travis 102
Krumperman, Kristi 81
Kwon, Peter 24
Lam, Amy 56
Lane, Kim William 92
Lazzara, M Thomas 69
Lee, Conrad 29
Lewis, Ric 81
Lo, Maggie 50
Lyon, Jeff 58
MacKenzie, Ken 43
Magalhaes, Diogo 38
Magendanz, Chad 16
Malik, Catie 42
Marshall, Joe 40
Martin, Kim 71
Marts, Tola 39
Mayclin, Tracy 66
McMaster, Jennifer 80
Meekhof, Angela 70
Miles, Brittany 34
Miller, Rita J. 97
Minard, Mike 36
Mittelman, Shirly 33
Mohamed, Hamdi 26
Mulich, Mark D. 87
Mullen, Ray 84
Mullet, Mark 37
Mullings, Sydne 69
Murphy Richards, Kara 55
Myers, Nicole 32
Nagarkar, Chinmay 68
Nelson, Jennifer Michelle 35
Nichols, Kevin 39
Nielsen, Toni 83
Nieuwenhuis, Jared 30
Nunn, Heija 45
Oberman, Ken 42
O'Byrne, Suzi 91
O'Callahan, Robert 72
Olson, John 44
Oviatt, Lori 78
Parnell, Sabrina 78
Pascal, Jon 43
Pérez, Ruth 54
Perry, Sarah 23
Polintan, Rick 97
Porter, Charles 65
Powell, Meagan 77
Prakriya, Vivek 51
Pratt, Josh 85
Prem, Shilpa 42
Quigg, Jim 49
Ragheb, Adam 48
Randolph, James 59
Reeves, Randy 46
Reichley, Chris 37
Richter, Aspen 71
Rish, Matthew 31
Rivera, Carmen 53
Robertson, Brian 89
Robinson, Lynne 32
Rose, Nina 81
Rossman, Jessica 45
Ryan, Marenah 94
Saal, Stacy 60
Sabey, Joseph D 62
Salahuddin, Osman 19
Sanderson, Carson 73
Schiefer, Christina 40
Schram, Lynda 75
Sharma, Arun 73
Slatter, Vandana 18
Smith, Brent 96
Soni, Menka 52
Stanton, Patrick C 93
Stewart, Nancy J 99
Stowe, Tom 61
Stuart, Melissa 51
Sumadiwirya, Claire 31
Sutherland, Pat 96
Swanson, Mark 34
Temkin, Dan 63
Tolentino, JoAnn 74
Treen, Debbie 57
Trilles, Marta 66
Vanover, Brian 65
Villasenor, Chris 49
Vossler, Jonathan 63
Walen, Amy 18
Walsh, Lindsey 37
Webster, Rick 85
Weinberg, Ted 47
Westgaard, Michael 53
Wheeler, Brad 61
Whitney, John 17
Wilkins, Perry 102
Wise, Amber 58
Wissner-Slivka, Lisa 35
Wotton, Rob 23
Yang, Lin 57
Zahilay, Girmay 21
Zahn, Janice 17
Zakharoff, Katia 39
Zevenbergen, Peter 91

King County
Department of Elections
919 SW Grady Way, Ste 100
Renton, WA  98057-2906

OFFICIAL ELECTION MAIL
Authorized by the U.S. Postal Service ®

NON PROFIT ORG
US POSTAGE
PAID
SEATTLE, WA
PERMIT NO 1455

## Dhammaan codbixiyeyaasha ku nool:

# Daabacaadda 2aad

**Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo ah qaab kale.**

---

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.

Nala soo xiriir si aad u hesho agabkaaga codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.

206-296-VOTE(8683) | elections@kingcounty.gov | kingcounty.gov/elections